

HOW TO STOP WORRYING AND START LIVING

DHAAF WALBAHAARKA OO BILLOW NOLOL CUSUB

TUSMADA BUUGGA

CUTUBKA KOOWAAD	
Xaqiiqooyinka xagga welwelka.....	14
Q. 1aad- ku noolow xuduudda maalintaada	14
Q. 2aad- Habka ugu fiican ee lagu xallin karo arrimaha walbahaarka.....	26
Q. 3aad- Muxuu ku gaarsiin karaa walbahaarku	33
Q. 4aad- raaxeysiga iyo is maaweelintu waa daawada walbahaarka	39
Murtida cutubka koowaad oo kooban.	44
CUTUBKA LABAAD	
Habka aasaasiga ah ee lagu xallin karo walbahaarka	45
Q. 1aad- Sida loo furfuro loona xalliyo dhibaatooyinka walbahaarka	45
Xaddidaadda Xaqiiqooyinka	46
Q. 2aad- sidaad uga xoroobi laheyd 50% walbahaarka shaqadaada.	55
Tallaabooyin saldhig u ah fufuridda walbahaarka	60
Sagaal talo oo muhiim ah.....	61
Murtida cutubka 2-aad oo kooban.	64
CUTUBKA SADDEXAAD	
Q. 1aad- sidaad u burburin laheyd caadada walbahaarka intaanay ku burburin.....	65
Q. 2aad- Ha oggolaanin in cabsidu kaa saayid caleysa.....	75
Q. 3aad- Qiimaha qaaliga ah ee aargudashada.....	83
Sheeko Gaaban	86
Nin Zingi Ah oo ku sigtay Daldalaad	90
Aayad Quraan ah oo koobtay nuxurka qeybtan	94
Q. 4aad- si aad u cayriso walbahaarka kaasho tirakoobyoo	95
Q. 5aad- ku raalli noqo wixii laguu qoray.....	101
Q. 6aad- U yeel walbahaarka heer lama dhaafaan ah	110
Q. 7aad- Ha shiidin burka.....	118

CUTUBKA AFARAAD	
LIX DARIIQO OO AH SIDA LOOGU ABUURO MASKAXDA	
WAXYAABO KUU SOO JIIDO XASILOONI & SACAADO	124
Q. 1aad- Noloshadu waa waxa fekerkaagu abuurro	124
Q. 2aad- Qofna haka sugin mahad-naq	139
Q. 3aad- maku beddelanaysaa waxaad heysatid malyuun doolar..	145
Q. 4aad- Ahaaw naftaada, ogoow inaanu dunida jirin cid kula mid ah	152
Q. 5aad- ka same liinta dhanaan biyo macaan	159
Q. 6aad- Sidaad uga bogsan laheyd cudurka uur ku taalada muddo 2 todobaad ah.....	167
Murtida cutubka afraad oo kooba	181
CUTUBKA SHANAAD	
Qaacido dahabi ah oo lagu jebin karo walbahaarka	182
Q. 1aad- Siday aabahey iyo hooyadey uga adkaadeen walbahaarka	182
CUTUBKA LIXAAD	
Sidaad uga fogaan laheyd walbahaarka dhaliisha	198
Q. 1aad- Qofna ma laado bakhtiga	198
Q. 2aad- H u liicin dhaliisha	202
Q. 3aad- Doqonimooyin aan ku kacay	206
Murtida cutubka lixaad oo kooban.....	210
CUTUBKA TODDOBAAD	
Lix dariiqo oo kaa dheereynaya noogga iyo welwelka kuna siinaya firfircooni iyo dhaqdhaqaaq.....	212
Q. 1aad- sidaad ugu kordhin laheyd hal saac soo jeedkaaga.....	212
Q. 2aad- Maxaa ku noojiya.....	217
Q. 3aad- Siday afooyinku isaga dhowri lahaayeen daalka una ilaashan lahaayeen dhabanadooda.....	222
Q. 4aad- ku dhaqan caaddooyinkan afarta ah	228
1. Ka dheeree miiskaaga waraaqaha iyo galalka	228
2. U qabo sida arrimuhu u kala muhiimsan yihiin.....	229
3. Berri hala sugin go'aan aad maanta gaari karto.....	229

4. Ka caado yeelo nidaamka iyo ku kalsoonaanta dadka kale...	230
Q. 5aad- sidaad uga badbaadi laheyd wahsiga	231
Q. 6aad- sidaad uga dheeraan laheyd walbahaarka ka dhasha hurdo la'aanta	236
Murtida cutubka toddobaad oo kooban	240
CUTUBKA SIDDEEDAAD	241
Go'aamo saldhig u ah nolosha	241
Q. 1aad- sidaad u heli laheyd shaqo kuu qalanta iyo go'aan	241
CUTUBKA SAGAALAAD	
Xallinta dhibaatooyinka dhaqaale	246
Q. 1aad- sidaad uga bixi laheyd dhibaatooyinka dhaqaale 70% sabab u ah walbahaarka	246
CUTUBKA TOBNAAD	
SIDA LOOGA ADKAADO WALBAHAARKA	246
SHEEKOOYIN GAAGAABAN.	246
5. Waxaa Igu Kulmay Hal Mar Lix Mushkiladood Oo Ad-Adag..	255
6. Waxaan awoodi karaa inaan iska dhigo qof saacid ah oo faraxsan saacad gudaheed.....	257
7. Sida looga xoroobo dareenka liidnimada.....	258
8. Waxaan Ku Noolaa Janadii Eebeheey.....	261
9. Sidaan Shalay U Adkeystay Ayaan Maanta U Adkeysanayaa	264
10. Waxaan Ahaa Doqon Weynaaday.....	265
11. Waxaan Ku Dadaalalay In Jidka Saabku Ii Furnaado.....	266
12. Markii Duqa Magaalada Soo Garaacay Iriddeyda	269
13. Ninba Waa Markiisa Mudanayaal.....	272
14. Sidee buu ugu intifaacay john d. Rock filler sanooyin ka badan cimrigiisii.....	273
15. Buug Aan Akhriyey Oo Ka Hadlaya Awoodda Jinsiga Ayaa Badbaadiyey Guurkeyga.....	279

DAABACAADDA 2-AAD EE BUUGGAN

Buuggan waxaa markii ugu horreysay Af-Soomaali lagu daabacay sanadkii 1988kii waxaana markaas laga daabacay tiro aad u yar oo lagu daabacay Stencil.

Haatan waxaa nasiib wanaag ah inay akhirstayaasha fursad u helaan mar kale in la daabaco buuggan "*Dhaaf walbahaarka*" iyadoo markaas loo daabacay si wanaagsan oo heer sare ah, maxaa yeelay dad badan oo nasiib u helay inay akhristaan daabacaddii hore ee soo baxday sanadkii 1988kii ayaa had iyo jeer na weydiin jiray goorta la daabici doono buuggan.

Marka waxaa Ilaah mahadiis ah in akhristayaasha sharafta leh mar kale loo soo bandhigo buugga aanu soo sheegnay, waxaana la rajaynayaa in qof kasta oo si dhab ah u akhrista in noloshiisa wax iska beddeli doonaan guud ahaan.

Shacabka Soomaaliyeed oo ay la soo gudbaanaatay muddooyinkan dambe dhibaatooyin kala duwan oo u baahan Samir, Dulqaad, Adkaysi, iwm; Waxaan u rajaynayaa in buuggani ka fududeeyo dhibaatooyinkaas sida uu uga fududeeyey dad badan oo ku xusan buuggan oo ay la soo gudboonaatay dhibaatooyin aad u waaweyn oo u eg kuwa qabsan kara qof kasta oo aadami ah bulshada heerkuu doono hakaga jiree.

MAHADCELIN

Waxaa halkan ugu mahad celinaynaa dhalinyarada iska xilsaartay garaacidda, sixidda iyo isku habeynta buugan daabacaddiisa labaad, waxaana ugu horreeya Cumar Suldaan Xoghayaha Xafiiska International Islamic Relief Organization (IIRO) ee muqdisho oo isku xilsaaray garaacista iyo sixidda buuggaan.

Waxaa kale oo isna kaalin wax ku ool ah ka qaatay xagga isku habaynta iyo habsami u soo saaridda buuggan Maxamed Xasan Cawaale xisaabiyaha Xafiiska (IIRO) ee Muqdisho.

Ugu dambeyntii waxaan halkaan ugu mahad celinayaa dadkii kale ee iyana si toos ah iyo si dadbanba uga soo qeyb qaatay soo bixitaanka buuggan kuwaas oo aanay suurtagal ii aheyn inaan halkaan ku xuso dhammaantood.

Sh. Cabdiraxmaan Xuseen Abu Xamza

GOGOL DHIGGA DAABACAADDA AF-SOOMAALIGA

Waxaa jirta xikmad caalami ah oo leh "raggu waa saddex: rag, rag ka soo bax, iyo liite, midka ragga ah waa kan markii dhibaato ama mushkilad ka hor timaado heli kara caqli iyo xeelad uu kaga baxo. Rag ka soo baxa waa ka aanan sugin intey dhibaataadu ka dhacayso, laakiin ka sii gaashaanta inta aanay dhicin. Liite isagu waa kan markay dhibaato ku dhacdo jahawareera oo hadba meel aan loo joogin isku qaada oo halkaa ku baaba'a".

Waxaa tusaale looga dhigaa xikamadan saddex kalluun oo webi ku dheelayey baa sheedda ka arkay nin kalluumayste ah, rag ka roonihii markuu indhaha ku dhuftayba wuu ka dhuuntay, labadii kale iyagoo dheelaya ayey shabakaddii ku dhaceen, kii ragga ahaa wuxuu ku fekeray xeelad uu kaga baxo dabinka markaas buu is bakhtiiyey, kalluumeystihii baa markaa iska tuuray isagoo leh; 'maxaan ku falayaa kalluun bakhti ah', markii la tuuray ayuu ku booday webigii markaas buu dabaashay. Kalluumaysihii baa farta dhexda ka qaniinay isagoo ka xun kalluunka ka caqli badiyey. kii lagu tilmaamay ninka liita intuu argagaxay ayuu hadba dhan isu dhufanayey shabakadii dhexdeedii halkii baana lagu qashay.

Xikmadan waxaa laga heli karaa kitaabka KALIILA WADIMNA ee uu qoray Ibnu Muqafac uuna ka soo guuriyey xikmadihii hore ee Hindiga. Haddaba kitaabkani wuxuu kugu hanuuninayaa sidaad u noqon laheyd nin rag ah ama rag ka soo bax ah ugana digtoonaan leheyd inaad noqoto nin liita.

Waxaan xusuusinayaa akhristayaasha sharafta leh in qoraha buuggan yahay ninkii allifay buuggii hore ee la jeclaystay ee "saaxiibbo kasbo" kaas oo ka sheekeynayey fanka la dhaqanka dadka.

Marka haddii buuggaasi ka hadlayey xiriirka qofka kala dhexeeya dadka kale siiduu uga dhigi lahaa mid sacaado iyo farax u soo jiida buuggani wuxuu ka hadalyaa xiriirka qofka naftiisa ku xirayaa siduu uga dhigi lahaa mid sacaado iyo farax u soo jiida.

Waxaa haboon inaad la socotid in hadba heerka qofku ka marayo ilbaxnimada ay la mid tahay baahida noloshiisa, taasina waxay keentay dhibaatooyin fara badan oo loo yaqaan "mukhkilooyinka ilbaxnimada", waxaana sal u ah inaan awoodda qofku dabooli kareyn baahida noloshiisa, sababtoo ah waxaa aad u badan waxyaabaha qofka magaalada ku nool doonaayo, wuxuu u baahan yahay waxyaabo badan oon laga dareemeyn nolosha miyiga waxaana ka hor imaanaya dhibaatooyin badan oon lagu dareemeyn baadiyaha.

Marka haddii qofku is waafajin kari waayo baahida noloshiisa iyo doonista naftiisa ama uu xalin kari waayo dhibatooyinka hortaagan danihiisa waxaa ku dhacaya welwel iyo walaac, waayo wuxuu dareemayaa caro, ciriiri, nolol naceyb, tiiranyo, murugo, hami, qami, waalli, waswaas iwm.

Laakiin dhibaatooyinka nolosha magaaladu keentay kuma koobna kuwa nafta caqliga iyo maskaxda oo keliya, hase yeeshee waxaa kale oo jira jirooyin ku dhasha jirka oo loo yaqaan "cudurrada ilbaxnimada" sida cudurrada wadnaha, dhiig karka, cadaadinta dhiigga, ciriiriga xididada dhiigga, boog calooleedka, kaadi macaanka, madax xanuunka iyo cudurada xididdada dareenka.

Marka waxaa haboon in la ogaado in waxaas oo jirooyin ah inuu Aabbe u yahay hal cudur oo ah midkii buuggan dartii loo alifay. Waa maxay cudurkaasi? Waa cudurka loo yaqaann "walbahaar" sababtoo ah cabsida uu qofku ka qabo nolosha adag ee ay ilbaxnimadu keentay waxay ku tusaysaa jahawareer iyo xasilid la'aan markaas buu qofkii walbahaarayaa.

Wuxuu ka weriyey qoraha buuggan takhtarro kala duwan inay dhallinyaro badan u cimri deg-degeen cudurka walbahaarka ama ay is dileenba iyagoon ka warqabin in cudurkaasi sabab u yahay geeridooda.

Haddii si kale loo sheego innagu waxaan soo qaadanay ilbaxnimadii reer Yurub, waxaan goosanay inaan ku noolaano noloshoodii oo kale, marka waxaa soo raacay noloshaas dhibaatooyin iyo jirrooyin ka dhashay nolosha adag ee ciriiriga ah. Sidaas darteed waa inaan daawo u helno dhibaatooyinka iyo jirrooyinka aanu soo sheegnay sidey iyaguba ugu heleen.

Waxaana igu xambaaray inaan buuggaan u soo tarjumo Af-Soomaali markaan dareemay in bulshadeenu si dhakhso ah oo is daba joog ah ugu soo qulquleyso magaalooyinka, waxaana muuqda in dhibaatooyin badani ka hor imaanayaan nolosha magaalada, qof kasta oo isku shuqliya arrimaha bulshadeena wuxuu dareemi karaa in dadka qaba jirrooyinka madaxa ee u socda takhtarrada inay aad u sii badanayaan sidoo kale dadka maskaxda ka jiran inay iyaguna sii badanayaan.

Waxaad la kulmaysaa dad badan oo ka cabanaya iney hurdadii ka tagtay, qaar kale haddad la sheekaysato waxay kugu furayaan cajalado cabasho calaacaal iyo sheegasho ka buuxdo, marka waxaan ku qancay in loo baahan yahay kitaab daweeaya jirrada walbahaarka ah ee waxaas oo cudur ah u soo jiidaysa qofka reer baladka ah. Run ahaan buugag badan baa ka hadlay cudurka walbahaarka laakiin sida kitaabkan ii saameeyey weli ma arag mid ii saameeya oo ku saabsan mowduucan.

Aniga laftayda wuxuu iga caawiyey mushkilooyin badan oo igu ridday walbahaar. Sidaas darteed waxaan ku kalsoonahay inuu dad badan ka badbaadin doono cudurkan halista ah iyo wuxuu dabada ku wato oo dhan sida jirrooyinka wadnaha gala, waallida iyo hurdo la'aanta.

GOGOL DHIGGA QORAHA BUUGAN

Sidee loo qoray buuggan maxaase u sabab ahaa?

Soddomeeyadii qarnigan waxaan ka mid ahaa dhallinyarada ku dhibaateysan magaalada Newyorkk oo aan ka ahaa Dilaal baabuurta waaweyn si aan uga helo waxaan ku noolaado.

Waxaa guri ii ahaa qol yar oo ay baranbaro iyo dooli ka buuxaan, waxaan cuntada ka cuni jiray makhaayad aad u nadaafad xun oo cuntadeedu raqiis tahay.

Waxaan imaan jiray habeenkii qolkeygii yaraa anigoo madax wareer la il daran oo ka gubanaya nolosha xun ee aan ku noolahay, waxaan is dhihi jiray ma sidaan baad nolosha ku dhameysan doontaa? Aaway noloshee aan ku yididiiloon jiray markaan ardayga ahaa?

Ugu dambeys waxaan go'aansaday inaan katago shaqada aan necbahay waana ka tegay. Go'aankaasi wuxuu beddelay nolosheydii intii iiga hartay maxaa yeelay waxaan ku nolaa intii dambe nolol baraare iyo barwaaqo ah.

Markaan shaqadii ka tegay waxaan markiiba helay shaqo barenimo oo dadka waaweyn ama qaangaarka ah, waxaan qaatay maaddada fanka khudbadaha iyo doodaha cilmiga aad baanan ugu guuleystay.

Maamulkii dugsiga aan baraha ka noqday waxaan ka codsaday in \$ 5 habeenkii mushaar ahaan la ii siiyo, laakiin nasiib darro waa la iga diiday oo waxaa wax la iga siin jiray ardayda aan waxbaro wixii ka baxa.

Markaan saddex dufacadood u dhameeyey waxaa la ii oggolaaday \$ 30 habeenkii waana tii markii hore la iga diiday \$ 5-ta doolar habeenkii. Markaan muddo waday fanka khudabadaha waxaan ogaaday in

ardaydu u baahan yihiin iney hagaajiyaan macaamilada dadka ay la dhaqmayaan, waxaan markaas goostay inaan qoro buug ka hadlaya xiriirka dadka, laakiin maan helin oo waxay dantu igu khasabtay inaan anigu dejiyo buuggaas, sidaan u fekerayey waxaan allifay buugga la yiraahdo saaxiibo kasbo "how to win friends and influence the people".

Waxaa dhacday inaan markaas ka hor qoray afar buug laakiin lama maqal magacyadooda waayo lama jecleysan, marka ma fileyn in buuggan uu sidaa u hirgalo, laakiin markaan arkay tirada badan ee laga iibsaday buuggan waxaa iga soo haray yaab iyo amakaag.

Dhowr sano kadib waxaan dareemay in xerteyda qaangaarka ah ay hor taagan tahay mushkilo kale oo weyn taas oo ah "walbahaar" maxaa yeelay xerteydu waxay u badnaayeen ganacsato, karraaniyaal, farsama yaqaano iwm. Waxaa kaloo ka mid ahaa haween shaqeeya iyo afooyin oo iyaguna leh dhibaatooyin u gaar ah, waxaan ku qancay inay u baahan yihiin buug ay isaga daweeyaan walbahaarka. Waxaan isku dayey inaan helo buug saldhig u noqda ardayda siday isaga caabin lahaayeen walbahaarka.

Waxaan ku wareegay maktabadaha waaweyn ee Newyork laakiin nasiib darro kama helin buug lagu qanci karo, waxaan la yaabay markaan ogaaday tirada buuggagii ka hadlayey walbahaarka een ka helay dhammaan maktabadihii waaweynaa oo gaarayey 22 buug halka ay gaareen buugagtii ka hadlayey Gooryaanka (worms) 189 buug, buuggagta ka hadleysa gooryaanka waxay noqdeenn 9 jibbaar kuwii ka hadlayey walbahaarka. Marka miyaanay taasi la yaab aheyn? Yaa dhib badan gooryaanka iyo walbahaar? Waxaa sugnaatay 33% in dadka ku jira isbitaalada ay yihiin dad cudurradooda ka dhasheen walaac iyo walbahaar.

Waxaan akhriyey dhammaan 22-kii buug ee aan ka helay maktabadaha Newyork, waxaa kale oo aan gatay dhammaann wixii buugag ah ee ku lug leh walbahaarka.

Inkastoo aan dadaalkaa sameeyey hadana ma helin buug kale oo saldhig looga dhigi karo xertayda.

Markaa waxaan u howl galay sidaan buugaag anigu u soo saari lahaa, waxay igu qaadatay soo saarista buugaan 7 sano waxaan akhriyey wixii ay ka qoreen falsafa yaqaanada xagga walbahaarka intii dunidu jirtay, waxaan akhriyey taariikhda boqolaal dad oo soo caan baxay laga soo bilaabo Confucius ilaa Churchill waxaan la kulmay dad badan oo ku can baxay arrimo kala duwan laakiin tallaabooyinkaas oo dhan waa gogoldhig

Waxaan sameeyey waxyaabo ka muhiimsan afkaartii buugaagta iyo wareysiyadii halyeeyadii caanka ahaa kaasoo ah, waxaan curiyey sheybaar lagu ciribtiro walbahaarka, waxaan waday shaqada sheybaarkaas muddo 5 sano ah waana sheybaarkii ugu horreeyey dunida ee noocaas ah, marka muxuu ahaa sheybaarkaas? Waxaan siiyay ardaydii fasallada koox mabaadi' ah oo saldhig u noqon karta sidii looga xoroobi lahaa walbahaarka waxaana ka codsaday mid kasta inuu ku camal falo mabaadii'daas kadibna uga sheekeeyo fasalka wixii ka dhashay ku dhaqanka mabaadii'dii iyada aheyd.

Tijaabadii waxay awood ii siisay inaan dhageysto khudbado tiro badan oo ku saabsan sida looga adkaado walbahaarka iyo dhibaatooyinkiisa. Sidaas dareed ma aha buuggani mid cir ka soo dhac ah ama sheekooyin mala awaal ah oo sidaa waa ka duwan yahay, waayo sida runtaa waxaan xoogga saaray in buuggani noqdo mid ku dhisan xaqiiqooyin dhab loo tijaabiyey dokumiinti iyo xujooyin run ah, waana taas midda keentay in kumanyaal dadka qaangaarka ahi ka adkaadaan walbahaarka.

Waxaa ii haray inaan u sheego akhristayaasha sharafta leh in buugani aad u fudud yahay sheekooyinka ku jirana ay yihiin kuwo dhab ah oo dadkii ay qabsadeen la yaqaano.

Hadaba buuggani waa daawo kaa samata bixineysa walaaca, wellwelka iyo uur ku taalada uu keeno walbahaarku.

Hadaan kugu dheereeyey gogoldhiga iga rallii noqo, maxaa yeelay umaad iibsan buugan inaad hordhaca keliya ka akhrisid, marka adiga iyo buugga ayaan idiin kala dhex baxayaa, waxaase iga waano ah markaad ka akhrisid buuggan 50ka bog ee ugu horreeya haddaad iska weydo dareen xoog leh oo ku dareensiinaya inaad heshay awood cudsub oo ku siineysa jebinta cadowga walbahaarka iyo ku raaxaysiga nolosha iskaga tuur buuggan qashin qubka m,axaa yeelay wax faa'iiido ah kuuma laha marka waa kan buuggii ee bilow wanaagsan.

Qore: Dale Carneige.

CUTUBKA KOOWAAD
XAQIIQOYYINKA XAGGA WELWELKA
QEYBTA 1-AAD
KU NOOLW XUDDUDDA MAALINTAADA

Sanadkii 1913-kii waxaa khudbad ka jeediyey golaha jaamacadda Yale ee dalka Mareykanka nin meel dhexaad ah oo cirradu dhafoorrada ka weerartay ninkaas waxaa ka muuqday xurmada aqoonyahanimada iyo xasiloonnada waayeelnimada erayaduu ku hadlayey waxay ahaayeen kuwo caddaan ah oo qoto dheer, khudbadda wuxuu u jeedinayey arday ka qalin jebinaysay kulliyadda caafimaadka.

Dadkii ka soo qeyb galay waxay u dhagaysanayeen si tixgelin iyo xiiso leh, waxaa ku jiray khudbadda erayo xeel dheer oo ujeeddo fog leh inkastoo ay u muuqdeen inay fududaayeen waxaana ka mid ahaa erayadaasi "dad badani waxay u maleynayaan in aniga oo afar Jaamacadood Bare sare ka noqday oo qoray kitaab caan ah oo dunida ku faafay inaan ahay nin caqli weyn oo garaad sare leh oon la gaari kareyn, laakiin xaqiiqdu sidaa way ka duwan tahay maxaa yeelay dad badan oo saaxiibaday ah waxay ogaadeen in garaadkaygu caadi yahay" waa kuma ninka sidaa leh? Waa Sir William Osler oo taariikhdiisa lagu qoray laba majaladood oo waaweyn uuna ugu deeqay boqorkii Ingiriiska Koofaart "Sir" abaal gud ahaan guulihii waaweynaa ee uu ka soo hooyay xagga caafimaadka darteed, waana ninkii unkay Jaamacadda Johns Hopkins, laakiin waa maxay xiriirka ka dhexeeya ninkaas iyo casharkeena walbahaarka? Jawaabtu waa tan:-

Sanadkii 1971-kii wuxuu u fariistay Osler imtixaankii qalin jebinta kulliyadda caafimaadka, meesha imtixaanka lagu qaadayey waxaa ka muuqday naxdin iyo cabsi laga qabay in imtixaanka lagu dhaco, markaas waxaa dhacday in Osler walbahaaray oo uu is weydiyey wuxuu sameyn doono hadduu ku dhaco imtixaanka? Maka dhumi

doonaa waqtigii dheeraa ee uu ku tabayey waxbarashada, mise wuu ka leexan doonaa kulliyadda oo wuxuu u leexan doonaa laamaha kale ee cilmiga. Intuu su'aalahaas is weydiinayey waxaa ku soo dhacday Oslar maskaxdiisa fikrad kale, wuxuu xusuustay xikmad uu hadda ka hor akhriyey oo uu qoray abwaanka suugaanta ingiriiska Thons Carlyl, xikmaddaa oo leh "waxba haka walbahaarin yididiilooyinka fog fog ee sheedda ka muuqda een u hanqal taageyno, waxaase waajibku yahay inaan ku dhaqaaqno waxa gacanta inoogu jira markaas, inagoo dhan kasta ka fiirineyna xooggana saareyna sidaan u fulin laheyn waxaana hubaal ah in arrimaha soo socda xal loo heli doono waqtigooda"

Bal fiiri xikmaddan yaabka leh iyo xaqiiqada ku jirta sida runta ah waa mabda' istaahila in la xafido oo lagu dhaqmo, ardaygii cabsanayey sidaas buu ku galay imtixaankii wuuna ku guulaystay, markaas buu awooday inuu jid cusub jeexdo kuna dhaqaaqo isagoo ku faanaya guushii uu gaaray, maxay tahay sirta liibaantaasu? Waxaan ku tilmaami karnaa sirtaas inaad ku noolaato xuduudda maalintaada, waxaad mooddaa in mabda'ani u baahan yahay caddeyn iyo faafaahin, bal aynu ku noqono waxyaabihii aan soo marnay. Intaanu khudbadiisa u jeedinin ardayda jaamacadda Yale Dhowr bilood ka hor Sir William wuxuu ku safray badweynta Atlas isagoo u socda dalka Ingiriiska wuxuuna raacay markab weyn oo ka goosha baddaas.

Wuxuu fuulay markabka dushiisa, wuxuu u fiirsaday siduu naakhuuduhu u waday markabka weyn iyo siday ugu suuragashay naakhuudaha inuu hogaamiyo buurtaa weyn ee birta ah oo ay ka buuxaan dad iyo xoolo meel kasta dunida isaga yimid, wuxuu arkay naakhuudihii oo taabanaya wax galuus yar oo kale ah markaana ay soo baxayaan tirooyin kala duwan, kadibna markabkii beddelaayo jidkiisii ama yareynaayo socodkiisii hadana wuxuu arkay isagoo taabanaya galuus (Badhan) kale, markaas bay makiinadaha qaar istaagayaan ama

derbi weyn oo bir ah ayaa meel ka soo baxaya, markaas buu qarinyaa dhinaca uu rabo naakhuuduhu inuu iska daboolo.

Markaa Oslar wuxuu is barbar dhigay makiinadaha markabka iyo makiinadaha dadka ee caqliga iyo jirku ku shaqeeyaan wuxuuna is yiri; "naakhuuduhu wuxuu isticmaalayaa makiinadaha hadba inta uu u baahan yahay waqtiga ama saacadda la joogo isagoo ku kalsoon inuu gaari doono muraadkiisa" marka dadku muxuu sidaas u sameyn waayey? Muxuu uga dheeraan waayey welwelka arrimaha aan weli la gaarin? Miyaanu awoodin qofku inuu sameysto galuus uu taabto si uu u soo baxo derbi bir ah oo uu kaga daboolo naftiisa ka welwelka arrimaha aan weli la gaarin iyo arrimaha tegay ee la soo dhaafay ee aan faa'iido ku jirin in la xasuusto ama laga tiiraanyoodo? Sidaas buu ku faafaahiyey Sir Oslar khudbadii uu u jeedinayey ardaydiisa.

Welise waxaa jira dalool weyn oo cadeyn u baahan kaasoo ah sidee loo dhihi karaa yaan laga fekerin aayatiinka dambe ama yaan la isku diyaarinin maalmaha soo socda? Taas muu hilmaamin Sir Oslar oo wuxuu yiri 'ugama jeedo wixii aan iri wahsi iyo inaan laysu diyaarin maalmaha soo socda, maya, taasi waa doqonimo, anigu waxaan u jeedaa in jidka ugu gaaban uguna habboon isu diyaarinta aayatiinka inuu yahay inaad xoogga isugu geyso fulinta howlaha markaas ku hor yaal una qabato sida ugu wacan waxayna ila tahay in habkaasi yahay jidka ugu toosan ee la isugu diyaarin karo berrito".

Haddana wuxuu soo qaatay Sir Oslar duco uu Nebi Ciise ku duceysan jiray subax kasta oo ah "Ilaahow Ceesh maanta nagu filan na sii" intuu ducaddaas akhriyey ayuu ka dooday oo yiri; 'Nebi Ciise wuxuu Eebbe ka tuugay rootiga maanta mana dhihin rootigii shalay yaabis buu ahaa ama wuu xumaa ama waxaan ka cabsi qabaa in calafkeyggu berri sidaas oo kale noqdo, kalamana hadlin ilaahiis in haddii uu shaqo waayo sanadka soo socda uu noqon doono mid hoogay" wuxuu ku

daray Sir Oslar waxay dadku aad uga doodeen ducada Nebi Ciise oo leh haka welwelin berrito iyaga oo leh sidee beynaan berrito uga welweleyn ma wuxuu naga doonayaa Nebigu inaanu aayatiinka ku qaabilno innagoo indho xiran oo aan isu diyaarin, waajibku waa inaanu isu diyaarino waqtiga soo socda oo aynu u heysano una keydsano xoolo ina anfaca waqtiga saboolnimada, cudurka iyo duqnimada, ra'yigaasi waa xaq laakiin Nebi Ciise uma jeedo in aayatiinka dambe waqtiga la isaga dhaafo wuxuuse doonayey inuu dadka ka fogeeyo iney noloshooda maanta iska hagaajiyaan intay isku shuqlinayaan cabsida ay ka qabaan waqtiyada aan weli la gaarin. Taasina kama soo horjeeddo waxaan idiin kugu yeerayo oo ah in jidka ugu fiican ee la isugu diyaarin karo mustaqbalka inuu yahay inaad ku dadaasho shaqada maanta ku hortaal, adigoo aan ka fekereyn waxa iman doona, maxaa yeelay walaacu wuxuu curyaaminayaa waxqabadkaaga.

Dagaalkii labaad ee dunida madaxda ciidamada badda ee Mareykanka waxay isugu geeyeen xooggoodii oo dhan iney u diyaariyaan maraakiibta dagaalka qalabka ugu fiican ee ay maraakiibtu u baahan tahay waxaanay sawiri jireen meelaha ugu habboon ee ay dajinayaan ciidamada iyo waxyaabaha ay u baahan yihiin, markaas ayuu dhihi jiray sarkaalka madaxda ahi "innagu waan qabanay wixii awoodeena aheyd oo dhan si loo helo guulaha ugu wanaagsan, laakiin kama celin karno markabka inuu badda ku dhex maanshoo doona shalaayi mayno haddii sidaasi dhacdo, sababtoo ah shalaaytadu kama soo saari karto markabka ku dhacay badda salkeeda, waliba waxaa la arkaa in shalaaytadaas nagu xambaarto inaan ku dhacno khalad kale oo sabab u noqdo in maraakiib kale maanshooto".

Haddii aad ku noqoto aqoontaada ama aad dib u baarto taariikhda waxaad ogaanaysaa in fikirka toosan ee caafimaadka qaba uu ka duwan yahay fikirka doqonimada ah ee murugsan kagana duwan yahay bar gundhig ah oo aan indhaha laga laaban Karin taasoo ah

fikirka toosan wuxuu daweynayaa mushkilooyinka iyo sidii wax looga qaban lahaa wuxuuna kugu hanuuninayaa inaad dejisato qorshe toosan oo caqliga geli kara.

Fikirka qaloocan wuxuu ku dhisan yahay boodbood iyo miyir la'aan, waxaanu kugu dhalinayaa qalbi jab murugo iyo khasaare. Muddo dhowr bilood laga joogo ayaan la kulmay nin joornaaliiste ah oo iska leh wargeyska Newyork Times ee caanka ah, waxaana ka sheekeysanay arrimo badan ilaa ay sheekadii nala gashay dagaalkii labaad ee dunida markaas buu yiri "markii dagaalku ka bilowday Yurub waxaa igu dhacay welwelkii iigu darnaa intaan noolaa, waayo waxaa iga adkaaday walaacii ilaa aan seexan kari waayey habeenkii oo dhan, waxaan ku meereysan jiray qolka hurdada mar marna waxaan qaadan jiray qalin markaas baan is masawiri jirey muddo dhowr bilood ah ayaan sidaa ahaa.

Ugu dambeyntii waxaan ku hanuunay wax I dejiya oon ka dhigtay bar tilmaameed, waxaanu ahaa wax I dejiyey eraygan laga soo guuriyay Injiil "hal tallaabo ayaa igu filan" waxaan ka helay xikmadaas aayad ka bilaabanta, "Nuurka eebahayow waxaan kaa baryayaa inaad gacanta I qabatid oo aad lugaha ii joojisid mana damacsani inaan gaaro meel dheer, waxaa igu filan hal tallaabo oo keliya" marka haddaan ka sheekeyay qisadii Sulzberger joornaaliistihii caanka ahaa ee reer Newyork waxaa habboon inaan ku ladho warqad iiga timid Yurub uuna soo diray nin la yiraahdo Tet Benjamin waxaanu ii soo diray sanadkii 1945tii,

waxaanu ku soo qoray sidatan; "waxaan ahaa sarkaal ka tirsan guddiga buug gelinta dhimashada oo raacsan gaaska lugta 16aad ee Mareykanka No (94) waxaa waajibkeygu ahaa inaan habeeyo magacyada askarta iyo saraakiisha dhimatay iyo kuwa la waayey, waxaan ka qeyb geli jiray faagidda meydadkii lagu duugay goobaha

dagaalka intii xabaddu dhaceysay waxaana jirtay in meydadku isku dhex jireen oo aan la kala sooci kareyn meydadkayaga iyo kuwa cadowgayaga, intaa waxaa ii dheeraa in guddigu ii xil saaray inaan soo ururiyo waxyaabaha ay ka tageen ciidamada dhintay ama la waayey ee gaarka u ahaa si loogu diro ehelkoodii, marka waxaas oo dhan waxay igu abuureen welwel joogto ah.

Waxaan hadba is weydiin jiray inaan nabad geli iyo in kale markaan godadka gelayo iyo meydadkan faraha badan ee aan hadba arkayo qof naf baxaya waxaa ii muuqan jiray siduu qofku ugu dhegan yahay nolosha, waxaan ku riyoon jiray anigoo laabta ku haya wiilkeygii yaraa ee iga dhintay markaas bay ilmo iga soo daadan jirtay oo aan ku baraarugi jiray oohinteyda, waxaa igu dhici jiray welwel iyo walaac ilaa uu miisaankeygii hoos u dhacay 34 rodol. Waxaan noqday ruux caato ah haddaan fiiriyo gacanteyda waxaan ku arki jiray xididadii oo bannaanka taagan oo maqaarkii keliya daboolayo waxaa igu sii batay walaacii ilaa aan ka baqay inaan waasho, waxaan ka shakiyey inaan shaqsi caadi ah noqon doono haddii dagaalku dhamaado.

Xaalkaygii wuxuu ku dhamaaday inaan galo isbitaalka goobta, waxaan la kulmay takhtar wanaagsan oo ii soo jeediyey waano aanan weligay hilmaameyn wuxuu igu yiri dhageyso Tet "adigu waad taqaanaa saacadaha qaruuraxa ku socda ee dadkii hore isticmaali jireen waxaa ku dhex jira kumaan kun xabbo oo qaruurux ah oo hadba mid ka baxo daloolka kuna dhaco dhalada hoos uga dhegan, nolosheenuna waxay la mid tahay xabbadahaas qaruuxa ah waayo waxaa mar kasta dhacaya hal xabbo oo keliya oo wax ka badan lama ridi karo haddii la rabo in saacaddu u socoto si nidaam leh, innaguna saacaddaas baanu la mid nahay markaan subixii kacno waxaanu arkaynaa howlo badan oo ina sugaya haddii aynaan hal hal u qaban howlahaas sidii quruuruxii hal hal u dhacayey waxaan halis gelineynaa jirkeena iyo nafteena, haddaba haku noojin naftaada ka welwelka waxa berri dhici doona".

Sidaas baan ku soo ceshaday caafimaadkeygii iyo faraxaygii nolosha, waxaana noqday nin caadi ah oo aan oggoleyn hamigu inuu ka dhooqeeyo nolosha, berrina waxaan u dhaafay waqtigeeda.

Waxaa jira xaqiiqooyin sugan oo la yaab leh oo ah in dadka jiifa isbitaallada badankood ama in ka badan kala bar ugu jiraan isbitaallada noog ka dhashay welwelka iyo walaaca, waxay awoodi lahaayeen dadkaasi inay ku raaxeystaan iftiinka qorraxda iyo hawada jidadka baladkooda, hadday ku camal fali lahaayeen xikmaddii Nebi Ciise oo aheyd "haku hamiyina Berrito" ama waanadii Oslar oo aheyd "ku noolow xuduudda maalintaada". Ku dhaqmid la'aanta xikmadaha aanu soo sheegnay waxay gaarsiiyeen dad badan inay isbitaallada galaan akhristayaasha sharafta leh waa inay ogaadaan inaynu u dhaxayno waqtigii tagay iyo kan soo socda awoodna uma lihin inaan wax ka beddelno waqtigii tagay ama inaan u habeyno waqtiga soo socda sidaan jecel nahay marka maxaan ugu murugoonaynaa wax aynaan awood u lahayn inaan beddenlo ama aynu u habayno sidaan rabno. Maxaan ugu waantoobi weynay erayga fannaanka caanka ah Robert I. Stevenson oo yiri; "qof kasta wuuu awoodi karaa inuu qabto howlaha loo xil saaray si kastaba ha u cuslaadeene, wuxuu yeeli karaa inuu maalin kasta shaqadeeda dhammeyo intaan cadceedu dhicin marka galabku dhacana wuu iloobi karaa dhibaatooyinkii maalintaas ku dhacay nolosha intaas oo keliya bay innaga rabtaa".

Bal dhagayso sheekadan dhabta ah ee ay werinayso qofkii ay ku dhacday, "anigu waxaan ahay Marwo E.K. Shielf oo reer Mexico ah, wuxuu iga dhintay ninkaygii 1937kii ka dib markuu ku dhacay cudur xun oo naga qaaday wax allaale wixii aan xoolo laheyn si daawo loogu helo ninkaygii, laakiin nasiib darro wuu dhintay waxaana ka dhaxlay saboolnimo aayatiin mugdi ah iyo keli ahaan ilaa aan ka quustay nolosha oo aan ku fekeray inaan is dilo. Ma ogi wax iga hor joogsaday is dilkii, oo markii tacsidii dhammaatay waxaan shaqo u doontay

nimaan horay ugu shaqeyn jiray si aan cunto u helo, wuxuu I siiyey ninkii shaqadeydii hore oo aheyd inaan kutub u iib geeyo tuulooyinka, xoogaa lacag ah ayaan ka uruursaday shaqadaas, waxaan gatay baabuur duug ah, xaaladii nolosheyduna way iska fiicnaatay, laakiin dareenkii murugada iyo wehel la'aantii waan iska saari kari waayey.

Sanadkii 1938dii waxaa igu weynaaday murugtii, waxaan ku fekeray mar labaad inaan is dilo, laakiin waxaa iga hor joogsaday markaan fikradayda is dilka ah gabar walaashey ah oo ka murugooneysa dhimashadeyda iyo anigoon heysan xoolo leygu duugo, markaas baan ka dheeraaday fikraddii is dilka aheyd, laakiin ma hilmaami karo inta madaxaygu saan leeyahay eray aan akhriyey siduu nafteyda u saameeyey ee uu u beddelay nolosheydii oo dhan, wuxuuna cinwaanka ereygu ahaa "maalinta cusubi waxay u tahay nolol cusub qofka garaadkka leh". Waxaan beddelay aragtideydii hore ee nolosha, maalintaa wixii ka dambeeyey waa iga suulay welwelkii oo aan ku beddeshay geesinimo iyo quudhsi dhibaatooyinka nolosha, waxaan noqday qof u jilib dhigaya dhibaataada maalin kasta ka hor imanaysa iyadoon u dheg dhigin dhibaatooyinka laga yaabo inay berri dhacaan, murtidii waxaan u qaatay maalin kasta inay tahay maalin cusub iyo nolol cusub.

Sidoo kale gabyaa reer rooma ah oo la oran jiray Horace wuxuu tiriyey tix gabay ah oo ku saabsan noolaanshaha maalintaada wuxuuna yiri; "waa badhaadhaa ninka ku magacaaba maalin kasta maalintiisa isagoo ku kalsoon naftiisa berrina u jilib dhigaya oo leh 'berriyahay waxaad doonto noqo anigu waan noolaan maalinteyda dhammaanteed", waxaa jira xaqiiqooyin qaraar oo laga argagaxo kuwaas oo ah in dadku ka dhuumanayaan nolosha dhabta ah waxayna jecel yihiin iney ku raaxaystaan waxyaabo ay ku riyoonayaan oo ka fog, waxaad dhihi kartaa waa yididiilo, waxaanse ku dhihi karaa waa dhuumasho dhabarku muuqdo oo laga dhuumanayo nolosha runta ah.

Stenensso waxaa laga sheegay inuu yiri; "maxaa ka yaab badan dadka? Markuu ilmaha yahay wuxuu u hanqal taagayaa wiilnimo, haddii uu wiil noqdo wuxuu u hanqal taagayaa barbaarnimo, hadduu barbaar noqdo wuxuu ku fekerayaa guur, haddii uu guursado dib buu u dhigayaa ku raaxaysiga nolosha ilaa uu ka duqoobo, markuu duq noqdana wuxuu dib u fiirinayaa noloshiisii hore, markaas buu ka xumaanayaa waqtigii uu iska dhumiyey, wuxuuna bilaabayaa murugo iyo shalaayto ah inaanu u raaxaysan sidii ku habooneyd iyo inaanu gaarin noloshiisii uu rabay" mar kasta dadku waxay u hanqal taagayaan waxa ka horreeya, wuxuu ka welwelayaa waqtiga soo socda hadduu waqigii dhaafay wuu u murugoonayaa, miyaanay dadku sidaa aheyn?.

Waa tan qiso kale oo ku saabsan welwelka cidhibtiisa dambe ha inooga sheekeeyo ninkii qisadu qabsatay oo ah Edward S. Svenset wuxuuna ku bilaabay, "anigu waxaan ku dhawaaday inaan is dilo welwel dartiis, intaan ku hanuunin in qiimaha noloshu tahay inaan saacad kasta xilligeeda ku noolaado ama hadba saacadda aan joogo ka faa'iideysto.

Anigu waxaan ka dhashay qoys sabool ah waxaana ku soo koray saboolnimo, waxaan iibin jiray wargeysyada oon ku noolaa, haddana waxaan ka helay shaqo karraaninimo ah dukaan khudradle ah, markaas baan guursaday waxaana dhalay 7 carruur ah, wuu ina deeqi waayey mushaarkii yaraa ee aan qaadan jiray markaas baan marar badan awoodi kari waayey quudinta qoyskeyga, waana ku dhici waayey inaan shaqada ka tago oo aan meel kale shaqo ka raadsado, markaan ciriirigii u adkaysan kari waayey ayaan ka tegay shaqadii waxaana furtay dukaan yar oo aan ku faa'iiday, shaqadii dukaanka baan sii ballaariyey ilaa ay ka badatay faa'iidada aan ka helaa sanadkii 20 kun oo doolar, anigoo iska ladan ayaa waxaa kacay bangigii aan lacagta dhigan jiray markaas baa la igu yeeshay 16 kun oo deyn ah, waxaan garan waayey si aan yeelo, wixii dunida masiibo jirtay oo dhan

ayaa mar keliya igu soo kulmay, waxaa iga adkaaday hamigii iyo welwelkii, waxaa I soo weerary cuduro ilaa aan ka caajisay socodkii, markaas baan isu diyaariyey dhimasho, takhtarkiina wuxuu igu waaniyey inaan diyaariyo dardaarankayga.

Anigoo sidaas ah ayaan xasuustay nolosheydii hore ee ciriiriga aheyd xusuustaas baa igu geesinimo gelisay inaan nolol cusub bilaabi karo, haddiiba waxaan iska dareemay inaan bogsanayo markaas baan ilaaway waanadii takhtarka ee aheyd diyaarinta dardaaranka, markay shan bilood ka soo wareegtay waan caafimaaday, markaas baan dib u bilaabay shaqadeydii inkastoo aan hadda helo toddobaadkii \$30 oo keliya, laakiin u shallaayi maayo wixii tegay, waayo waxaan ku deeqtoomay waxaan heysto kamana welwelo mustaqbalka, maxaa yeelay waxaa igu filan inaan maalin kasta ku noolaado maalinteeda.

Marka waxaa iga badbaadiyey halistii aan ku jiray waa xikmad aan ka faa'iideystay tijaabooyinkii I soo maray taas oo ah "ma beddeli karo wixii tegay awoodna uma lihi inaan garto waxa soo socda marka maxaan u murugoon ama aan u welweli", xikmaddaa oo kale waxaa gaaray waa hore Feylasuuf Giriig ah oo la oran jiray Heraclitus wuxuuna yiri; "ma jiro adduunka waxaan is beddeleyn oo aan ka aheyn qaanuunka, xitaa isbeddelka laftiisa wuu is beddelaa, tusaale ahaan haddii aad webi ku dhacdo ilbiriqsi kadib webigii laftiisa kuma dhici kartid mar labaad, maxaa yeelay ilbiriqsigii hore kadib webigu wuu isbeddelay oo way gudbeen biyihii hore ee aad ku dhacday, marka adiga laftaadu waad beddelantay oo ma tihid sidii aad aheyd ilbiriqsigii hore ee aad webiga ku dhacday. Mar haddii xaalku sidaa yahay maxaan isaga dhoobeyneynaa wanaagga oo aan waqtiga ugu dileynaa welwel iyo tiiraanyo.

Waxay dhihi jireen reer Room "ku raaxeyso maalintaada ka faa'iideyso nolosha maalintaada" taas oo loola jeedo inuu qofku kala baxo

maalintaas wax allaale wixii uu awoodi karo oo faa'iiido ah, waxaa ku taal Injiil ereyadan; "maalinka maanta ah ee Eebahay sameeyey waan ku reynreynayaa waana ku farxayaa" mana dhihin berri baan u dhiganayaa faraxa ama waxaan xusuusanayaa welwelkii shalay laakiin wuxuu yiri; "maantaan farxayaa isagoon ku xisabtamin waqtiga tegay iyo kan soo socda midna".

Nin la oran jiray John Raskin waxaa u yiilay xafiiska dhagax cad oo lagu qoray maanta, waxaanu uga dan lahaa in waajibku yahay in shaqada maanta iyo nolosha maanta la hirgeliyo laguna dadaalo in la fuliyo, haddii taasi dhacdo maalintaasi waa mid baraare ah.

Nin qoraa ahaa oo Hindi ah lana yiraahdo Katidas wuxuu qoray tix gabay ah oo loo bixiyey "salaanta waaberiga" waana tan tixdii; "maanta aad joogtid ku raaxeyso saacadaheeda yar, waayo waxaa ku qarsoon sirta jiristaada, maalintaasi waa noloshaada xaadirka ah, waxaa ku jirta mucjisada koridda iyo sharafta shaqada, shalay waa maalin tagtay oo dhammaatay, burrito waa yididiilo macaan iyo dhallanteed, maantase waa xaqiiqo jirta, haddii aan rabno inaan si fiican u noolaano waa inaan ilownaa shalay iyo berri, waayo waxay innaga shuqlinayaan wixii aynu qabsan laheyn maanta". Marka haddii aad dooneyso inaad ka erido noloshaada welwelka waxaa kugu habboon inaad fasho sidii uu falay Sir Oslar oo aheyd inuu ku nolaa soohdinta maalintiisa, hadaba u jeedi naftaada su'aalahan:-

- 1- Ma dhumisaa waqtiga aad joogtid adigoo ka fekeraya mustaqbalka?
- 2- Maka tiiraanyootaa wixii shalay ku dhaafay inkasta oo aanad waxba ka beddeli Karin?
- 3- Maka toostaa hurdada adigoo ku tashaday inaad ka faa'iideysato maalintaada in Allaale intii suuragal ah?

- 4- Ma kula tahay inaad ku liibaaneyso noloshaada haddii aad raacdo waanada Sir Oslar?
- 5- Goorma ayaad bilaabi doontaa ku dhaqanka arrimaha aad ku qanacday, ma burrito ma toddobaadka soo socda mise maantaba?

QEYBTA LABAAD

HABKA UGU FIICAN EE LAGU XALIYO ARRIMAHWA WALBAAHARKA

Dadka oo dhami waxay doontaan daawo haddii ay jirradaan, waxaase fiican in laga hortago jirrada inta aanay dhicin, waana taas waxa igu xambaaray inaan soo kordhiyo daawo waxtar leh oo dhaqso u muuqanaysa laguna dhaqmi karo mar kasta daawadan waxaan helay mar aan laba sano jahawareersanaa oon asqeydnaa, waxaa la arkaa inaad jeceshahay inaan dhaqso daawada kuugu sheego haddaba kugu raajin maayo ee bal akhri sheekadan:-

Anigu waxaan ahay Wallies Carrier oo ah farsamo yaqaan ka tirsan shirkadda "Carrier Corporation" ee ugu magac dheer magaalada Newyork, shirkaddu waxay igu tirisaa inaan ka mid ahay hantideeda taasina waxay I gaarsiisay darajo sare, laakiin kuma raaxeysan magacii lacagtii iyo darajadii aan gaaray. Waxaan la kulmay barbaarinimadeydii maalmo adag maxaa yeelay waxaa aad ii dhibi jiray walbahaarka, waxaan ka xusayaa dhibaatooyinkii I qabsaday hal arrin keliya oo ku filan in la sugo in qofku awood u leeyahay inuu ka adkaado walbahaarka, arrinkaas oo aan weli maskaxdeyda ka bi'in.

Wuxuu yahay markaan yaraa ayaan shaqo ka helay shirkadda Forge ee magaalada Buffalo, subax buu ii yeeray agaasimihii shirkadda, wuxuuna ii xil saaray shaqo gaara oo ah inaan soo curiyo aalad lagu sifeeyo gaas warshad ay leedahay shirkad rukun inoo ah oo sameysa dhalooyinka. Waxaan bilaabay shaqadii dhibaatooyin badan kadib waxaan soo saaray aaladdii markaas baan farax la duuli gaaray, laakiin farxaddii way bidday markay aaladdii dhaafi weyday tijaabadii ugu horreysay, runtii waxba lama harin mana maskax xumayn si aan u soo saaro aaladdaas, laakiin cilmiga sifeynta gaaska ayaan ku cusbaa, markaa waxaa iga hor yimid dhibaatooyin aanan xisaabta ku darsanin, waxaa I wareeriyey hungadii, waxaan dareemay in nolosha ii hartay

aanay wax qiimo ah ii laheyn mar haddaan leeyahay maskax I xasuusinaysa inaan ahay nin hoogay oon waxtar aheyn, waxaa iga tegtay hurdadii waxaana iga xumaaday xubnihii cuntada shiidayey, waxaa igu dhegay saxaradii, mindhicirkiina waa howl gabay, markaas bay dunidii mugti igu muuqatay.

Anigoo ku jira xaaladaas cadaabta ah ayuu ii ifay nuur ka yimid maskaxda kaas oo igu hanuuniyey nolol cusub oo cagta ii saaray jidkii liibaanta iyo guusha, jidkaas oo I gaarsiiyey inaan ka noqdo agaasime shirakaddii lafteeda. Waxaan ogaaday in walbahaarku ka kooban yahay saddex qeybood markaas baan ku dhaqaaqay sidii aan qeyb kasta goonideeda ugu xalin lahaa waxaana raacay saddexda dariiqo ee hoos ku xusan.

1. Waa inaan furfuro dhibaataada anigoo ka bilaabaya meesha ugu kulul, waxaan is weydiyey maxay shirkaddu igu sameyn kartaa haddaan kari waayo oon ku hungoobo soo saaridda aaladda, waxaan ogaaday inaanay shirkaddu maxkamad I hor taageyn oon la I xireyn xitaa hadday isku daydo in laygu xukumo toogasho inaanay u suuroobi kareyn. Shirkadda waxaa ka baxay 20 kun oo doolar si loo curiyo aaladda cusub, marka waxay ka bixin kartaa shirkaddu khasaarahaas kharashka loogu tala galay tijaabooyinka.
2. Dhibaataada ugu weyn ee shirkaddu I gaarsiin karto wuxuu noqon karaa in shaqada layga saaro, waxaana markaas suuragal ah inaan meelo kale shaqo ka helo, inkastoo bartii madoobeyd ii raacayso shaqada kale, laakiin igama hor joogsaneyso inaan nolol cusub bilaabo, waayo waxaan dhacsiin doonaa markaas maskaxdeyda cusub inaan lagu wada guuleysan tijaabooyinka, waxyaabihii culimadu curiyeen oo ay inta lagu hungoobay badneyd. Markaan talooyinkaas is hor keenay ayaan goostay inaan diyaar u noqdo wax kasta oo iga hor yimaada, markaas baan dareemay iney dabeyl cusub oo raaxa iyo deggenaana ah I soo gashay, waxaana igu

dhashay isku kalsoonaan, waxaa fiicnaaday caafimaadkeygii, waxaa iga baxay walaacii iyo welwelkii, waxaana u gaddoomay nin nolosha ku qaabilaya isku kalsoonaan.

3. Mar haddii guushu dhib tahay hungaduna hoog tahay maxaan isugu dayi waayey inaan hungada la dagaalamo oo aan badbaadiyo wixii suuragal ah si khasaruhu u yaraado taasoo mar kasta aniga faa'iido ii ah, waxaa igu war wareegeysay markaas fikrad aan ka baqayey hirgelinteeda, maxaa yeelay waxaa loo baahnaa in shirkaddu bixiso 5000 \$, waxaan ku fekerayey inaan shirkaddu waxba u noqoneyn haddii mar kale lagu guuleysan waayo fikradeyda, mar haddii aan ku qiyaasay khasaarihii tijaabadii hore, 20 kun oo doolar, marka haddii lagu daro 5 kun oo kale miisaaniyadda shirkaddu ma dhumeysa haddii ay khasaarto 25 kun oo doolar, markaas baan ku dhaqaaqay fulintii tijaabadaas, nasiib wanaag tijaabadii waan ku liibbaanay, aaladdiina waxay ku soo baxday sidii la rabay. Shirkaddii waxay ka macaashtay 15 kun oo doolar, markii laga bixiyey kharashkii khasaaraha ee tijaabooyinkii oo dhan, hadda waxaan noqday nin abwaan ah oo gacan u fidiya dadka ay ku dhacdo jirrada welwelka.

Waxaan ku iraaqdaa dadka ka bilow fikradda ka xoroobidda walbahaarka, barta ugu kulul kadibna isu diyaari waxa ugu xun ee ka iman kara markaas waxaa soo baxaya awoodda xayiran ee walbahaarku keenay, waxaadna dareemi doontaa nolol cusub oo jirkaaga iyo caqligaaga ka duxaysa.

Tani waa qisadii Walies Carrier, umana baahna faallo iyo faafaahin midna, waayo sida runta ah walbahaarku dhulkuu nagu gilgilayaa si dhab ahna uma fekeri karo nin dhulku la gariirayo, inkastoo Wallies xikmadan kala soo dhex baxay tijaabooyinkiisa gaarka ah waxaa uga hormaray Walliam james aabaha Cilmi-nafsiiga casriga ah wuxuuna yiri; "aqoonsiga arrin horay u dhacday oo ina dhibeyso inaan xasuusano

waa tallaabada ugu horeysa ee lagaga adkaan karo dhibaatooyinka in hor yaal, markaas waxaa habboon in qof kasta diyaar u noqdo aqoonsiga xaqiiqada jirta?

Ra'yigaas oo kale waxaa gaaray isaguna Feylasuuf reer Shiine ah oo la oran jiray Lir Yutang, wuxuuna ku sheegay buuggiisii, "ahmiyadda nolosha" degenaanshaha naftu waxay ku dhalaneysaa in la aqoonsado xaaladda ugu xun uguna dhib badan, waxaana saldhig u ah fikradaas cilmi-nafsiga oo qaba in aqoonsiga xaqiiqada uu dabarka furayo dhaqdhaqaaqa qofka, waxay ila tahay in xaqiiqadani fududahay oo dadka intiisa badan aanay dood ka qabin laakiin waxaa la yaab leh in malaayiin dad ah aanay ku dhaqmin sida xaqiiqadani fareyso oo ay ku tebiyaan waqtigooda welwel iyo walaac.

Waxaa jirta qiso kale oo ninkeedii ka adkaaday walbahaarka, waana nin ka mid ahaa ardaydayda, waxaan ka cudurdaaranayaa inaan xuso magaciisa, wuxuuna yiri; "Anigu waxaan madax ka ahaa shirkad ka shaqeysa soo saarista batroolka sifeyntiisa iyo iibkiisaba, waxaan ugu shubnaa batroolka dadka rukunka noo ah booyado waaweyn oo ay wadaan shaqaalaha shirkadda, muddo dheer bay shaqadu sidaas ku socotay ilaa aan ka ogaaday iney wadayaasha booyaduhu xadaan batroolka ay qaadaan, waxaan isku dayey inaan wax ka qabto waanse awoodi waayey", maalin maalmaha ka mid ah ayuu xafiiska iigu soo galay nin ay heybadi ka muuqato oo xaragoonaya markaas buu igu yiri; "waxaan hayaa warar xaqiiqo ah oo caddeynaya in wadayaashiinu xadaan batroolka, aniguna waxaan ahay baadhayaasha lacagta xagga dawladda, wuxuuna ii soo bandhigay inaan lacag siiyo si uu sirtaa indhaha uga qarsado, markaas baan fekeray oo aan is weydiyey inaan xoolaha shirkadda ku bixin karo baad iyo in kale, iyo inay shirkadda dan u tahay in loo hogaansamo hanjabaadaas iyo in kale, haddiise ay u hoggaansanto soo ninkaasi mar kasta dooni maayo in la siiyo baad joogto ah.

Haddii ay shirkaddu diido baaddaas maxaa dhici doona? Waxaa la arkaa in arrinku soo baxo oo wargeysyadu faafiyaan, taas oo dhaawacaysa magaca shirkadda lagana yaabo inay weydo kalsoonidii lagu qabay oo ay halkaas ku baaba'do, markaas baan ka codsaday ninkii inuu I sugo muddo toddobaad ah si aan ula soo tashado guddiga shirkadda run ahaan hadalkii ninka aad buu ii cabsi geliyey, wuxuuna igu dhaliyey welwel iyo walbahaar, waxaan dareemay in saldhigii shirkaddu lulanayo jiritaankeeduna halis ku jiro, laakiin markaan ka soo qaaday in dhibkaasi dhaco shirkadduna baaba'do maxaa aniga I soo gaaraya oo dhib ah? Waxaan isugu jawaabay haddii shirkaddu baaba'do shirkad kale ayaan shaqo u doonanayaa markaas bay neef weyni iga soo baxday iina suurto gashay inaan si dhab ah u fekero, waxaan goostay inaan arrinka u bandhigo qareenka shirkadda waana u bandhigay, wuxuuna igula taliyey inaan arrinka gaarsiyo xeer ilaaliyaha guud.

Waxaan u tegay xeer ilaaliyihii anigoo aad u welwelsan laakiin bashaashnimadiisii iyo hadalkiisii ayaa iga feyday murugadii I heysay, shirkadiina badbaadiyey, wuxuuna igu yiri xeer ilaaliyihii; "ninka isugu kaa sheegay hanti dhowrka waa beenaale dhagar badan oo boolisku raadinayo, marka waxba haka baqin", waxaa dhamaaday todobaadkii aan u qabtay iyo mid kaleba, laakiin ninkii hanti dhowrka beenbeenta ahaa iguma soo laaban, waxa laga yaabaa inuu ogaaday inaan hanjabaadii waxba u tareyn haddii uu igu soo noqdana la qaban doono.

Wuxuu yiri agaasimihii shirkaddu; "arrintaasi wuxuu I baray cashar aanan waligeey hilmaameyn kaasoo ah ku talagalka xaaladda ugu xun uguna adag kadbina halkaas ka bilow xallinta mashaakilka".

Tanina waa qiso kale oo xoogaa la leh laakiin walbahaarku dhib weyn uma geysanin ninkii weriyey oo la oran jiray Earl B. Haney oo ka

tirsanaa magaalada Borokalin wuxuu qabay ninkani boog-calooleed mindhicirka ayaana bararay oo malaxi ka gashay waxay kula taliyeen sadex takhtar oo daaweyneysay inuu dardaarmo, kana argagixin dhimashada. Markuu ogaaday inuu geeri gadaanka u saaran yahay ayuu ka tegay shaqo weyn oo uu mushaar badan ka qaadan jiray, wuxuu iska fariistay gurigiisii isagoo sugaya malagii nafta ka qaadi lahaa, intaanu u iman malagii ayuu si kedis ah u go'aansaday inuu mar dunida ku soo wareego, waana yididiilo uu weligii doonayey, markaas buu damcay inuu ka gaarsiiyo intayar ee nolosha uga hadhay.

Markuu arrintiisii oo dhan kala hagaajistay sidii nin aakhiro u ambabaxaya uuna dardaarankiisii qoray ayuu raacay markab u baxayey Yurub, wuxuuna horay u sii qaatay sanduuq saan ah oo qurux badan si loogu rido meydkiisa markuu dhinto, dadkii aad bay ula yaabeen nin dalxiis u socda oo haddana karfantiisii wata, laakiin Haney uma aabo yeelin dadkii ku jeesjeesayey. Sidoo kale, uma dheg dhigin taladii takhaatiirta oo aheyd inaanu qaadan cunto adag iyo cabid adag, laakiin Haney wax kasta wuu cunay, wuuna cabay weliba aad buu u ciyaari jiray, wuxuu sameeyo oo dhan maalin kasta wuxuu u soo qori jiray qaraabadiisa iyo takhaatiirtiisa.

Haney wuxuu ku soo wareegay dunidii isagoo soo xaqiijiyey dantiisii uu ku xaqiijin kari waayey cafimaad qabka wuxuuna ku soo noqday magaaladiisii iyo shaqadiisii hore ee uu uga tegay inuu aakhiro u socdo darteed.

Ma kula tahay haddii uu u hogaansami lahaa walbahaarka iyo cabsida inuu guushaas gaari lahaa, shaki kuma jiro haddii uu isu dhiibi lahaa hamiga iyo murugada inuu halkaa ku baabi'l lahaa oo malihii takhaatiirtu rumoobi lahaa, laakiin markuu diiday walbahaarkii ayey noloshiisii soo noqotay cudurkiina iska tegay.

Sheekooyinka inoo soo hormaray waxaan kala soo dhex bixi karnaa qaaciddo wanaagsan oo ah:-

1. Haddii uu ku qabsado mashaakil walbahaar kuu keenaya xusuuso Wallies H. Carrier kuna dhaqaaq tallaabooyinkiisa saddexda ahaa:
 - a. Is weydii maxay tahay xaaladda ugu xun uguna dhib badan ee dhici karta
 - b. Ku talagal in xaaladaasi dhacdo oo ay ku qabsato
 - c. Ku dhaqaaq inaad qabato wixii aad awoodi karto.

QEYBTA SADDEXAAD

MUXUU KU GAARSIIN KARAA WALBAHAARKU

Xafiiska u xilsaaran caafimaadka guud ee magaalada Newyork waxay ka war heleen in laba qof u dhinteen cudurka furuqa, wargeysyadiina waxay baafiyeen khatarta cudurkaas, markaas bay dadka badankiis ku dhacday cabsi iyo argagax. Nin deris ii ahaa ayaa irrida igu soo garaacay, isagoo cabsi la gariiraya, wuxuuna igu waaniyey inaan si dhakhso ah isu tallaalo. Anigu waxaan ku noolaa magaaladaas 38 sano, waxaana deggenaa dad dhan 8 milyan. Marka waxaan la yaabay siday u cabsi galisay dadkii magaalada deggenaa laba qof oo furuq ka dilay dad 8 milyan dhan muddo 38 sano ah.

Intaan deggenaa Newyork weli ma arag qof iiga digay cudurka walbahaarka inkastoo uu dilay muddadaas toban kun jibbaar inta uu dilay cudurka furuqa. Run ahaan tobankii qof ee mareykan ahba mid baa halis ugu jira in xiddidadu shaqo gabaan, waxaana u sabab ah walbahaarka. Sidaas darteed, anigu waxaan garaacayaa iridda akhriste kasta si aan uga digo cudurka halista ah ee loo yaqaan walbahaarka.

Nin la yiraahdo M. Alexis Carrel oo ah qoraha kitaabka caanka ah ee loo yaqaan "qofku waa wax makhluuq dahsoon ah", qorahaan oo ah takhtar la yaqaan oo caan ah, wuxuu qiray in shaqaalaha iyo ganacsatada aan ka hortagin walbahaara inay cimri degdegayaan oo dhimanayaan iyagoo dhalinyaro ah, waxaan qabaa in dadka u soo noqnoqda isbitaalada badankood inay daaweyn karaan naftooda kana bogsiiin karaan jirooyinka haya, haddii ay iska bixiyaan qoolka walbahaarku ku xiray, hana u qaadinin inaan u heysto in jirrooyinka dadkaas haya yihiin kuwo male iyo dhalanteed ah, waxaanse u arkaa inay yihiin kuwo xaqiiqo ah oo u dhigma ilka xanuunka, qabsinka, boog-caloolleedka, wadno xanuunka, hurdo la'aanta iyo qalalka.

Aniga lafteyda waxaa igu dhacay boog-calooleed, waxay I heysay muddo dhan 12 sano, wixii aan waayo aragnimo lahaa baan isugu geeyey si aan isaga daweeyo laakiin waan ku hungoobay inaan daawo u helo, ugu dambeyntii waxaan ogaaday in walbahaarku sabab u yahay, markaas baan iska eryey walbahaarkii, mar dambena ma aanan dareemin laxawgii oo waan ka bogsooday jirraddii boog calooleedka aheyd.

Run ahaan cabsidu waxay keentaa walbahaar isaguna wuxuu kiciyaa xididdada dareenka, kuwaas oo daciifiya xiddidada caloosha, biyaha cuntada shiidana waxay u gaddoomaan sun "aysiidh" sidaa waxaa ii sheegay Dr. O. F. Goble oo ah takhtar weyn oo ka tirsan midowga isbitaallada Gulf Colorado iyo Sant. Mar aan wareegayey walaayadda Texas, Dr. Joseph F. Montgue, waa ninkii dejiyey kitaabka la yiraahdo gaddoonka xiddidada dareenka caloosha, wuxuuna sheegay inaan boog-calooleedku ka dhalan wax aad cuneysa laakiin uu ka dhasho waxa ku cunaya, wuxuuna ula jeeday waa ku cunaya "hamiga iyo qamiga" Dr. W. C. Alrores wuxuu u tiiriyey jirooyinka boog-calooleedka badankood iney ka dhashaan gadgaddoonka caadifadda iyo jahawareerka xididdada dareenka, waxaanu gaaray Dr. W. C. Alrores xaqiiqadan kadib markuu baaray in ka badan 15 kun oo jiroole ayuu yiri; "Waxaa sugnaatay in 100kii qof ee jirro u soo gala isbitaalka in 80 ka mid ahi aysan qabin cudurro xagga jirka ah laakiin ay qabaan cudurro kaga yimid xagga welwelka iyo walbahaarka.

Waxaa kale oo sidaa caddeynaya khudbad uu ka jeediyey Dr. Harold shir ay yeesheen ururka takhtarrada Mareykanka ee ka shaqeeya warshadaha, wuxuuna sheegay markuu baaray 176 qof oo ganacsato ah in 33% aanay qabin jirooyinka ka dhasha xagga kicitaanka xididdada dareenka kuwaas oo ah cadaadinta dhiigga, garaacidada wadnaha, iyo boog calooleedka, wuxuuna ku daray 'waxaa murugo leh inay dadkaasi ku dhinteen in ka yar 45 sano, marka mirihii libaantooda xagga

ganacsiga waxay noqotay cimri degddeg waxbana kama faa'iidin magacii iyo xoolihii ay heleen'.

Waxaa hubaal ah in ninka beeraleyda ah ee ka shaqeeya beertiisa inuu saddex jeer wax cuno maalintii uuna xirto shaati iyo surwaal sida ganacsatada oo kale weliba waxaa jirta inuu ka qalbi degan yahay kana walbahaar yar yahay ninka ganacsatada ah ee magaca dheer, anigu waxaan door bidayaa inaan noqdo nin beeraley ah oo ku nool nolol caadi ah kuna raaxeysanaya cuntada uu cuno intaan noqon lahaa nin magac sare leh oo aasaasay shirkad weyn ama dhisay jidad tareenno isla markaana halis u ah inay ku dhacdo boog-calooleed ama kaadi sonkorow iwm.

Shirkad lagu magacaabo Walaalaha May oo isbitaallo waaweyn ku leh dalka Mareykanka; waxay caddeysay dadka bukaan jiifka ah in ka badan kala bar inay qabaan cudurro la xiriira dareenka oo aan jirka aheyn, haddana haddii la baaro xididdada dareenka waxaa muuqanaya iney caafimaad qabaan oo ay caadi yihiin, maxaa yeelay kamay dhalan jirooyinkooda waxyeelo gaadhay xiddiddada dareenka ee waxay ka dhasheen caadifooyinka kacsan sida carada, murugada, jaceylka, naceybka iwm, waxaana intaas ka sii daran cabsida iyo qalbi jabka la xiiriira.

Waxaa laga soo wariyey Palato abwaankii falsafadda ee Giriigga ahaa inu yiri "takhtarraddu waxay daaweynayaan jirka caqliga la'aantiis, taasina waa gef weyn sababtoo ah caqliga iyo jirka waa laba shey oo qof keliya wada leeyahay". Sida dhabta ah cilmiga takhtarnimadu wuu ku guulaystay daaweynta jirrooyinka jirka ilaa heer sare, qalliinkuna wuxuu gaadhay heer aad u sarreeya, laakiin nasiib darro cilmiga heerkaa gaaray wuu ka caajisan yahay jirrooyinka ka dhasha caadifooyinka ee raqdoodu sii badaneyso maalinba maalinta ka dambeysa.

Dagaalkii labaad ee dunida waxaa loo diiday kumanyaal dhallinyar inay ku biiraan ciidamada qalabka sida, wax yar oo ka mid ahaa dhallinyaradaas waxaa loo soo celiyey dhaawacyo ama iimo jirkooda gaadhay darteed, laakiin intooda badan waxaa loo soo celiyey inay naftoodu buktay oo ay qabtay cudurro nafsii ah oo aan ka soo qaadan karno jirrooyinka waalida.

Ma taqaanaa sababta loo waasho? Ma jiro qof yaqaan sababta loo waasho laakiin takhtarro badan waxay qabaan in sababtu ka dhalato cabsida iyo walbahaarka maxaa yeelay qofka walbahaarku ku raago wuxuu noqonayaa qof caajis ah oo aan ka hortagi Karin dhibaatooyinka nolosha iyo xallinta mukhkilooyinka. Sidaas awgeed wuxuu abuurayaa xaalado dhallanteed ah oo waafaqsan awooddiisa, markaas buu wuxuu u dhaqmayaa sida uu rabo xaalka cusub ee dhalanteedka ah, markaas buu u muuqanayaa si dadka ka gaar ah oo lala yaabo siduu waxaas u wado ayuu gaarayaa heerka waalida.

Sida runta ah walbahaarku ninka raga ugu xoog badan wuxuu u beddelayaa daciif tabar daran oo si fudud loo jebin karo, waxaana arrinkaa daaha ka qaaday General Grant wax yar ka hor intaanu dagaalkii sokeeye ee Maraykanku dhammaan waxaanu weriyey qisadan; "waxaanu qabanay magaalada Richmond laakiin ismay dhiibin markaas baan dul degnay oo aan hareereynay muddo sagaal bilood ah ayaana kor fadhinay oon sugeynay inay is dhiibto.

Xaaladda magaaladu aad bay u xumeyd, askartii General Lee ee innaga soo horjeeday way baahdeen, dadkii magaalada ku noolaana waa macluulay, ciidamadaydii waxay gubeen bakhaarkii cudbiga ee baladka waxayna burburiyeen jidkii tareenka, waxaa ku dhacay guud ahaan dadkii magaalada quus iyo qalbi jab, qaarkoodna wayba waasheen. General Lee oo ahaa madaxa Ciidamada la hareereeyey intaanu is dhiibin habeenkaas waan seexan kari waayey jirro iga

heysay lugaha darteed, waxaan isku dayey inaan biyo kulul ku diiriyo kubka waxaana ku dhawaaday inaan quusto, maxaa yeelay aad baan u walbahaaray habeenkaas.

Waxaan dareemay inaan aad daciif u ahay, laakiin si degdeg ah baan uga bogsaday jirradii I heysay oo dhan, waxaana noqday nin caadi ah oo xoog leh, kumana bogsan daawooyinkii iyo biyihii kululaa midna laakiin waxaan ku bogsady war uu I soo gaarsiiyey sarkaal ka tirsan ciidamadeyda oo ii sheegay in General Lee oggolaaday inuu is dhiibo, markii warkaa la ii sheegayey waxaan basteey la ahaa madax wareer, laakiin haddiiba wuu iga ba'ay markaan akhristay dhambaalkii uu isku dhiibay General Lee iyo ciidamaiisa, marka waxaa cad in jirrada Geneeral Grant aheyd walbahaar nolosha ka dhoobeeyey.

Markaas kadib 70 sano nin la oran jirey Henry oo ahaa wasiirkii lacagta ee xilligii madaxtooyada Roosevelt wuxuu ogaaday in walbahaarku u soo jiiday cudur madax wareer la jiro, markuu ku khasaaray qamadi badan oo uu iibsaday. Waxaa sugnaatay in sonkortu ku kororto kaadida dadka ganacsatada ka ah suuqyada shirkadaha markay qiimaha saamiyadu hoos u dhacaan.

Waxaa laga soo weriyey nin la oran jiray Montagu oo abwaan ku ahaa falsafadda una dhashay faransiiska mar loo doortay madaxtinimada dowladda hoose ee Baladkiisa oo ay dadkii u hambalyeeyeen inuu ku yiri dhageysta, "anigu diyaar baan u ahay inaan arrimihiina ku maamulo gacmaheyga, laakiin beerkeyga iyo caloosheyda raalli baad iiga noqoneysaan inaan idinku maamulo" wuxuuna taas ula jeeday walbahaarka beerka googoynaya calooshana qoomaya.

Sidoo kale Dr. Russdle oo Bare ka ahaa kulliyadda Caafimaadka Carwell warbixin uu qoray wuxuu ku sheegay in ololka xubnaha uu ka dhasho sida badan mid ka mid ah waxyaabaha soo socda:

1. In lagu hungoobo ama lagu fashilmo guurka
2. Khasaare xagga dhaqaalaha ah ama dhibaato murugo keenta.
3. Welwelka iyo walbahaarka
4. Argagaxa joogtada ah.

Waxaa tusaale u soo qaadan karnaa nin saaxiibkey ahaa oo ka shaqeyn jiray shirkad gaaska iibisa, shirkaddii baa kacday waxaa ku dhacay saaxiibkay jug weyn oo xagga dhaqaalaha ah xaaskiisiina waxaa ku dhacay jirro xubno xanuun ah, waxay u tagtay takhtarro fara badan, hase yeeshee waxba uma tarin daawadii, markii ninkeedii shaqo helay horay bay ka bogsatay marka walbahaarkii ninkeeda iyo shaqadiisa baa u keenay cudurka, markay walbahaarkii ka baxdayna way bogsatay, walbahaarku wuxuu baabi'iyaa ilkaha, sababtoo ah qiyaasta kaalshiyamka ee jirka lafaha ayaa yaraanaya marka qofku walbahaaro, waxaana sidaa caddeeyey Dr. Wiliam mar uu u khudbeynayey ururka takhaatiirta ilkaha ee Mareykanka.

QEYBTA AFRAAD

RAAXEYSIGA IYO ISMAAWEELINTU WAA DAAWADA WALBAHAARKA

Qofkii doonaya inuu nasto waa inuu jimicsado oo is kala bixiyo si uu naftiisa u dareensiyo raaxada jimicsiga, qofka nasanaya waa inuu u raaxeeyo jirkiisa oo uu hurdada badsho waqtiyada uu gacan bannaan yahay oo uu ku raaxeysto maqalka muusikada, waa inaanu dib u xasuusan waxyaabihii xumxumaa ee soo maray, waa inuu xasuustaa waxyaabihii faraxa lahaa ee uu soo maray, haddii aad raacdo waanooyinkan haka baqin hadda ka dib wax walbahaar ah waayo waxaad noqon doontaa qof saacid ah oo farax badan oo weji furan.

Nin saaxiibkey ah oo walbahaar hayo ayaa takhtar u tagay markaas baa la weydiyey waa maxay waxa kugu kiciyey walbahaarka? Waxaana looga digay haddii aanu iska saarin walbahaarka inuu gaarsiin doono cirib xun oo uu waliba halis u yahay jirrooyinka ah boog-caloolleed, wadna xanuun iyo kaadi macaan, kuwaas oo ah dhammaantood jirrooyinka ilmo adeer ah oo ka dhasha walbahaarka.

Mar baan soo booqday xidigta filimada ee caanka ah Marle Obbersson, waxay ii sheegatay inay wax badan diiday iney soo dhaweyso walbahaarka, sababtoo ah waxay ogaatay in walbahaarku burbiriyo sheyga ugu qiimaha weyn qofka jilaaga ah, sheygaas oo ah quruxda iyo bilicsanaanta, waxay iiga sheekaysay dhibaato qabsatay, waxayna ku bilowday sidan; "markii igu horreysay ee aan isku dayey inaan metalo filimada waxaa igu dhacay cabsi iyo welwel, waxaan ka imid Hindiya waxaana imid London si aan u metelo filimada darteed.

Magaalada London ee aan imid qofna kama aqoon, waxaan doontay shaqo mana helin wax shaqo ah oo waxaan ku noolaa muddo laba todobaad ah biyo iyo rooti keliya, waxaan tegay dhowr meelood oo ku shaqo leh soo saarista filimada, way I diideen dhammaantood inay

shaqo I siiyaan, markaas baan aad u ciishooday oo nafteydii ku canaantay siday u oggolaatay inaan imaado dhulkaan aanan cidna ka aqoon si aan filimada uga shaqeeyo anigoon weliba aheyn qof aad u qurux badan oo indhaha soo jiidanaysa, waxaan isku fiiriyeey muraayad, markaas baan ka yaabay fool xumada ka muuqatay wejigayga iyo dhabanadeyda oo duuduubmay walbahaarkii iyo gaajadii I heysay darteed, markaas baan ogaaday haddaan saas ku sii socdo inaan hoog iyo ba' la kumi doono, waayo quruxdu waxay aheyd badeecadda keliya ee aan la shir imid, markaas baan goostay inaan joojiyo walbahaarka si ay quruxdeydii u soo baxdo, runtii waan ku guuleystay arrinkaas oo si deg deg ah bay u soo baxday quruxdeydii, markaasaa laygu soo dhaweeyey inaan filimada wax ka metelo.

Sida runta ah ma jiro cadow uga daran quruxda haweenka walbahaarka, maxaa yeelay dhakhso buu u gaboojinayaa wuxuuna ku dhalinayaa cirro oo wuxuu duuduubayaa dhabanada oo uu fool xumeynayaa. Waxay muujiyeen tiro koobyoo laga soo saaray dalka Mareykanka in walbahaarku yahay sababaha dhaliya dhimashada ee koowaad.

Dagaalkii labaad ee dunida waxaa ku dhintay goobaha dagaalka in ka badan 35 kun oo askari, islal markaana wadna xanuunku wuxuu dilay laba milyan oo ka mid ah dadkaas oo u soo jiiday wadno xanuunka walbahaarka iyo welwel gadoodiyey xididdada dareenka. Marka wadna xanuunku waa sababihii ku xambaaray Dr. G. Carrier inuu dadka u baaqo oo yiraahdo "dadka aan garaneyn sida loola dagaalamo walbahaarka waxay dhimanayaan iyagoo dhallinyaro ah oo xoog badan".

Afrikaanka deggan Koonfurta-Ammeerika iyo dadka Shiinaha ah waa dhif inuu ku dhaco wadno xanuun, sababtoo ah waxay u qaadanayaan dhibaatooyinka ka hor yimaada si fudud oo sahlan.

Takhtarrada u dhinta wadnaha oo istaaga waxay ka badan yihii, labaatan jeer dadka beeraleyda ah ee u dhinta jirrada wadnaha, sababtoo ah takhtarrada mar kasta waxaa kacsan xididdada dareenka.

Wuxuu yiri William James' Haddii Eebbe kuu dembi dhaafo waxaan kuu dembi dhaafeyn xididdada dareenka", haddana dhageyso xaqiiqda la yaabka leh ee aadan rumeysan Karin taas oo ah "in dadka Mareykanka ah ee naftooda dilaa ay ka badan yihiin kuwa u dhinta jirrooyinka kale oo dhan! Waa maxay sababtu? Jawaabtu waxay tahay waa walbahaar, waxaa dadka garasho tiray ee u geddinaya noloshiisa cadaab aan loo adkeysan kareyn.

Shiinuhu markay doonayaan inay ciqaabaan dadka ay qafaashaan garbadaub bay u xiri jireen markaas bay hoos dhigi jireen tubada biyaha, markaas bay in yar ku furi jireen si ay hadba dhibic ugu dhacdo madaxiisa, markay saas muddo ku socdaan biyaha dhibcaha ahi qofku wuu waalan jiray, waxa iyana habkaas dadka ay qafaashaan ula dhaqmi jiray Spanishka, waagii Maxkamadaha Baarista, sidoo kale ayuu isticmaali jiray Jarmalka waagii Hitler xukumayey. Marka walbahaarku wuxuu aad ugu dhow yahay dhibcaha biyaha ah ee ku soo dhacaya maskaxda qofka oo sidaas ayuu walbahaarku dadka u gelayaa.

Waagii aan yaraa waxaan dhageysan jiray wacdiga wadaaddada, markaas waxa igu dhici jirtay cabsi marka la tilaamo caddaabta Aakhiro, laakiin wacdigu waxba kama sheegi jirin cadaabta walbahaarka ee dunida aynu ku nool nahay.

Ma jeceshahay nolsoha? Ma dooneysaa inaad ku raaxaysato xoogga iyo caafimaadka? Haddii aad sidaa dooneysid akhri xikmadan uu qoray Alexi Carrel oo ah "dadka awoodda u leh inay xukumaan dareenkooda iyo naftooda iyagoo ku dhex nool meel buuq iyo qeylo badan waxaa hubaal ah inay ka fog yihiin walbahaarka oo ay ka nabad gelayaan

jirrooyinka welwelka ka dhasha". Hadaba waxaa lagu soo jeedinayaa su'aal ee si daacad ah uga jawaab, maxaa yeelay faa'iidada adigaa iska leh.

Maku noolaan kartaa magaalo casri ah oo ku caan baxday buuq iyo ciriiri? Haddii aad ku jawaabtid "haa" waxaa tahay nin daran oo u adkeysan kara nolosha adag ee ilbaxnimada, sida runta ah qofka waxaa ku aasan xoog iyo laxaad adkeysii ah oo aan qiyaas laheyn, marka qofku waa inuu la soo baxo awooddaas ku aasan si uu ugu jilib dhigo nolosha casriga ah ee adag ee ku dhisan buuqa, qeylada iyo qaska.

Haddii qofku ku dhaqmo awooddiisa wuxuu ku noolaanayaa nolol sacaado leh, waxay ila tahay in akhristayaal badan awoodi karaan iney walbahaarka ka hortagaan kana adkaadaan markay kula dagaalamaan adkeysii iyo Samir qoto dheer, waxaan tusaale u soo qadaneynaa Marwo la oran jiray Olga K. jaren oon ku bartay walaayada Odaho, waxay daaha ka qaadday marwadaasi iney awooday inay walbahaarka burburin karto, inkastoo ay ciriiri ku jirtay waa tan sheekadeedii iyadoo werineysa.

"Mar laga joogo 8 sano waxaa igu dhacday jirrada la yiraahdo kansar, takhtarradii I baaray waxay ii sheegeen inaan jirradeydu dawo laheyn oo aan u dhiman doono, aad baan u tiiraanyooday noloshiina waan ka quustay, anigoo xaalkaygu aad u liito ayaan taleefon kula hadlay takhtarkii I daweynayey, waxaana ula hadlay si oohin iyo calaacal ka muuqdo, markaas buu aad ii canaantay iguna eedeeyey fulaynimo, dulqaad xumo iyo doqonimo, wuxuu igu yiri; "mar haddii wixii lagu qoray qofna kaa baajin kareyn dad iska dhig oo si geesinimo leh uga hortag wixii kaa hor yimaad, maxaa yeelay cabsida iyo welwelka kaa celin mayaan dhimashada".

Hadalkii takhtarku wuxuu igu dhaliyey fikrad cusub waxaana goostay inaan xaqiiqada jirta aqoonsado kuna raaxeysto inta iiga hadhay nolosha inkasta oo aan aad u caatoobay lafihiina I soo baxeen xididadiina bannaanka yimaadeen, waxaa igu dhalatay nolol cusub oo waxaan iska doondooney muuso, waxaa la yaab leh in muusadii aan isku khasbay ay igu caawisay inaan u adkeysto cudurka wax yar ka dibna caafimaad baa ii kordhay ilaa aan ka bogsaday cudurkii kansarka ahaa, waxaana sabab u ahaa caafimaadkeyga ereyadii uu takhtarku igu yiri ee ahaa "dhaaf welwelka, adkatso oo xaqiiqada aqoonso", waxaan ku gunaanadayaa inaan ku celceliyo ereyadii dhaxalgalka ahaa ee uu yiri Dr. Alexi Carrel ee ahaa "dadka aan aqoon habka loola dagaalamo walbahaarka way cimri degdegaan" dadka raacsan Nebi Muxamed "NNKH" ee ku adag diinta waxaa ku daabacan laabtooda aayado Qur'aan ah. Aniguna waxaan jeclahay in Cinwaan casharkan ka mid ah ku daabaco qalbiga akhriste kasta oo buugan akhriya cinwaankaas oo ah "dadka aan aqoon sida loola dagaalamo walbahaarka way cimri degdegaan".

MURTIDA CUTUBKA 1-AAD OO KOOBAN

Xaqiiqooyin run ah oo loo hanweyn yahay inaad ka ogaatid xagga walbahaarka.

1. Haddii aad jeceshahay inaad ka badbaaddo walbahaar garaac ereyadii Sir Osla ee ahaa ku noolow xuduudda maalintaada hana ka walbahaarin aayatiinka fog ee ku noolow maalintaada ilaa waqti hurdada.
2. Haddii ay kaa hor yimaadaan dhibaatooyin aadan ka fakan kareyn tijaabi habkii yaabka lahaa ee uu falay Wallles Carrier oo ahaa weydii naftaada su'aalahan afarta ah:-
 - a. Waa maxay waxa ugu daran ee dhici kara?
 - b. U diyaar garow in waxaasi kugu dhacaan.
 - c. Isku day wixii aad qaban kartid haddii dhibaataadaasi dhacdo.
 - d. Xusuuso dhibaatooyinka waaweyn ee uu walbahaarku u leeyahay xagga caafimaadkaaga shaqadaada iyo dhaqaalahaaga. "ogow dadka isku dhiiba walbahaarka in ay cimri degdegaan".

CUTUBKA LABAAD
HABKA AASAASIGA AH EE LOO XALIN KARO WALBAHAARKA
(QEYBTA 1-AAD)
SIDA LOO FURFURO LOONA XALLIYO DHIBATOORYINKA
WALBAHAARKA.

Waxaa laga soo wariyey Abwaanka caanka ah ee la yiraahdo Rudyard Kipling inuu yiri "waxaan leeyahay lix adeege oo daacad ah oon ka bartay waxaan aqoon leeyahay, waana kuwaan magacyada lixdaas adeege:-

1. Waa maxay?
2. Waayo?
3. Goorma'
4. Meelma?
5. Sidee? Iyo
6. Waa kuma?

Adeegayaashaasi waxay kuugu gargaarayaan inaad xaddido sababaha keena walbahaarka.

Dariiqadii aanu ku soo sheegnay qeybtii labaad waxay aheyd mid waxtar weyn leh, marka haddii aynu raacno waxaa hubaal ah ineynu xallin karno mushkilooyinka ina hor taagan, waxaase laga yaabaa in mushkilooyinka dhammaantood aan lagu xallin Karin dariiqadaas fudud, sidaas awgeed waxaa loo baahan yahay inaan barano dariiqooyin kale oo gacan inaga siiya sidaan uga gudbi laheyn dhibaatooyinka inaga hor imaanaya, waxaana ka mid ah dariiqooyinka ina caawin kara kuwa soo socda:-

1. In la xaddido xaqiiqooyinka.
2. In loo kala dhig dhigo arrinka xubin-xubin.
3. In la gaaro go'aan kama dambeys ah laguna dhaqaaqo fulintiisa.

Saddexdan dariiqo ee la soo sheegay waxaa laga dhaxlay oo ku camal fali jiray feylasuufkii Giriigga ahaa ee la oran jiray Aristotal, markuu xallinayo dhibaatooyinka ka hor yimaada, dadkeena ku nool casriga cusub kama dhammin in aanu raacno daariiqooyinkaas uu isticmaali jiray Aristotal, haddaan dooneyno inaan ka adkaano dhibaatooyinka Culculs ee dunida inagu ciriirinaya walbahaarkana inagu ridaya, marka bal aynu dariiqooyinkaas hal hal u soo qaadanno.

1. XADDIDAADDA XAQIIQOYINKA

Maxaa looga baahan yahay in la xaddido xaqiiqooyinka? Jawaabtu waxay tahay; haddii aan la koobin xaqiiqooyinka lama xallin karo dhibaatooyinka innagu kor gudban, haddii aynu isku dayno ineynu ka baxno dhibaatooyinka innagoon marka hore koobin sababaha keenay waxaan la mid nahay qof laf cad toobin ku haya, wax inoo suuroobi karaana ma jirto. Fikraddan waxaa ka sal gaaray hormuudka Jaamacadda Hebert E. Hawkes mar laga joogo 20 sano, ninkaasi wuxuu awood u helay inuu gargaaro 15kun oo arday kuna caawiyey inay ka badbaadaan walbahaarka, mar uu ii sheekeeyey wuxuu igu yiri; "sababaha keena walbahaarka badankood waxay ka yimaadaan in dadku isku dayaan inay go'aan gaaraan iyagoon xaddidin mushkiladdii oo aan heysan warbixino iyo tiro-kooby u ifinaya xallinta mushkiladda.

Tusaale ahaan haddii ay ila soo gudbboonaato mushkilo la xallin karo Talaadada soo socota sagaalka subaxnimo waxaa waajibku yahy in aanan wax go'aan ah ka gaarin wax ka qabadka dhibaataadaas ilaa la gaaro maalintaas iyo waliba saacaddaas mushkiladdu dhacayso, inta laga gaarayo maalintaas waa in aanan walbahaarin oon is waalin ama hurdada ka tagin, marka la gaaro Talaadadii waa inaan u xeytaa wax ka qabadka dhibaataada oo aan kobo dhammaan sababaha mushkiladda

dhaliyey iyo sida wax looga qaban karo markaas ka dib ayaan gaari karaa go'aan ku saabsan xallinta mushkiladda".

Waxaan weydiyey hormuudkii inay dariiqadaasi ka korisay cadaabta walbahaarka wuxuuna ku jawaabay; "haa waxaan kuu sheegayaa anigoo daacad ah inaan ka xoroobay welwelka iyo walbahaarka, sababtoo ah waxaan ku tebiyey waqti ku haboon xallinta dhibaatooyinkeysidaas darteed, waxaa ii suuragashay inaan ka adkaado sababaha keena walbahaarka, waxaan qabaa haddii dadku ku tebin lahaayeen wax yar oo waqtigooda ah ka baaraan degidda waxyaabaha u soo jiidaya walbahaarka inay ka adkaan lahaayeen walbahaarka kuna noolaan lahaayeen nolol deggan oo raaxo leh oon walbahaar u soo dhawaan Karin.

Waxaan jeclahay inaan ku celceliyo xikmaddii aheyd "haddii dadku ku tebin lahaayeen wax yar oo waqtigooda ka mid ah ka baaraan degidda waxyaabaha soo jiida welwelka waxay ku noolaan lahaayeen nolol xasiloon oon walbahaar jid uga bannaaneyn".

Maxay kula tahay in dadka badankoodu sameeyaan? Waa dhif in qofku isku dhibo baarista xaqiiqooyinka dhabta ah xitaa qofka isku daya inuu baaro xaqiiqada dhabta ah wuxuu xushaa waxyaabaha aan ka hor imaaneyn markaas fikradda maskaxda ugu jirta oo wuxuu raacaa waxyaabaha la socon kara himilooyinkiisa ee waafaqsan habka uu doonayo inuu ku xalliyo mushkilooyinkiisa, waana ka dheeraadaa arrimaha adadag ee naftiisu diidayso. Waxaana arrintan ka hadlay nin caan ah oo la yiraahdo Andrey Marrios, wuxuuna yiri; "waxaa dabeeci ah in dhammaan arrimaha inoogu muuqda wax toosan oo la gareysan karo yihiin kuwo waafaqsan himilooyinkeena iyo doonisteena, laakiin waxyaabaha inala qaloocan ee aan la liqi kareyn waa kuwa liddiga ku ah doonisteena, marka la yaab malahan inaan xallin kari weyno mushilooyinka ina hor taagan.

Miyaanay wax lagu qoslo aheyn markaanu aragno qof xallinaya xisaab fudud oo soo saaraya jawaabtaan oo kale $2+2=5$, sidaas ayaa dadku u badan yahay, marka xalka gefka ah ee lagu socdo waxay ka dhigtay noloshee mid ka buuxda welwel iyo walaac, sababtoo ah marka qofku ku adkaysto in $2+2=5$ ama 500 sidee ayuu ku gaari karaa xal dhab ah ama jawaab sax ah, marka arrimaha kale dhammaantood waxay la mid yihiin sidaas oo kale, waxaana looga bixi karaa in caqli la isticmaalo halka caadifad iyo hawo raac lagu socdo, waana inaan u fekerno si macquul ah oo ka fog hawo raaca ama aynu falno sidii uu falay ninkii la oran jiray Hawkes kaas oo xaqiiqooyinka u mari jiray jid dhexdhexaad ah, kuna gaari jiray runta, mana aha jidkaasi mid fudud gaar ahaan marka qofka walbahaar jahawreeriyo, maxaa yeelay marka xaalku sidaas yahay caadifadda kama fogeyn karno caqliga waayo waxaa inaga adkaanaya caadifadda iyo hawo raacidda, waxaase jira laba dariiqo oon tijaabiyey kuna guuleystay oo lagu gaadhi karo dhabta kuwaas oo ah:-

- 1- Markaan xaqiiqada baarayo waxaan iska dhigaa sidii anigoo qof kale u baaraya, taasina waxay igu caawisaa inaan iska taago xaqiiqada la baarayo meel dhexdhexaad ah oo ka fog eexda iyo iilashada marka sidaas bay xaqiiqadu ku soo baxaysaa.
- 2- Xaqiiqada aan baarayo waa inay ahaato mid lid ku ah danaheyga sidii anigoo ah eedeysane hortaagan garsoore.

Markaas waxaan qoraa wixii iiga soo baxay baaristii oon laba u qaybiyaa, xaqiiqooyin lid ku ah danaheyga iyo kuwo waafaqsan, markaas baan si dhab ah ugu fiirsadaa, sida badan waxaa markaas ii soo baxa in ra'yiga toosan noqdo mid u dhexeeya labadii qeybood. Haddii aan sii caddeeyo hadalkeygii hore waxaan leeyahay qof kasta oo aadami ah heer kasta ee uu gaadho garaadkiisa iyo caqligiisu ma gaadhi karo go'aan caqligal ah oo mushkilad xallin kara haddii aanu

koobin marka hore dhammaan arrimaha ku lug leh mushkiladaas. Marka waxay noqoneysaa xaqiiqda saldhigga u ah xallinta mushkilooyinka sidatan:-

Fal sidii uu fali jiray Howkes oo ah marka hore soo ururi xaqiiqooyinka ka dibna furfur mushkiladda taasina kuuma suuroobi karto haddii aadan koobin sababaha keenay mushkiladda adigoo ka fog caadifadda iyo eexda aad naftaada u iilaneyso. Laakiin xaqiiqooyinka jira dunida oo dhan haddaan uruurino waxba inoo tari mayaana keligood tijaabo la'aan marka waxaa jira tijaabooyin innagu caawinaya furfuridda xaqiiqooyinka oo ah in marka hore la qoro xaqiiqooyinka sababtoo ah qorridda xaqiiqooyinka loo baahan yahay waa tallaabo wax ku ool ah oo kugu hoggaaminaysa inaad gaarto go'aan toosan sida uu yiri Charles Ketttering, "mushkiladda marka la qoro xubnaheeda waxaan garaneynaa kala bar xalka mushkiladda".

Dhageyso waxaan kuu sheegayaa siday iigu suurowday dhaqan gelinta arrinkan, waxaan soo qaadayaa Galen Litchduid oo aan bartay mar dhowr sano laga joogo, ninkan wuxuu ahaa nin Maraykan ah oo ladan oo asaaggii dhaafay, wuxuu joogay dalka Shiinaha sanadkii 1942-kii markii Jabaanku qabsaday shangahay, qisadiisuna waa tan siduu isugu u weriyey mar aan ku marti qaaday gurigeyga, wuxuuna ku bilaabay; "waagii ciidanka Japanku ku soo duulay Pearl Harbour waxaan ahaa agaasimaha shirkadda Aasiya ee ceymiska nolosha magaalada Shankagay, markii ay magaaladii qabsadeen Ciidankii Jabanka ayaa la ii soo diray sarkaal sarreeye Guuto ah si ay ula wareegaan xoolihii Shirkadda iyo maamulkeedii, waxay igu amreen inaan ka macaamiloodo ama in la i toogto markaas waxaan bilaabay inaan amarkii fuliyo, diyaariyana wixii shirkaddu xoolo laheyd, waxaanse ka reebay liiskii warbixinta 750 kun oo doolar oo ay laheyd faraca shirkadda ee Hongkong.

Markaas waxaa igu dhacay cabsi daran anigoo ka baqayey in laygu dilo biyo kulul haddii ay ogaadaan lacagta aan liiska ka reebay, wayna ogaadeen markiiba, markay ka war heleen Jabaanku lacagtii aan ka qariyey ee dhameyd 750 kun oo doolar wuxuu soo aaday sarkaalkii watay ciidamada xafiiskaygii, laakiin markaas kumaan jirin xafiiska, waayo waxaa taleefoon igula soo xiriiray xisaabiyihii oo ii sheegay in Admiralku careysan yahay iguna tilmaamay inaan ahay tuug. Marka haddii aan ka careysiiyeey ciidankii Jabaanka waxaa laga yaabaa in laygu tuuro xabsiga loo yaqaan guriga cadaabka jirka oo ah xabsi khatar ah oo qofkii galaa uusan ka soo bixin, waayo wuxuu badiba u dhintaa qofkaas cadaabta lagu hayo ama wuu is dilaa markuu u adkaysan waayo cadaabkaas.

Haddaba markuu xisaabiyihii ii soo sheegay arrinkii waxaa igu dhashay walbahaar iyo cabsi, waxaana ii caado aheyd inaan dhibaatooyinka iga hor yimaada u maro dariiqo miyir ah oo igu caawisa inaan si fudud u gaadho muraadkayga, waayo muddo dhowr sano laga joogo ayaan caadeystay markii welwel iga hor yimaado inaan aado makiinadda qoraalka, "Teebka" oo aan ku qoro labadan su'aalood oo kala ah:

1. Maxaan u welwelaa?
2. Maxaan sameyn karaa si aan welwelkaas uga nabad galo?

Waagii hore su'aalahaas waxaan kaga jawaabi jiray afka markii dambase waxaan caado ka dhigtay inaan kaga jawaabo qoraal, maxaa yeelay qoraalku wuxuu caddeynayaa fikradda, sidaas awgeed markii aan ogaaday in Admiralka Jabbaanku ii careysan yahay iguna tilmaamay tuug waxaan aaday xafiis aan ku lahaa ururka dhallinyarada kirishtaanka ee Shangahay, markaas baan ku qoray makiinaddii labadii su'aalood ee ahaa:

S. Maxaan u welwelaar?

J. waxaan ka baqayaa in la igu tuuro xabsiga guriga ciqaabta jirka berrito.

S. Maxaan sameyn karaa?

J. Intaan aad u fekeray ayaan helay afar dariiqo oo suuragal ah:-

- Inaan u faafaahiyo arrinka Admiralka Jabbaanka, laakiin ma yaqaan Af-Ingiriiska haddii aan turjubaan doontana wuu caroonayaa oo waa iiga sii darayaa, waliba waxaa laga yaabaa intuu arrinka ila baadhi lahaa inuu door bido in xabsiga hore la iga geeyo.
- Waxaan isku dayi karaa inaan ka baxsado magaalada taasina ma dhici karto, maxaa yeelay waa lay ilaaliyaa, waana lay daba joogaa mar kasta, waxaana laygu amray inaan buug saxiixo marka aan soo galo iyo marka aan ka baxayo, meesha aan degganahay, haddii aan isku dayo inaan fakado oo la I soo qabtana markiiba waa la I tooganayaa.
- Inaan iska fadho guriga oo aanan tagin xafiiskii shirkadda, laakiin haddii aan sidaas sameeyo waxaa igu abuurmaya shakiga Admmiralka, waxaana dhici karta inuu soo diro askartiisa oo inta la I soo qabto la igu tuuro xabsiga iyadoon aanba leyla hadlin.
- Inaan xafiiskii shirkadda tago, subax kasta oo Isniin ah, sidii caadada ii aheyd waayo waxaa laga yaabaa haddii aan sidaa yeelo in Addmiralku ku shuqloomo hawshiisa oo aanu I xasuusanba, xitaa haddii uu mar dambe I xasuusto waxaa la arkaa in caradii ka qabowdo, markaasna waxaa ii suuroobi karta inaan arrinka ka dhaadhiciyo.

Markaan ka baaraan degay xaaladhii ii suuroobi karayey waxaan goostay inaan ku dhaqaaqo dariiqada afraad oo iila roonaatay. Waxaan dareemay markiiba raaxo iyo xasiloonaan, welwelkiina waa iga fududaaday.

Markaan ku kullanay xafiiskayga subixii Isniinta waxaan la kulmay Admmiralkii Jabaanka oo fadhiya oo sigaar cabaya, wuu I soo fiiriyey, wax hadal ahna iima yeelan, maalintaas iyo maalintii ku xigtay midna, maalintii 3-aad arrintii caadi ayey ii noqotay, markay ka soo wareegtay dhowr todobaad Admmiralkii waxaa loo beddelay Tokyo halkaas bayna mushkiladdii I heysatay ku dhamaatay.

Marka waxaa qaxarkii iyo murugadii iga saaray oo iga badbaadiyey waa fadhigii iyo nasashadii maalintii Axadda ee aan helay xasiloonaaanta aan kaga adkaaday walaacii iyo walbahaarkii, markaan ka baaraan dagay afartii dariiqo ee suuragalka ahaa kana doortay mid ka mid ah.

Haddii aana sidaa yeelin oo aan hadba dhan u ordo oon is jahawareeriyo kama nabad galeen toogasho, tijaabooyinka ceynkaas ah waxay ii xaqiijiyeen inay faa'iido weyn leedahay in go'aan sax ah laga gaaro mashaakilka laakiin walaaca fulaynimada iyo ka war-wareegidda mashaakilku waxay asqeysiinayaan qofka waxayna ku ridayaan hoog iyo qalbi jab.

Sida runta ah 50% walbahaarka waxaa baabi'iya inaad gaarto go'aan toosan, 50% ka soo harayna wuxuu dhammaanayaa markaad guda gasho fulinta go'aanka aad gaartay. Sidaas waxaan kaga badbaaday 90% walbahaarkii I dhibi jiray ee iga dhoobeeyey nolosha, taasina waxay ii suura gashay markaan raacay tallaabooyinka afarta ah ee hoos ku xusan:

- 1- In si caddaan ah loo qoro sababaha keenay walbahaarka.
- 2- In la wada qoro tallaabooyinka suuragalka ah ee la qaadi karo si loo tirtiro walbahaarka
- 3- In la doorto tallaabada ugu habboon ee la go'aansado
- 4- In lagu dhaqaaqo fulinta go'aankii la gaaray.

Mudane Galex wuxuu agaasime ka ahaa Faraca bangiga Shirkadda Star Prak ee Ceymiskka, miyaanay kula aheyn dariiqadiisu aasaaskeeda inuu waxtar yahay, waxaa intaa sii dheer qaaciddo aan looga maarmi kareyn la dagaalanka walbahaarka oo ah "ku dhaqaaq fal aad ku cirib tireyso walbahaarka haddii aadan ku dhaqaaqin falkaas, ururinta xaqiiqooyinka waxay noqoneysaa waqti lumis iyo tacab khasaar'.

Wuxuu yiri William James "marka aad go'aan gaarto ee aad bilowdid fulintiisa ku feker oo keliya natiijooyinka ka dhalan doona iyo sidaad ku gaari laheyd, wax kalase ha u aabo yeelin. Wuxuu ujeeddaa Wiliam mar haddii aad go'aan gaartay inaad wax qabatid toos ugu dhaqaaq kana leexi jidkaaga warwareegga kale sida shakiga iyo marmarsiiyaha.

Ha u oggolaan fekerka dhalanteedka ah inuu ku cabsi geliyo ama iska kaa hortaago horay ugu socodka fulinta go'aamadaada, ka faa'iideyso waayo aragnimadaadii hore oo ku dhaqaaq howslaha ciddna ha u aabo yeelin.

Waxaan warsaday W. Philip oo ah nin caan ku ah ceelasha batroolka Okland su'aal ah sidii uu u fulin jiray go'aamadii? Wuxuu ku jawaabay "fekerka dheer ee adag ee faraha badan laguna feker mushilad dhacday wuxuu soo jiidayaa walaac iyo walbahaar ilaa aad ka gaarto heer uu fekerka badan noqdo walbahaar dheeraad ah oo aan laga lug bixi kareyn, marka haddaada arrin go'aan ka gaarto bilow fulintiisa gadaalna ha u fiirin ee horey u soco.

Maxaad ugu dhaqsan weyday dhaqan gelinta dariiqadan, saacadda aad joogto si aad u xalliso mushkiladda welwelka abuureysa? Waa tan dariiqadu:

S- Maxaa sabab u ah walbahaarka?

Jawaabtii oo qoran ku dhig halkaan.

.....

S. Maxaad sameyn kartaa si aad u baabi'iso walbahaarka?

J.

S. Maxay tahay dariiqada ugu habboon ee baabi'inta walbahaarka

J.

S. Sidee iyo goortee ayaan bilaabi doonaa?

J.

QEYBTA LABAAD
SIDAAD UGA XOROObI LAHEYD 50%
WALBAHAARKKA SHAQADAADA

Nin kasta oo ka shaqeeya maamulka ma akhriya ereyadan wuu nagu jees-jeesi doonaa, wuxuuna dhihi doonaa "Anigoo shaqadan waday 20 sano ayaa maanta dad igu waaninayaan inaan iska fogeeyo walaaca iiga yimaada xagga shaqada, anigu uma baahni waanadaas oo kale, waayo anigu waan aqaan shaqadeyda iyo sidaan u xalliyo dhibaatooyinka iiga yimaada.

Sida runta ah qofku heer kasta oo uu ka gaaro aqoonta iyo tijaabooyinka ha yaraado ama ha weynaadee; waa kii u baahan qof toosiya oo hanuuniya. Marka qofka isu heysto inuu aqoon buuxda u leeyahay shaqadiisa waa inaanu ka madax taagin tijaabooyinka iyo waaya aragnimada dadka kale, waayo waxaa laga yaabaa iney ka caawiso inuu xal u helo dhibaatooyinka ka hor imaanaya, sababtoo ah tijaabooyinka qofka dadka oo dhan bay u dhexeeyaan ee qof keliya malaha, xitaa ninka arrimaha nolosha oo dhan xog ogaal u ah tijaabooyinka dadka kale kama maarmo, maxaa yeelay waxay ifinayaan meelaha uu ku gefsan yahay iyo meelaha uu ku toosan yahy ee maamulka shaqadiisa.

Waxaa la arkaa inaad xasuusan tahay ereyo aan ku sheegnay qeybtii hore ee kitaabkan oo laga soo weriyey Dr. Alexis Carrier, ereyadaas oo ahaa "dadka aan aqoon sida loola dagaalamo walbahaarka way cimri degdegaan".

Marka haddii khatarta walbahaarku ku gaarsiin karto ilaa heer geeri ah miyaanay habooneyn in lagaa gargaaro xallinta mushkilooyinka soo jiidaya walbahaarka, xataa ha noqoto inta lagaa gargaaro 10% walbahaarka. Gargaarkaasi wuxuu kuu yahay faa'iido weyn sababtoo ah waaridda liibaantaadu waa guusha ugu wanaagsan noloshaada. Waxaa la arkaa inaan qiimo weyn kula laheyn walbahaarka kaaga imaanaya xagga shaqada marka, waxaan ku siinayaa tusaale.

Nin maamule ah oo 75% waqtigiisa qaaliga ah ku tebiyey xallinta mashaakilka la xiriira shaqadiisa, ninkaas oo la yiraahdo Len Slumkin ahna ninka iska leh madbacadda Sinon ee Newyork marka dhageyso ha noo waramee. "waxaan helay shaqo mar 15 sano laga joogo, markii aan doonayo inaan dhibaato wax ka qabto, waxaan qaban jiray shir ay ka soo qeyb geli jireen dhammaan kalkaaliyeyaasha, markaan isugu nimaado qolka shirarka ayaan is weydiin jiray waxaan qaban karno, sidaa ma sameynaa? Mise waan iska deynaa? Mise waxaa roon inaan wax tallaabo ah la qaadin? Markaa baa walbahaar nagu dhici jiray oo arrinku naga murgi jiray oo dhulku ciriiri nagu noqon jiray, marmar murankaa adkaan jiray markaas baan fajac la wareeri jiray, waxaana sidaa badan ku warwareegi jiray dhibaataada hareeraheeda annagoo aad mooddid inaan laf cad toobin ku hayno oo kale ayaan gabalku noo dhici jiray, annagoo daalan oo maskaxdii ina noogtay oo aan waxba qaban ayaan shirka ka kici jiray.

Markaan 5 sano sidaas ku shaqeeyey ayaan ogaaday in dhibaatooyinka iga hor yimaada aan sidaas lagu xallin kareyn, isla markaana haddii qof ii sheego dariiq mushkiladda lagu xalin karo waan ku qosli jiray, sababtoo ah caadada aan 15-ka sano ku soo dhaqmaayey ayaa ila toosneyd, wax ka fiican inay jiraana uma maleyneyn, nasiib wanaag waxaan kula kulmay si kedis ah dariiqo igu gargaartay xallinta mushkilooyinka iga hor imaanaya, igana fogeyneysa walbahaarka oo ii soo jiideysa raaxo iyo deggenaana, waxay I gaarsiisay dariiqadaasi faa'iidooyin waxtar u leh shaqadeydii. Waxaan dhihi karaa waa dariiqo sax ah oo fudud, waana tan dariiqadii:

Waan joojiyey habkii falanqeynta ee waqtiga badan ku lumi jiray, markaan aniga iyo kalkaaliyeyaasha fadhiyada badan isugu nimaado waayo waxaa caado u aheyd in kalkaaliyayaashu sida badan yiraahdaan; waxaa dhacday dhibaato oo si aan u xallino baan garan weynay ee maxaan falnaa?

1. Waxaan u xilsaaray sarkaal kasta markay ka hor timaado mushkilo inuu ka soo qoro warbixin buuxda kana jawaabo su'aalahan afarta ah.

- b. In la xaddido mushiladda: "Markii hore waxaan tebin jirnay saacado badan muran iyo dood iyadoon lagu fekerin mushkiladda la baaro oo la kala qoro"
- t. In la caddeeyo sababaha dhaliyey mushkiladda "markii hore saacado badan baa nooga dhumi jiray annagoon isku dayin inaan hubino sababaha dhaliyey mushkiladda.
- j. Siyaabaha wax looga qaban karo "markii hore waxaa la soo hor dhigi jiray fadhiga hindisooyin wax looga qabanayo mushkiladda taagan, laakiin waxaa laga hor keeni jiray muran iyo dood aan ku dhisneyn xog iyo aqoon midna".
- x. Doorashada xalka ugu haboon "markii hore lama qori jirin doodda, sidaas darteed lama ogaan Karin xalka la qaadanayo, maxaa yeelay mar haddaanu wixii qorneyn waa la iloobayaa intaan fadhigii dhammaan".

Tallaabooyinkaasi waxay aad u yareeyeen su'aalihii ay warsanayeen kalkaaliyeyaashu markay ka hor timaaddo dhibaato, sababtoo ah waxay ku camal faleen 4-tii su'aalood, markaa bay heleen xalinta mushkiladda ugu yaraan 75% inta soo hadhay oo ah 25% uma baahna gargaarkeeyga oo hadday u bataan waxay I warsanayaan ra'yigeyga, taasina uma baahna dood iyo muran dheer, sidii markii hore dhici jirtay, sababtoo ah xalinta mashaakilku markaan wuxuu ku socdaa tallaabooyin qorsheysan, dariiqadan waxay noo suuro gelisay inaan waqti dheer ku tebiyo shaqada si aan uga hortagno mushkilooyinka inta aanay dhicin waqti yarna ku tebino welwelka iyo baarista xallinta mushkilooyinka.

Mar baan u tegay nin saaxiibkey ah oo la yiraahdo Bettger oo ah sarkaal ka shaqeeya gadidda heshiisyada ceymiska nafta wuxuu ii sheegay inuu awooday inuu ka badbaado walbahaarka walibana uu helo macaash xoog leh, waayo wuxuu raacay dariiqo ku dhow middii aan soo tilmaamay, waxaanu yiri isagoo ka sheekeynaya dariiqadaas sidatan, "Markii aan bilaabay shaqada waxaan u hayey xiiso iyo xamaasad aan qiyaas laheyn waxaana iga hor imaan jiray mar kasta mushkilooyinka shaqada ee caaddiga ah si saraakiisha kale, marka habkii aan ku xalin lahaa waan ku jahawareeray, markaas baan

shaqadii ka xiiso dhacay, ilaa aan ku fekeray inaa ka baxo, waana ka tegi lahaa runtii haddii aanay igu soo dhicin fikrad igu baraarujisay sababaha ii keenay walbahaarka.

1. Waxaan is weydiyey waa maxay waxa aan ka walbahaarayo? Waxaan isugu jawaabay waa faa'iidooyinka aan ka helaa heshiisyada aan sameeyo dadaalka iyo waqtiga aan ku tebiyo, waayo waxaan u tegi jiray ninka naftiisa ceyminaya, markaas baan sheeko macaan u bilaabi jiray, sheekadaas baana isla wadi jiray ilaa laga gaaro kala qoridda heshiiska, markaas buu dhihi jiray "ma xuma hadalkan, laakiin isii waqti aan ku soo tashado oo mar dambe isoo mar".

Marka howshaas iyo waqtigaas aan ku khasariyey gorgortanka ayaa ii soo jiidday walbahaarka igu xambaaray inaan ka cararo shaqada.

2. Waxaan is weydiyey haddana maxaan kaqaban karaa mushkiladda I heysata? Si aan uga jawaabo su'aashan waa in aan koobaa xaqiiqooyinka ku lug leh dhibaataada, anigoo bartaa ka ambaqaadaya, ayaan goostay inaan wada akhriyo dhammaan heshiisyadii aan sameeyey intii aan ka shaqeynayey shirkadda, markiiba waxaa ii soo baxday natiijo la yaab leh, waayo waxaan ogaaday in dhammaan heshiisyadii aan galay 70% ay ku dhammadeen kulankii ugu horeeyey 27% ay ku dhammaadeen kulankii labaad, 3% keliya ayaa baaqi aheyd oo u baahneyd in dhowr kulan oo kale lagu dhameeyo. Markka waxaan ogaaday in heshiisyada dambe ee aan ku dhammaan kulanka 1-aad iyo kan 2-aad ay sabab u yihiin walbahaarka iyo ka xiisa dhaca shaqadeyda, haddii si kale loo sheego ma jirto sabab loo gareysan karo walbahaarkeyga, maxaa yeelay haddaan iska dhaafo intaa yar ee ii keenaysa dhibaataada walbahaarka waxaa igu filan inta kale ee badan ee sida fudud ku dhamaaneysa.

3. Muxuu yahay xalka kuugu door roon.?

Markaan ogaaday heshiisyadii yaraa ee 3% keliya ahaa u sabab yihiin walbahaarka, arrinkii aad buu iigu fududaaday, waayo waxaan goostay inaan iska dhaafo heshiiskii ku dhammaan waaya kulanka 2-aad, hadduu rajo sii leeyahayna waa inaanu ila dhaafin kulanka afraad, waan fuliyey go'aankaan waqtigii aan ku tebin jiray

heshiisyada waqti dhumiska ahaa ee walaaca igu abuuri jirayna waxaan uga faa'iideystay inaan ku raadiyo heshiisyo cusub oo ah nooca kuwa kulanka hore ku dhammanaya ah, intaan waqti dheer ka soo wareegin, waxaa kordhay macaashkii shirkadda anigana waxaa ii kordhay wixii iga soo galayey.

Mr. Bittger maanta waa nin ku liibaansan heshiisyada ceymiska nafta sanadkii wuxuu saxiixaa heshiisyo gaaraya malyuumaad \$, waana ninkii ku hungoobi gaaray shaqadaas macaashka badan leh ee ku dhawaaday inuu ka cararo haddaanay ku dhalan maskaxdiisa fikraddii badbaadisay waqtigii ku haboonaa.

Akhristaha sharafta lahow waxaa hubaal ah inaad ka jawaabi karto 4-tii su'aalood ee uu ka jawaabi jiray Mr. Bittger, waana in la ogaado in walbahaarku ka dhasho sida gefka ah ee loo xillinayo mashaakilka, walbahaarkka dunida jira nuskiis wuxuu ka dhashaa isku dayidda xallinta mushkiladda iyadoon la koobin sababaha la xiriira dhibaataada.

TALOOYIN SALDHIG U AH FURFURIDDA WALBAHAARKA

1. Baar xaqiiqooyinka, xusuuso ereyadii Howkis ee ahaa si aan u gaarno go'aanno waxtar leh waa inaan koobnaa dhammaan xaqiiqooyinka saldhigga u ah mashaakilka ina heysta.
2. Markaan hubsano xaqiiqooyinka waa inaan gaarno go'aan.
3. Markaan gaadhno go'aan waa inaan ku dhaqannaa fulintiisa inagoon ka cabsaneyn natiijada ka soo bixi karta.
4. Marka walbahaarku ka yimaado xagga shaqada waa in laga jawaabaa 4-tii su'aalood ee kala ahaa:-
 - a. Maxay tahay mushkiladdu?
 - b. Maxaa keenay mushkiladda?
 - c. Siddee loo xalin karaa ama wax looga qaban karaa?
 - d. Xalkee ugu door roon?

Waa in lagu dhaqaaqaa ka jawaabidda 4-taan su'aalood mar kasta oo ay inala soo gudboonaato dhibaato keenaysa walaac ama walbahaar, marka haddii aad si fiican uga jawaabto 4-taan su'aalood ee kugu caawinaya xallinta mashaakilka kuna camal fashid, waxaa hubaal ah inaad ku liibaaneyso shaqadaada oo aad ka nabad geleyso walbahaarka xagga shaqada kaaga imaanaya.

SAGAAL TALO OO MUHIIM AH.

1. Haddii aad dooneysid inaad ka faa'iideysato kitaabkan waa in lagaa helaa ujeeddo qoto dheer, ogowna haddii aan lagaa helin ujeeddadaas kumanyaal xikmado iyo murti ah waxba kuu tari mayaana.

Maxay tahay ujeeddadaasi xiriirka ah?

Waa doonis mamam oo kuu hogaaminaysa inaad ku intifaacdid kitaabkan iyo inaad baabi'iso ood ciribtirto walaaca iyo walbahaarka,

Haddaba sideed ugu abuuri kartaa naftaada doonistaas uguna korin kartaa?

Xusuusi naftaada mar kasta qiimaha kitaabkani kuu leeyahay isdhacsii in ku camalfalka mabaadii'da kitaabkani ay kuu horseedayso inaad ku noolaato nolol wanaagsan oo baraare ah, ku celceli inaad tiraahdo raaxada nafteyda caafimaadkeyga iyo dhaqaalaheyga waxaa saldhig u ah fulinta iyo ku dhaqanka xaqiiqooyinka ku qoran kitaabkan.

2. Akhri qeyb kasta oo kitaabkan ka mid ah akhrin fudud oo degdeg ah si aad uga qaadatid aragti guud, waayo waxaa laga yaabaa in xiise kugu qaado inaad u gudubtid fasalka ku xiga midka aad ku jirto markaas, laakiin ha oggolaanin xiisaha noocaas ah haddii aadan u akhrineyn kitaabka madadaalo keliya, haddiise aad dooneyso inaad ka adkaato walbahaarka oo aad bilowdid nolol cusub oo saafi ka ah walaaca iyo welwelka ku noqo meeshii aad ka bilowday oo u akhri si miyir iyo fiiri leh, waxaad arki doontaa in habkaasi kuu faa'iideyn doono waxtar ka muuqda shaqadaada iyo waqtigaaga sidaad uga faa'iideysan laheyn.

3. Ka istaag akhriska marar badan, ku feker oo naftaada weydii sidee iyo goortee ayaad ku camal fali doontaa talooyinka ku qoran kitaabkan.

Akhriska noocaas ah wuu ka waxtar badan yahay midka orodka lagu maro fiiri la'aan.

4. Intaad akhrineysid buuggan ku qabso gacanta qalin guduudan oo haddaad la kulantid talo ku qancisa calaamadee hoosteeda, haddii taladu dhowr qeybood ka kooban tahay mid kast ku hoos dhig calaamad sida (=) laba xariiqood oo kale, calaamadahaasi waxay

kugu caawinayaan xusuusta iyo naqtiinka kitaabkan markaad doonto inaad ku dhaqanto mid ka mid ah talooyinka aad summadda ku dhigtay.

5. Waxaan aqaanaa nin agaasime ka ahaa shirkad weyn oo ceymis ah muddo 15 sano ah, wuxuu akhrin jiray bil kasta dhammaadkeeda dhammaan heshiisyada ceymiska ee ay shirkaddu sameysay, waayo waxay tijaabooyinku bareen in dariiqadaasi u xaqiijineyso inay heshiisyadaasi maskaxda ugu jiraan uuna xusuusnaado, taasina waxay wax uga qabaneyso fulinta iyo xallinta dhibaatooyinka ka yimaada heshiis kasta.

Anigu waxaan ku tebiyey muddo 2 sano ah qorid kitaab ku saabsan khudbadaha guud, waxaana khasab igu aheyd inaan marar badan ku laabto wixii aan qoray si aan u dhowro isku toosnaanta iyo taxnaanta kitaabka, waxaa la yaab leh in dhaqsaha wax loo iloobaa wax lala yaabo yahay, hadaba waxaan kugu waaninayaa akhristaheyga qaaliga ahow si aad uga heshid kitaabkan faa'iido raad reeb ah u akhri si dhug leh, laakiin ha u maleyn in hal mar akhrikiisu ku gaarsiinayo faa'iido weyn. Waxaa lagama maarmaan ah inaad dhigatid xafiiska ama guriga si aad ugu noqotid markay kaa hortimaaddo mushkilo, taasoo dhaqso kuu xasuusineysa tallaabooyinka ku habboon si loo xaliyo mushkiladda oo walbahaarka irrida looga xiro intaanu soo gelin.

6. Wuxuu muujiyey Bernard Show fikraddan:- qofka aad wax u sheegtaa waxba kaama baran hadduuna ku camal falin, wixii aad u sheegtay. Marka show waa ku qumana fikradaas, maxaa yeelay waxbarashadu waa howl qabad, aqoontuna waxba ma tarto haddii aan lala xiriirin falka iyo waxbarashada.

Haddii aad doontid inaad barato mabaadii'da kitaabkan ku qoran waa inaad ku dhaqantid munaasabad kasta markay kula soo gudboonaato, waayo haddii aadan sidaas yeelin waxaa hubaal ah inaad si dhaqso ah u hilmaami doonto mabaadii'dan iyo aqoonta madaxa kuugu jirta oo ah midda aad ku shaqeyso maalin kasta.

Waxaa laga yaabaa iney dhibaatooyin kaa hor yimaadaan si aad ugu dhaqanto mabaadii'da lagu sheegay kitaabkan, haddaba markay kaa hor timaad mushkilo ha oggolaan marnaba caadifaddu inay gadooddo, laakiin is celi intaad kartid oo hawadaada ha raacin, marka si aad u qaboojisid ood u dejiso qalbigaaga, fur kitabkan oo fiir-fiiri meeshi aad hore uga calaamadaysatay qalinka cas, markaas ku dhaqan qaacidooyinka aad calaamadeysatay kadibna sugo sida la yaabka leh oo dhibaataada u xalismeysa.

7. Mar kasta oo lagu arko adigoo ku tumanaya mid ka mid ah mabaadii'da ka timid kitaabkan is ganaax oo sii xaaskaaga ama carruurtada hal \$ u beddel ku dhaqanka mabaadiidan caadooyin lagu raaxeysto.
8. Si dhab ah u akhri fasalka 2-aad ee buugan, kadibna ku dayo dariiqooyinkii H.B Hawel iyo B. farankalin siday u saxeen gefekoodii taasoo kuugu gargaareysa tirtiridda walbahaarka iyo ka guuleysiga dhibaatooyinka, waliba waxaa kordhaya kartidaada ka hortagga walbahaarka iyo inaad ku noolaato nolol sacaado leh.
9. Ku qor xasuus qorkaaga habka iyo waqtiga aad ku camal fashay mabaadii'daan iyo guulaha aad ka gaartay, maxaa yeelay taasi waxay kugu geesinimo gelinaysaa inaad hore ugu socotid ku dhaqanka mabaadiidaan si aad u gaartid guulo cusub.

MURTIDA CUTUBKA 2-AAD OO KOOBAN

- 1- Ku abuur naftaada doonis maman oo qota dheer si aad ugu faa'iideysato kitaabkan.
- 2- Akhri fasal kasta laba jeer inta aadan u gudbin fasalka ku xiga.
- 3- Ka istaag akhriska marmar oo is weydii goorta iyo habka aad ku dhaqmi laheyd mabaadii'da kitaabkan.
- 4- Ku calaamee qalin cas fikrad kasta oo aad la dhacdid.
- 5- Akhri kitaabkan bil kasta ugu yaraan hal mar ilaa uu ku dheehmo nafsaddaada oo aad wada baratid mabaadii'diisa.
- 6- Markay kula soo gudboonaato dhibaato ku noqo mabaadii'da kitaabkan kana dhigo seeftii aad ku xallineysay mashaakilka kaa hor yimid.
- 7- U beddel ku dhaqanka mabaadii'da kitaabkan madadaalo, bixi hal \$ oo ganaax ah marka laguugu qabto adigoo ku gefay mid ka mid ah mabaadii'daan.
- 8- La xisaabtan naftaada todobaad kasta hal mar, si aad u ogaatid faa'iidooyinka aad ka heshay iyo sidii aad ugu camal fashay mabaadii'daan, isweydii inaad ku xallisay mabaadii'dan mashaakil kaa hor yimid iyo in kale.
- 9- Heyso xusuus qor aad ku qortid mar kasta oo aad ku camal fashid mabaa'iidaan iyo guulaha aad ka gaartid. Maxaa yeelay waxay kuu hoggaamineysaa arrintaas inaad hore ugu socotid fulinta mabaadii'da kale.

CUTUUBKA SADDEXAAD
QEYBTA KOOWAAD
SIDAAD U BURBURIN LAHEYD CAADADA WALBAHAARKA
INTAANAY ADIGA KU BURBURIN

Haddaan wax kasta ilaawo kolley ma ilaawi doono sheeko aan ka maqlay ninkii ay ku dhacday kaasoo iga codsaday in aanan magaciisa sheegin, waxaan u bixiyey ninkaas Marto Douglas, wuxuuna ahaa nin aad ugu liibaansan noloshiisa qoyska, waxaa sacaadadiisa u sii kordhiyey gabar yar oo uu dhalay oo uu aad u jeclaa, laakiin nasiib darro waxaa ka dafay malaggii mowdka. Markaas baa gurigii sacaadada ku noolaa u gaddoomay guri hoog iyo murugo ah, 10 bilood kadib ninkii Marto ahaa ayey gabar u dhalatay, markuu faraxii u soo noqday ayaa hadana gabadhii 2-aad ka dhimatay, markaas baa qoyskii balaayo, uur ku taalo iyo murugo ku soo degtay oo uu xaalkoodii aad u xumaaday, ilaa Marton iyo afadiisaba hurdadii ka tagtay, waxay kula taliyeen takhaatiirta inay ka tagaan magaalada oo ay soo hawo geddistaan, laakiin tiiraanayada guriga ma wadin ee waa wax iyaga la socday una raacaya meeshii ay tagaanba.

Takhtarro kale waxay kula taliyeen inay qaataan kaniinka hurdada keena, laakiin daawadii waxba uma tarin oo waxay ku noolaayeen in muddo ah iyagoon hurdo dhadhamin.

Wuxuu yiri Marton; "Anigoo xaalkeygu sidaa yahay ayuu will yar oo aan dhalay oo afar jir ahaa igu caawiyey inaan ka bogsado tiiraanyadii, markuu igu khasbay inaan u sameeyo huuri yar, markaas baan u hoggaansamay doonistii yarka oo aan bilaabay sameyntii huuriga, waxaana ku howlanaa saddex saacadood oo xiriir ah, markii aan dhameeyey ayaan dareemay raaxadii caafimaadka ee aan u baahnaa, waayo shaqadii aan wiilka u qabtay waxay ii furtay jid cusub oo I tusay inaan ka baxo walbahaarkii I dulleystay ee waqtiga badan iga dhumiyey, markaas baan dhaar ku maray in aanan ilbiriqsi dambe oo waqtigeyga ka mid ah ku tebin shaqo la'aan.

Subaxdii dambe markaan ka soo kacay hurdadii waxaan ku dhaqaaqay inaan fuliyo go'aankii aan shalay gaaray oo ahaa inaan isku shuqliyo shaqo iyo wax qabasho, kolkaas baan gurigii baaray, waxaan arkay alaab badan oo gaaraysa 242 shey oo hagaajin u baahan, waxaan ku dhaqaaqay inaan dejiyo qorshe aan ku fulinayo go'aanka aan gaaray oo ah la dagaalanka shaqo la'aanta, waxaan ku dhaqaaqay inaan hagaajiyo alaabtii guriga ee hagaajinta u baahneyd oo dhan, haatan waxaa ka soo wareegtay 2 sano maalintii aan go'aankaa gaaray oo aan shaqada adag bilaabay, welina ma noqon shaqo la'aan oo waxaan ku biiray naadiyada ciyaaraha si aan uga qeyb galo shaqadooda adag ee isboortiga ah, waxaa kaloon ku biiray urur ka shaqeeya arrimaha samafalka si aan uga qeyb galo shaqadooda adag ee gargaarka ah, weliba waxaa kale oon ka qeyb galay waxbaridda dadka waaweyn ee magaalada Newyork ilaa la igu magacaabay maamulaha dugsiga ee xaafadeyda, waxaan ku dadaali jiray inaan goob joog ka ahaado dhammaan khudbadaha laga akhriyo dugsiga.

Sidaas ayaan ugu shuqliyey dhammaan waqtigeygii shaqo joogto ah iyo qorsheyn habka shaqadu u fuli karto, walaacii iyo walbahaarkii I baabi'in lahaana mar dambe agteyda kama soo dhawaan.

Waxaa laga sheegay Churchell madaxii golaha wasiirada Ingiriiska ee waqtigii dagaalkii 2aad ee dunida inuu shaqeyn jiray 18 saacadood maalintiiba, sidaas darteed muu heli jirin waqti uu ku walbahaaro. Mar baa la weydiiyey inuu ka murgo shaqadiisa badan markaas buu yiri; "maya maxaa yeelay shaqada badan darteed walbahaarkii boos buu iga waayey" wuxuu ula jeeday maba haleeli karo inaan walbahaaro.

Waxaa jira dad badan oo sida Churchel iska ceydhiyey walbakaarka, waxaana ka mid ah dadkaas Charles Kittering markuu curiyey matoorka baabuurka ee is wada wuxuu kormeeri jiray qeybta tijaabooyinka "General Motors" waxaa soo maray Charles waqti uu dhadhamiyey xanuunka saboolnimada ilaa uu ka dhex dhisay sheybaarkiisii xero lo'aad agteeda, waayo muu heysan wax lacag ah oo wuxuu ka amaahday xaaskiisa 2,500 \$ oo ay ka keydsatay casharro

music ah oo ay dad bari jirtay. Markaas buu bilaabay shaqo xiriir ah oo socota habeen iyo dharaar ilaa uu waqti u waayey welwel iyo walaac.

Mar la weydiiyey xaaskiisa inay walbahaarto waxay ku jawaabtay "haa cabsi iyo walbahaar baa I dilay ilaa aan hurdadii ka tegay, hase yeeshee ninkeygu waa liddigeyga oo wuxuu shaqeeyaa habeen iyo dharaarba, sidaas darteed waqti uma helo walbahaar" waxaa isna ka hadlay arrinkan aqoonyahankii Pasteur oo yiri: "markay nabaddu maansheyso maktabadaha waaweyn qolalka wax akhriska iyo sheybaarrada waa inuusan ku jirin walbahaar, haddii dadka oo dhami isku shuqliyaan inay waqtigooda ka faa'iideystaan markaas firaako looma heli laheyn welwel iyo walaac. Culimada iyo dadka wax baara ee had iyo jeer mashquulka ah sida badan kuma dhaco walbahaar, maxaa yeelay walbahaarku wuxuu saaxiib la yahay shaqo la'aanta.

Waxaa la is weydiiyey su'aal lagu wareeray oo ah "maxaa u sabab ah marka qofku is shuqliyo wax kastaba ha qabtee inuu ka badbaado xaaladda walbahaarka ah? Waxaa ka jawaabay su'aashaas cilmi nafsiga oo yiri "waxaa ma dhacdo ah in maskaxda qofka labo shey hal mar wada galaan" haddii taasi shaki kaaga jiro bal adiguba tijaabi oo ku feker hadda "inaad hor taagan tahay taallada xoriyadda oo aad fiirineyso haddana isla markiiba ku feker inaad ku howlan tahay shaqo kale". Ma kuu suuroobi kareysaa hal mar inay maskaxdaadu qabato labadaas shaqo?

Waxay ila tahay inaad ku qanacday in aanay kuu suuroobi kareyn inaad kulmiso laba shaqo hal ilbiriqsi, sidoo kale xagga dareenka iyo shucuurta ma dhici karto inaad hal mar wada dareento sacaado iyo walbahaar, waayo labadooda midkood baa xerada laga sarayaa, maxaa yeelay ma wada ku kulmi karaan, aragtidaas waxay ku kaalmeysay takhtarrada waqtiyadii dagaalka markay askarti cabsi iyo qalbi jab ku ridday welwel iyo murugo, haddaba takhaatiirtu si ay uga badbaadiyaan askarta xaaladaas cudurka ku riday waxay ku dhihi jireen "ku daweeya naftiina inaad ku shuqlisaan shaqa kasta, kana fogaada xaaladda shaqo la'aanta ee laxawga badan". Haddii lagu

dhameeyo waqtiga shaqo wax kastaba ha noqotee sida masawirrada, wax akhriska, beer waraabinta, ciyaaraha, heesaha, muusikada iwm.

Waxaa hubaal ah in shaqadaasi kaa jeedinayso mashaakilkii kuu keenay xanuunka iyo qalbi jabka, daaweynta ceynkaas ah waxaa loo yaqaan hadda "daminta shuqlinta". Waana farac ka mid ah daweynta cilmi nafsiga ee maaha farsamo cusub, maxaa yeelay takhtarradii Giriiggu waxay kula talin jireen dadka daaweynta shuqlinta qofka, sidoo kale Quakers waxay ku isticmaali jireen magaalada Philadelphia waagii Benefark Lii xukunka hayey.

Nin booqasho ku tagay isbitaalka Quakers ee maskaxda sanadkii 1774-dii aad buu u yaabay markuu arkay dad maskaxda ka jiran oo si fiican ugu hiwlanaa dhar sameyn, markaas buu aad ula yaabay oo wuxuu u maleeyey in lagu addoonsanayo shaqadaas dadka waalan, laakiin waxaa loo sheegay ninkii in dadka waalani ka bogsadaan jirrada markii ay shaqada isku ilaawaan, waayo xididdadaa u qaboobaya, qalbiguna waa u degayaa. Nin kasa oo takhtar ku ah cilmi nafsiga wuxuu kuu sugi karaa in howl isku shuqlintu tahay waxa ugu muhiimsan oo lagu dejin karo xididdada kacsan.

Waxaa ogaaday xaqiiqadaas gabyaagii la oran jiray Henry W., Lonfallow markay kadhimatay afadiisii oo dhallinyaro aheyd, kadib markii ay ku gubatay jikada, markaas ninkeedii muddo dheer buu murugeysnaa oo xasuusnaa ilaa uu ku dhawaaday inuu waasho, waxaanu lahaa saddex carruur ah oo u baahnaa xanaanadiisa, sidaas darteed waxaana khasab ku aheyd inkastoo uu tiiraanyeysnaa inuu xanaaneeyo carruurtaas una noqdo Aabbe iyo Hooyo, wuxuu ku soo tamashleyn jiray beeraha, wuxuu ugu sheekeyn jiray carruurtiisa qisooyin kala duwan, wuxuu kala qeyb geli jiray cayaarahooda ilaa uu dejiyey qasiido la yiraahdo; "sacaadadii carruurta" haddana wuxuu isku shuqliyey buugaagtii "Danter" howlahaas waxay shuqliyeen naftiisa iyo caqligiisa, waxaanay ka badbaadiyeen waalidii.

Wuxuu yiri gabyaagii Tanaysan markuu dhintay saaxiibkiis qaali ku ahaa oo la oran jiray Auter Hallen; "waa inaan nafteyda ku shuqliyaa howl hadii kale murug baa I dileysa".

Inta aynu shaqada ku jeedno ma dareemeyno walbahaar laakiin marka la gacan bannaanaado ayaa halis loo yahay in walbahaarku wareer soo qaado, markaas baanuu is weydiinaa miyeynaan nolosha ka helin waxaynu u baahneyn waa maxay walbahaarku? Miyaan jirranahay?

Waxaa jirta in maskaxdeenu maran tahay markii aynaan shaqo heyn, qof kasta oo cilmiga dabeecadda dhigtayna waa og yahay in dabeecaddu neceb tahay meel maran oo ay haddiiba buuxineyso, bal tijaabo ahaan dalooli laanbada dheer ee cad ee hawada faaruqa ka ah, waxaad arkeysaa in markiiba dabeyl buuxineyso laanbada gudaheedii, sidoo kale markay maskaxdu ka faaruq noqoto shaqada waxaa markiiba ka buuxsamaya caadifooyin iyo dareemo kala duwan, waayo? Waxaa jira caadifooyin sida walbahaarka cabsida, carada, xasadka, masayrka iwm, oo ku socda xoog adag oo laga soo dhaxlay waagii keymaha lagu noolaan jiray, waana dareemo xooggoodu gaarayo ilaa heer ay maskaxda ka firdhiyaan nabadda iyo xasiloonaada.

Waxaa arrinkaa ka hadlay aqoon yahan James L. Muesel oo ahaa Bare ka dhiga maaddada barbaarinta kulliyadda macallimiinta ee Jaamacadda Colombia, wuxuuna yiri; "walbahaarku kuuma soo dhawan karo intaad shaqada gacanta kula jirto, laakiin markaad kala baxdo gacanta ayuu weerar jac kugu soo siinayaa" waayo markaas waxaad ku fikereysaa waxyaabihii xumaan ahaa ee aad sameysay ee ku soo maray iwm. Marka caqligaagu wuxuu la mid yahay baabuur jid lagu sii daayey, oon cidi wadin cidina saarneyn oo markaas hadba wax jiiraya oo burburinaya, waxaanu halis u yahay inuu qarxo oo gubto, markaa si aad uga fakato xaaladdaas halista ah waa inaad u oggolaan naftaada wax firaaqo ah oo aad isku shuqlisaa shaqo waqtar kuu leh.

Si aad xaqiiqadan ugu camal fashid uma baahnid inaad sugtid inta aad ka noqoneysid Bare sare Jaamacadda Colombia sida James L. Muesel,

maxaa yeelay haddaad dareemi kartaa kuna dhaqmi kartaa xaqiiqadan.

Waxaan la kulmay markuu socday dagaalkii 2-aad ee dunida marwo reer Chicago ah waxay iiga sheekeysay siday ku gaartay xaqiiqada shuqlinta nafta iyo siday isaga daweesay walbahaarka markay shaqo isku maansheysay, waxaan kula kulmay marwadaas iyo ninkeeda tareen ku socday Missure oo ka baxay Newyork, waxay ii sheegaan inay wiil keliya carruur ka qabeen isagiina ku biiray ciidanka markii Jabbaanku soo weerary Pearl Harbour, waxay tiri Marwadii; "waxaan ku sigtay in caafimaadkeygu baaba'o welwelkii aan ka qabay wiilkeyga dartiis, waxaan is weydiin jiray xagguu jiraa? Ma nabad qabaa? Ma la dhaawacay? Ma laga adkaaday? Mise waa la dilay? Waxaan markaas weydiiyey siday uga adkaatay walbahaarkaas? Waxay iigu jawaabtay;

"waxaan isku shuqliyey howl, waxaan shaqada ka sii daayey gabadhii guriga iiga shaqeyneysay, markaas baan u xeytay maamulkii iyo shaqadii guriga oo dhan, laakiin shaqadii guriga si weyn iima shuqlin, markaas baan ku dhaqaaqay inaan raadiyo shaqooyin kale oo aad ii sii shuqliya, waxaan shaqo ka helay qeybta wax gadidda ee dukaan weyn oo shaqo badan waayo, waxaa hortaada buuxinaya gatayaasha iyagoo ku warsanaya alaabo kala duwan iyo qiimahooda, marka ma heli kareyn ilbiriqsi aan ku fekeri, wax ka baxsan shaqada I hortaal, markaan habeenkii shaqada ka soo hoydo ma heleeli kareyn waxaan ka aheyn inaan u raaxeeyo lugihii ku daalay sara-joogga maanta oo dhan, markaan casheeyana horey baan ka seexan jiray hurdo dheer oo macaan.

Waxay garatay marwadaas wixii uu ujeeday John Cowper kuna sheegay buugiisa loo yaqaan "fanka ilowga" dareenkeena nabadgelyada nafta iyo xasiloonaa waxay u raxeynayaan xididada dareenka 'neerfaha' marka uu qofku isku maasheeyo shaqo.

Waxay ii sheegtay haweeney dal mareen ah oo ku magac dheer Osa Johnson siday isaga xoreysay walbahaarka, waxaanay haweeneydaasi qortay buug ka sheekeynaya taariikhdeeda oo la yiraahdo "waxaan

guursaday is biimeynta" waxaa guursaday gabadhaas Martin Chonson iyadoo 16 sano jir ah, waxay markiiba u guureen keymaha Jasiiradda Borno, waxay ku wareegeen Afrika iyo Aasiya muddo 25 sano ah, waxayna ku caawiyeen shineemooyinka masawirro ay ka soo qaadeen xayawaanadii hore ee waagii bilowga dunida, kuwaas oo ku sigtay inay ka dabar go'aan dunida, markay soo noqdeen sagaal sano kadib ayey goosteen inay ku soo wareegaan dhammaan geyiga Mareykanka si ay khudbado uga jeediyaan filimadii caanka ahaa, uguna bandhigaan dadweynaha Mareykanka, waxay raaceen diyaarad ay leeyihiin, taasoo ka duushay magaalda Denver, una socotay xagga xeebta.

Halkii buu ku dhintay Marti kadib markii diyaaraddii buur herdisay, takhtarradii waxay yiraahdeen Osa kama kaceyso dhaawaca gaaray, laakiin mallahoodii ma rumoobin oo saddex bilood kadib bay ka soo baxday isbitaalkii iyadoo ku fadhida kursi giraamo ku socda oo curyaantay, markaas bay bilowday inay khudbad u jeedisoo kumanyaal dhegeyseyaal ah, weliba sannadkaa waxay jeedisay in ka badan 100 khudbadood, iyadoo ku fadhida kursigeedii giraamada lahaa, mar baan weydiyey waxay sidaa isugu dhibeyso, waxay igu tiri; "waxaan sidan isugu dhibayaa in aanan u oggolaan nafteyda inay waqti u hesho walbahaar iyo tiiraanyo".

Waxay gaartay Osa xaqiiqadii uu ka gabyey Taneyasan qarni ka hor oo aheyd "waa inaan nafeyda ku shuqliyo howl haddii kale waxaan u dhimanayaa murugo".

Sidoo kale waxaa gaaray xaqiiqdan Admiral Byrd, mar uu ku noolaa shan bilood teendho ku hoos dhisan buuro baraf ah, qudbiga koonfureed, wuxuu ku noolaa meeshaa cidlada ah keligiis, wax nafley ahna waxaa ugu dhawaa meel u jirta 100 mayl, dhaxantu waxay gaartay heer aan loo adkeysan kareyn ilaa uu arkay neefta afkiisa ka soo baxaysa oo u gaddoontay baraf, markay dabeysha qabow dhaafto, wuxuu kaga sheekeeyey Beyrd xaalkiisa kitaab uu qoray oo la yiraahdo "keligii" shanti bilood ee uu ku noolaa qudbiga koonfureed ee habeen iyo maalin isku mid ahaayeen mugdiga dartiis, waxaa waajibku ahaa inuu wax isku shuqliyo si uu u xafido caqligiisa.

wuxuu ku sheegay kitaabkiisa, "inta aanan seexan habeenkii waxaan qorsheyn jiray shaqada aan berri qaban doono, waxaan u qeybin jiray saacadaha shaqada sidatan, "laba saacadood inuu ku banneysto irrid uu ka baxo, si uu barafka irrida ka ooday isaga dhaqaajiyo, laba saacadood inuu ku kala hagaajiyo kutubta iyo alaabta cuntada, laba saacadood wuxuu ku rakibi jiray qalabka lagu xaaqo barafka, sidaas buu waqtiga oo dhan isku shuqlin jiray, waayo haddii aanu sidaa isku shuqlin wuxuu noqon lahaa nin aan qasdi iyo ujeeddo midna laheyn, haddii uu sidaas noqdana wuu halaagmi lahaa' marka haddii walbahaar kugu dhaco xasuuso inaad howl qabad isku daaweyn kartid.

Waxaa isna adkeeyey xaqiiqadan Dr. Rechard C. Cabat oo Bare ka ahaa kulliyadda Caafimaadka ee Jaamacadda Havard, waxaanu ku sheegay kitaabkiisa loo yaqaan "muxuu dadku ku nool yahay", waxaa I farax geliyey inaan ogaaday anigoo Bare caafimaad ah in shaqadu dad badan daweysay kana bogsiiyay jirrooyinkii hayey, iyadoo qaarkood dadkaas jirran ka sheeganayeen awood la'aan xagga galmada iyo jirrooyin kale, haddii aynaan isku shuqlin howl oo intaan meel iska fariisano aan fikir hoggaanka u sii deyno, dhaqdhaqaaqeenu wuxuu noqonayaa eber ama waxaan jirin yididiiladeenuna dabeysha ayey raaceysaa.

Waxaan aqaan nin ganacsade ah oo reer Newyork ah oo kula dagaalama walbahaarka habka is shuqlinta ilaa uu waayey hal daqiiqo oo firaaqo ah, ninkaas waxaa la yiraahdaa Trankar Longman, wuxuuna ka mid yahay ardaydeena, wuxuu nooga sheekeeyey si xiiso leh habka uu uga adkaaday welwelka aad baana loo jecleystay, khudbadiisii markaas baan casho ku marti qaaday, halkaas baana ku wada sheekeysanay, ilaa habeen barkii waana tan qisadiisii uu nooga sheekeeyey.

"mar laga joogo 18 sano waxaa igu dhacay walbahaar kulul oo igu riday hurdo la'aan ilaa aan ka baqay inaan waasho, waxaanu lahaa walbahaarkaasi sabab ah inaan ka ahaa khasnaji shirkad la yiraahdo Crown Fruit oo ku shaqey jirtay rasamaal dhan malyuun \$, waxay

shaqada shirkaddu aheyd inay miirto furutada kuna shubto miidda gasacado oo ay ka iibiso dukaamada waaweyn ee sameeya jalaatada, waxaana shaqadaas waday muddo dhan 20 sano, haddaba waxaa dhacay inay hal mar istaagtay shaqadii shirkadda, sababtoo ah dukaamadii naga iibsan jiray furutada aanu miirno baa sameystay makiinado ay ku miirtaan furutada oo markaas ka deeqtoomay wixii ay naga iibsan jireen, waxaa markaas nagu dhacay khasaare weyn oon laga soo waaqsan Karin, ilaa aan bixin kari weynay amaahdii nalagu lahaa, markaa la yaab malaheyn inaan walbahaaro, waxaan aaday Cobenfoarm oo ah xarunta warshadda weyn ee shirkadda si aan u dhacsiyo madaxii shirkadda xaalka cusub, laakiin waa iga gareysan waayeen.

Waxaan eedeeyey laanta iibka ee shirkadda Newyork oon ka soo bixin waajibaadkii, waxaan xoogga saaray inaan ku qanciyo madaxii shirkadda in la joojiyo miraha furutada, wixii la hayo oon weli la miirina dib loogu celiyo suuqa si loo gado, maxaa yeelay mar haddaan suuq loo heyn waa tacab khasaar in la miiro wax kale, ugu dambeyn wuu iga oggolaaday agaasimihii shirkadda taladeydii, markaas bay mushiladdii xal u dhawaatay, markaan warshaddii ka joojiyey wax soo saarkii wixii furuto la hayeyna aan suuqa ka iibinay waxaan filayey in markaas walbahaarku iga fududaado laakiin wuxuu igu noqday caado ila socota.

Waxaan ku soo noqday Newyork markaas baan wax kasta oo ku lug leh shirkaddii ka walbahaaray ,hurdadii baan ka tagay waxaana ku dhawaaday in caqliga la iga galo, anigoo quus ku dhow ayaan ku hanuunay dariiqo cusub oo iga badbaadisay tiiraanyadii iyo hurdo l'aantii, waxaan isku shuqliyey arrimo kala duwan oo u baahan inaan xooggeyga iyo dareenkeyga oo dhan isugu geeyo ilaa aan ka waayo waqti aan ku walbahaaro, waagii hore waxaan shaqeyn jiray todobo saacadood maalintii, hadda waxaan shaqeeyaa 15 saacad maalintii, waxaan tagaa xafiiska 8-da subaxnimo, waxaan ka soo noqdaa anigoo noogan, markaas baan isku tuuraa sariirta oon hurdo la dhacaa, waxaan sidaa ku socday saddex bilood, markaas baan ka adkaaday walbahaarkii oo aan ku soo noqday nolosheydii caadiga aheyd, waxay

qisadani igu dhacday mar laga joogo 18 sano ilaa markaas iguma soo noqon walbahaarkii.

Wuxuu ku soo koobay Bernard Shaw qisadiisii ereyadan "sirta qarsoon waa in qofku dareemo hoogga oo ah inuu qofku waqti helo inuu is weydiiyo inuu yahay qof liibaansan iyo in kale, marka waa inaad is weydiin inaad tahay mid guuleysatay ama mid guul darreystay, laakiin afuuf gacantaada oo ku dhaqaaq shaqo dhab ah, dibna ha u dhigin ee hadda ku dhaqaaq, waxaad arki doontaa in dhiigu ku ordo, xididadadaada maskaxdana ka buuxsamaan fikrooyin cusub, oo waxtar leh, wax yar ka dibna waxaad akri doontaa in natiijooyin wax ku ool ah kaaga soo baxaan is shuqlintaada.

Haddaba ahaaw qof shuqloon abidkii, waa taan daawada ugu wanaagsan uguna waxtar badan ee dunida jirtaa xagga walbahaarka, markaa si aad u burburiso caadada walbahaarka raac qaaciddada (1.1) isku maanshee howl haddii aad dareento welwel is shuqli, haddii kale waxaa ku dili doona murugo iyo uur ku taalo.

QEYBTA LABAAD

HA OGGOLAAN IN CABSIDU KAA SAAYID CALEYSO

Waxaan halkaan ku soo gudbinayaa sheeko nafta cariiri galisay, waxaana ka sheekeynaya ninkii ay qabsatay oo la yiraahdo "Robert Moore" oo ka tirsan wakaaladda New Jersey ee Mareykanka, wuxuuna ku bilaabay; "Waxaan ku qaatay casharkii iigu darnaa dunida intaan noolaa meel 276 fuudh badweynta indo-china gunteeda ah.

Sanadkii 1945-kii waxaan ka mid ahaa 88 badmaax oo ka shaqeynayey markab quusa oo la yiraahdo Baya SS-318, maalin buu noo sheegay raadaarku in maraakiib Jabaan ahi nagu soo jeedaan, markii waagu baryey markabkeenii kor buu u soo baxay si uu weerar ugu qaado maraakiibta Jabbaanka, hase yeeshee waxaa nagu soo baxay laba markab oo ah kuwa dagaalka oo uu jabbaanku lahaa oo loogu tala galay inay burburiyaan maraakiibta cadowga, waxaan ku tuurnay saddx madfac.

Laakiin waan la gefnay, annagoo isu diyaarinayna inaan madaafiic ku afuufno markab naga horreeyey ayaa waxaa nagu soo kediyeey markab kale oo nagu sameeyey dhabar jebin, waxaana la socodsiiyey barta aanu joogno dayuurad jabbaan ah, markabkeenii hoos baan u dejinay ilaa 150 mitir, makiinadihiina waan daminay si aan loo maqlin guuxooda, hase yeeshee saddex daqiiqo kadib waxaan la kulanay jab iyo hoog, waayo waxaa agteena ku qarxay lix bamboo oo ah kuwa loogu talagay badda gunteeda, xooggii bambooyinkaas hoos buu noo dejiyey ilaa 276 mitir.

Waxaa nagu dhacay argagax, waxaan aad uga baqnay in cadowgu nagu soo weeraro biyaha hoostooda ilaa 1000 mitir, haddana waxaan joognaa in ka yar masaafadaas, markaas baa cabsidii nagu sii weynaatay oo ay u muuqatay in geerideena la hubo, waayo wuxuu na kor taagnaa markabkii miinada muddo 15 saacadood ah oo uu bambo nala dhacayey, markaasuu xaalkayagii aad u xumaaday, cabsidii iyo argagixii waxay I gaarsiiyeen heer aan neefsan kari waayo, waxaan ku celceliyey inaan iraaqdo kani waa wadkeenii oo run ah, markii la

damiyey makiinadihii markabka waxaa kordhay heerkulkii ilaa 100C, inkastoo uu heerkaa joogay kulka hadana waxaan dareensanaa inaan baraf noqday dhaxantii cabsidu keentay awgeed, ilaa aan dharkii ka dul gashaday jubbad suuf ah oo aan ilkaha isla dhacay, waxaa iga socday dhidid qabow intii la garaacayey markabkeena muddo 15 saacadood ah, markaas baa si kedis ah garaacistii nalooga joojiyey, waxaan u maleeynay in markabkii miinada ee na garaacayey ay ka dhamaatay rasaastii oo uu markaas iska cararay, waxay ila noqdeen 15-kii saacadood 15 malyuun oo sano, saacadahaas iyaga ah waxaa iga hor yimid wax allaale wixii aan horay u sameeyey oo xumaan iyo wanaag ah, wax weyn iyo wax yarba, waxyaabahaas oo qaarkood aad ii walbahaariyeen waqtigoodii.

Intii aanan ku biirin kulliyadda hadda waxaan ahaan jiray sarkaal ka shaqeeya bangi, waxaa ugu badnaan jiray walbahaarka I qabta saacadaha shaqada oo badnaa, mushaarka yar ee aan qaato, iyo rajo la'aanta raaxaysiga. Waxaan ka murugoon jiray in aanan laheyn guri baabuur iyo xoolo aan xaaskeyga ugu iibiyo waxyaabaha qurqurxoon ee ay u baahan tahay, waxaa kale oon aad uga walbahaari jiray daqar uu I gaarsiiyey shil baabuur oo igu reebay astaan dhabarka ah. Waxaan aad ula yaabay waxyaabahaas fudud ee aan sida daran uga murugoon jiray iyo waxa maanta ina heysta, anigoo badweynta salkeeda jooga oo bambooyinku I halis gelinayaan, malaggii mowdkuna I dul taagan yahay, waxaan ku nadray maalintaas in haddii aan ka nabad galo khatarta maanta ina heysata in aanan mardambe walbahaarin wax kasta oo dhaco, waayo waxaa si aad ah ii cabsi gelisay masiibadii maalintaas na qabsatay.

Runta haddaan sheego wax ka badan wixii aan kutubta ka bartay afartii sano ee aan ku jiray jaamacadda Syracuse ayaan ka bartay dhacdadaas badda salkeeda igu qabsatay.

Innagu sida badan waxaan uga hortagnaa masiibooyinka waaweyn si geesinimo iyo adkeysii leh, waxaase nasiib darro ah inay innaga adkaadaan waxyaabo yaryar oo aan macno laheyn, kuwaas oo inagu rida welwel iyo walaac.

Tusaale ahaan waxaan u soo qaadan karnaa hadalkii Sumuel Pepes uu ku sheegay xasuus qorkii uu uga sheekeeyey Sir Harry Veni, markii la geeyey meeshii qoorta looga goynaayey ma codsan in la cafiyo iyo in loo naxariisto midna, laakiin wuxuu ka baryey qoorgooyihii in aanu seefta uga dhufan meel uu boog ku lahaa oo qoorta ah, sidoo kale waxaa laga sheegay Admiral Byrd isagoo ka sheekeynaya habeenkii mugdiga iyo dhaxanta ahaa ee uu ku noolaa cirifka koonfureed in ragiisii isku shuqlin jireen waxyaabo aan qiimo laheyn, isagoo ku noolaa meel heerkulku gaarayo -80C, waxay ku dagaalami jireen haddii midkood ku xad gudbo meesha kan kale seexdo oo uu ku soo durko, waxa ka mid ahaa raggaas nin ka yaqyaqsoon jiray markuu arko nin raga ka mid ahaa oo ka caado yeeshay markuu wax cunayo inuusan cuntada liqin ilaa uu 28 jeer calaliyo, waxaa haboonaa in Byrd ku daro hadalkiisii in waxyaabahaas aan qiimaha laheyn ay qoyska u soo jiidaan dhibaatooyin badan oo sabab u noqda jirrooyinka qalib xanuunka ee dunida jira nuskood. Waxaana sidaa sheegay oo caddeeyey rag xogogaal ah oo uu ka mid ahaa Joseph Spath oo ka tirsanaa garyaqaanada Chicago, kaddib markuu xukumay in ka badan 140 kun oo kiis oo furid ah, waayo waxyaaba aan qiimo laheyn ayaa u sabab noqda masiibada qoyska.

Sidoo kale wuxuu yiri Franks Hogan xeer ilaaliyihii Newyork "dacwooyinka dembiyada ah ee la hor keeno maxkamadaha nuskood waxay ka dhashaan waxyaabo aan macno laheyn sida muran dhex mara xubnaha qoyska quursi yar ama hadal xun oo aflagaado ah.

Waxyaabaha ceynkaas ah ayaa sababa dembiyo waaweyn oo gaara ilaa heer dil, wax yar oo dadka ka mid ah ayaa qaloocan oo dabci qalafsan, laakiin dadka badankiis wuxuu jecel yahay wanaag iyo nabad, hase yeeshee ereyada xunxun ama aflagaadada ah ee loo jeediyo nafta ee qabka iyo sharafta qofka dhaawacaya ayaa u sabab noqda dhibaataada dunida badankeed oo abuura is af garanwaa kala erya dadkii uu waajibku ku ahaa inay iskaashadaan oo ay wada noolaadaan.

Waxay ii sheegtay Elena Roosevelt marwadii madaxweynihii Roosevelt inuu ku dhacay walbahaar markii la aroosay sababtoo ah adeegtada u shaqeysa oo aan cuntada Karin aqoon, waxay tiri Elena "hadda haddii arrinkaasi igu dhacdo garbahaan dhaqajin lahaa anigoo leh maxaa ka macno ah wax yar ka dibna waan iloobi lahaa" waa kaa marka dadku bislaado wixii markii hore cabsida iyo walbahaarka ku ridi jiray waaga dambe ku qoslaya.

Mar buu nagu marti qaaday nin saaxiibkey ah aniga iyo xaaskeyga gurigiisa oo ku yiil magaalada Chicago, iyaddoo ay saaxiibkey iyo xaaskiisa nala cunteynayaan ayuu saaxiibkeey sameeyey gef yar oon micno laheyn oo aan istaahilin in la dareemo, laakiin xaaskiisii ayaa horteena ku canaanatay oo ku tiri; "John waxaad sameysay gef miyaanad hilibka googooyin aqoon? "markaas ayey ina soo fiirisay iyadoo leh mar kasta sidaan buu u gefaa oo hilibkka si fiican uma googooyin yaqaan, laakiin ceebtiisu waa inaanu isku dayeyn inuu saxo gefkiisa, waa dhici kartaa in ninku gafay laakiin aad baan ula dhacay dabeecaddiisa, waayo waa nin labaatan sano la dhaqmayey naag ceynkaas ah oo ka gaaray heer sare xagga dulqaadka.

Run aphantii anigu waxaan door bidi lahaa inaan ku casheeyo rooti jajab oo aan ku heysto guri is afgarad iyo is tixgelin leh intaan ku casheyn lahaa digaag shilis ah, laakiin ay dhagahayga ku soo dhici lahaayeen ereyo buuq iyo canaan oo kale ah.

Maalintaas wax yar ka hor waxay casuumtay xaaskeyga koox saaxiibadey ah, markii waqtigii soo dhawaaday waxaan ogaaday iney jiraan saddex istiraasho oo midabkood uu ka duwan yahay kuwa kale, waxaan haddiiba ku orday xaggii adeegtada guriga ka shaqeynaysay, waxaan arkay inay u diyaarisay istiraashooyinkii in la dhaqo martidiina way ku soo bilaabatay guriga, waxaan ku sigtay inaan ciil la dilaaco, markaas baan is qabtay oon is iri; "maxaad gef yar oo ceynkaas ah aad ugu arbusheysaa casuumadan weyn ee loo baahan yahay in farax iyo sacaado lagu dhameysto.

Waxaan dareemay in la ii baaqay oo la i yiri; "maxaad ugu haleyneysaa xafladda gefkaas yar? "markaas baan tagay miiskii qadada oo aan bilaabay inaan martida ku soo dhaweeyo qalbi furan, waayo waxaan door biday inay martidu igu tilmaanto maamul xumo guri intey igu tilmaami laheyd dabci xumo iyo qeylo badnaan, laakiin nasiib wanaag qofna kuma baraarugin saddexdii istiraasho ee midabka gaarka ah lahaa.

Waxaa jirta xikmad Giriiggu leeyahay oo leh; "qaanuunku is kuma shuqliyo waxyaabaha aan qiimaha laheyn ee fudud", hadda waxaa loo baahan yahay inaan qofku isku shuqlin waxyaabaha yaryar ee aan qiimaha laheyn, hadduu rabo inuu ku noolaado nabadgelyo iyo xasiloonaan.

Hadaba si aanu uga addkaano waxyaabaha yaryar waa inaanu fikirkeena u jeedino waxyaabaha qiimaha iyo qaayaha weyn leh, sida uu sameeyey saaxiibkey Homer Groy oo ah ninkii qoray kitaabka "waa iney arkaan baariis". Waxaa jirta tusaale Homer looga dayan karo oo ah in Homer uu ku shuqloonaa qiso uu qorayey, waxaa aad uga careysiin jirey qaboojiyaha guriga ugu jira oo lahaa codka argagixiya oo kale oo ka dhabqin jiray fikradihiisa, wuxuu yiri Homer; "Anigoo sidaas ah ayaan maalin saaxiibadey u raacay meel baadiye ah oo cidla ah, waxaan maqlay cod ka soo baxaya laamaha geedaha ee dabeyshu ruxayso, kaas oo u ekaa codkii ka soo baxayey qaboojiyaha guriga ii yiil, laakiin kama aanan argagixin markaan ee waan jecleysatay.

Waxaan isweydiiyey maxay tahay sababta aan ku jeclaaday codka laamaha oo aan codka qaboojiyaha ku nacay? Maadaama labada codba isku mid yihiin, markaas baan isku leyliley inaan u adkeysto codka qaboojiyaha ee aan kahday, markii ay dhowr maalmood ka soo wareegtay, waxaan hilmaamay inuu qaboojiye cod xun guriga ii yaal iyo in kale, waayo codkiisii baa caadi ii noqday, markii aan isku leyliley inaan jeclaado" marka waa sidaas waxyaabo badan oo ina welwel gelinaya, hadaba yeynaan ku xeel dheeraanin isku dhibidda waxyaabaha yaryar ee aan qiimaha laheyn, laakiin aynu fududeyno oo indhaha ka laabano si aanu haddiiba u ilowno.

Wuxuu yiri Dis Valid; "noloshu way gaaban tahay ee yaan la sii gaabin", wuxuu ku qoray Ander Manries majaladiisa loo yaqaan Disrali" ereyadaasi aad bay iigu kaalmeeyeen inaan u adkeysto dhibaatooyin qaraar, waayo waxaa dhaca marar badan inaan nafteena u dagaal gelino waxyaabo yaryar oo waajibku yahay in indhaha laga qabsado oo keliya.

Cimriga qofka kama badna sanooyin dhowr tobnaad ah, hadana waxaan ku tebinaa saacado badan inaan ka tiiraanyoono waxyaabo fudud oo aan qiimo laheyn oo ku haboon in la ilaawo. Marka waa inaan ka buuxinaa nolosheena dhaqdhaqaaq miro dhaliya, fikrado waxtar leh iyo shaqo wax ku ool ah, maxaa yeelay, noloshu way gaaban tahay, sidaas darteed waa inaan la sii gaabin oon lagu ciyaarin ee laga faa'ideystaa ilbiriqsi kasta.

Nasiib darro qoraagii weynaa ee la oran jiray Rudyard Kipling waa ilaaway xaqiiqadan ah; "noloshu way gaaban tahay ee yaan la sii gaabin" maxaa yeelay, wuxuu la dagaalay seediggiis run ah, wuxuuna dagaalkoodii gaaray heer ay maxkamad isla fuulaan oo khilaafkoodii dunida caan ku noqdo, qisadiina waa tan. Wuxuu guursaday Kilpling gabar reer Verment ah oo la yiraahdo Crolin Plaster, wuxuu uga dhisay baladkeedii guri qurxoon, halkaas oo ay ku wada noolaayeen, wuxuuna jeclaa inuu halkaas ku noolaado inta uga hartay nolosha.

Waxaa jiray nin la oran jiray Bietti Plaster oo ahaa Kilping saaxiibkiis daacad ah lana dhashay xaaskiisa. Markaa waxaa dhacday in Kipling ka gatay seedigiis Bietti Beer, hase yeeshee wuxuu shardi ka dhigay Bietti inuu xilli kasta isagu goosto cawska beerta. Maalin buu arkay Bietti in Kilping cawskii iska gooyey, meeshiina ku abuuray ubax, markaas buu Bietti aad u carooday oo uu qarxi gaaray, markaas buu seedigii Kilping caay iyo canaan ku sii daayey, Kilping isaguna sidii oo kale ayuu ugu jawaabay, xaalkoodii baladka oo dhan uu ku faafay.

Maalmo kadib, waxaa dhacday in Kilping oo fuushan baaskiil intuu hor dhigay seedigiis gaari fardo jiidayaan, markaas buu Kilping dhulka ku

dhacay oo uu aad u carooday, waxaanu hilmaamay erayadii uu hore u qoray oo ahaa "dharkaaga ha iska furin marka dadka kula jooga dharka tuuraan caro darteed" laakiin markaan waa ceshan kari waayey dharkii, waxaanu ku dhaartay inuu seedigiis xabsiga ku tuuro, waxaana ka dhex dhacay dacwad weyn oo wareerisiay magaaladii Verma, waayo waxay weriyeaashii joornaalada ka kala yimaadeen magaalooyinka Ameerika si ay ugu faafiyaan dunida wararka dacwadan yaabka leh.

Waxaa khasab ku noqotay Mr. Kilping inuu ka tago gurigiisa qurxoona iyo beertiiba, wuxuuna goostay inuu ka baxo dalka Mareykanka oo dhan, marka sidaas bay isaga iyo xaaskiisiiba uga baxeen Mareykanka oo ay door bideen inay dal shisheeye ku noolaadaan, waxaas oo dhibaato ah waxaa keenay xoogaa caws ah oo la gubay, badalkoodiina lagu beeray ubax. Marka maxaa inooga fiicnaan badan inaan ku camal falno ereygii uu yiri feylasuufkii la oran jiray Bericls 24 qarni ka hor "ina kiciya walaalayaal meeqaan kor fadhinaa waxaan macno laheyn".

Halkan waxaan ku soo gudbinayaa qiso ka mid ah sheekooyinka Dr. Harry Emerson waana tan "Buurta la yiraahdo loxpek ee Colorado korkeeda, waxaa ku yaal geed leh jirrid weyn oo doog ah oo loo daawasho tago dhumucda geedkaas culimadu waxay ku sheegeen inuu jiray 400 oo sano, waxaanu ahaa geedkaasi mid yar markii Colombos cagaha dhigay San Salfador, waxaa ku dhacay geedkaas dabeylo onkod danab la jiro roobab badan iyo waliba 14 jeer oo uu danab toos ugu dhacay, intaas oo dhan way dhaqaajin waayeen oo wuxuu noqday geed balaayo ku bax ah oon waxba looga baqin, geedkaas sidaas uga adkaaday dhibaatooyinkii waaweynaa waxaa soo weerary cayayaan iyo xar yaryar oo dhan walba uga yimid, siday u wadeen bay tirtireen geedkii weynaa ee u adkeystay duufaantii, roobabkii iyo danabkiiba, waxaa liqay geedkii weynaa cayayaan iyo xar yaryar oo farta iyo suulka lagu burburin karo.

Marka miyeynaan la mid aheyn geedkaas oo kale, waayo waxaan ka nabad galnaa masiibooyin iyo dhibaatooyin culculus, ka dibna waxaan u hoggaansanaa cayayaanka walbahaarka, kaasoo far iyo suul lagu

burburin karo, marka waa inaan ka digtoonaano in arrimaha yaryar ee fudud inaga dhoobeeyaan nolosha gaaban ee loo baahan yahay inaan la sii gaabin.

Goor laga joogo dhowr sano waxaan dhex qaaday keymaha Teton ee gobolka Weyuming, aniga oo la jira qaar saaxiibaday ah, waxaana booqasho ugu soconay John Droek Feler oo beer weyn ku lahaa keynta, waxaan markaa ka lunay jidkii tegi lahaa Beerta, markaas baan saacad ka dib dhacnay ballantii, waxaa markaas iridda ii sii joogsaday Mr. Seifred oo hayey furaha iridda Beerta oo halkaas saacad igu sugayey iyadoo qorrax iyo kaneeco dhan kasta ka soo weerartay ilaa aan ka imaado, kaneecadaas oo ay runtii adkeyd sida looga fakado oo dadka waalli ku ridi jirtay sida badan, laakiin Mr. Seifred intuu I sugayey isma waalin, kaneecadiina may cabsi galin ee intuu soo goostay qori uu dalooliyey ayuu buun ka dhigtay.

Markaan u tagay muu aheyn nin dagaal kula jira kaneecada, laakiin wuxuu ahaa nin iska afuufaya buunkii uu sameystay oo ku raaxaysanaya, anigu waxaan ka soo qaatay ninkaas buunkii si aan meel u dhigto oo aan u xasuusto, waayo ninkaas wuxuu ahaa nin arrimaha yaryar dejiya meeshooda runta ah ee aanay ku xambaareyn iney nolosha ka mashquuliyaan.

Haddaba si aad u burburiso caadada walbahaarka inta aanu ku burburin raac murtida 2-aad. Ha u oggolaan naftaada inay ka gadooddo waxyaabaha yaryar ee aan qiimaha laheyn. "xasuuso in noloshu gaaban tahay marka ha sii gaabin".

QEYBTA SADDEXAAD QIIMAHA QAALIGA AH EE AARGUDASHADA

Habeen habeenada ka mid ah ayaan ku dhex tamashleeyey keymaha Coston iyadoo ay ila jireen qaar saaxiibadey ah, waxaan ku dhex dhisanay keymaha teendhooyin, markaas baa waxaa si kedo ah noogu soo baxay xayawaanka keymaha ee Argagixiyaha ah loona yaqaan Dubbiga madow, waana xayawaan sida jeerta ah oo laga helo badweynta waqooyi ee barafku daboolo.

Wuxuu u gudbay dubbigii meel aan qashin ku daadinay, wuxuuna bilaabay inuu cuno cunto meesha lagu qubay. Waxaa halkii noogu yimid G/le Martandi oo ka mid ah raga naftood hurayaasha ah ee sahmiya keymaha, isagoo faraskiisii fuushan ayuu nooga sheekeeyey sheekooyin la yaab leh oo ku saabsan dubbiga iyo sida uu uga adag yahay xayawaanada kale oo dhan, waxaan ka aheyn dubbida asagoo kale ah ee geesaha leh, laakiin isla markiiba waxaan arkay xayawaan yar oo daciif ah oo u tegey dubbigii, isagoon wax cabsi ah ka qabin, waliba wuxuu la wadaagay cuntadii uu cunayey kaas oo ahaa sida Wallada oo kale, hadduu caroodana wuxuu sii daayaa candhuuf qarmoon.

Marka dubbigu wuu awoodi karay inuu hal dhirbaaxo ku dhufto xayawaanka yar ee cuntada la qeybsaday, laakiin ma yeelin, maxaa yeelay waxay bareen tijaabooyinkiisii hore in la dagaalanka xayawaanka yar-yar ee sidaas oo kale ah dhib maahee aanay faa'iido u laheyn, marka wuxuu oga in sharaftiisa iyo karaamadiisa ku jirto inuu indhaha ka laabto la dagaalanka xayawaanka yaryar ee noocaas oo kale ah.

Anigu waxaan ka faa'iideystay dhacdadaas cashar qiimo weyn ii leh, maxaa yeelay waxaan ku ogaaday tijaabooyin badan in cadaawadnimada iyo col u qaadidda dadka kale aanay wax faa'iido ah ii soo jiideyn, waayo markaan calool xumo u qaadno dadka cadowga noo ah, waxaan fursad u siineynaa inay naga adkaadaan oo ay naga dhoobeeyaan raaxadeena, caafimaadkeena iyo sacaadeena. sida

dhabta ah markay ogaadaan cadowgeena inay walbahaar, ceeb iyo calool xumo ina gaarisyeen farax bay la dhacayaan, marka carada iyo ceebka aan la dooneyno dadka aan colaadineyno innaga keliya ayey na dhibaysaa oo ay nolosheena cirriiri gelineysaa intaan wax ina anfaca qabsan laheyn ayaana waqtigeena isaga khasaarineynaa wax dhib maahee aan dheef noo laheyn.

Haddii ay dadka qaarkood naftooda u qurxiso inay ku xumeeyaan adigu is moogeysii oo iska dhig sidii qof aan ka war qabin in la xumeeyey, hana isku dayin inaad adna xumeyso ood ka aar gudato, haddii aad ku dhaqaaqdo aargudasho ogow inaad naftaada dhibeyso in ka badan intaad dhibayso cadowgaaga.

Ha u maleynin inay erayadan ka soo baxeen Feylasuuf heer sare ah oo waayo badan bulshada ku dhex jirey, waxay erayadani ku soo baxeen wareegto uu soo saaray saldhigga booliska Nilwaky, waxaanay ka tarjumeysay wareegtadu dambiyada ka dhasha aargudashada iyo siday kuugu geysan karto dhibaato aargudashadu. Dhibaatada kaaga iman karta aargudashada ee xagga caafimaadka waxaa ka hadashay mujaladda loo yaqaan Life ee ka soo baxda Washington oo qortay; "waxay ku caan baxeen dadka dhiig karka qaba, gadoodka dhaqsaha ah, carada iyo xinka taasoo keeni karta dhibaato ilaa wadno istaagid ah".

Nebi Ciise waxaa laga soo weriyey inuu yiri; "Cadowgiina jeclaada" markuu waanadan farayey dadka uma jeedin toosinta anshaxa oo keli ah ee wuxuu u jeeday badbaadinta qofka naftiisa, tasmada waanadan waxay waafaqsan tahay mabaadii'da caafimaadka ee casriga ah, marka waxaa dadka loogu yeerayaa inay todobaatan jeer cafiyayaan dadka walaalahood ah ee ay wax dhex maraan, waxaana looga digayaa dadka cudurrada, dhiig karka, wadna xanuunka iyo boog-calooleedka oo ka dhasha ku fekerka aargudashada.

Haweeney aanu deris aheyn ayaa wadno xanuun ku dhacay, waxay takhaatiirtu kula taliyeen inay ka digtoonaato carada wax kasta oo

dhaca, maxaa yeelay waxay ogaadeen takhtaradu in qofka qaba wadna xanuunka hal mar oo uu aad u caroodo ay u keeni karto geeri.

Waxaa dhacday mar dhowr sano laga joogo nin Hotel weyn ku lahaa magaalada Isboken oo ka tirsan Gobolka Washington inay caro dishay, waxaana ka sheekeeyey dhacdadaas Taliyaha Saldhigga booliska ee Magaalada Hoteelku ku yiilay, waana tan qisadiisii; "muddo dhowr sano laga joogo waxaa geeriyooday Wiliam Felkibir isagoo 68 jir ah, wuxuuna ahaa Milkiile Hotel ku yiilay magaalada Isboken, wuxuu aad uga carooday markii adeege hoteelka cunto kariye ka ahaa uu ku cabbay kafee koobkiisa, falka adeegaha wuxuu ka careysiiyey milkiilihii hotelka oo u qaadan waayey in adeegahiisu ku cabbi karo koobkiisa, waxay caradu gaadhay heer uu milkiilahii u karo sida dheriga oo kale, wuxuu la soo baxay bastoolad cabeysan, markaasuu la daba galay adeegihii dembiga ka galay si uu u dilo.

Adeegahii wuu ka cararay oo hadba derbi buu ku gambanayey, laakiin ugu dambeyntii milkiilahii baa dhulka ku dhacay, markii wadnuhu istaagay, halkii buuna ku naf baxay isagoo bastooladii gacanta ku heysta, warbixinta takhtarka sharciga waxay caddeysay in caradu keentay naf-baxa.

Aniga iyo adigu waxaan naqaan haween badan oo wejigoodii duuduubmay, quruxdoodii foolxumo u gaddoontay oo maanta qaabkoodii dadka soo jiidan jiray laga cararayo, maxaa yeelay qofna ma farax gelinayo waxa sidaa u galayna waa carada, qeylada iyo gadoodka ay caadeysteen, mana jiro wax u soo celin kara iftiinkii iyo dhaldhalaalkii muuqaalkooda quruxinayey, haddii aanay qalbigooda ka buuxin cafis, jaceyl iyo naxariis, waayo waxaa la ogaaday in naceybka iyo uur-xumadu ay burburinayso awooddeena ku raaxeysiga cuntadeena iyo caafimaadkeena.

Waxaa jirta xikmad laga soo weriyey Nebi Ciise (CS) oo odhanaysa; "rooti qarax ah oo aad ku heysato guri nabad ah ayaa ka kheyr roon guri hilib ka buuxo oo ay muran iyo qeylo ka jirto".

Miyaanay cadowgeenu farax la dhaceyn markay ogaadaan naceybka aan iyaga u qabno inuu innaga na dhibayo oo uu nafteena burburinayo, muuqaalkeena fool xumeynayo oo uu wadno xanuun innagu ridayo, marka haddii aynaan cadowgeena jeclaan Karin waa inaan nafteena u daneynaa oo aynaan siinin cadowgeena awood uu ku baabi'yo caafimaadkeena, sacaadadeena iyo muuqaalkeena guud ahaan.

Waxaa laga soo weriyey gabyaagii caanka ahaa ee Ingiriiska Shekespear inuu yiri xikmadan; "ha u faafin cadowgaaga dab ama ha u sii holcin, waayo waxaa laga yaabaa in dabku adiga laftaada ku gubo",

SHEEKO GAABAN.

Waxaan halkaanku soo gudbinaynaa dhambaal uu ka soo diray Sweden nin garyaqaan ah oo la yiraahdo George Ronald, ninkan wuxuu qareen ka ahaan jiray magaalada Viena, markii uu socday dagaalkii labaad ee dunida buu u qaxay Sweden, isagoo fara madhan oo aad shaqo ugu baahan, wuxuu aqoon u lahaa dhowr luqadood, wuxuu isku dayey inuu wakiil u noqdo shirkadaha ganacsiga isagoo werinaya qisadiisii wuxuu yiri; "shirkadaha badankood waxay iigu jawaabeen hungo, hadda shaqo ma heyno laakiin magacaaga waa heyneynaa ilaa waqtiga lagu baahdo, Laakiin hal nin baa ii soo qoray warqad ka duwan kuwii kale oo igu yiri; "adigu aad baad u gefsan tahay, fikradda aad ka qabtid shaqadeyda, waayo waxaa tahay doqon oo xitaa haddii aan shaqo hayo adiga kuuma qaateen, maxaa yeelay adigu ma taqaanid luqadda reer Sweden arjigaaga gefef baa ka buuxay, markaan akhriyeyna caro ayaan la booday, xididadii dareenkuna way I wada kaceen".

Waxaan ku fekeray inaan u qoro warqad sida waranka ku noqoto, laakiin markaan cabbaar joogay ee heerkulka xididdada dareemadu I qaboobeen ayaan dib isugu noqday, markaas baan caqli ku shaqeeyey oo aan nafteyda ku iri; 'yaa og in ninkaasi run sheegay? Waayo luqadda Sweden maaha tii aan u dhashay, waxaana suuragal ah inaan ku gefay anigoon u kaseyn, haddii aan gef luqadeed sameeyey waxaa

igu habboon inaan kordhiyo aqoonteyda luqadda, waddanka intaan caay iyo cannaan u jeedin lahaa ninka gefkeyga ii sheegay waxaanu mudan yahay mahadnaq, haddii uu ceebteyda ii sheegay, sidaas darteed waa inaan u mahadnaqo.

Markaas waxaan u qoray warqaddan: "mudane wax wanaagsan baad fashay, markaad waqtigaada qaaliga ah ku tebisay inaad warqad gaar ah ii soo qortay oo aad iigu sheegtay inaad u baahneyn shaqadeyda, waxaan aad uga xumahay inaan ku gefay xaqiiqada shaqada sharikadda aad madaxda ka tahay, sababtuna waxa weeye dad baa si xun wax iigu sheegay, sidoo kale kuma baraarugin gefefka xagga luqadda ee aan ku dhacay, sidaa awgeed waxaan dareensanahay inaan ceebeysnahay waxaana ku dadaalayaa inaan xoogga saaro sidaan xariif ugu noqon lahaa luqadda reer Sweden.

Ugu dambeyn iga guddoon mahad qalbiga ka soo go'day anigoo kaaga mahad celinaya fursadda aad igu baraarujisay ee ah inaan nafteyda saxo si aan horumar u gaaro mustaqbalka dambe.

Dhowr maalmood kadib George ninkii warqadda u soo qoray wuxuu ugu yeeray inuu la kulmo, wuxuuna isla markiiba siiyey shaqo, wuxuu ogaaday Goerge in jawaabta dabacsan ee macaan ay haatineyso carada iyo cadaawadda, waxa laga yaabaa in dadka badankiis adkeysii u laheyn inay cadowgooda jacilaadaan, laakiin waa inay isku khasbaan inay jeclaadaan iyagoo u daneynaya caafimaadka naftooda iyo sacaadadooda, waxaana ku habboon dadka waxgaradka ah inay sidaa u fahmaan.

Waxaa laga weriyey Confucius Feylasuufkii Shiinaha inuu yiri; "wax ku yeeli meysa caay iyo cambaareyn, waxaase ku dhibaya inaad ku fekerto amase aad qiimeyso" waxaan weydiiyey John Eiscenhower inuu marna arkay Aabihii oo careysan ama kacsan wuxuu iigu jawaabay; "maya weligay ma arkin aabihii oo ku fekeraya cadowgiisa".

Waxaa jirta xikmad soo jireen ah oo odhanaysa doqonka ayaa carooda, laakiin garaadluhu waa kan ku gacan seyra carada, taasina waa

siyaasaddii uu raacay Wiliam Jaymor oo ahaa Duqa magaalada Newyork, markii ay wargeysayadu ku qaadeen olole cambaareyn ah, taasoo ku carisay inuu nin madaxa looga jiro rasaas oodda uga qaado halkaana ku dili gaaray. Markuu sakaradayey Wiliam intaanu naf bixin ayaa laga maqlay erayadan "habeen kasta waxaan cafiyaa wax kasta oo la igu sameyey, waan saamaxaa qof kasta oo ii gefay" ma kula tahay in ninkaasi suufinimada ku xeel dheeraaday, mise waa miskiin qalbi jileecu ka batay? Intaadan ka jawaabin su'aasha dhegeyso waanada Feylasuufka Jarmalka ee caanka ah Shuban Hur waana ninka qoray kitaab la yiraahdo 'casharo bilo sheega' ninkaasi wuxuu u arkay nolosha inay tahay wax biime ah oo xanuun badan oon faa'iido laheyn.

Wax kasta wuxuu ula muuqday wax baas oon dhib maahee aan dheef laheyn, ninkii xaalkiisu sidaa ahaa maalin buu ku dhawaaqay isagoo niyo xumo iyo nolol ka quusasho ka muuqato inuu yiraahdo; 'waxa dadku awoodi karaan inaanu qofna soo jiidan cadownimada qof kale' waxaa dadka caado u noqotay inay xusaan dadka fiican oo waxtar weyn oo dhaxalgal ah u qabta si magacoodu u waaro, waxa lagu magacaabaa buurta ugu qurux badan dunida reer galbeedka oo ku taal dalka Kanada 'Adith Kafal', waxaa iska leh magacaas gabar kalkaaliye caafimaad ah oo u dhalatay dalka Ingiriiska.

Waxay taariikhda ku gashay gabadhaas iyadoo ay toogteen ciidamadii Jarmalka xilligii dagaalkii labaad ee dunida. Waxaa lagu eedeeyey inay gurigeeda oo ku yiilay dalka Belgum ku qarisay askar Ingiriis iyo Faransiis ah oo ku soo jabay dagaalka oo gaajeysan lana taahaya dhaawacyo soo gaaray oo cabsi darteed uu dhulka ciriiri la noqday, markaas intey quudisay oo daweysay bay ku caawisay inay Holand u gudbaan.

Waxaan ka war helay ciidamadii Jarmalka oo markaas qabsaday Brugsels oo ah caasimadda Belgium, xabsiga ayaa loo taxaabay gabadhii, waxaana lagu xukumay toogasho, iyadoo lagu eedeeyey inay gashay dembi ah inay caawisay cadowga Jarmalka. Intan la toogan ayaa loogu yeeray wadaad ka qora dardaaran erayadeedii ugu

dambeeyey adduunyada waxay ahaayeen kuwo taariikhda galay oo waaray waana kuwan.

"waddaninimada keligeed innaguma filna xagga aadaminimada waxa waajib ah ineynaan caloosha ku heysan naceyb iyo cadownimo cid kastaba ha ahaatee', waagii dambe waxaa loo qaaday meydkeedii London, waxaana loogu dabaal degay sida halyeeyada waaweyn, waxaana loo dhisay taallo. Waxa su'aal loo jeediyey nin la oran jiray Bar Nard oo la taliye u ahaa lix Madaxweyne oo Mareykan ah oo ay ka mid ahaayeen Rosevel iyo Truman, waxaa la weydiiyey inuu ka danqaday ama ka argagaxay ololaha cadowtinimada ee lagula kacay, wuxuu ku jawaabay; "anigu ma oggolaado inuu qofna I argagax geliyo ama I kiciyo maxaa yeelay qofna ma awoodi karo inuu ina argagixiyo haddii aynaan fursad u siinin innaga".

NIN ZINGI AH OO KU SIGTAY DALDALAAD

Waxyaabaha dadka u fududeeya inay cadowgooda iska caabiyaan waxaa ka mid ah in qofku yeesho mabda' weyn oo ka madax bannaan arrimahiisa gaar ah, hadduu qofku aamino mabda'a weyn ee bulshada u adeegaya u aabo yeeli maayo waxyaabaha ay kula kacayaan cadowgiisa, waayo waxa shuqlinaya mabda'a uu ku nool yahay.

Tusaale ahaan waxaa jiray nin Mareykanka madow ah oo ka baxay Jaamacadda (AYA) 19.v, wuxuu caan ku noqday dadaal dabeecad wanaag iyo macallimiintiisaba, waxay u bandhigeen shaqooyin lacag badan, hase yeeshee wuu diiday, wuxuuna go'aansaday inuu u shaqeeyo mabda'a uu aaminsan yahay oo ah inuu Mareykanka madow ee masaakiinta ah waxbaro.

Wuxuu tagay meeshii ugu jaahilnimo badneyd deegaanada Mareykanka madow oo aheyd agagaarka webiga dunida ugu weyn ee Missisipe daantiisa, wuxuu ku bilaabay mashruucaas \$1 iyo 65 senti, oo uu u rahmay saacadiisii, wuxuu xafiis ka dhigtay geed hoostiis, miis iyo kuraas, waxaa uu ahaa qoryo, dhismaha waxaa ka caawiyey dad maalqabeeno ah oo caddaan ah. Markii la gaaray 1918kii ee uu socday dagaalkii koowaad ee dunida, waxaa ku dhex faafay magaaladii uu joogay in ninkii madoobaa ee dadka wax barayay uu Jarmalka naasiga ah ku kicinaayo Mareykanka madow si ay caddaanka ugu kacaan. Mr Lrens Jones oo ahaa ninkii dadka madow ilbixinayey waxaa kale oo uu ahaa wadaad dadka kaniisadda ka wacdiya, marka isagoo Kaniisadda ka khudbeynaya ayey dad caddaan ahi maqleen isagoo leh 'nolosha waa halgan, waxaana ku waajib ah nin kasta inuu hubka qaato oo uu u halgamo nolosha fiican".

Markay caddaankii maqleen hub iyo halgan waxay rumeysteen sheekadii faaftay oo aheyd in Jarmalku ku dirayo Mareykanka madow kuwa caddaanka ah oo ninkan wadaadka ahina uu ka socdo Jarmalka. Nimankii caddaanka ahaa intey baxeen ayey soo kiciyeen dad badan, waxayna xoog ku soo galeen kaniisaddii oo waxay garba-duubeen wadaadkii Lores oo ay ku jiiddeen jidadkii magaalada waxayna geeyeen

meesha dadka lagu daldalo, waxaa la suray qoortiisa xarigii ka soo laalaaday qorigii daldalaadda, waxaa la hoos dhigay miis uu ku istaago si looga hoos qaado marka nafta laga qaadayo.

Meel u dhow waxaa laga buuxiyey xaabo, waxaana lagu daaray tarraq si loogu gubo meydkiisa marka la daldalo, waxaa si toos ah uga soo dhex baxay dadkii nin oo uu yiri; "bal u kaadiya aan fursad siino ninkaan intaan la dilin si aanu u weydiino inuu heysto bal wax uu isku difaaco oo dhab ha u hadlo intaanu dhimane, waxaa loo oggolaaday ninkii inuu hadlo intaanu dhiman, halkii ayuuna khudbad ka jeediyey isagoo qoolkii daldalaadda qoorta ugu jiro.

Wuxuu jeediyey Lores khudbad gaaban oo dadkii cadowga u ahaa u beddeshay dad naxariis leh oo qalbi jilicsan waana tan khudbadii;

"Aniga oo u halgamayey inaan dadka masaakiinta ah ee jahliga ku jira ilbixiyo ayaan ka furay dugsii keymaha sanabarka gudaha ee masaakiintu ku badan tahay oo cid wax u qabatana jirin, waxaan baraa howlaha beeraha, warshadaha yaryar, cunto-karinta iyo maamulka guryaha"

Wuxuu tiriyey dad caddaan ah oo samafal ahaan ugu caawiyey dhul, lo' iyo maal si uu u wado howsha dugsiga, waxay khudbadiisii aad u saameysay dadkii joogay goobta daldalaadda, isma difaacin ee wuxuu ka sheekeeyey sida uu ugu halgamo mabda'a uu rumaysan yahay, dadkii gadoodsanaa way dabceen, oday howlgab ah oo ku dhex jiray dadkii khudbadda dhageysanayey ayaa is heyn kari waayey,

wuxuuna yiri; "waxay ila tahay in ninkani run sheegayo, anigu waan aqaan raga caddaanka ah ee ku caawiyey mashruuciisa, ninkaani shaqo weyn buu hayaa, wuxuuna mudan yahay in lagu caawiyo, waxaana u arkaa inaanu wax dembi ah gelin, waxaa innagu habboon inaan caawino ee maaha inaan daldalno. Wuxuu iska siibay koofiyaddii wuxuuna la dhex galay dadkii kacsanaa ee u yimid inay daawadaan daldalaadda, wuxuu ka ururiyey lacag dhan 52\$ oo lagu

wareejiyey wadaadkii loo keenay in meesha lagu dilo, waxaana loogu abaal guday mabda'a aadaminimada ah ee uu naftiisa u huray.

Waxaa la weydiyey Lores inuu caro iyo colaad u qaaday dadkii dhulka ku jiiday ee u diyaarinayey inay gubaan, wuxuuna ku jawaabay; "in qaddiyaddii uu u halgamayey ay ka shuqlisay inuu ku fekeri colaad iyo caro uu cid kale u qaado; 'waayo muu heysan waqti uu ciil iyo caro ku mashquulo, mana jiro qof awoodi karo inuu gaaro heer uu isku shuqliyo naceyb iyo karaahiyo. Sidaas buu Lores uga badbaaday masiibadii ku dhici laheyd markuu isku shuqliyey mabda'a uu rumeysnaa oo ahaa inuu u adeego bulshadiisa.

Waqti laga joogo 19 qarni ayaa laga weriyey feylalsuuf Shiines ah oo lana oran jiray lbkintos erayadan" annaga waxaanu guraneynaa miraha aynu abuurno, waxaana hubaal ah in qof kasta laga abaal marin doono dhibka uu geysto ha dhowaato ama ha dheeraato, marka waxaa nala gudboon inaan lagu dhaqaaqin aargudasho canaan iyo cadownimu".

Waxaa laga yaabaa Abraham Lincoln inuu ahaa ninkii ugu caro badsaday dadka u dhashay Mareykanka waayo ma jiro nin la kulmay wixii loo geystay Abraham Lincoln oo kale ee ahaa caro, khiyaano iyo shirqoolooyin, inkastoo uu ciriirigaas ku jiray haddana dadka kuma qiimeyn jirin jaceylka iyo naceybka uu u qabo sida uu sheegay Handron oo taariikhda Lincoln qoray.

Haddii nin xumeeyey Lincoln uu u qalmo inuu qabto jago sare uuna yahay ninka ugu habboon, kama warwareegi jirin ee markiiba wuu u dhiibi jiray xilka isagoon xisaabta ku darin xumaanta u dhexeysay, qofna shaqo ugama saari jirin naceyb uu u qabo awgiis, sida runta ah rag badan oo uu u xilsaaray Lincoln darajooyin waaweyn ayaa aad u xumeeyey, maxaa yeelay Lincoln wuxuu qabay inaan dadka lagu aaminin ama lagu ceebeynin camalka ay sameeyaan, waayo dhammaanteen waxaan u hogaansan nahay xaaladaha innagu wareegsan, sida tacliinta, caadooyinka, cimilada iyo dhaqanka kuwaas oo dadka ku dhegan oo hoggaaminaya naftiisa iyo la dhaqanka dadka.

Waana suuragal in ra'yiga Lincolon run yahay, maxaa yeelay, haddii aniga iyo adiga aan go'aan gaari laheyn awoodiina ay leeyihiin dad cadowgeena ah xagga xoogga, garaadka iyo caadifadda waxaan u dhaqmi laheyn sidooda oo kale.

Nin la oran jiray Kalar Nisward ayaa dhihi jiray "intaan cadowgeena u caroon laheyn ama caayi laheyn maan horeba qoorta uga goyno maxaan u sugeynaa" laakiin Ilalah baa mahad leh oo aan sidiisa naga dhigin. Marka intaan dadka aan neceb nahay eed, ceebo iyo aargudasho kula kici laheyn bal aan isku dayno inaan ku maansheyno naxariis, gargaar iyo cafis, waxaad arki doontaa siday isku beddelaan.

AAYAD QUR'AAN AH OO KOOBTAY NUXURKA QEYBTAN

Waxaa jirta aayad qur'aan ah oo ku jirta suuradda Fusilat lambarka 33-aad macnaheedu waa kan:-

"ma sinna sammaanta iyo xumaanta, ku moos ama ku dabool sammaanta godka xumaanta, haddaad sidaa yeesho kii cadowga kuu ahaa wuxuu u gaddoomayaa saaxiib daacad kuu ah, sidaana waxaa yeeli kara dadka samirka leh ee muslinka ah oo Jannada nasiib u leh" tusaale ahaan carada ka horjeedi Samir iyo adkaysi gardarrada dulqaadka ka hor gee, aflagaadada cafis iyo saamaxaad ka hor gee, sidaa bay culumadu u fasireen. Waxay ila tahay haddii Dale Carnegie aqoon lahaa aayaddaan iyaduu ugu horreysiin lahaa qeybtan.

Haddaba si aad u hesho fikrad xasiloon iyo sacaado kuu soo jiido haku fekerin; "aargudashada cadowgaaga" maxaa yeelay isku shuqlinta cadowgaaga adigay ku dhibeysaa in ka badan dhibkaad gaarsiin karto cadowgaaga. Fal sida uu sameyn jiray Eisenhower "haku dhuminiin ilbiriqsi inaad ku fekerto kuwa aad u careysan tahay" (Tarjumaha).

QEYBTA AFRAAD

SI AAD U CEYRISO WALBAHAARKA KAASHO TIRO KOOBYO

Waxaan xasuustaa carruurnimadaydii anigoo hooyadey ku caawinaya diyaarinta beerta si loo abuuro, inaan si kedo ah oohin ula dhacay, hooyaday intay aad u yaabtay ayey I weydiisay waxa igu dhacay? Waxaan ugu jawaabay anigoo oohintii I qaadqaadayso "waxaan ka baqanayaa in anigoo nool la I duugo", sida runtaa waxyaabo badan baan ka cabsan jiray yaraanteydii, haddii dabeyli kacdo ama cirku onkodo walbahaar baa igu dhici jiray oo waxaan ka cabsan jiray in danab gugac ama hilaac I dilo.

Haddii aabahey ciriiri dhaqaale soo gaaro waxaan ka baqi jiray inaan cunto weyno oo aan gaajo u dhimano, haddii aan dhinto waxaan ka cabsan jiray inaan Naarta galo, waxaan ka baqan jiray wiil iga weyn inuu dhegta iga jaro oo ay markaa gabdhuu igu qoslaan, waxaa kale oo aan ka baqan jiray inaan waayo gabar I oggolaato inaan guursado, haddii aan damco, sidoo kale waxaan ka baqan jiray inaan garan waayo waxaan kula hadlo afadeyda marka la igu mehriyo ee la innaga kala tago.

Waxaan mala-awaalay in la ii mehriyey gabar ka dibna nalagu qaaday gaari faras lagu qurxiyey ubaxyo, waxaan ku wareeri jiray waxaan ugu sheekeyn lahaa arosadda inta aan ku sii socono guriga la inagu tala galay, waxaan ku dadaalay sidaan xal ugu heli lahaa mushkiladahaas adadag, anigoo weli hooyadey beerta ku gargaaraya, wax la joogaba markii ay sanooyin ka soo waregtay waxaan ogaaday in 99% wixii aan ka cabsan jiray in aanay waxba ka dhicin tusaale ahaan:-

Cabsidii aan ka qabay danabka waxaan arkay warbixin uu soo saaray golaha Ceymiska qaranka oo sheegaysay in 350,000 kii qofba uu hal qof ku dhaco gugac, cabsidii aan ka qabay in nolosha la igu aaso, wuxuu waaba doqonimo, maxaa yeelay tobankii malyan ee qofba waxaa jirta in hal qof nolol lagu aaso. Waxaase jirin in 8dii qofba hal u dhinto kansar. Haddaan garaad lahaan lahaa waxaan ogaan lahaa in cabsida Kansarku ay ka mudan tahay cabsida danabka iyo nolol ku

duugidda. Waxaan ku dheeraa sheekada cabsida dhallaanimada, waxaase jira dad badan oo waaweyn oo ka baqo waxyaalo aanay carruurta ka bixin, dadkaasina way ka xoroobi karaan cabsida doqonimada ah, haddii ay iska dhaafaan soo calyo-celinta sheekooyinka beenbeenta iyo khuraafiga ah oo ay kaashadaan tira koobyada iyo warbixinada runta ku dhisan.

Shirkadda Loyadh ee London ku yaal waa sharikadda ugu caansan sharikadaha caymiska ee dunida, waxay ka faa'iideysatay malaayiin Gini cabsida ay dadka ka qabaan waxyaabaha dhiciddoodu fog tahay, waxaad mooddaa in sharikaddu la sharatameyso dadka in masiibooyinka ay ka baqayaan aanay dhaceyn, inkastoo aanu heshiisku ku magacaabneyn sharatan ee ay sharikaddu ku magacaabeeyso ceymis.

Sharikaddu shaqadaas waxay wadday 200 oo sano, waanay wadan doontaa guushaas konton qarni ee soo socda, haddii aanu dadku dabeecadda cabsida iska beddelin. Waxaan ku diyaarinayey dhowr qeybood oo buugan kamid ah guri uu leeyahay nin saaxiibkey ah oo la yiraahdo James Sambison oo degenaa xeebta bad yarada (BO) ee buuraha dalka Kanada. Waxaan kula kulmay halkaas nin la yiraahdo Har Bart Salinjer iyo xaaskiisa oo ahaa qoys Faransiis ah, waxaa iiga muuqday marwada Salinjer miisaan iyo degeenaan, waxaan weydiiey su'aashan:-

Weligaa ma la kulantay walbahaar? Waxay ku jawaabtay "alla ha igu soo qaadin walbahaar, wuxuu igu dhigay kama sheekeyn karo, waxaan ku sigtay inaan nolosheyda burburiyo, waxaan la noolaa 11 sano cadaab iyo ciriiri aan gacanteyda ku abuurtay, waxaan ahaa qof dabeeco kulul, qaxar iyo qeylo badan, markasta dareenkeyga waa gadoodsanaa, waxaana ii caado aheyd inaan todobaadkii hal mar kasta u soo raaco magaalada Sanfransisco si aan uga soo adgeeto xitaa intaan baska ku jiro walbahaarku ima deyn jirin.

Waxaan is dhihi jiray markaan guriga ka soo baxo 'amaadan nalalkii soo demin? Amaa guriga dab qabsadaa intaad maqan tahay? Ameey

addeegtadii dhuumataa oo ay carruurta bannaanka isaga baxaan oo ay baabuurto jiirtaa?, Markaasaan welwel iyo walaac igu dhici jiray oo aan guriga degdeg ugu noqon jiray, waxaan imaan jiray iyadoo wixii aan ka baqayey oo dhan aanay waxba ka dhicin, marka sidaa baa keentay inaan ku fashilmo guurkeygii hore".

Ninkaygan cusub waa qareen waana nin deggen oo caqli badan oo arrimaha lafa gura, walbahaarkana agtiisa kama soo dhowaado, hadduu I arko anigoo kacsan oo cabsida I jahawareerisay wuxuu igu dhihi jiray 'is deji, maxaa kugu dhacay eed la gubaneysaa bal aynu arrinka isla baarno oon ka fiirino dhan kasta inuu astaahilo walaac iyo gadood'.

Waxaan xasuustaa mar aanu baabuur ku wadanay jid raf ah oo u dhexeeya magaalada Albo Kerbo iyo New Mexico iney nagu kacday dabeyl xoog leh, waxaan arkay baabuurkan wadanay oo hadba dhan u dheeliyayo oo marmar gacanteena ka baxayo, waxaana jidka labadiisa dhinacba ahaa jeexjeexyo dhaadheer oo wixii ku dhacaa aan dib dambe loo arkeyn, markuu arkay ninkeyga xaalkeyga ayuu igu yiri; "is deji anigu baabuurka si miyir leh ayaan u wadaa xitaa haddii aan jidka ka baxno dhibaato malaha oo waxba ina gaari mayaan anigu shaagga uun baan u rogayaa" marka degenaantiisii baa igu dhalisay xasilooni, markaas baa walaacii iyo cabsidii iga tageen.

Mar kale waxaa dhacday inaan u xagaa baxnay waadiga Tokrin ee buuraha Kanada, waxaa nalooga dhisay teendho buur dheer oo badda ka sarreysa 7,000 oo mitir, waxaa si kedo ah u dhabatay dabeyl xoog badan oo dhulkii iyo dhirtii nagu dhaweyd gilgishay dhidibo dhulka ku duugan, laakiin waxaa igu dhacay argagax iyo walaac oo dhulkii ballaarnaa baa igu yaraaday cabsi darteed, waxaan mala awaalay in dabeyshu teendhada naga fujin doonto, annagana na kala tuuri doonto, laakiin ninkeygii baa I dejiyey oo igu yiri; 'I dhagayso hogaamiyeyaaasheena waa dal yaqaan waxay u shaqeyaan Broster waana rag waayo arag ku ah xirfadooda, waxay teendhooyinka ku dhisayeen keymaha muddo lixdan sano ah, teendhadeenana goobtaan tobanaan jeer baa lagu dhisay welina lama soo sheegin hal mar oo ay

dabeysu qaaday, xitaa haddii dabeyli qaado waxaan u wareegaynaa teendhooyinka kale ee jaarkeena ah, marka is deji oo cabsida iska aayar xaqiiqooyinka huban wax lagu walbahaaro ma sheegayaan', markii sidaas la ii sheegay baa waxaa iga tegay walbahaarkii, cabsidii iyo argagixii habeenkaas waxaan helay hurdo fiican.

Waayadii dambe markuu ninkeygu igu arko anigoo gadoodsan oo cabsi la jareynaya wuxuu igu dhihi jiray 'naa bal is xasili oo kaalay aan baarno xaqiiqooyinka sugan sida tiro-koobyada iyo warbixinada arrinkan ku dhibay' ereyadaas waxay iga xallin jireen 90% walbahaarka aan sheegayno sidaa awgeed 22-kii sano ee nolosheyda ugu dambaysay, waxaan ku noolaa sacaado iyo badhaadhe".

Nin la oran jiray Jimsrant oo ahaa milkiilaha shirkad weyn oo qeybisa macmacaanka canabka iyo liinta ee dalka Mareykanka oo badeecadiisa lagu rari jiray tareenno, wuxuu iiga sheekeeyey siduu walbahaarku u geli jiray, waana tan sheekadiisii; "waxaan ka walbahaari jiray in tareenka aan macmacaanka ku raray uu shil galo, ama buundadu la go'do markuu kor marayo, inkastoo badeecaddu ceymisan tahay, haddana waxaan ka baqi jiray marka badeecadu gaari weydo dadka rukunka ah inay iga iibsan waayaan oo ay heshiiskii ka baxaan, welwelkii iyo cabsidii waxay igu rideen jirro, waxaan u maleeyey in hoog igu dhacay, waxaan u tagay takhtar si fiican ii baaray, wuxuu igu qanciyeey in aanan wax jirro ah qabin oo aan ka aheyn neerfayaasha oo aad u kacsan, markii takhtarkii sidaa ii caddeeyey waxaan dareemay in waa cusub ii baryey, waxaan markaa is weydiiyey su'aashan; 'meeqa tareen baad sannadka rartay? Waxay noqdeen 25,000, meeqa tareen baa shil ku dhacday?, jawaabtii waxay noqotay 5 tareen baa shil ku dhacday, taasoo ah in hal tareen shil ku dhacay shantii kunba (1:5,000) marka ma intaas baa wax laga walbahaaro ah'.

Muddo kadib hadana walaacii baa igu soo noqday, waxaan is iri; armay buundadu la go'daa marka tareenku kor marayo? Laakiin waan is gaaray oo waxaan markiiba is weydiiyey meeqa tareen baa buundo la go'day intii aad wax raraysay? Jawaabtii waxay noqotay, 'waxba, midna lama og'in, markaas baan dib isu eegay mar kale oon is

dhacsiyey miyaanay doqonimo aheyn inaan ka walbahaaro buundo aan weligeed go'eyn iyo wax aan weli dhicin oo aan ka cabsado'. Wuxuu intaa ku daray Jim markaan dib u fiiriyo ficilkii aan fali jiray waxaan dareemaa doqonimadii walbahaarku igu abuuri jiray, marka halkii baan ku burburiyey walaacii iyo doqonimadii cudurkii caloosha, xididada iyo dareemada halkii baan kaga caafimaaday.

Al-Smith oo guddoomiyaha ka ahaa Newyork waxaan ka maqlay isagoo uga jawaabaya weeraradii siyaasiyiinta ka soo hojeeda ku soo qaadeen 'bal kaalaya aan isla baarno xaqiiqooyinka sugan; markaasuu kala dhigdhiigay tirakoobyadii iyo warbixinadii. Mararka soo socda haddii aad dareento walbahaar fal ficilka Smith, bar xaqiiqooyinka jira oo hubso hadday jiraan wax keeni kara cabsi ama welwel, kaddib ku dhaqaaq wixii kula soo gudboonaada, waxaa casharkaan ka faa'iiideystay Fardarik Mahlisitid waana tan qisadiisii; "bishii Juun 1944kii, markii uu socday dagaalkii labaad ee dunida waxaan ka mid ahaa ciidankii ka dagaalamayey xeebta Normanda, waxaana ahaa askari ka tirsan kooxda 999 ee qeybta isgaarsiinta, waxaan qodanay dhufeysyo aan kaga gabbano weerarka dayuuradaha Jarmalka, markaan galay dhufeyskii oo ahaa god dhuuban oo u sameysan sida xabaasha, waxaan is iri 'Alla dhufeyskani qabri u ekaa', markii habeenkii aan seexday mugdigii dhufeyska waxaan dareemay inaan xabaal ku jiro, waxaan is dareensiiyey in kani qabrigeygii noqon doono.

Markii diyaaradadihii nagu maansheeyeen bambooyinka, waxaan maqlayey bambooyinka hareeraheena ku qarxayey iyo holacooda oo la moodo hilaac, cabsi darteed carrabkii iyo xubnihii kale baa I qalalay, labadii habeen ee hore hurdo ma dhadhamin, habeenkii afraad iyo kii shanaad, waxaan noqday lafo socdo, markaasaan ogaaday haddii aanan wax sameyn in cabsidu I waali doonto oo aan maryaha tuuran doono. Waxaan dib u fiiriyey wixii khasaaro dhacay 5-tii habeen ee hore ee walbahaarku I hayey, waxaan arkay in kooxdii aan ka mid ahaa nin keliya uu ka dhaawacmay, isaguna dayuuraddu wax may gaarsiin ee waxaa ku dhacay firirka madafiicda aan dayuuradda ku rideynay.

Waxaan sidaa isha u mariyey aagga ciidankeygu degan yahay, markaas baan ku qancay in aanan dhimaneyn haddii aanay bambo toos ugu dhicin dhufeyskeyga, taasina waxay suuragal tahay tobankii kunba hal mar (1:1,000). Markaas baan goostay inaan ka baxo cabsida iskuna shuqliyo howl waxtar leh, markaas baan bilaabay inaan waab ka hor dhisto dhufeyskeygii si aan uga gabbado firirada madaafiicda iyo bambooyinka, halkaas baana kaga badbaaday walbahaarkii dareemadiina way ii degeen, waxaana awooday inaan seexdo iyadoo ay weeraradii diyaaraduhu socdaan.

Qeybtaan waxay ku dhisan tahay inaan laga walaacin wax ku tiri ku teen ah oo aan la hubin inuu dhacayo, wixii aad ka shakiso waa in lagu dhiso runta iyo xaqiiqada huban, iskana tuur shaki iyo waswaas.

Haddaba si aad u burburiso caadada walbahaarka intaanay adiga ku burburin raac qaaciddada lamb. 3-aad si aad u erido walbahaarka, kaasho tirokoobyada iyo xaqiiqooyinka sugan, is weydi inay jiraan wax run ah oo ku cabsi gelin kara, ilaa iyo intee suuragal ah inuu dhaco waxa ku cabsi gelinaya?.

QEYBTA SHANAAD KU RAALLI NOQO WIXII LAGUU QORAY

Anigoo yar oo maalin la ciyaaraya lana boodboodaya carruur asaagey ah guri korkiis ayaan ku dhacay dariishaddii guriga, markaas baa musbaar far iga gooyey, waan qeyliyey oon ooyay, markaan arkay farteydii oo bannaanka taala dhiiguna hawda I hayo, waxaan is iri; waad dhimanaysaa, markii aan ka bogsaday boogtii oo fartii go'day way iga ba'day cabsidii dhimashada, hadda waxaa dhacda inay ka soo wareegto bilo badan anigoon xasuusan in fari ka maqan tahay gacaneyda bidix.

Mar laga joogo dhowr sano waxaan kula kulmay dhismo shirkad weyn oo Newyork ku taal sallaankeeda lagu qaado badeecada ee dabaqyada sare la geeyo nin gacantiisa midig ka go'an tahay, waxaan weydiiyey inuu ka walwalo gacanta ka go'an? Wuxuu iigu jawaabay; "maya, ma qiimeeyo, laakiin xaas ma lihi oo waxaan tebaa markaan u baahdo inaan marada tosho ama galuus iga go'o", marka waxaan halkaa ka fahmay dhakhsaha loola qabsanayo dhacdooyinka lama huraanka h inay wax lala yaabo yihiin, intaanay wax badan ka soo wareegin ayaa laga caado dhiganayaa nolsoha cusub, runtuna waxay tahay in dunida lagu arkayo imtixaano badan.

Waxaa hubaal ah qof kasta oo innaga mid ah inay ka hor imaanayaan dhacdooyin xanuun badan, marka waxaa inalal gudboon labo talo inaan kala doorano:-

1. Inaan ku raalli noqono dhacdada aanan waxba ka qaban kareyn.
2. Inaan nafteena dagaal, ciil, cabasho iyo gadood ku qaadno kaas oo laga yaabo inuu na gaarsiyo ilaa waalli.

Waxaa laga weriyey Wiliam James oo cilmi nafsiga caan ku ahaa waano qiimo leh oo ah; "u diyaar noqo inaad aqbasho wixii lama huraan ah ee laguu qoray, maxaa yeelay oggolaanshaha waxa dhacay waa tallaabada ugu horreysa ee ka guuleysiga waxyaabaha la xiriira dhacadaas oo dhibaatooyin ah, waxaa taladan waanada ah ka faa'iideystay marwada Elzabil oo deggeyneyd magaalada Botlan ee

gobolka Orizion, waana tan warqad aan ka helay, maalin ay Mareykanku u dabaal degayeen guul ay ciidamada ka soo hooyeen koonfurta Afrika oo fardaa lagu shuqloon yahay, ayaan ka helay akhbaar taar-hayaha dagaalka, wuxuuna ii sheegay in la waayey wiil aan habaryar u ahaa oon aad u jeclaa.

Wax yar kadib waxaan helay taar kale oo caddeeynaya inuu wiilkii dhintay, aad baan uga naxay, waxaa iga adkaaday murugo iyo walbahaar, markaa ka hor aad baan isaga ladnaa oo waxaan ku noolaa sacaado iyo baraare, waxaan heystay shaqo aan jeclaa oon aad ugu dadaali jiray, waxaan aad uga qeyb qaatay barbaarinta iyo korinta wiilkaa geeriyooday, wuxuu iigu muuqday wiil aad u fiican oo aayatiin fiican leh, aad baan ugu rajo weynaa mustaqbalkiisa, markii aan helay labadii taar ee dhiilada ahaa waxaa igu dhacay quus iyo qalbi jab, waxaan dareemay in aanay noloshu wax qiimo ah ii laheyn mar haddii aanan heleyn wiilkii iga dhintay, waxaan dayacay shaqadeydii, waxaan gooyey wixii aan saaxiibo lahaa oo dhan noloshiina way ila qaraaraatay.

Anigoo jahawareersan ayaan is weydiin jiray maxaa wiilka walaashey mowdku u dafay? Maxaa loo quudhiyey ubaxa soo baxay isagoon miro dhalin? Laakiin su'aalihii wax jawaab ah uma helin murugadii way iga badatay, waxaan ka baxay shaqadii si aan ugu gacan bannaanaado oohinta iyo walbahaarka.

Maalin baan tagay xafiiskii aan ka shaqeynayey si aan uga soo qaato wixii alaab ah ee iga yaalay, markii aan warqadaha soo qaadanayey waxaan ka dhex helay, warqad uu wiilkii dhintay oon iska iloobay mar hore ii soo diray, wuxuu iiga tacsiiyeynayey dhimashada hooyadey oo dhowr sano laga joogo, waxayna u qorneyd waraddu sidatan; "waan ogahay inaad hooyadaa tebayso waxa kale oo aan ogahay inaad aqbali doonto amarka dhacay een cidina wax ka qaban kareyn, ka dibna aad noloshaada caadi ugu soo noqon doontid. Falsafaddaa adigaa I baray mana ilaawi doono, inkastoo aan kaa fogahay, waxaad igu barbaarisay inaan u muusoodo dhibaato kasta oo iga hor timaaddo, waxaad I

bartay inaan raalli ku noqdo amarka dhacay ee aan cid celin kartaa jirin".

Dhowr jeer baan ku noqnoqday akhriska warqaddii, mar kasta waxaan dareensanaa wiilkii aan habaryarta u ahaa oo ila hadlayo sidii isagoo I hor taagan oo igu leh; "maxaad ugu camal fali weyday wixii aad I bartay? "qari murugadaada oo dabool muusood, dhacdo kasta ee kaa hor timaad, noloshaada ha iska dhoobeynin, wixii Eebbe kuu qoray way dhacayaan". Markaas kadib waa nafisay, shaqadii baan ku noqday, waxaan is moogeysiyeey murugadii, waxaan iska dhaafay baroortii iyo gadoodkii, waxaan bilaabay inaan ku celceliyo 'arrinkan waa dhacay mana jiro cid loo maro soo celintiisa.

Waxaan isku maaweeliyeey inaan u qoro dhambaal ciidamada jira goobaha dagaalka, si aan u geesinimo geliyo una madadaaliyo, haddana waxaan galay dugsi galabtii la dhigto si aan u helo aagag cusub iyo saxiibo cusub oon isku shuqliyo, waan rumeyn kari waayey siday nolosheydii isku beddeshay guud ahaan, hadda kama fekero wixii tagay, kama murugoodo wixii I dhaafay, maalin kasta waxaan ku noolaadaa xaaladda maalintaas anigoon dib ugu noqoneyn wixii iga tagay, umana hanqal taagayo wax aanan gaarin". Isbedelkaas ma hesheen gabadhaas haddii aanay ku raali noqon amarka dhacay, sidaas baanay uga adkaatay Elzabil walbahaarkii gaaray.

Xaqiiq ahaan casharkani ma aha mid si fudud loogu dhaqmi karo, waxaase jirta in dadka waxgaradka ahi ay isku shuqliyaan inay casharkan xafidaan, si ay ugu fududaaato inay ku dhaqmaan markay u baahdaan. Boqorkii Ingiriiska ee shanaad wuxuu ku heystay qolkiisa loox ay ku qoran yihiin erayadan; "waxaan doonayaa inaan barto sidii aan isaga celin lahaa oohinta, markaan ku hungoobo wixii aan rabay ama aan masiibo la kulmo", sidoo kale waxaa laga weriyey Feylasuuf Shubaan Hur inuu yiri; "oggolaanshaha amarka nagu dhacay waa keyd aan laga maarmin intaan nool nahay", sida runta ah waxaan leenahay awood inoo suurta gelineysa inaan u adkeysano dhacdooyinka dhibaataada leh ama aynu kaga adkaan karnaba, laakiin waa haddii aanu si wanaagsan u isticmaalno.

Waxaa jiray nin la oran jiray Yut Tan Kijton, wuxuu dhihi jiray 'waan u akeysan karnaa masiibo kasta oo igu dhacda, waxaana ka aheyn indho la'aan". Markuu lixdan jir noqday ayuu fiiriyey sijaayaddii ku goglaneyd qolkiisa, waxaa iskaga dardarmay midabadii u dhawdhawaa oo uu kala sooci kari waayey, wuxuu u tagay takhtarkii indhaha, waxaa loo sheegay inuu hal il beelay tan kalena ku daba jirto, waxaa ku dhacay masiibadii keli aheyd ee uu ka baxayey. Marka sidee buu yeelay, Mr. Tan, markuu ogaaday inuu indho beelay wuu adkeystay wuxuuna ku dhaqmay si farax iyo weji furnaan ah, waxaa laga sheegay markaas inuu iri; 'waxaan ogaaday in dadku indho la'aanta aqbalayaan siday u aqbalaan masiibooyinka kale, xitaa haddii aan waayo lixda lixaad, waxaan ku shaqeynayaa caqliga, waayo dadku waxay wax ku arkayaan oo ay ku nool yihiin caqliga. Xaqiiqdu waa sidaa ee aan ogaano ama yeynaan ogaanin.

Waxaa lagu sameeyey Mr. Tan 12 qaliin indhihiisa muddo sanad gudaahis ah, iyadoo laga rajo qabay in bal araggiisii soo noqdo, intaa marna lagama dareemin caro, kahasho iyo quusasho midna. Wuu diidi jiray in qol u gaar ah la dhigo, marka la qalo wuxuu door bidayey in daka badan ee jirran la dhex dhigo, dadka ka cabanaya dhibka isaga heysta oo kale, wuxuu isku dayir jiray inuu caawiyo una tacsiiyeeyo. Waxaa laga weriyey gabyaa Ingiriis ah oo la oran jiray June Milton inuu yiri; "masiibada maaha inaad indho beesho ee waa inaad u adkeysan kari weydo indho beelka".

Sidoo kale waxay tiri; Margret Taylor oo ka mid aheyd hogaamiyeyaasha kacaankii haweenka ee dalka New England, "anigu waxaan raalli ka noqday masiibo kasta oo igu dhacday, waxaan ka maqlay hadalkaa qoraagii Ingiriiska ahaa Tomas Karlin, markaasuu ku daray 'ilaahay baan ku dhaartay ee falkaasi waa kan ugu kheyr badan ee aad fali laheyd, waxaa hubaal ah in haddii aan boodboodno oo aan dhacno ama aanu qeyliino in aanan waxba ka beddeli kareyn amarka dhacay, taasina waa tijaabo aniga lafteyda I soo martay, waayo mar baan ka gadooday amar dhacay oon diiday inaan oggolaado oon ku raalli noqdo amarka dhacay, qab iyo qeylo baan isku daray, habeenkii

ma hurdi jirin, markaan hal sano sidaa nafteyda u cadaabayey ayey dantu igu qasabtay inaan u hoggaansanaado amarka dhacay, anigoo ogaa in aanan waxba ka baddeli kareyn amarka ayaa haddana sanad cadaab ah ku jiray, taasina waa doqonimo iyo caqli xumo.

Ha u qaadanin inaan kugu waaninayo inaad masiibo kasta oo kaa hortimaado madaxa u raariciso ama u hogaansanaatid, arrinku sidaa maaha, waa in dhacdada la baaro oo la fiirsho iney xal leedahay iyo in kale, haddii ay xal leedahay wa in albaab kasta la garaaco ilaa laga heelo xalkeeda, haddiise aanay xal laheyn maxaa la isugu daalinayaa wax aan la heli kareyn oo la mid ah waxaan jirin, oggolaanshaha amarka waa marka dhacdadu tahay wax ka baxsan awoodeena.

Wuxuu ii sheegay Horos oo ahaa hormuudka jaamacadda Colombia inuu mabda' ka dhigtay ereyadaan; 'cudur kasta oo aadamiga ku dhaco waa inuu leeyahay daawo ama aanu laheyn, haddii uu daawo leeyahay waa in la helo daawadaas, haddii aanu daawo laheyn maxaa la isugu daalin waxaan jirin".

Markii aan buuggan ururinayey waxaan la kulmay dhowr nin oo caan ka ah dalka Maraykanka, waxaan weydiiyey siday u qaabilaan masiibooyinka ka hor yimaada, waana kuwan jawaabahoodii, "j. S. Beni oo magaciisu ku caan yahay aasaasaha bakhaarada waaweyn, wuxuu yiri; "anigu ma walbahaaro xitaa haddii ay xoolaheyga oo dhan khasaaraan, maxaa yeelay waxaan ogahay dhibaataada walbahaarku ii geysan karo, shaqadeyda waxaa u qabtaa sida ugu wanaagsan ee aan awoodi karo, wixii awoodeyda ka baxsan Ilaahey baan u tala saartaa".

Waxaan weydiiyey Henry Ford sida uu uga nabad galo masiibada walbahaarka, wuxuu iigu jawaabay sidan; "markuu iga hor yimaado mowqif adag waxaan hubiyaa inuu jiro waxaan ka qaban karo si aan u xalliyo dhibaataada, haddii aanay jirin wax aan ka qaban karo waan iska xiraa arrinkaa oo howlaha kale ayaan qabsadaa, xagga mustaqbalkana kama walwalo, sababtoo ah waxaan ogahay in aanay jirin cid sheegi karta waxa dhici doona mustaqbalka, marka maxaan uga welweli waxaan dhicin inuu dhacayana aan la ogeyn".

Mr. Henry waxaad moodaa inuu si aad ah u raacay falsafaddii Ibtiktitos ugu yeeray xertiisa waqti laga joogo 19 qarni, waana tan 'waxa jira hal jid oo ina geynaya sacaadada, kaas oo ah ineynaan ka baqin waxyaabaha aanan xukumi Karin oo ka baxsan awoodeena".

Sara Birmar waxay tusaale u tahay haweeney gaartay sida looga raali noqdo amarka dhacay, Sara waxay aheyd fannaanad ku fadhiday kursiga boqortooyada tiyaatarka muddo 50 sano ah oo laga caashaqay dunida oo dhan, markii ay gaartay 71 jir ayey aaday badweynta Atlas markabka dhegtiisii ayey ku kuftay, waxay ka dhaawacantay kubka, wuxuuna gaaray ilaa lafta, dhaawicii baa xumaaday, waxay takhaatiirtii ogadeen haddii aan lugta la goyn in nafteedu halis geleyso, laakiin takhtarkeedii wuxuu ka baqay in haddii uu u sheego xaqiiqada ay naxdo oo ay argagaxdo, laakiin markii loo sheegay intey cabbaar aamustay ayey tiri; 'haddii aanu jirin jid kale oon kan aheyn hala gooyo, markii loo sii waday qolkii qalliinka iyadoo gaari gacan lagu wado ayey ku aragtay iriddii qolka wiilkeedii oo ilmeynaya, intay gacanta u taagtay iyadoo muusooneysa ayey ku tiri; 'I sug intaan ka soo baxayo' markii qolkii la geliyey si lugta looga gooyo waxay ku heeseysay mid ka mid ah riwaayadihii ay meteli jirtay.

Nin shaqaale ahaa ayaa weydiiyey inay nafteeda ku geesinimo gelineyso dhibka iyo in kale, waxay tiri; 'maya, ee waxaan geesinimo gelinayaa takhtarrada oo ay howl badani hor taa', markii ay bogsatay Sara waxay ku soo wareegtay dunida, toddobo sano oo dambe bayna shaqadeedii wadatay.

Waxaa jirta in awoodda qofka u qeybsami Karin inuu ku walbahaaro amarka dhacaya ee aanan waxba ka qaban kareyn iyo inuu ku noolaado sacaado iyo farxad. Marka aadamigu waa inuu labadaa shey mid doorto. Inuu isku howlo welwel iyo shalayto iyo wax aanu awood u laheyn wax ka qabashadooda iyo inuu samro oo u adkeysto wixii aanu waxba ka qaban kareyn.

Nin tababare u ahaa ardayda baraneysa legdanka Jabbaanka, wuxuu bari jiray ardaydiisa inay isku jilciyaan tartamayaasha kale, sidii laan qoyan oo kale, wuxuuna uga digi jiray inay is qotomiyaan, sida jirdaha geedaha oo kale, waayo markay sidaa yeelaan way burburayaan.

Mala socotaa sida lugaha baabuurta ugu adkeystaan cadaadinta jidadka, warshadaha lugaha lagu sameeyo waxay markii hore soo saareen lugo adadag oo taagan oo iska cilin kara dhulka, laakiin markiiba way burbureen, markaas baa la sameeyey lugaha cinjirka ah ee dhexda ka duleela oo neefta laga buuxiyo si ay ugu adkeystaan cadaadinta dhulka kaga imaaneyna intey u qotomin lahaayeen, marka lugihii jilcanaa ee neefta ku jirtay ayaa u adkeysatay dhibkii iyagaana waaray.

Hadaba waad awoodi kartaa inaad muddo dheer ka faa'iideysato noloshaada kuna raaxeysato, haddii aad isku debciso dhacdooyinka dhibka badan ee kaa hor imaanaya, intaad isku taagi laheyd oo aad ku kici laheyd ciil, caro, eed, aargudasho wim.

Waxaa la soo gudboonaatay askartii furunta ku jirtay dagaalkii labaad ee dunida inay kala doortaan labo xaaladood oo kala ah;

- 1- Inay raalli ku noqdaan amarka dhacay iyo
- 2- In walbahaarku tirtiro.

Waxaan tusaale u soo qaadan karnaa sheeko uu ardayda uga sheekeeyey Wiliam Kosliyeey oo reer Newyork ah, waana tan sheekadii; "waxaan ka ganacsan jiray buskudka intii aanan ciidamada ku biirin, markii aan ciidanka galay waxaa la igu daray ciidamada xeebaha ilaaliya, waxaana la ii magacaabay ilaaliyaha bakhaarrada ay ku jiraan hubka qarxa, sida miinooyinka bambooyinka iwm.

Waxaa la ii tababaray ilaalinta hubka muddo labo beri ah, waxaa aad ii cabsi geliyey xog warrankii iyo digniintii la iga siiyey hubkaas markuu qarxo. Waxaa dhacday in maalin la i faray inaan diyaariyo xamuul markab lagu raro, waxaa loo xilsaaray raridda sanaadiiqda miinooyinka 5 xamaali oo xoog weyn, waxaa lagu saarayey markabka labo fiilo oo silig dhuuban ah oo markabka iyo bakhaarka isku xirayey, marka

sanduuqa laga soo saaro bakhaarka waxaa lagu xirayey labada silig ilaa markabka korkiisa, waxaan ku fekerayey, haddii labada silig midkood go'o oo markaa sanduuqu dhaco, wuxuu gubayaa markabka, baabuurka iyo wixii u dhow oo dhan, aniguna halkaas baan ku gubanayaa, cabsi darteed waxaa I qalalay carrabkii jilbahaan isla dhacay, wadinihiina afkuu ku soo dhowaaday oo waxaan ku fekerayey inaan baxsado, laakiin baxsashadana ka sii daran, maxaa yeelay ka baxsashada ciidamada waa toogasho.

Waxaa intaa sii dheer ceebta qoyskeyga gaareysa, mark ma jirin jid ii furan oo aan aheyn inaan adkeysto oon samro. Waxaan dib u fiiriyey askartii qalabka halista ah rareysay, waxaan arkay iyagoo iska heesaya oo shaqadooda wata, oo aan wax welwel ah laheyn, markaan muddo saacado ah cadaabkaa ku jiray oo aanay waxba dhicin, oo aan silig go'in waxna qarxin, ayaan dib isugu noqday oon si caqli ah u fekeray, waxaana is iri; ka soo qaad in mid qarxo oon ku gubto maxaan sameyn karaa?

Taasi waa dhimasho howl yar, kolley dunida ku waari meyside in qaraxa hubka lagu dhinto ayaa roon intii uu ku silcin lahaa Kansar iwm. Hadaba waa maxay waxaan isu wareerinayo oo aan nafteyda walaaca iyo welwelka ugu dilayo, markaan go'aankaa gaaray waxaan dareemay naxariis oo qalbiga baa ii qaboobay, welwelkii iyo cabsidiina way I daayeen, waxaan helay xasilooni iyo kalsooni aqbalay amarka dhacaya.

Casharkaas wuxuu noqday mid I hogaamiya intii aan dib u noolaa, mar kasta oo ay ila soo gudboonaato wax welwel iyo walaac keenaya intaan garbaha gundhiyo ayaan dhahaa, wixii dhacay waa dhaceen, mana la soo celin karo, xitaa markii dagaalkii dhamaaday ee aan ku soo noqday shaqadeydii hore ee ka ganacsiga buskudka, waxaan ku socday casharkii aan bartay, maalintii la iga dhigay ilaaliyaha hubka qarxa, casharkan waxa la sheegay 400 oo sano ka hor dhalashadii Nebbi Ciise (CS).

Waagii Suqrad lagu xukumay inuu sun cabbo ee loo dhiibay koobkii dhimashada wuxuu yiri; 'waa in lagu raalli noqdo amarka dhacay, markaas buu cabbay, waxaan akhriyey 8-dii sano ee la soo dhaafay wixii kutub mujalado iyo joornaalo ay gacanteydu gaadhay oo ku saabsanaa walbahaarkka. Haddii aan kuu sheeego waanadii ugu faa'iido iyo waxtar badneyd ee aan ka faa'iideystay 8-da sano, waa tan uu qoray Renod Nebir oo macallin ka ahaa machadka midowga diinta, wana tan; 'Ilaahayow I sii Samir iyo karti, si aan ugu raalli noqdo amarka dhaay, Ilaahow I sii awood iyo geesinimo, si aan u beddelo wixii aan awoodi karo, Ilaahow iigu deeq xikmad iyo xaq asiibid, si aan u kala sooco xummaanta iyo samaanta" marka si aad u burburiso caadada walbahaarka intaanu ku burburin raac qaaciddada N-4aad ee ah "ku raalli noqo qadarka Eebbe".

QEYBTA LIXAAD

U YEEL WAXBARASHADA HEERKA LAMA DHAFAANKA AH

Ma rabtaa inaad ogaato sidii aad macaash uga heli laheyd suuqyada ganacsiga, shaki malaha inaad sidaas rabtid, sidoo kale malaayiin ganacsade ayaa sidaa doonaya, haddii aan xeeshaasi kasayo kitaabkan waxaan doono ayaan ku iibin lahaa, laakiin waxaan aqaan jid fiican oo ay ku isticmaalaan ganacsatada najaxsan, waxaanay ku helaan jidkaas faa'iido badan oon qiyaas laheyn, marka jidkaas baan kuu tilmaamayaa.

Waxaa iiga sheekeeyey jidkaas mudane Charles Ribat oo waayo arag ku ahaa suuqa maalgelinta mashaariicda, waana tan sheekadiisii, "waxaan imid magaalada Newyork anigoo heysta labaatan kun \$ oo ay iigu deekeen saaxiibadey si aan uga ganacsado suuqyada sharikadaha iyo sarriifka, waxaan isu heystay inaan xariif ku ahay xeeladaha ganacsiga, waxaanse la kulmay khasaaro weyn oo wixii aan heystay dhammaantood gacanteyda way ka baxeen, kama damqan xoolaha iga khasaaray, laakiin waxaa dhib igu hayey xoolihii saaxiibadey, inkastoo ay ahaayeen rag ladan oon waxba u noqoneyn lacagta luntay, laakiin anigu walaac bay igu dhalisay sidaan ugu sheegi lahaa, markiise aan uga warramay siday wax u dhaceen way gareysteen oo kama aanay xumaan, sababta aan u khasaaray, markaan dib ugu fiirsaday waxay noqotay inaan mabda' qaldan ku socdo, kaasoo ah 'wax walba ama wax la'aan',

Si aanan mar dambe ugu dhicin khasaarahaas waxaan la kumay ninkii ugu najaxsanaa ganacsatada suuqa sharikadda Newyork ee caanka ah Mr. Brown Ksalter, waxaan ka codsaday inuu iga caawiyo xeeladaha suuqa, wuxuu I weydiiyey dhowr su'aalood oo ku saabsan habka aan u gorgortamo iyo sidaan u ganacsado, wuxuu iigu jawaabay; 'anigu markaan wax ka iibsano sharikadaha waxaan qiyaasaa heerka ugu sarreeya ee aan khasaari karo heshiis kasta oon galo, tusaale ahaan haddii aan iibsado saamiyo mid kasta yahay 50\$ markaaba waxaan ku qiyaasaa khasaaraha iga soo gaari karo 5\$ saami kasta, haddii markaa qiimaha saamiyadu sharikadda aan gatay hoos uga dhacaan 5\$

markiiba waan iska iibiyaa oo ma sugo intey mar dambe dib ugu soo kacaan, haddii aad dariiqadaa raacdo ood khasaarto qeyb raasumaal ah dhinac kalena aad wax macaashto, markaad isu miisaanto waxaad ogaan doontaa in khasaarahaagu yar yahay ugu dambeystana waad macaashi doontaa".

Waxaan bilaabay markiiba inaan ku camal falo mabda'aas, sida runta ahna wuxuu ii badbaadiyey kumanaan \$ aniga iyo dadka ila dhaqmaba, waxaana ogaaday inaan mabda'aan gaar ku aheyn ganacsiga iyo sharikadaha, laakiin xitaa looga faa'ideysan karo dhibaatooyinka kale ee dadka ku imaanaya. Tusaale ahaan waxaan jiray nin saaxiibkey ah oo aan sugi jiray xilliga qadada si aanu hotel ugu wada qado doonano, laakiin ballanta muu ilaalin jirin, marka sugiddiisa waqti dheer bay igu qaadan jirtay, markaan mabda'aan ku camal falay baan ku iri; "dhageyso saaxiib muddada ugu dheer ee aan ku sugi karaa waa toban daqiiqo oo dheeraad ka ah saacadda aan ballanay, marka haddii aad dib uga dhacdo waqtigii aan ballanay toban daqiiqo ka badan meehii iga heli maysid".

Haddii aan mabda'aan baran lahaa waa hore aad baan uga badbaadi lahaa dhibaatooyinka badan oo igu dhaliyey Samir darro, caro iyo walaac, markaas kadib waxaan go'aansaday inaan dhacdo kasta u qiyaaso heer lama dhaafaan ah, waxaan is dhihi jiray; 'Eebow shaqadan waqti intee ah baa ku filan, intaan wixii ka dheeraada waqti kale ha isaga khasaarin'. Laakiin waxaan u hambalyeeyey nafteyda sidaan u daweeeyey dhacdo adag oo I soo martay oo nafteyda halis gelisay, waana tan dhacdadii;

"markaan soddon jir gaaray ayaan go'aansaday inaan ka shaqeeyo sheekooyin qorid inta nolosha iiga hadhay, waxaan higsanayey nimanka caanka ku ah qiso qoridda, sida Tores ama Jack London ama Tomas Hari, waxaan aad u xiiseynayey inaan xaqiijiyo doonisteyda ilaa aan Yurub u tegey si aan u gaaro doonista sheeko qorista, lacag aan badneyn ayaan heystay, waxaanay aheyd markii dunidu ciriiriga dhaqaalaha soo food saaray ee dagaalkii labaad ee dunida, xaalufiyeyna dad iyo xoolaba.

Waxaan joogay Yurub laba sano oon qorayey sheeko, waxaan u bixiyey duufaanka barafka "tha Bilzzard", markan u bandhigay daabacayaasha buugaagta si qabow ayey ii qaabileen maxaa yeelay kumay qancin in qisadaan la faafin karo, markaa baan la kulmay nin kutubta faafiya oo ka ganacsada daabacaadda sheekooyinka, wuxuu iigu jawaabay 'qisadu waa wax liito oo malaha wax qiimo ah, adiguna ma lihid hibada qoraanimada sheekooyinka iyo nimcada curinta fanka'.

Markay ereyadasi dhegtayda ku soo dhaceen wadnihii baa I istaagi gaaray, waana miyir daboolmi gaaray, markii waxaan labo sano ku soo dhimanayey laga soo qaaday eber.

Waxaan ka baxay xafiiskii anigoo jahawareersan oo dunidii igu soo ururtay, waxaan dareemay inaan ku jiro waqti kala guur ah, xagga nolosheyda oo loo baahan yahay inaan go'aan adag qaato, si aan u helo jidkii aan u mari lahaa nolol aayatiin ii leh, inta dunida iiga harsan, waxaa ka soo wareegtay dhowr todobaad si aan uga soo bogsado jugtii I gaartay ee aheyd labadii sano ee laga soo qaaday waxba kama jiraan. marka waxaa loo baahnaa inaan jid kale u maro nolosha, mana aqaano markaas mabda'a xad u yeelidda khasaaraha, laakiin Ilalahey baa I waafajiyeey inaan mabda'aa ku camal falo si aan ciriiriga uga baxo oon jid cusub u jeexdo, marka waxaan gaaray go'aankan.

'Labadii sano ee aan ku tebiyey sheekadii igu baartay kama dhigin waqti lumay ee waxaan ka dhigay waqti aan ku qaatay layli, tijaabooyin iyo imtixaanno, casharkii aan labadaa sano bartayna waxaan goostay inaan uga faa'iideysto mustaqbalka nolosheyda dhammaanteed. Waxaan go'aansadya inaan hadda dariiq cusub bilaabaa, anigoon dib ugu noqoneyn ama isugu shuqlineyn waqtigii iga tagay, haddaan waqti heystaa waa inaanu mar kale iga lumin.

Jidkii cusbaa wuxuu noqday inaan ku laabto shaqadeydii hore ee aheyd wax baridda dadka waaweyn, allifidda kutubka taariikhda dadka caanka ah iyo kutubta kale sida midkaan aad hadda akhrineyso ee ah 'Dhaaf Walbahaarka' oo kale. Markii aan go'aankan qaatay waa cusub

baa ii baryey dunidii ciriiriga igu aheyd baa ii furantay, farax iyo reyn-reyn baan la duuli gaaray, ilbiriqsi dambe kuma lumin inaan ku fekeru waqtigii iga khasaaray, waxaan maskaxda gashaday inaan noqon karo sheekeeye caan ah, sidii Tomas Har oon ku hanqal taagi jiray, inaan heerkiisa gaaro, marka go'aankii aan maalintaa gaaray waa kanaa an weli mirihiisa guranayo, waxaana rajeynayaa inaan sii gurto inta nolosheyda ka harsan.

Waxaa laga soo wariyey Henry Thoro inuu yiri xikmaddan 'Qiiimaha sheyga waxaa lagu qiyaasaa inta uu kuu faa'iideynayo iyo waayaha uu kugu kordhinayo', xikmaddaan macnaheedu waa inaan noqoneyno doqmo aan dantooda aqoon u laheyn haddii aan ku dhumino maslaxadeenna shey ama fal aan qiimo noo laheyn, sida ay sameeyeen Jalbart iyo Sovan, waana tan qisadoodii.

"labadaan nin waxay ahaayeen labo nin oo saaxiib ah oo isku daacad ah oo aan dhexdooda la geli Karin, shaqadooda waxay aheyd sameynta muusikada, heesaha maaweelada iyo madadaalada oo dadka lagu farax gelin jiray, hase yeeshee kuma ay guuleysan, iyagu inay naftooda raaxo iyo sacaado geliyaan, waxay u soo jiiddeen walbahaar, murugo iyo shallay uu sababay shey aan qiimo weyn laheyn, wuxuu sheygaasi ahaa (sajaadad), wuxuu amray Solvan in la soo gado sajaadad si loogu goglo golaha madadaalada oo ay wada lahaayeen, markuu arkay Jalbart rasiidkii qiimaha sajaadada ayuu madaxa derbiga la dhacay caro darteed, ilmo baa ka soo daadatay isagoo ka qeylinaya qaalnimada Sajaadada, waxaa halkaa ka bilowday dood iyo muran kulul oo la xallin kari waayey ilaa murankii uu gaaray heer ay maxkamad isla tagaan, dacwadoodii waxay socotay intii noloshooda ka harsaneyd.

Waxaa la yaab lahaa in labadaas nin dantu ku khasabtay inay wadaan shaqadoodii ka dhaxeysay iyagoon is arkeyn, tusaale ahaan marka uu Solvan allifo qeybo muusik ah, wuxuu boostada ugu diri jiray Jalbart si uu isaguna ugu laro heeska ku aadan, markaasuu dib ugu soo celin jiray Solvan codka iyo miraha heeska, intii aanay dagaalamin labadooda ayaa wada sameyn jiray, waxay wada tegi jireen masraxa, iyagoo gacmaha is heysta ayey dadka wada salaami jireen, hadda

markii ay dagaalameen ninba dhan buu ka soo galaa masraxa, markay dadka salaamayaan midba wuxuu isu leexiyaa dhanka aanu xigin saaxiibkiis si aanay indhahooda isu qaban. Waa kaa qiimihii sajaadada oo aan wax macno ah ku fadhiyin gaaray heerkaa.

Labadaa nin dagaalkoodii ka dhashay qiimihii sajaadada kamay helin dhib maahee wax dheef ah, 'maxaa yeelay labadan nin uma yeelin caradoodii xad lama dhaafaan ah, siduu Abraham Linclon ugu yeeli jiray carada xad lama dhaafaan ah, waxaa dhacday markii uu socday dagaalkii sokeeye ee Maraykanka inay qaar ka mid ah saaxiibadii ay olole ku qaadeen dad ay cadaawo u hayeen, markaas buu yiri; 'waan arkayaa inaad iga caro iyo gadood badan tihiin, waxaase laga yaabaa inaan anigu sidaan u abuur nahay, waxayse laga yaabaa inaan anigu sidaan u dhumio nolosha barkad muran iyo dagaal, haddii mid ka mid ah dadka I cadaadinayo joojiyo weerarka uu igu hayo, kuma aanan fekereen ilbiriqsi dambe cadaawadnimadii hore ee noo dhexeysay, jeclaan lahaayaa in Eedadey Edith lahaan laheyd dabeecadda wanaagsan ee uu lahaa Abraham Linclon ee ah iska iloobidda cadaawadnimada la soo dhaafay.

Eedayay waa ooridii adeerkay Frank waxay ku noolaayeen beer yar oo ay ku lahaayeen gobolka Missouri. Beertu waxay aheyd mid carro xun oo uu jeexjeex badan ku dhex yaalay, wax soosaarkeeduna aad buu u liitay, weliba waxay u rahmaneeyd deyn ay bixin kari waayeen, iyagoo xaalkoodii sidaa yahay ayey Eeddo ka codsatay bangiga lacag deyn ah oo ay ku soo gadato daahyo qaali ah, si ay ugu qurxiso gurigeeda ku yiilay tuulada oo cariish ahaa, marka adeerkey isagoo deyntii hore qoorta ugu jirto ayuu ka baqay deyn kale oo cusub, markaas buu agaasimihii bangiga hoos ula hadlay si uu ugu diido deynta cusub ooriidisa.

Mar dambe ayey ogaatay Edith in ninkeedu ka dambeeyey deynta loo diiday, markaas bay bilowday iney derbiga madaxa ku garaacdo, muddo 50 sano ah ayey derbiga herdineysay, markii ay xanuunsatoba, qofkii ay aragtaba waa uga sheekeyn jirtay, aniga waxay iiga sheekeysay in ka badan labaatan jeer, markii igu dambeysay iyaddoo

70 jir ah bay iiga sheekeysay qisadii lafteeda. Waxaan ku iri Eeddo waa run in Adeer Frank ku xumeeyey, laakiin miyaadan dareemeyn inaad muddo 50 sano ah ka sheekeyso xumaantaas, miyaanay taasi ka darneyn xumaantiisii, laakiin waxaan noqday nin dayaxa la hadlay oo jawaab ka sugaya.

Waxaa eedaday ka sii daran nin la oran jiray Benjamin Frank oo ku soo iibsay caroog qiimo qaali ah, waana tan qisadiisii isagoo werinaya; "markaan ahaa 7 jir ayaan sameeyey gef aan xasuusnaa ilaa aan 70 jir noqday, kaasoo ahaa waxaan aad u caashaqay Buun ama caroog si aan ugu dheelo, markaan xoogaa lacag ah helay ayaan la orday, waxaan tegey dukaankii qalabka ciyaaraha, waxaan u dhiibay dukaan lihii wixii aan lacag hayey oo dhan, anigoon weydiin qiimahiisa, anigoo farax la duulaya ayaan ku soo noqday gurigii, markii ay walaalahey ogaadeen qiimaha aan ku soo gatay caroogga ayey qosol la dhaceen iyagoo igu jeesjeesaya, waxaa markaa ila gudboonaaday oo keliya inaan oohin la dhaco anigoo ka xun sida walaalahay u quudhsadeen doonisteyda aan xaqiijiyey.

Inkastoo Frank noqday nin caan ah oo uu gaaray darajada safiirka Mareykanka u fadhiya Fransiiska, hadana weli muu ilaawin inuu buun yar ku soo iibsaday qiimo aad uga badan qiimihiisii runta ahaa, waxaase jirta inuu dhacdadaas ka faa'iideysatay cashar lama ilaawaan ah oo aan la qiimeyn karin, wuxuu yiri isagoo sii wata sheekadiisa; 'marka nolosha aan aad u sii dhexgalo oo aan u fiirsado ficillada dadka, waxaan arkaa in dad badani qiimo aad u sarreeya ka bixiyo caroog yar, taas oo aan u arkayo in dhibaataada dadka heysata badankeed ay ka imaanayso qaddarin la'aanta qiimaha sheyga iyo falalka, haddii ay shey kasta u qiyaasi lahaayeen qiimo u qalma way ka badbaadi lahaayeen cudurrada iyo masiibooyinka badan.

Waxa la yaab leh in qadarin la'aanta sheyga aanay ka nabad galeyn culumada & qorayaasha caanka ah, bal fiiri qisadii Tolostay oo ku caan baxay riwaayadaha caalamiga ah, nabadda, dagaalka iyo riwaayadaha (Ana karina), waa ninka ay ku tilmaantay hay'adda keydka aqoonta ee Ingiriiska erayadan, "tolosty waa ninka dunida ugu qadarin iyo xushmo

mudan 20-kii sano ee ka horreysay dhimashadiisa oo aheyd intii u dhexeysay 1890 – 1910, dadka la dhacsan xigmadiisa, cilmigiisa iyo boqolaal xertiisa ah ayaa gurigiisa ku soo xoomi jiray si ay uga dhegeystaan casharradiisa, erey kasta oo afkiisa ka soo baxo qorid baa lagu kala boobi jiray, waxayna ula dhaqmi jireen sidii isagoo Nebi la soo diray ah oo kale.

Inkastoo uu sharafka iyo xurmada caan ku ahaa, haddana noloshiisa gaarka ah waxay aheyd mid aad uga duwan tan ka muuqata oo xitaa waxaa la yiri doqonimaduu sameynayey 70 jirkiisii way ka darreyd tii uu Frank sameeyey markuu 7 jirka ahaa, (qisadii carooga) ee aanu soo sheegnay. Waana tan qisadiisii; "wuxuu guursaday Tolosty gabar uu aad u jeclaa, guurkoodii wuxuu noqday mid baraare iyo sacaado kulansaday, waxaa jirtay in afada Tolosty aheyd mid masyr badan, markuu maseyrkii ka tan badiyey waxay labbisan jirtay dharka reer baadiyaha, markaas bay u kuur geli jirtay dhaqdhaqaaqa Tolosty, xitaa waxay ka hinaasi jirtay carruurteeda.

Waxaa dhacday inay mar qaadatay qori oo ay la dhacday masawir ay gabadheedu laheyd oo derbiga ku dhegenaa ilaa ay ka burburiso, maalin kale waxay sameysay wax ka sii daran, intey dhalo sun ku jirto gacanta ku qabsatay ayey dhulka galglatay, waxayna ku hanjabtay inay suntaas nafteed ku dileyso, carruurteedii intay argagaxeen ayey qolka gudihiisa isku kuuseen, cabsi iyo argagax bay la hadli kari waayeen, markaa muxuu sameeyey Tolosty? Wax alaale wixii guriga alaab yiil buu jebiyey, taas waa loogu garaabi karaa oo wuu ku caro burburay, laakiin wax ka sii daran buu ku kacay.

Wuxuu curiyey dhambaalo gaar ah oo u ku qoray caay, canaan iyo cambaareyn ku socota afadiisa, wuxuu ku eedeeyey wixii dhacay oo dhan, waa kaa caroogiisa qaaliga ahaa ka bixiyeey qiimo aanu astaahilin, waxaase ka dartay afadiisii oo intay googooyasay dhambaaladii gubtay, markaas bay curisay dhamaalo gaar ah oo ay ninkeeda ugu jawaabeyso, iyadoo eedda iyo dembiga oo dhan dusha ka saareyso isaga, waxay qortay qiso ay ku magacawday 'gefka yaa

leh', waxay ku tilmaantay ninkeeda sheydaan qalafsan, iyaduna waxay isku tilmaantay sifooyinka malaa'ita.

Laakiin waxay ku gefsanaayeen reerkaas inaan dadku u garsooreyn oo aanay dooneyn inay ogaadaan labadooda midka gardaran, waayo qof kasta wuxuu ku shuqloon yahay danihiisa gaar ah oo kuma fekereyn u garsooridda reer Tolosty, marka waxa nasiib darro ah in qoyskii sacaadada ku noolaa caroog raqiis ah ay qiimo qaali ah ku bixiyeen muddo 50 sano ah, iyadoon midkoodna u baraarugin in sheyga qiimahiisa dhabta ah aan la dhaafin, ama midkood ku fekerin inuu dagaalka qaboojiyo ama heer lama dhaafaan ah loo yeelo, weliba wuxuu ku dardaarmay Tolostay inaan loo oggolaan afadiisa inay aragto meykiisa, sida dhabta ah Jalbart iyo Solvan Eedayay Edith iyo reer Tolosty dhammmaantood waxay ku dhaceen khasaaraha ka dhasha qiyaasid la'aanta qiimaha sheyga.

Anigu waxaan rumeeysanahay in qadarinta qiimaha sheyga uu yahay saldhig asaasi u ah sacaadada iyo xasiloonaanta aadamiga, marka waxaan uga bixi karnaa walbahaarka ina haya badankiis, haddii aynu raacno mabda'an dahabiga ah "in sheyga lagu qiyaaso qiimahiisa xaqiiqada ah, "haddaba si aanu caadada walbahaarka u burburino raac murtida lambarka 5aad, haddii aad ku walbahaarto inaad hesho shey is weydii su'aashan;-

1. Waa maxay faa'iidada aan ka helayo sheyga aan u walbahaarayo?
2. Waa intee xadka lama dhaafaanka ah ee aan u walbaahri karo?
3. Waa imisaa qiimaha ugu sarreeyo ee aan ku bixin karaa sheyga I walbahaariyey?

QEYBTA TODDOBAAD HA SHIIDIN BURKA

Markii aan fasalkan qorayey waxaa iiga muuqday dariishadda qolka aan ku jiray lafihii xayawaankii loo yaqiinay Diinsoor, oo aan ka soo iibsaday matxafka Bibodes ee raacsan jaamacadda Yale, waxaa la ii sheegay markaan soo qaadaneey lafahaan taariikhiga ah in xayawaankan uu dunida ku noolaan jiray mar laga jooogo 180 malyan oo sano. Marka doqon kasta oo dunida ku nool kuma fekeri karo inuu maskaxdiisa dib ugu celiyo 180 malyan si uu wax uga ogaado lafahaa taariikha ah, una maleyn mayo inuu jiro dunida qof ku fekeraya inuu wax ka beddelo lafahaas doqon kastoo uu yahay.

Laakiin waxaa jira dad welwel iyo tiiraanyo ku nool, sababtoo ah waxay awoodi waayeen inay wax ka beddelaan arrimo dhacay muddo ka yar 180 daqiiqo. Waxaa caqligal ah in wax laga beddelo natiijooyinka ka dhashay masiibadii dhacday 180-kii daqiiqo ee la soo dhaafay, laakiin qofka isku dayaya inuu amarka laftiisa wax ka beddelo, isagaa dhabarku daali doonaa. Waxaa jira hal jid oo keli ah oo looga faa'iideysan karo dhacdooyinka ina soo dhaafay, kaas oo ah in la furfuro oo la kala qalo arrimaha dhacay, kadibna laga qaato wixii looga faa'iideysan karo dhacdooyinka soo socda, wixii intaa ka soo harana la iska ilaaliyo ama laga soo qaado wax aan jirin.

Anigu waan rumaysnahay fikradaas, laakiin ma lihi raganimadii aan ugu camal fali lahaa, waxa aan aaminsanahay, waxaa caddeynaaya sidaas tijaabo I soo martay muddo dhowr sano laga joogo, waxaanay keentay tijaabadas inaan khasaaro 30,000\$, waana tan tijaabadii ee fiiri, "waxaan aasaasay mashruuc weyn oo ku saabsan wax baridda dadka waaweyn, waxaan ka furay fasallo badan meelo iyo goobo kala duwan, Waxaan ku bixiyey xoolo badan ogeysiis iyo xayeysiin, waqtigeygii oo dhan waxaa iga qaaday maamulka iyo habeynta mashruuca iyo nidaamintiisa, waxaan beylihiyey dhinicii maamulka lacagta, kamana fekerin in loo baahan yahay inaan sameeyo maamule aqoon u leh arrimaha xisaabaadka iyo miisaaniyadda ilaa aan khasaaro ku dhaco.

Markii ay hal sano ka soo wareegtay oo ay lacag badani I soo gashay, laakiin aanan wax faa'iido ah helin oo wixii aan heli lahaa ay u dhumeen maamul xumo, ayaan xaqiiqsaday iney khasaaro igu dhacday, waxaa ila soo gudboonaaday labo arrimood oo kala ah;-

- 1- Inaan falo siduu falay aqoon yahankii Maraykanka madow ahaa ee la oran jiray George Washington, markii uu kacay bangigii uu lacagta dhigan jiray oo uu ku khasaaray, wixii uu ururusaday intuu noolaa oo dhan oo dhameyd 40,000 oo doolar.

Nin baa weydiiyey inuu ka warqabo inuu khasaaray dhammaan xoolihii, wuxuu ugu jawaabay; "haa waan ka warqabaa, kadibna wuxuu aaday shaqadiisii macallinimada aheyd, sidii nin aanay wax dhibaato ah ku dhicin. Wuxuu awooday inuu maskaxadiisa ka tirtiro, dhammaan khasaarihii ku dhacayna wuu iska ilaaway.

- 2- Inaan furfuro oon kala qalo gefefkeygii si aan ugala soo baxo cashar aan ka faa'iideysto mustaqbalka si aanan mar dambe ugu dhicin gefefka khasaaraha iyo saboolnimada ii keentay. Laakiin nasiib darro labadii dariiq midna ma aan marin ee waxaan ku dhacay dabinkii walbahaarka, muddo dhowr bilood ah ayaan ku asqeysnaa oon ku noolaa jahawareer, hurdo waaan ka tagay, cuntadii way ii dhadhami weyday, waagii dambe markaan xasuusto xaalkeygii waxaan la yaabay doqonnimadii aan ku kacay ee walbahaarku ii horseeday, waxaan ogaaday in waxbaridda dadka ay aad iigu sahlan tahay, waxaase aad iigu adkaaday inaan ku camal falo wixii aan bartay.

Waxaan kari waayey inaan ku dhaqmo cashar uu siiyey Mr. Brandon oo macallin ka ahaa kulliyadda caafimaadka ee George Washington ardadiisii, waxaana uga sheekeeyey ardadayda nin casharkaa dhageystay, waana kan isagoo ka sheekeynaya Mr. Sandrosi. "subax annagoo fasalka ku jirna ayuu inoo soo galay Mr. Brandon isagoo gacanta ku sita dhalo caano ku jiraan, wuxuu dhigtay miiska korkiisa, waxaan dhammaanteen fiirinaynay dhaladii, annagoo yaaban si kedo ah intuu u kacay macalinkii ayuu dhaladii gacanta ku dhufatay,

markaasay jabtay, caanihiina daateen, intuu codka kor u qaaday ayuu yiri; 'qofna yaanu u ooyin wax dhaafay', markaasuu mid mid inoogu yeeray si aanu aad ugu fiirino dhalada jabtay iyo caanaha daatay, mid kasta wuxuu ku dhahaayey; 'si fiican u fiiri waxaan doonayaa inaan casharkan xasuusnaato intaad dunida ku nooshahay', caanihii way tageen oo dhulkii baa liqay, haddaad timaha iska rifto adigoo tiiraanyeysan ama murugo u hogaansan wax kastoo aad sameyso hal dhibic kama soo celin karti caanihii daatay, waxaa kuu suuroobi kartay inaad ka gaashaamato inta aanay caanuhu daadan ood ka digtoonaato, laakiin mar haddii ay daateen waa wax kaa tagay oon kuu soo noqon doonin".

Waxaad awoodi kartaa hal shey oo keli ah, kaas oo ah inaad ilowdid oo aad maskaxdaada ka tirtid ka dibna aad shaqadaada isu diyaarisid si dardar cusub ah.

Wuxuu ku daray Sondrosi tijaabadan maskaxdeyda bay ku dhegtay, inkastoon aqoon badan aan ka bartay kulliyaddii sida xisaabta handasada, luqadda laatiinka iwm. Haddana sida dhabta ah tijaabadan waxay ii faa'iideysay nolosheyda in ka badan intaan ka faa'iideystay afartii sanno ee aan kulliyadda ku jiray, waayo waxay I bartay tijaabadan, 'inaan kahortago inaan caanuhu daadan, intaan karo iyo inaan iloobo haddii ay daateen oon kari waayey ka hortagga'.

Dhegeystayaasha qaarkood intey garabka gundhiyeen ayey dhaheen, muxuu macalinku sidaa ugu weyneynayaa tijaabadaas, waayo waa xikmad caan ah, waana laga yaabaa inaan marar badan akhriyey, waxaana jirta in xikmadaha caanka ah ay xambarsan yihiin faa'iidooyin badan, haddii aad akhrido waxay culumadu ka qoreen walbahaarka ummadihii hore ilaa iyo haatan kama maarmi kartid xikmadan ay xambaarsan yihiin labadan tusaale;-

1. Ha gudbin buundada inta aadan gaarin.
2. Ha u ooyin wax kaa tagay.

Haddii aynu ku camal falno labadan tusaale oo keliya, looma baahanayo inaad akhrisid kitaabkan oo kale, oo ku bara sidaad walbahaarka ula dagaalami laheyd, sida runta ah aqoontu ma noqoto

xoog waxtar leh, ilaa lagu dhaqmo, kitaabkan ujeedadiisu ma aha inuu ku baro wax aadan aqoon, laakiin ujeedadiisu waa inuu ku xusuusiyo waxaad taqaanid, iyo inaad ku dhaqantid oo aad uga faa'iideysato noloshaada, anigu waxaan jeclaa hab uu isticmaalay nin la oran jiray 'Ford Foulter Shide', kaasoo awood u lahaa inuu ka dhigo xaqiiqooyinka soo jireenka ahaa ee la yiqiinay kuwo cusub oo xiiso leh, markuu madax ka ahaa jariidada Villa Delvia, mar uu muxaadaro u jeedinayey arday ku jirtay sanadkii ugu dambeeyey ee jaamacadda ayuu weydiiyey; imisaa jeexday xashiishka ka daato qoriga marka la jeexayo? Cidna kuma jawaabin anigaa jeexay, maxaa yeelay qofna ma jeexo huubo qori ka daatay, waa sidaa wax kaa tegey, haddaba maxaad ugu walbahaareysaa wax kaa tegay, runtii qofka u walbahaarayo wax hore oo tegay wuxuu la mid yahay qof cajiin shiidnaa sii shiidaya.

Nin la oran jiray Koni Nak oo ciyaar yahan caan ahaa, ayaa la weydiiyeey markuu 81 jir gaaray, inuu ka walbahaari jiray marka ciyaarta lagaga adkaado, wuxuuna ku jawaabay; "haa, aad baan u walbahaari jiray, laakiin waayadii dambe waan ka xoroobay caadadaas xun ee xanuunka badan, waxaan ogaaday in qofka ka tiiraanyoonaya wax tagay oo aan waxba laga qaban kareyn inuu la mid yahay qof bur shiidaya, walbahaarku waxba kuu tari mayo aan ka aheyn inuu wejiga kaa kaduudmo ama boog-caloolood kugu rodo, habeen baan la casheeyey nin la oran jiray Jack Dabisi, halyeygii feerka culus.

Wuxuu iiga sheekeeyey tartan feer uu la galay Toni oo ka qaatay boqortooyadii feerka, wuxuu yiri; "intii aan dagaalka ku dhex jirnay ayuu igu dhashay dareen ah inaan gaboobay, wareegii tobnaad markii la gaaray waan ka quustay wax guul ah, inkastoo aan sii waday feerkii oon istiilayey, ilaa wejigeygii dhiig daboolay oo aan indhihii wax ka arki waayey, waxaan si dhib ah ku arkay garsoorihii oo gacanta Toni kor u qadaya, isagoo caddeynaya inuu boqortooyadii feerka ku guuleystay, kadib waxaan u dhaqaaqay xaggii qolkeygii anigoo luudaya, dadkii na daawaneeyey ee taageerashaa ii ahaa qaar baa gacanta I qabtay iyagoo ii tacsiiyeynaya, qaar kale waxaan idhahooda ku hubaa ilmo iyagoo ii

damqay khasaaraha igu dhacay, markii aan waayey halyeynimadii feerka culus.

Hal sano kadib ayaan mar kale isku taagay Toni bal inaan ka soo ceshan karo kursigeygii boqortooyada, laakiin wax faa'iido ah kama keenin si wanaagsan buuna bannaanka ii mariyey, aad bay iigu adkaatay inaan ka badbaado tiiraanyada iyo murugada, waagii dambe waxaan isku waaniyey inaan iska iloobo oon iska xiro, wixii tagay ee aan laga rajo qabin inuu soo noqdo, waxaan goostay inaan ka baxo oohintii oo aan wax qabsado. Waxaan furtay hoteel weyn iyo mashaariic kale oo aan ku najaxay, sida mashaariicda ganacsiga, waaban ka nastay noloshii feerka iyo boqornimadiisii.

Markaan akhriyo buugagta taariikhda een fiiriyo sida dadku u dhaqmaan, waxaan la amakaagaa siday dadku awood ugu leeyihiin tirtiridda masiibooyinka walbahaarka iyo siday dhakhso nolosha cusub ula qabsadaan, sidii iyagoon sooba marin dhacdooyin xanuun badan oo jiif iyo joogba u diiday.

Mar baan soo booqday xabsiga weyn ee la yiraahdo Sing-sing, waxaan aad ula yaabay sida maxaabiistu aanay uga sacaado iyo farax yareyn dadka ku nool meelaha ka baxsan xabsiga. Waxaan weydiyey agaasimahii xabsiga arrintaas, wuxuuna iigu jawaabay; "dambiileyaasha waxay xabsiga soo galaan iyagoo careysan buuqaya oo gadoodsan, markii ay dhowr bilood ka soo wareegto kuwooda waxgaradka ahi aad bay isu beddelaa, oo way iska iloobaan walbahaarkii iyo nasiib daradii ay la tiiraanyoon jireen, markaas bay la qabsadaan nolosha cusub ee xabsiga, markaas bay si deggan oo xasilooni ah u dhaqmaan".

Wuxuu iiga sheekeeyey Logis Loice oo ah agaasimaha xabsiga in nin maxbuus ah oo beeraley ah uu isku shuqliyey inuu ku tallaalo ubax iyo geedo beerta xabsiga ku dhex taal, isagoo heesaya, wuxuu ku camal falayey heestaan, 'haddii hadal la dhaho ama erey la qoro ama wax lagu fekerro ma soo celinayo wixii horey loo falay, dadaal daal iyo oohin midna, marka maxaan ugu ooyeynaa wax tagey oo aan soo noqoneyn',

waxaa hubaal ah inaan dhmmaanteen sameyno gefef iyo doqonimo badan, mana jirto qof gefka ka caagan, marka ha u murugoonin gefefka aad horey u sameysay, sababtoo ah murugadaasi waxba kuuma tareyso, mana jirto dunida cid soo celin karta wixii tagay ama wax ka beddeli karta, hadaba raac xikmadan, "ha isku dayin inaad burka shiidan sii shiiddo".

CUTUBKA AFARAAD
LIX DARIIQO OO AH SI LOOGU ABUURO MASKAXDA
WAXYAABO KUU SOO JIIDO XASILOONI IYO SACAADO
QEYBTA KOOWAAD
NOLOSHAADU WAA WAXA FEKERKAAGU ABUURO

Waqti dhowr sano laga joogo ayaa la iga codsaday inaan idaacadda u soo diyaariyo barnaamij jawaab u noqon kara su'aalahan; waa maxay wixii kuugu darnaa adduunyada ee ku soo maray? Jawaabtu way ii fududeyd markiiba, waxaan iri; 'casharka aan xafiday ee aanan weligey hilmaamin waa in fikradaha gefefka ah ee maskaxda iiga jira inay raad xoog leh ku leeyihin habeynta nolosheyda, maxaa yeelay fikradaheena ina hogaamiya, waayo waxaan ka fekernaaba waa sheyga ugu horreeya ee aasaaska u ah aayatiinka nolosheena'.

Wuxuu yiri Emerson; "ii sheeg waxa qofka maskaxdiisa ku wareegaya anigana waxaan kuu sheegayaa qofkuu yahay", sida runta ah qofku ma noqon karo waxaan aheyn wuxuu ku fekerayo, waxaan rumeysnahay in mushkiladda ugu weyn ee na hortaagan dhamaanteen inay tahay sidaan u dooraneyno fikrad wanaagsan oo toosan, haddii aan mushkiladaas xallino dhammaanteen, dhibaatooyinkeenna oo dhan waa xallismayaan, waxaana soo koobay mushkiladdaa ninkii feylasuufka ahaa ee la ora jiray Marikosar Yiz Yous oo ahaa boqorkii imbiradooriyaddii Roomanka, wuxuuna ku soo koobay dhowr erey, 'our life is what our thought make it' macnaheeduna yahay 'nolosheenu waa waxay fikradeenu sameeyso' haddii fikradaheenu sacaado fiican yihiin, waxaan noqoneynaa dad sacaado ku nool, haddii ay inaga adkaadaan, fikrado xunxun waxaan noqoneynaa dad baas oo xun, haddii aanu heysano fikrado argagixis ah, waxaan noqoneynaa dad cabsado oo fulay ah, haddii ay naga adkaato fikrad jirro ama cudur ah waxaan noqoneynaa dad buka ama jiran.

Haddii aan ku fekerno guul darro waan ku fashilmeynaa mashaariicdeena, haddii aan ku fekerno calaacal iyo cabasho dadkaan ka go'eynaa, la kulankeenana waa laga cararayaa, wuxuu yiri Normann

Bill; "adigu ma tihid sidaad isu maleynayso, laakiin waxaa tahay waxaad ku fekerayso".

Ha moodin inaan dadka ugu yeerayo inay mashaakilka ka hor imaanaya dhagaha ka fureystaan taasi waa dhuumasho dhabarku muuqdo, noloshuna way soconeysa oo uma joogsaneyso kuwa dhibaataada ka dhumanaya, waxaanse kuugu yeerayaa inaad mushkilooyinka waajahdid ee aadan ka welwelin, maxaase u dhexeeya in mushkiladda la wajaho iyo in laga welwelo, si loo fahmo tusaalahan dhageyso.

"mar kasta oo aan ka gudbayo jidadka waaweyn ee Newyork ee gaadiidku ku badan yahay waxaan wajahaa wixii aan fali lahaa, si aan u gudbo jidadka nafteydana uga badbaadiyo shilalka ee ma welwelo, mana walaaco, waxaanse ku dhaqaaqaa qorshihii aan ku xalin lahaa mushkiladaa I hortaagan, marka wajahaadda waa inaad fahamtid xaqiiqada mushkiladda ka dibna aad ku tallaabsatid tallaabooyin wax ku ool ah, sidaad u xallin laheyd dhibaataada, walaacuna waa inaad jahawareertid ood hadba dhan u boodid ood ku war wareegtid mushkiladda hareerahaada ah.

Waxaa jira rag wajahaya mushkilooyinka ugu adag ee dhibka badan, isagoo madaxa taagaya oo weji furan oo muusoonaya, waxaan la soo joogay ninkii la oran jiray Loyele Tamas ee caanka ku ahaa sameynta filimada, waxaan arkay siduu u wajahay mushkilo adag oo ka hor timid, waana tan qisadiisii;

Waxaan nasiib u helay inaan ka qeyb galo ololihii filimadiisa caanka ahaa ee bandhigga uu sameynayey, wuxuu awood u helay Loyele iyo saaxiibadiis inay soo sawiraan lix aag oo ka mid ah goobihii dagaalkii labaad ee dunida ka socday, waxaa ugu muhiimsanaa muuqaaladii ciidamadii Lores ee hoggaaminayey ciidanka carabta iyo Lord Huube, markuu ka soo duulay Falastiin waxay filimadiisii noqdeen kuwo aad loo jecleystay oo suuq yeeshay.

Markuu Loyele ku guuleystay filimadaas ayuu isku dayey inuu filimo ka sameeyo nolosha Hindiga iyo Afganistaan, labo sano ayuu ku

wareegayey Hindiya iyo Afganistaan oo uu soo sawirayey filim, laakiin nasiib darro filimkii lama jecleysan oo waa ku fashilmay oo uu ku khasaaray, anigu markaas waan la jiray, waxaan xasuustaa mar aan makhaayad raqiis ah cunto raqiis ah ka cuneynay, oo taasina xitaa noo suurta gasheen haddii aanan amaah ka helin James Markes fannaankii reer Kanada ee caanka ahaa. Ujeedada qisada Loyelee waxay tahay; inkastoo ay deyn cusleysay kuna fashilmay rajadii uu ka qabay filimadiisa, hadana mushkiladii ayuu wajahay una jilib dhigay, kamana walaacin, maxaa yeelay wuxuu ogaa hadduu walbahaarka isku dhiibo inuu waayi lahaa kalsoonaanta dadka, halkaasna uu ku baabi'i doono, wuxuuna isku dhiiri gelin jiray marka uu subixii guriga ka baxayo, intuu si wanaagsan u lebisto ayuu kuleetiga suran jiray ubax, markaasuu u bixi jiray magaalada, isagoo isku kalsoon, wuxuu ahaa fikirkiisa mid wax ku ool ah, kaas oo ah inuu diiday fashilaadii dhacday inuu ku qalbi jabo, wuxuu ahaa nin adkeysii badan oo xigmad leh, marka fashilaadii ku dhacday wuxuu ka dhigtay tijaabo uu kaga faa'iideysto noloshiisa dambe.

Waxaa hubaal ah in fikirkeena uu ku leeyahay raad weyn nolosheena guud ahaan iyo xitaa miisaankeena, waxaana xaqiiqadan caddeeyey aqoonyahankii cilmi nafsiga ee caanka ahaa una dhashay Ingiriiska ee la oran jiray Hi Hadfield, wuxuu ku sheegay kitaabkiisa la yiraahdo awoodda nafta ama psychology of power, sidatan; "waxaan tijaabiyey miisaanka saddex nin si aan u imtixaano siday maskaxdoodu u sameyneeyso miisaankooda, waxaan ku qiyaasay Diinimo Mitir, kaas oo ay dhammaantood labada gacmood ku qabsanayaan inta xoogooda ah, waxaan tijaabiyey saddex heer.

Tijaabadii koowaad, waxaan imtixaanay miisaankooda saddexdaa nin iyagoo dareenkoodu dhan yahay, ceceliska miisaankooda wuxuu noqday 101 Rodol. Tijaabadii labaad, waxaan seexiyey hurdada loo yaqaan maqnaadiis, waxaan maskaxda u geliyeey iney aad iyo aad u daciif yihiin oo ay tabar dhigeen, markaasuu celceliska miisaankooda noqday 29 Rodol, taasoo ka yar saddex u dhig meel ahaan miisaankoodii markii ay caadiga ahaayeen, saddexdooda midkood wuxuu ahaa cayaar yahan caan ah, marka la seexiyey ee loo sheegay

inuu daciif yahay wuxuu yiri; 'waxaan dareemay gacmaheygii oo yaraaday sida kuwa carruurta oo kale'. Tijaabadii saddexaad, iyagoo ku jira hurdadii maqnaadiiska ayaan maskaxda u geliyey iny aad u xoog badan yihiin, wuxuu markaa noqday celceliska culeyska miisaankooda 142 rodol. Taasoo macnaheedu yahay markii maskaxdoodu ka buuxsantay fikradda quwadda wuxuu kordhay miisaankoodii 500%, marka waa taa fikradda maskaxda inoogu jirta awoodda ay ku leedahay kartideena.

Si aan kuu siiyo fikradda maskaxdeena ku jirta waxaan halkaan ku soo gudbinayaa qiso la yaab leh, inkastoo ay dheer tahayna waan soo koobayaa; "habeen aad u dhaxan badan oo ka mid ah bisha Oktoobar, waxaa la soo garaacay guriga Webster oo aheyd afada nin Naakhuude ah oo howl gab ah oo ku noolaan jiray gobolka massachutee, waxaana soo garaacay haweeney dibjirad ah oon cid laheyn, markii Webster iriddii ka furtay waxay aragtay haweeney miskiinad ah oo harag iyo hilbo isku dhegen ah, waxay codsatay miskiinaddii in caawa la siiyo meel ay seexato, Webster way soo dhawaysay oo waxay ku tiri; soo gal anigaa ku nool gurigaan weyn ee ila deg, laakiin wax yar kadib waxaa soo galay Bill Alis oo ah ninkii qabay gabadha Webster oo ka yimid magaalo kale. Markuu arkay miskiinadda meesha fadhisa ayuu ku qeyliyey sodohdii oo uu ku yiri; "ma rabo gurigan inuu hooy u noqdo dibjir iyo miskiin" gabadhii miskiinadda aheydna bannaankuu u tuuray iyadoo uu da'ayo roob weyn, markaa miskiinaddii roobkii bay ku dhex oroday.

Dhinaca la yaabka leh ee qisadan waxaa weeye in gabadhii miskiinadda aheyd ee guriga laga eryey ay fikradeedu saameysay dunida oo dhan in ka badan haweeney kasta oo dunida ku nooleyd waxa loo yaqaan 'ururka cilmiga masiixiga'.

Haweeneydaas waxba kamay aqoon nolosha, waxaan ka aheyn gaajo iyo cudur, ninkeedii hore wax yar kadib guurkeedii ayuu dhintay, ninkeedii labaadna wuu ka dhuuntay isagoo la saaxiibay naag nin leh, markaas ayaa meydkiisii laga helay buur xun, waxay laheyd hal wiil,

laakiin markii ay korin kari weysay gaajo iyo cudur dartood bay dad kale siisay, dib dambana uma arkin. Marka haweeneyda jirooleyda aheyd waxay isku shuqlisay in awoodda caqliga wax lagu daweeeyo. Waxaa dhacday maalin iyadoo magaalada war wareegeyso inay kuftay, markaas baa xubnaha dhabarka wax ka gaareen oo ay miyir daboolantay, waxay filayeen takhtarradii inay hore u dhimaneeyso ama xubnaha dhabarku qalalaan, marka iyadoo Marry Beaker ku jiipto sariirta isbitaalka ayey furtay kitaabka muqadaska ah, markaas baa Ilaahay ku hanuuniyey inay akhriso qisadan.

"waxaa loo keenay Nebi Ciise qof qalal qaba, wuxuu ku yiri kakac, qaado gogoshaada oo aad gurigaada", wuu ka kacay ninkii oo meeshii buu lugihiisa kaga dhaqaaqay. Marry Beaker waxay siisay qisadii iimaan iyo awood waxay ka kacday gogoshii, waxay ku lugeysay qolkii dhexdiisa, tijaabadan waxay ku baraarujisay Marry iney nafeeda iyo dad kaleba ku daweyso ducadaan, waxay heshay kalsoonaan, waxay rumeysatay in cudurkeedu ahaa oo keliya wax maskaxdeeda ku jira, markii ay maskaxdeedu ka buuxsantay fikrad caafimaad iyo xoog leh waxay noqotay qof caafimaad qaba oo xoog leh, waxaa laga yaabaa inaad tiraahdo Dale Carnegie wuxuu noqday nin faafiya cilmiga masiixiga, laakiin runtii ma ahi nin raacsan cilmigaa isaga ah, hase yeeshee marka uu cimrigeenu kordho raad ayey firkadeenu ku leedahay awooddeena iyo shaqadeena.

Waxaan aqaanaa rag iyo haween badan oo awood u heli karayo inay iska fogeeyaan welwelka iyo walbahaarka, kuwaasi waxay awood u heli lahaayeen inay noloshooda u beddelaan sacaado iyo caafimaad, haddii ay afkaartooda saxaan, wax badan baan soo jeediyey tijaabooyin ah in fikradaha badan ay keenaan caafimaad.

Waxaa ku dhacay isbedel fikradeed oo noloshiisii saameysay mid ka mid ah ardayda machadkayga oo lagu magacaabo Frank Hoyal oo ka tirsan degmada Sant Bale, waana tan qisadiisii isagoo ka sheekeynaya;

"waxaan ka walbahaari jiray wax kasta, gaar ahaan xagga dhuubnaanteyda iyo timaheeyga oo daadan jiray, waxaan ka cabsi

qabay inay I diido gabadha aan rabay inaan guursado, waxaan u maleyn jiray inaan boog-caloolleed qabo, walbahaarkii baa iga batay, shaqadii waan wadi kari waayey, markaas baan ka tagay, laakiin walaacii waa igu sii kordhay ilaa aan u ekaaday dheri karaaya oo aan laheyn meel uu ka neefsado oo ku dhow inuu qarxo, waxaa igu dhacay jirrooyin xagga neerfaha ah oo iga takooray dadka, waan kari waayey inaan cid la hadlo xitaa qoyskeygii, waxaan xukumi waayeey fikradaheygii, wax walba waan ka baqi jiray, markaan cod maqlo argagax baa igu dhici jiray, dadkii oo dhan baan ka dheeraaday, sidaan u joogo baan oohin la dhici jiray sabab la'aan, ayaamaheygii oo dhan waxay noqdeen kuwo imtixaan igu noqday, waxaan dareemay in dadku dhammaan iga cararayaan, xitaa naxariista llaahey waan ka quustay, waxaan ku fekeray inaan webi isku tuuro.

Ugu dambeyntii waxaan goostay inaan u dhoofa gobolka Florida, intaan webi isku tuuri lahaa, si aan u soo hawo gedisto, markaan tareenkii fuulay baa aabahay iga daba yimid, wuxuu ii dhiibay baqshad xiran, wuxuu igula dardaarmay in aanan furin ilaa aan ka gaaro Florida, markaan gaaray waxaan la kulmay waqti ay magalada ka buuxsamaan dalxiisayaal, waxaan ka waayey qol aan kireysto, ugu dambeyntii waxaan qol ka kireystay garaash baabuurta lagu xareeyo, waxaan shaqo ka helay markab xamuulka qaada, laakiin waan wadi kari waayey shaqadii, markaas baan war wareegi jiray xeebta magaalada, waxaan la kulmay ciriiri iyo dhibato ka badan tii igu heysatay magaaleyda.

Waxaan furay baqshadii aabahay I siiyey, waan akhriyey waxayna u qorneyd sidatan; "wiilkeygiyow hadda waxaad ii jirtaa 500 mayl, inkastoo aad sidaa iiga fogaatay hadana wax isbedel ah ma heysid, sababtoo ah waxaa kula socda socotadaa dheer sheygii keliga ahaa ee dhibaataada kuu soo jiiday oo aan kaa harin, kaasoo ah naftaada, kuma heyso jirro jirkaaga iyo caqligaaga ah midna, waxa dhibaataada kuu geystay oo dhan oo jirrada kugu riday waa fikradaha maskaxda kuugu jira, qofku waxa uu noqdaa waxa uu ku fekerayo, hadduu qofku ku fekero jirro waa u jirranayaa, marka haddaad garato daawadaada oo ah

inaad fikradaada beddesho isaga soo noqo gurigaada, markaas waad caafimaadaysaa".

Warqaddii aabahey aad bay ii caro gelisay, maxaa yeelay kama sugayn waano iyo wacdi ee waxaan ka sugayey naxariis iyo garowsho, caradii waxay I gaarsiisay inaan go'aansado in aanan kuba noqon gurigeenii, anigoo habeenkaa jidadka iska war wareegayo ayaan la kulmay gole dadka lagu wacdinayo, waan iska fariistay si aan wax uga dhageysto wacdiga iyo waanada, waxa khudbadu cinwaankeedu ahaa; "ninkii naftiisa ka adkaada ayaa ka qiimo badan ninkii magaala dhan furta". Hadalada khudbadda waxay u dhowaayeen kuwii baqshadda aabahay I soo siiyey ku qornaa, laakiin ereyada khudbadda way ku dhibceen nafteyda, waxaa iga ba'ay gadoodkii caqligeysa ku daboolnaa, waxaan bilaabay inaan u fekero si miyir leh.

Markii igu horeysay intaan dunida joogay waxaa ii suurta gashay inaan fahmo nafteyda iyo xaqiiqada, waxaan isku arkay inaan doonayo inaan dunida oo dhan iyo waxa korkeeda ah beddelo, sida runta ah waxaa in la beddelo uun u baahnaa fikirkeyga iyo maskaxdeyda, todobaad kadib waxaan ku soo noqday gurigeenii, waxaan dib u bilaabay shaqadeydii, dhowr bilood ka hor aan ka tegay, waxaan aroosay gabadhii aan jeclaa ee aan ka baqan jiray inay I diido, hadda waxaan ahay Aabbe qoys weyn madax u ah oo ka kooban shan wiil iyo hooyadood, Ilaahey waa ii naxariistay xag dhaqaale iyo caafimaadba, wuxuu iga saaray dhibaatooyinkii I heystay markii aan jirranaa.

Waxaan ahaa Ilaaliye madax u ah 18 shaqaale, maanta waxaan madax ka ahay warshad waraaqaha soo saarta, waxaan xukumaa 4,450 shaqaale ah, hadda waxaan qadariyaa qiimaha nolosha iyo nimcada Ilaahey I siiyey, haddii ay ila soo gudboonaadaan wax walbahaar ii keeni kara waxaan nafteyda ku iraaahdaa 'adkayso si miisaan leh u feker maskaxdaada toosi wax walba way hagaagi doonaane'.

Hadda nafteyda waan xakameeyaa markii ay igu soo dhacdo cudurka neerfaha, maxaa yeelay waxaan ka bartay cashar I anfacy nolosheydii intii markaa ka dambaysay, kaas oo ah inaan fahmay sida caqligeenu u

hogaaminayo jirkeena, sidoo kale waxaan ogaaday inuu xaq ii sheegay aabahay markuu yiri; 'inaan qabo jiro xagga fikradda maskaxdeyda ah oo keliya, dawadeeduna tahay inaan si fiican u fekero' halkaas buu ku dhamaaday imtixaankii cadaabayey Franka Hoyelo.

Hadaba haddii aad akhrisay qisadan waxay ila tahay inaad ku qanacday in caafimaadkeena caqligeena ku raaxeysiga nolosheenna iyo qiimeynta nimcooyinka Ilaahey inoogu deeqay inaanay ku xirneyn waxaan heysano iyo waxaan nahay xaqiiqo ahaan, ee ay ku xiran yihiin toosinta fikradaha maskaxdeena ku jira iyo siday u caafimaad qabaan oo keliya, waxaan tusaale u soo qaadan karnaa nin la ora jiray Joh Brown oo lagu xukumay in lagu daldalo Gobolka Virginia, kadib markii lagu eedeeyey inuu dadka madow ku kiciyey dadka cadcad, markii la geeyey meeshii lagu daldalayey aad buu u kacsanaa, walaac iyo weji xumo ayaa ka muuqatay, laakiin John Brown intuu indhaha ka buuxsaday buurihii ku xeeranaa magaalada Virginia ayuu yiri; "ila qurux badnaa buurahan inaan daawado, nasiib uma helin inaan daawado buuraha qurxoon", wax cabsi ah ama argagax ahna kama qabin daldalaadda.

Sidoo kale nin la oran jiray Robert Falcon iyo koox uu watay oo u dhalatay dalka Ingiriiska ayaa u socoteyey cirifka koonfureed ee dhulka waxaanay aheyd socodaalkii ugu dhib badnaa ee dad socoteeyo. Waxaa ka dhammaaday sahaydii, shidaalkii iyo qalabkii kale, waxaa ka hor yimid dabeylo baraf leh oo xoog badan oo aan kala go' laheyn, muddo dhan 11 haban iyo dharaar ah, markaa Robbert iyo saaxiibadiis waxay xaqiiqsadeen in aanay mowd ka badbaadeyn, waxaanay wateen sun marka la cabo dadka hurdo ku riddo, taasoo mar dambe laga kaceyn, laakiin may isticmaalin suntii oo waxay dhinteen iyagoo heeso macmacaan isku maaweelinayo, waxaa lagu ogaaday dhimashadoodii warqad laga helay jirkoodii barfku qalajiyey, waxaana helay koox sidooda oo kale meshaa socoteynayey 8 bilood kaddib.

Marka haddaan maskaxda gashano fikradaha wax curinta geesi gelinta iyo xasiloonaa waxaan awoodi karnaa inaan ku raaxeysanno ilbiriqsi kasta oo nolosheena ka mid ah, xitaa haddii nafteena loo

hogaaminayo xariga daldaaladda, ama aan ku dhex dhimanayno dabeylaha barafka ah ee ka dhacayo cirifka koonfureed ee dunida, ama aan ku jifno firashkii mowdka, waxaa si run ah u caddeeyey xaqiiqadan mar laga joogo 30,000 sano ka hor gabyaagii indhaha la'aa ee caanka ahaa ee lagu magacaabii jiray Milton, wuxuuna ayiri; "Caqligu wuxuu awoodi karaa isagoo meeshiisa taagan inuu Naarta Janno u beddelo ama Jannada Naar u beddelo", ereyadan Milton waxay ku rumoobayaan dad badan oo nimcadoodii cadaab u beddelay, waxaana ka mid ah Nepeleon iyo Hillon Killer, waana tan qisadoodii.

"Napelon wuxuu awooday inuu helo wax allaale wixii aadami u hanqal taago sida magac, sharaf, weji wanaagsan, boqornimo iyo wax kastoo qofku rabo, inkastoo uu sidaa ahaa hadana waxaa laga soo weriyey isagoo ku xayiran Jasiiradda Santa Hilana, inuu yiri 'ma dhadhamin nolosheyda sacaado dhab ah, muddo lix maalmood ah oo isku xigta, sidoo kale Hillon waxaa laga soo weriyey iyadoo indhaha iyo dhegahaba beeshey inay tiri; "sida runta ah waan ku raaxeystay nolosheyda, waana ku nimceeystay quruxdeyda".

Haddaan dib ugu noqdo nolosheyda nus qarnigii aan noolaa waxaan ka bartay waxa ugu weyn hal shay oo ah 'ma jiro wax awood kuu siinayo raaxo iyo kalsoonaan oo naftaada aheyn', marka aan hadalkaa leeyahay waxaan soo xiganayaa erayadii Emerson maqaal fiican oo uu ka qoray kalsoonaanta nafta, waana kan maqaalkii; "waxaan kugu waaninayaa inaad sacaado dhab ah ka filan meel ka baxsan naftada, sida guul siyaasadeed oo aad gaartay, xoolo badan oo kuu kordhay, nin qaali kugu ah oo cudur ka bogsaday, ama saaxiib aad jeceshahay oo meel fog ka soo noqday sababtoo ah waxaa ka sacaado weyn waxyaabahaas oo dhan naftaada".

Wuxuu nooga digay Ibketi Toes oo ah Feylasuuf riwaayadaha sameyn jiray in lagu kadsoomo arrimaha naftaada dibedda ka ah, wuxuuna yiri; "in laga xoreeyo caqliga fikrooyinka qaldan ayaa ka nafci badan in laga gooyo jirka burooyinka ka baxa", digniintan wuxuu bixiyey Ibketi Toes mar laga joogo 19 qarni, inkastoo ay waqti dheer ka soo wareegtay hadana cilmiga caafimaadka ee cusub wuu taageerayaa ereyadaas,

waxaa caddeeyey Dr. H. Cabtea, markuu yiri; "shantii qof ee jirran ee la keeno isbitaalka Johnes Hope Knz waxay afar ka mid ah ka sheeganayaan cudurrada jirkooda ku jira oo ay sababeen neerfayaashooda oo kacsan ama cadaadin gudaha ah, Waxaana suuragal ah in cudurradaas ka dhasheen guud ahaan fashilaad ka dhalatay markuu qofku is waafajin kari waayey waxay naftiisu dooneyso iyo mashaakilka ama baahida ka hor imaaneysa.

Faylasuuf Faransiis ah oo la oran jiray Mountun ayaa mabda' ahaan uga dhigay nolsohiisa ereyadan, "qofka ma dhibaana dhacdooyinka, waxaase dhiba sida uu u qiimeeyo ama uu u qadariyo dhacdooyinkaas" qiimeynta dhacdooyinka waa arrin qofka u gaar ah isagoo dhacda kasta u qiimeynaya siduu isagu u arko.

Akhristayaasha sharafta leh ma waxay u maleeynayaan inaan ku waaninayo markii ay ku dhacaan masiibooyinka xididdada ee neerfayaasha gadoodaan oo wadnuhu gilgisho ee jahawareer ku dhaco inay tahay howl adiga kuu gaar ah oo kuu taal, sidaad u banneysan laheyn albaaab aad uga baxdo? Maya sidaa uma jeedo baan ku leeyahay, fasalkan waliba waxaan kuu caddeynayaa sidaad u heli laheyd albaab toosan, waxaan ka soo minguuriyey mabda'aan Wiliam Jemes oo caan ku ah cilmi nafsiga, wuxuuna yiri; "waxaad moodaa in dadku qabaan in ficilku ka dambeeyo dareenka, laakiin sida runta ah ficilka iyo dareenku waa wada socdaan, iskumar bayna dhacaan, taasoo ah haddii aan ficilka xukumo isla markaana in aan si dadban uga adkaaneyno dareenka, ficilku wuxuu u hogaansan yahay rabitaankeena ama amarkeena markaan ficil falno waxaa raacaya dareenkii isla markiiba".

Haddii si kale loo sheego wuxuu u jeeday Wiliam inuu yiraahdo; "ma awoodi karno inaan wax ka beddelno dareenkeena, laakiin waxaan beddeli karnaa ficilkeena, waayo haddii aanu ficilka beddelno waxaa is beddelaya dareenka". Wuxuu intaa ku daray; "jidkaasina waa kan ugu dhow ee sacaadada ku geynaya". Waa inaad is yeelyeesho ood isu muujiso inaad sacaado iyo baraare ku jirto, markaa sacaadada iyadaa ku soo aadaysa iyadoo socota, haddaba tijaabi hadda mabda'aan ficil

beddelelidda ah si dareenku isu beddelo, wejiga furfur, ilkaha caddey oo muusoo, ku dhawaaq ereyo macmaan leh ama duco iwm. Marka fiiri sida dareenkaasi isu beddelo, waxaad ogaan doontaa haddaad tijaabadan sameyso inaan wejigaagu kaduudmeyn ama afkaagu murugo la xirmeyn, marka isku dhib inaad sacaadada naftaada u abuurto.

Waaxaan aqaanaa haweeney reer California ah oo aan magaceeda sheegeynin, waxay awoodi kartay inay ciriiriga iyo tiraanyada iska baabi'iso muddo 24 saac gudahood ah, haddii ay raacdo mabda'a soo socdo qisadeediina waa tan.

"waxay aheyd haweeney garoob ah oo ninkeedu lacag uga tegay, taasoo ay ka heshay ceymiska naftiisa, waxay laheyd wiilal iyo gabdho reero leh, aqal weyn ayey keligeed ku jirtay, haddii aad salaanto ama aad tiraahdo '*xaalkaaga ka warran*', waxay ku jawaabeysaa '*waan iska roonahay*', iyadoo wejiga kaduudeysa indhahana ka ashtakooneysa, marka loo fiirsado hadallada iyo xaaladda ka muuqata waxaad moodaa inay leedahay maxaad iigu diganaysaa adigoo arkaya murugada iyo shalaaytada aan ku jiro, maxaad hortayda ugu muujineysaa farax iyo sacaado, waxay ka sheeganaysaa nimanka gabdhaheeda qaba qalafsanaanta iyo naxariis darrada ay qabaan, waxay ka sheeganaysaa gabdhaheeda in aanay haddiyado u keenin, iyaduna aanay u baahneyn, kana xoolo badan tahay.

Sida runta ah haweeneydaasi nafteeda iyo qoyskeedaba waxay u soo jiidday dullinimo, ciil iyo ciiri, waxaa laga yaabaa inay jiraan kumanyaal haween ah oo iyada ka sii daran, waxaa nasiib darro ah iyadoo awood u leh inay nafteeda beddesho oo ay ka dhigto marwo la jecel yahay oo dhaqan wanaagsan oo qiimo ku leh qoyskeeda iyo deriskeeda inay six un ku dhameysato nolosheeda, waxa qura oo ay u baahan tahay inay iska doondoonto farax, iyadoo qalbigeeda u fureysa jeceylka dadkeeda, intey canaan iyo calaacal kaga hor tegi laheyd.

Waxaa kale oo aan aqaan nin lagu magacaabi jiray H. G. Englerto, wuxuu sabab uga dhigayaa noloshiisa wanaagsan inuu fahmay ku

dhaqanka sirta mabda' beddelka ficilka si dareenkuna u beddelmo, waana tan qisadiisii; "mar laga joogo toban sano ayaan jirraday, waxaa igu dhacay kelyo xanuun, waxaan tijaabiyey dhammaan takhtarradii la yaqiin iyo quraafaad oo dhan, wax daawo ah ma helin, waxaa haddana igu dhacay dhiig-kar, markaan u tegay takhtarkii wadnaha wuxuu ii sheegay in xaaladeydu halis tahay, heerka dhiig karkuna uu gaaray 214, korna u sii socdo. Waxaa la igula taliyey inaan u diyaar garoobo qaabilaadda mowdka, markii aan gurigii ku soo noqday, waxaan kala hagaajiyey wixii xuquuq la igu lahaa iyo wixii aan dadka ku lahaa, markaas baan Ilaah weydiistay cafis iyo demi dhaaf, wixii aan dembi hore u galay, kadib waxaan isu dhiibay qulub iyo tiiraanyo, nafteydii afadeydii iyo ehelkii oo dhan baan ciriiri geliyey, waxaan ku dhex dhacay bad shaqaabadnimo, hami iyo qami ah.

Iyadoo xaalku sidaa yahay ayaa si kedis ah waxaa iigu soo dhacay fikrad cusub, waxaan is iri 'adigu si doqonimo ah ayaad u dhaqmeysaa, waxaa laga yaabaa in aadan sanadkan oo dhan dhiman, sidaas darteed, maad sacaado iyo naxariis ku noolaatid, inta cimrigaaga kaaga dhiman, garbihii baan gilgilay, waan ilka caddeeyey, qosol baan iska doon-doonaay, waxaan iska yeelyeelay sidii nin sacaadadii dunida oo dhan gacanta loo geliyey'.

Sida runta ah maalmihii hore aad baan ugu dhibaatooday iska doondoona ka sacaadada, laakiinse waan akeystay, waxaana isku qasbay inaan ahaado nin faraxsan oo weji furan, isla maalintii waxaan dareemay caafimaadkeyga oo soo hagaagaya, hadda waxaa ka soo wareegtay bilo badan markii takhtarku ku qiyaasay in ciidda la igu duugi doono, maantana waxaan dareensanahay farax, reynreyn iyo caafimaad buuxa, waan ka bogsaday dhiig-karkii, waxaan hubaa in saadaasha takhtarku rumoobi laheyd haddii aan u hogaansami lahaa walbahaarka iyo cabsida, laakiin isbedelkaas wuxuu ku yimid Ilaahey inta ka sokeysa markaan fikrad caafimaad qabta maskaxda gashaday oo aan ficilkeygii beddelay, ayaa dareenkii jirradana caafimaad u beddelmay, marka haddii iska doondoona ka sacaadada iyo ku fekerka caafimaadkka ay badbaadisay ninkii H. G. Ennglerto ahaa ee aanu soo sheegay, innagu maxaan ugu samreynaa weji kaduudka iyo

tiiraanyada, maxaan nafteena iyo tan dadka inala nool aan murugo iyo xirxirnaan ugu sababeynaa, inagoo awoodi karno inaan u soo jiidno sacaado iyo farax, taasoo ku xiran oo keliya inaan iska yeelyeelno sidii dad liibaansan oo barwaaqeysan?".

Mar dhowr sano laga joogo waxaan akhriyey kitaab yar oo la yiraahdo "sida aadamigu u fekeru" oo nafteyda ku reebay raad aan tirmeyn, waxaa ka mid ahaa waxyaabihii ku qornaa' "marka dadku beddelo fikradiisa xagga dadka ama sheyga wuxuu arki doonaa in dadkii iyo sheygiiba isbeddeleen, si waafaqsan isbeddelka fikirkiiisa, Ilaaha awoodda leh ee nafteena rakibay wuxuu ku dhex abuuray karti iyo awood aan xad laheyn oo u wanaagsan aayatiinkeena, taasoo la soconeysa fikradaheena iyo hadba siday u jiheysan yihiin, waxa uu qofku falayo, waxaa natiijooyinkaas qofka ugu dhasho fikradaha maskaxdiisa ku wareegaya oo ah sida qofka fadhiya u kaco kan ordayana isu taago, kan taagana uu howlaha u qabto isagoo ka amar qaadanayo fikradihiisa, sidaas oo kale ayuu qofku u jirjiranayaa ama u fayoobaanayaa, sida hadba fikradaha maskaxdiisa ku wareegaya ay yihiin.

Ilaahey wuxuu aadamiga u wakiishay kuwa intifaaca waxa dhulka korkiisa ah, wuxuuna uga dhigay hayn, taasina waa nimco weyn, laakiin waxaa la ina amray inaan nafteena ka adkaano, caqligeenana u jiheynto wixii na anfacyo kana dheeraano wixii ina dhibaya, marka waa ineynu u halganaa si aan ugu noolaano farax, xasiloonaan iyo sacaado, taasoo ah inaan raacno fikradda fayow ee inoo hogaamineysa jidka sacaadada, inaan maskaxdeena ka buuxino, sida awgeed waxaan halkaan ku soo gudbinayaa waanooyin laga soo minguuriyey nin la oran jiray Sybil Epartridge, cinwaankeeduna waa tan; "maanta oo qura ayaan ku noolaanayaa sacaado iyo baraare", sida laga weriyey Abraham Linclon.

1. Dadka badankiisu waxay ku waa bariisanayaan farax iyo reynreyn, haddii ay sidaa niyoodaan oo ay saafi ka dhigtaan qalbigooda, sacaadada waxay ka imaaneysaa qofka gudhihiisa ee maaha wax dibadda kaga imaanaya.

2. Maanta oo qura ayaan iswaafajinayaa nafteyda iyo dhacdooyinka jira, iskuna shuqlin mayo inaan iswaafajiyo rabitaankeyga iyo shey kasta oo kale, waxaan ku raalli noqonayaa ehelkeyga, shaqadeyda, nasiibkeyga iyo wixii Ilaahey ii qoray.
3. Maanta oo qura waxaan ku dadaalayaa dhisidda jirkeyga, waan dhowrayaa, waan leylinayaa, waan quudinayaa, mana xumeynayo, mana dayacayo ilaa uu ka noqdo aalad daacad ah oo gacanteyda ku jirta.
4. Maanta oo keliya waxaan isku deyayaa inaan caqligeyga edbiyo, waxaan akhrinayaa casharo u baahan dadaal weyn, waxaana ku dadaalayaa inaan si fiican u fahmo, waxaana baranayaa wax nacfi leh.
5. Maanta oo keliya ayaan nafteyda nadiifinayaa, dad baan samafal u fidinayaa, anigoon u sheegin qofka aan ahay, waxaan sameynayaa labo ficil oo aan nafteyda raalli ka aheyn si aan ugu qasbo waxyaabaha ay dhibsaneyso.
6. Maanta oo qura ayaan isku dayayaa inaan ku kabo howsheyda nolosha maanta, iskuna wada keeno mashaakilka nolosheyda waxaa ii suuroobi kara, inaan fuliyo arrimo waaweyn muddo 12 saacadood ah oon hadda dib u dhigid laheyn lagana yaabo iney igu adkaan lahaayeen.
7. Maanta oo keliya ayaan nafteyda qorshe u dejinayaa, waxaan qorayaa wixii aan howl isu geeyey, waxaa laga yaabaa maanta inaan ku socon kari waayo qorshaha aan dejistay, laakiin kolley waan iska qorayaa si ay ugu yaraan iiga badbaadiyaan labo arrimood oo kala ah:
 - a. Degdega
 - b. Ismaqiqa
8. Maanta oo keliya ayaan nafteyda gooni la noqon doonaa muddo nus saac ah, waxaan u jeedinayaa fekerkeyga, xagga ilaahey iyo aayadaha ku tusinaya awooddiisa iyo siduu iigu nimceeyey.
9. Maanta oo keliya ayaan ka fogaanayaa cabsida ah inaan ku hoogo ama aan ku guul darreysto nolosha, waxaan ku raaxaysanayaa waxyaabaha fiicfiican ee aan heli karo, waxaan ku qancinayaa nafteyda in dadka aan la dhaqmayo I jecel yihiin sida aniguba aan u jeclahay.

Haddaba haddii aad rabtid inaad maskaxdaada gelisid fikrado fayow oo sacaado kuu soo jiida raac qaacidada Lamb, 1-aad "u feker si sacaado iyo farax iska doondoona ah, waxaad arki doontaa ineey sacaadadu gacanta kuu soo gasho".

QEYBTA LABAAD

QOFNA HAKA SUGIN MAHADNAQ

Waxaan kula kulmay walaalayadda Taxes nin ganacsade ah oo caro darteed sida dheriga u karaya, waxaa la ii sheegay inuu iiga warrami doono sababta uu la caroonayo, wax yar kadib la kulankeygii wuxuu iiga sheekeeyey sababta uu la careysan yahay, waxayna aheyd qisadiisii sida tan: "mar laga joogo 11 bilood ayuu ugu deeqay 10kun \$ shaqaalihiisa oo dhammaa 33 qof, wuxuu helay qof kasta qiyaastii 303 doollar munaasabaddii ciidda mowliidka" laakiin waxaa dhacday inaan qof shaqaalihiisii ka mid ah laga maqal wax mahadcelin ah, oo qof kasta intuu lacagtii jeebka ku ritay uu iska dhaqaaqay, wuxuu igu yiri ninkii carada la karayey; 'waan ka tiiraanyoonayaa sent kasta oo aan siiyey dadkaa abaal laawayaasha ah' waxa uu yiri Confucius; 'qofka careysan waxaa ka buuxa sun', marka ninka aan la kulmay sidaas bay uga buuxday waabaay, aad baana uga naxay xaalkiisii.

Wuxuu ahaa 60 jir, waxa uga dhinaa noloshiisa 14 ama 15 sano siday qiyaaseen sharikadaha ceymiska, inkastoo uu sidaa ahaa haddana wuxuu iska dhumiyey hal sano oo ah cimrigiisii yaraa ee dunida uga harsanaa isagoo ka tiiraanyoonaya amar dhacay oo la soo dhaafay.

Wuxuu awoodi karay ninkasi intuu ceeb iyo calool xumo u dhimanayo inuu is weydiyo sababta uu uga waayey shaqaalihiisii hal qof oo u mahad naqa?, maxay uga abaal ka dareen hibadiisa? Waxaa la arkaa inuu ogaan lahaa inaanu oofin xaqoodii ay mushaqaayadda ugu lahaayeen, ama uu ku kallifay howl aanay qaadi kareyn, ama ay iyaga la noqotay inay xaqal-ciidka muteysteen, ama uu six un oo kibir iyo isla weynaan ah ula dhaqmay oo ay ku dhici waayeen inay u mahad naqaan, ama ay la noqotoay inuu siiyey hibo u dhiganta inta canshuur ahaan looga qaadan lahaa oo ay mar kastana lacagtaasi ka bixi laheyd jeebkiisa.

Hadii dhan kale laga fiiriyo waxaa suuragal ah in shaqaalahaasi ahaayeen dad asluub xun ama ay jireen waxyaabo kale oo aanan waxba ka ogeyn. Waxaase jirta in Dr. Somvel Johnson yiri;

"mahadnaqu waa miro ku bislaada dadaal iyo xeel dheeri oo keliya, sidaas awgeed dadkoo dhan lagama wada helo waana midaas ujeedada aan u socdaa".

Marka ninkani wuxuu sameeyey gef, maxaa yeelay wuxuu ka fishay dad inay u mahadnaqaan taasina waxay ina tusineysaa inuu jaahil ka ahaa dabeecadda aadmiga. Haddii aad badbaadiso qof noloshiisa ma ka sugeysaa mahadnaq iyo abaal gud? Adigu waad ka sugi kartaa laakiin Somver Liebowert oo Garyaqaan ahaa kadibna Garsoore noqday wuxuu badbaadiyey 87 qof oo loo heystay in lagu dilo kursiga korontada, meeqaad u maleyneysaa inay u mahad celiyeen ama u soo diray hambalyo jawaabtu waa qofna.

Wuxuu ka daweeeyey Nebi Ciise toban qof cudurka qalalka hal galab, imisaad u maleyneysaa inay u mahad naqeen? Hal qof baa u mahad celiyey, sagaalkii kale way iska dhaqaaqeen iyagoon xitaa macsalaama dhihin. Wuxuu ka sheekeeyey Charles Shubab inuu mar badbaadiyey sarkaal ka shaqeeya bangi oo lacagi ku fakatay, wuxuu siiyey lacagtii ku dhuntay siddaasuu kaga badbaadiyey xabsigii, ma kula tahay in sarkaalkii mahad celiyey? Markii hore waa u mahad celiyey, laakiin wax yar kadib wuu ku gaddoomay, markaasuu ku furay caay iyo dacaayad. Haddii aad siiso qof qaraabadaada ah malyan \$ maka sugaysaa abaal gud? Wuxuu siiyey Andrew Carneige malyan \$ nin qaraabadiisa ah, laakiin haddii uu Andrew uu xabaasha ka soo bixin lahaa, wuxuu la kulmi lahaa ninkii uu siiyey Maylan \$-ka oo dacaayadeynaya oo lacnadaya, sababtu waxay tahay Carneige wuxu ugu deeqay 365 malyuun oo \$ urur samafal ah.

Dabeecadda aadamiga waa tii hore oo ma beddelmayso weligeed, sida badan marka maxaan ceebaheeda wax uga qaadan weynay, maxaan ugu noolaan weynay runta sidii Imberadoorkii Roma Marws Aurelives ee ugu caqli badnaa Boqorradii Rooma, waana ninkii maalin ku qoray xusuus qorkiisa; "waxaan la kulmi doonaa maanta dad daneystayaal ah abaal ka darayaal ah, laakiinse waxaasi iga argagixin mayaan igana careysiin mayaan, maxaa yeelay ma maleysanayo in la heli doono duni ka maran", marka maxaan uga murugoonayaa caasinimada iyo abaal ka darka ku dhex faafsan dadka? Waa dabeeci in dadku ilaawaan

waajibka mahadnaqa, haddii aan filano oon sugno mahadnaqa, waxaa dhab ah inaan nafteena dhibaato aan loo baahneyn u soo jiiideyno.

Waxaan aqaanaa haweeney reer Newyork ah oo weligeed ka sheeganeysa inaan qaraabadeedu u wehel yeeleyn waana loo cudurdaari karaa dadkaas, maxaa yeelay haddii aad soo booqatid haweeneydaas waxay ku tebineysaa waqti dheer waxay u qabatay gabdho ay habaryar u tahay, markii ay carruurta ahaayeen, siday ugu soo jeedi jirtay markii ay jiradaan iyo siday u xanaaneyn jirtay oo ay midood ugu dartay dugsi ganacsi, tan kalena ugu guurisay, marka gabdhihii marmar bay ugu yimaadaan booqasho iyagoo dareensan in waajib saaran yahay, hase yeeshee way kahanayaan booqashadaas, maxaa yeelay uma adkeysan karaan calaacalka iyo canaanta habaryartood.

Markii Islaantii ka quusatay wehelkii gabdhaheeda ayuu ku dhacay wadno xanuun, waxay yiraahdeen takhtarradii "waxay leedahay qalbi neerfis ah oo daawo uma heynta" waxay u jirraneyd run ahaan waa jaceyl tixgelin iyo xanaano, laakiin waxay iyadu ku magacaabeysaa mahadnaq, marka haweeneydaasi ma heleeyso jaceyl marba hadday iyadu raadineyso oo ay sugeyso, laakiin waxay heli doontaa markii ay ka joogsato raadintiisa oo ay dadka siiso kalgacal iyadoon abaal ka sugeyn.

Ma kula tahay inaan kuu soo gudbinayo waanooyin iyo wacdi kale? Maya waxaan kuugu yeerayaa waa hab ficiil ah oo awood inoo siinaya inaan garano sacaadada aan dooneyno, waxaan u soo joogay habkaas oo lagu liibaanay qoyskeyga dhexdiisa, waxaa dhacday in aabahay iyo hooyadey aad u jelaayeen inay u naxariistaan dadka baahan, inkastoon sabool aheyn oon deyn badan qabnay, haddana waxay u diri jireen hibooyin sanad kasta guriga agoonta lagu xanaaneeyo ee magaalada Iowa, labadeyda waalid midna sooma booqan jirin meesha ay lacagta u dirayaan, waxaanay u dhowdahay inaan qofna uga mahadcelin hibadooda, haddana waxay ka heli jireen farax iyo sacaado deeqdaa ay bixinayaan, iyagoo qofna ka sugeyn abaalgud iyo mahadnaq toona.

Markii aan weynaaday ee aan ka tagay gurigii, waxaan ka caado yeeshay inaan u soo diro waalidkey xoogaa lacag ah, waqtiga ciiddu soo dhowaato, si ay naftooda ugu raaxeeyaan, lakiin isuma ay quuri jirin, maxa yeelay markaan u imaado ayey iiga sheekeyn jireen alaabtii kala duwaneyd ee ay u gadeen dadka tabaaleysan oo la deggan tuulada, aabahay iyo hooyadey waxay la dhici jireen farax marka ay deeq bixiyaan, iyagoon abaalgud cidna ka sugeyn, waxaan u maleynaya in aabahay ku sifoobay tilmaamihii uu sheegay Aristotal, kuna tilmaamay qofka wanaagsan ee nin doorka ah oo aheyd 'Ninka wanaagsan waa ka helaa sacaadad markii uu u samafalo dadka kale, laakiin wuxuu dareemaa hoog iyo quursi marka isaga loo samafalo' waxaa ka mid ah calaamooyinka gobanimada in qofku wanaag sameeyo, halka calaamadaha liidnimada ay ka mid tahay in qofka loo samafalo, marka haddii aanu dooneyno sacaado aan ka dheeraano inaan sugno mahadcelin iyo abaalgud, waa inaan wax u bixino Ilaahey dartii oo keliya.

Qarnigii is daba joogay ee la soo dhaafay weli waalidiintu waxay ka tiiraanyoodaan caasinimada carruurtooda, wuxuu ka sheekeeyey Shekispear Boqor lear inuu yiri; "waxaa ka xanuun kulul qaniinyada abeesada halista ah caasinimada carruurta", laakiin maxaa ku xambaaray carruurta caasinimada? Yaase mas'uul ka ah caasinimada Caruurta? Waxaa laga yaabaa in waalidiintu aanay ku barbarian carruurta xaquuqda lagu leeyahay, marka sidee bay caruurta dadka ugu mahad naqayaan, haddii aan si quman loo ababin, ogow caasinimadu waa abuur dabeeci ah sida geedaha iska baxa oo kale, baarinimaduse waa ubax oo kale kuma baxdo waxaan nafaqo iyo waraabin ka aheyn, marka haddii aan la barbaarin caruurta siday dadka u samafalay ugu mahadnaqaan, sidee baan uga sugeynaa inay inoo mahadnaqaan? Waxaan xasuustaa in habaryartey Vicle Alexander tusaale wanaagsan u tahay haweeneydii ka sheeganaysay caasinimada caruurta.

Waxaan xasuustaa ilaa yaraanteydii in habaryartey Vicle ugu yeeri jirtay hooyadeed gurigeeda, waxaanay u soo dhoweyn jirtay si naxariis iyo kalgacal leh, sidoo kale waxay u yeeri jirtay sodohdeed, waxaa weli

ii sii muuqda labada islaamood oo ku kulaalaya dabka guriga habaryartey oo sheekeysanaya, waa dabeeci iney culeys ku hayaan Vicla, hase yeeshee marna lagama daremeyn wax jirdiid ah ama kahasho ah, maxaa yeelay way jecleyd, waxayna ku soo dhoweyn jirtay si kalgacal iyo qalabi furan ah.

Inkastoo ay laheyd lix wiil oo u baahan jaceylkeeda iyo xanaanadeeda waxa ku habboon in la xuso inaanay ugu muuqan habaryartey inay samafalkeeda ku muteystay mahadnaq iyo abaalgud.

Hadda Vicle waxay noqotay garoob muddo laga joogo 20 sano waxay leedahay shan wiil oo reer leh, mid waliba wuxuu doonayaa inay hooyaddii isaga la noolaato, wiilashooda aad bay u jecel yihiin, kamana dhergayaan arageeda, waxaasi maaha abaalgud ee waa jaceyl iyo xanaano ay hooyadood horay ugu abuurtay uguna barbaarisay samafalka, markii arrinkii isbeddalay ee ay hooyadood u baahatay xanaano iyo dhaqaaleyn ayey qalbigooda u fureen.

Waxaan ku celinayaa mar labaad si ay carruurta baarri u noqdaan waa inaan inagu u bilowno oon ku barbaarino siday dadka wax u tara ugu mahadcelin lahaayeen, waa inaan ku baraarugsanaano inay caruurta aad u dhego fiiqan yihiin, marka waa in la miisaamo erey kasta oo aan hortooda ka sheegayno, tusaale ahaan haddii aad quursaneyso haddiyad lagu soo diray ka digtoonow inaad tiraahdo carruurta oo ku maqlaya "bal fiiri hadiyadda ay ii soo dirtay heblaayo, ciidda wax qiimo ah malaha" hadalkaasi inagu waa inala fudud yahay, hase yeeshee carruurta waxay u dhegeysanayaan hadalkeena si xiiso leh, waana ku dheehmeysaa naftooda, marka waxaa fiican inaan niraahdo; "shaki malaha in heblaayo ku tebisay waqti dheer si ay noogu soo diyaarisoo hadiyadan, soo wanaag inoomey sameyn aan u mahad celino".

Markay Ilmuhu maqlaan ereyadaas oo kale waxay baranayaan caadada tixgelinta iyo ammaanta, haddaba si aad uga dheeraato walbahaarka kaaga imaanaya caasinimada iyo abaal ka darka dadka aad u samo fashay raac murtida lambarka 3-aad.

1. Intaan ka walbahaari laheyn abaal ka darka dadkii aan ku oggoolaano ceebahooda, aan xasuusano in Nebi Ciise ka daaweyey 10 qof cudurka qalalka hal galab, wax u mahad naqayna waxaa ka jiray hal qof, marka maxaad u sugeysaa abaal gudkii uu waayey Nebi Ciise?
2. Xusuuso in dariiqada keliya ee lagu gaari karaa sacaadada tahay inaad filan wax abalgud ah, marka wxtarkaagu ha noqdo ilaahey dartii oo keliya.
3. Xasuuso in mahadnaqu ka dhasho abuuris ilaalin iyo dadaal, haddaba haddii aad dooneyso in caruurtu ku barbaaraan sacaado, waa in marka hore lagu abuuro caadada abalgudka yo mahadcelinta.

QEYBTA SADDEXAAD
MAKU BEDDELANEYSAA WAXAAD HEYSATID
MALYUUN DOOLAR

Waxaan bartay mar dhowr sano laga joogo nin la yiraahdo Harold Abortt oo reer Webb ah, waxaanu ahaa muddo dheer maamulaha barnaamijka khudbadaheyga. Maalin baan kula kulmay magaalada Kansas, wuxuu igu qaaday baabuurkiisii, intaan soconay ayaan weydiiyey siduu isaga celiyo walbahaarka? Markaasuu iiga sheekeeyey qiso la yaab leh, waxayna aheyd maalin ka mid ah Gu'gii 1943-kii, wuxuuna ku bilaabay; "anigoo socda jidka Donghery ee magaalada Webb City, ayaan arkay anigoo walbahaar la dhalaalaya, muddo 15 ilbiriqsi ah, laakiin waxaan bartay 15-kaa ilbiriqsi in ka badan intii aan bartay 10-kii sano ee aan ku dhex jiray fanka nolosha, labadii sano ee maalintaa ka horreysay waxaan ku lahaa dukaan magaalada Webb, markaas baan ku khasaaray wax allaale wixii aan lacag keydsaday, waliba waxaan galay deyn ay bixinteedii igu qaadatay todobo sano, dukaankiina maalmahaas baan xiray.

Maalintii aan socday jidka waxaan ku socday bangiga si aan uga soo qaato lacag amaah ah oo aan ku tago magaalada Kansas si aan shaqo uga helo. Marka anigoo isla hadlaya oo dunida ka quustay kuna dhow inaan iimaan beelo, ayaan la kulmay nin labada lugoodba ka go'an oo doonaya inuu jidka gudbo isagoo gurguuranaya, waan ka gudbay, markaasuu ii muusooday, wejigana ii furay oo igu yiri 'subax wanaagsan', maanta waa maalin fiican soo maaha? Markaas baan istaagay, ninkii baan fiiriyey anna waan is fiiriyey, markaasaan is iri; 'Alla ladaniyaa! Taajirsaniyaa, anigu waxaan leeyahay laba lugood, meeshaan doonaan ku marki karaa, markaas baan isku sheexay inaan sidaa isu dulleeyo anigoo ladan, haddii ninkaasi karay inuu si farax iyo kalsoonaan leh ku noolaado isagoo gurguuranaya, soo waajib iguma ah inaan sacaado ku noolaado anigoo laxaadkeyga qaba?

Waxaan u socday inaan bangiga ka amaahdo 100\$, waxaana ku fekerayey inaan ku iraaqdo bangiga waxaan u socdaa Kansas si aan isugu dayo inaan shaqo ka helo. Laakiin hadda waxaan ka

amaahanayaa Bangiga 200\$ waxaan ku dhahayaa waxaan u socdaa Kansas si aan shaqo u helo, waan helay amahaadii iyo shaqadiiba. Hadda aroor walba waxaan fiiriyaa ereyadaas oo aan anigu muraayadeyda geliyey, kuwaas oo ah, 'waxaan la ooyayaa kabo la'aan ilaa aan la kulmay nin lugo la'.

Maalin baan warsaday Eddie Richen Backer oo ku socoteeyey dooni yar oo Cinjir ah badweynta (Pasific) muddo 21 beri ah, waxaana kula wehliyey socodkiisa dad kale, waxaan weydiiyey wixii uu ka soo faa'iideystay socodkiisa? Wuxuu yiri; casharka aan soo faa'iideystay wuxuu yahay; "inaan haddii qofku uu heli karo cunto iyo biyo aanay ku habbooneyn inuu wax kale ka sheegto", wuxuu ku qoray mujaladda (Time) maqaal aad wax u saameeyey oo laga qoray askari ku dhaawacmay dagaal oo laga qalay Cunaha 7 jeer falliir ka galay aawgiis, dhiigna lagu shubay, isagoo askarigii jiifa isbitaalka ayuu warqad ku qoray su'aal uu ku weydiiyey takhtarkii '*ma noolaan doona*'? wuxuu ugu jawaabay takhtarkii '*ahaa*', wuxuu hadana warsaday '*ma hadli doonaa*? Markaasaa loogu jawaabay '*haa*' wuxuu yiri askarigii 'doqonsaniyaa marka maxaan la walbahaarayaa, marka bal maad istaagtid, hadda meesha askarigaas ood is weydiisid, maxaad u walbahaareysaa? Waxaa la arkaa in waxaad ka walbaahaysid ka fudud yahay wixii qabsaday askariga aanu soo sheegnay.

Sida runta ah 90% arrimaheenu waxay u socdaan si toosan, 10% keliya ayaa u socda si qaloocan, marka haddii aad dooneysid inaad ku noolaato sacaado iyo baraare, xooggaaga isugu gee sidaad 90%-ka arrimahaaga toosan aad dhidibada ugu aasi laheyd, iskana ilow 10%-ka arrimahaaga qaloocan.

Haddiise aad rabtid inaad noloshaada ciriiri gelisid isugu gee xooggaaga 10%-ka shey ee arrimahaaga ka qaloocday, waxaad ku arki doontaa labadan erey (feker oo mahadnaq), waxa derbiyada kaniisadaha dalka Ingiriiska lagu naqshadeeyey badankood, inagu habboonaan laheydaa inaan ku naqshadeyno derbiyada qalbigeena (feker oo mahadnaq) ku feker nimcooyinka eebahay ku siiyey kadibna mahadnaq.

Ninkii la oran jiray Janathan Swift oo allifay kitaabka (safarkii sulliver), wuxuu ahaa suugaan-yahanada Ingiriiska ah kan ugu baas sheeg badan, ilaa uu weer xiran jiray maalmaha ciidaha ah ee dadku faraxsan yahay. Inkastoo uu sidaa ahaa, hadana marbuu amaanay faraxa iyo reynreynta, wuxuuna yiri; "takhtarrada dunida ugu wanaagsan waa saddex; cuntada, nabadgelyada iyo faraxa" aniga iyo adigu waxaan bilaash ku heli karnaa takhtarka 3-aad oo ah faraxa, haddii aan ku tuuntuunsano nimcada weyn ee aan heysano, nimcadaas oo ka qiimo weyn xagga ruuxa iyo xagga magacaba kansigii sheeko beraleydi ee Cali Baaba.

Maku iibi laheyd malyuun \$ indhahaaga? immisaad ku qiimeyn laheyd lugahaaga? Maqalkaaga? Iyo carruurtaada? Bal nimcooyinkaaga hal hal u xisaabi, kadibna isu gee, waxaad arki doontaa inay ka qiimo badan yihiin dahabkii ay urursadeen Rock Feller, Ford iyo Margan oo la isku daro, laakiin ma kula tahay inaan sidaa u qaddarineyno kansigeena. Maya sida uu yiri Schopen Hour 'badana intaan ku fekereyno waxa inaga dhiman, yara intaan ku fekereyno waxaan heysano' taasina waa aafada dunida maanta heysata.

Nin la oran jiray John Bahner oo deggenaa magaalada Peterson, wuxuu ka shekeeyey qiso qabsatay waana tan; "waxaan ka tirsanaan jiray ciidamada markaas baan ka baxay, waxaan furtay dukaan weyn oo aan uga shaqeeyey si dadaal ah, habeen iyo dharaar iimay kala soocneyn ee shaqaan isugu bixin jiray. Markaan muddo sidii ku socday badeecadiina aad iigu socoto, ayaan ciriiri ka galay xagga alaabta ceydhiin ee shaqeydu u baahan tahay, waxaan ka baqay in khasaare igu dhaco, aad baan u walbahaaray ilaa uu caafimaadkeygu hoos u dhacay oo aan noqay nin weji xun oo caro badan oo laga cararayo.

Anigoo sidaa ah ayuu igu yiri nin dhallinyaro ah oo dagaalkii ku cuuryaamay oo shaqada igu caawin jiray, 'war miyaadan isla yaabeyn John? Waxaad iska dhigeysaa sidii nin keligii la saaray wixii dunida hami iyo qami jiray oo dhan, ku qaddar dukaanka inaad xirtid muddo, maxaa dhacay? Waxaad furan kartaa mar labaad markii xaaladdu

hagaagto, waxaad haysataa waxyaabo badan oo Ilaahey looga mahadnaqi karo, haddana adigu waad sheeganaysaa? Jeclaan lahaayaa inaan adigoo kale noqdo, anigu waan ku kamanayaa, isoo fiiri sidaan ahay, waxaan leeyahay hal gacan keliya, wejigeysa waa nus, haddana ma walbaaharo. Marka haddii aadan joojin gadoodka iyo walabahaarka ma khasaari doontid oo keliya shaqada, ee waxaa kale ood waayi doontaa caafimaadkaaga, qoyskaaga iyo weliba saaxibadaa', ereyadaasi waxay ii saameeyeen sida sixirka oo kale, waxaan ku baraarugay inaan dad badan ka roonahay, markaasaan goostay inaan joojiyo walbahaarka waanan joojiyey.

Waxaan aqaanaa Gabar la yiraahdo Lucilee Blake oo ku sigatay hoog iyo halaag intaanay baran siday ugu raali noqoto nasiibkeeda, waxaanay u dhiman gaartay welwel iyo walaac, waxyaabo ka dhiman aawgood.

Waxaan bartay Lucile mar aan isla dhigan jiray fanka, qisada gaaban ee Jaamacadda Colombiga, sagaal sano ka hor ayey dhibaato qabsatay, iyadoo joogto magaalada Theson qisadeediina waa tan siday u sheegtay; "waxaan ahaa qof dhaqdhaqaaq badan, marka waqtigeysii oo dhan waxaan ku shuqliyey howlo, waxaan baran jiray muusikada, dadna waan bari jiray, waxaan ciyaari jiray khudbadaha guud, waxaan ka qeyb qaadan jiray ciyaaraha dhaaniska iyo xafladaha waaweyn, waxaan daawan jiray tartanka farad fuulka, markaas baan waxaa igu dhacay wadno xanuun.

Wuxuu igu amray takhtarkii inaan muddo hal sano ah sariirta jiifo, waxaa markaas igu dhacay argagax weyn, waxaan is weydiiyey 'waxaan galabsaday ee uu cudurkan iigu dhacay' markaas baan karay ciil iyo caro dartood, oohin baan la dhacay, laakiin waan fuliyey amarkii takhtarka oo sariirta ma dhaafin.

Waxaa isoo booqday nin deriskeyga ah oo fannaan ah lana yiraahdo Rodolf, wuxuuna igu yiri; 'Shaki kuma jiro inaad u maleyneyso in aanay jirin masiibo ka weyn inaad sariirta jifto sanad dhan, laakiin sida aad moodeyso maaha arrinku, waxaad heli doonta waqti aad dhab ahaan ugu fiirsato arrimaha kala duwan, waqti aad naftaada baratid, waxaad

kasban doontaa bilaha soo socda aqoon badan oon la qiimeyn kareyn', hadaladaasi way I dejiyeen, waxaa iga dhacay culeyskii laabta iga saarnaa, waxaa I soo galay nolol cusub.

Waxaan bilaabay inaan barto dareenka qiimeynta ummadaha si cusub, waxaan ka maqlay raadiyaha maalin isagoo leh 'waxa dadku ku kacayo oo dhan waxay ku tusinayaan fikrooyinka qofka madaxiisa ku wareegaya' marar hore ayaan maqlay ereyadaas laakiin markaas qalbigeyga ayey u degeen, markaas baan goostay inaan ka dhigo fikrooyinka maskaxda iiga wareegaya dhammaantood kuwa faa'iido u leh nolosheyda, sida fikradaha caafimaadka, faraxa, sacaadada iwm.

Waxay ku raali noqotay nafteydii inay ku fekerto subax kasta waxyaabaha ay waajib tahay inay Ilaahey uga mahad celiso, sida gabadheeda ay jecleyn lixaadkeeda, caafimaadkeeda iyo saaxiibada wanaagsan ee ay qabto. Waxay tiri; 'waxaan dareemay farax nafteydii maansheeyey, waxaa batay dadkii isoo booqday oo raalli ka noqday qalbi furnaanteyda, ilaa takhtarkii amray in qofba mar ii soo galo si loo dhowro raaxadeyda.

Hadda waxaa ka soo wareegtay 9 sano waqtigaas, waxaan abaal iyo mahad u hayaa sanadii aan sariirta jiifay, wuxuu ahaa sanadkii ugu wanaagsanaa nolosheyda, welina waan ku dhegenahay caadadii aan goostay inaan ku dhaqmo oo aheyd inaan maskaxdeyda ka buuxiyo fikrooyin waxtar u leh nafteyda iyo inaan ku fekero nimcooyinka Eebahay igu manneystay, waxaan ka xumahay in aanan horey u baran sida nolol cusub oo dhab ah loogu noolaan lahaa intaan ka baqan mowdka.

Mar laga joogo laba boqol oo sanno ayuu yiri Dr. Sanvel Johnson "inaad ka caado yeelato fiirada waxyaabaha ku soo maray ayaa ka qiimo badan kun qarni oo lagu siiyo" ninka ereyadan yiri ma aha nin lagu yaqaan sama-sheeg ama ladnaansho, laakiin waa nin dhadhamiyey fakhri iyo gaajo muddo 20 sano ah.

Sidoo kale wuxuu sheegay Logan Pearsall xikmad aad u qiimo badan kana kooban ereyadan 'waxa jira labo shey oo ah ujeedada dunida, kan hore waa inaad hesho waxaad rabtid, kan labaadna waa inaad ku raaxaysatid wixii aad heshay, ninka dunida ugu xikmad badan waa nin labadaa arrimood xaqiiyey".

Haddii aad Marwo tahay ma jeceshahay inaad ka dhigtid howsha jikada mid wanaagsan oo ku farax gelisa? Bal akhri sheekadan ay qortay Borghild Dahl, waxaa lagu magacaabaa "waxaan doonayaa inaan wax arko", waxay ku nooleyd muddo nus qarni ah indho la'aan, waxay laheyd il keliya oo weliba xuub ka saran yahay, si dhib leh ayey wax ku akhrin jirtay, markii ay wax akhrineyso waxay ku dhejin jirtay buugga wejigeeda, mana oggoleyn inay noqoto qof loo naxariisto, waagii ay yareyd waxay jecleyn ciyaaraha, markay caruurta hoydaan ayey ciyaaraha leyli ku qaadan jirtay, ilaa ay asaageed ku dhaaftay.

Markii ay guriga joogto waxay ku tebin jirtay waqtigeeda akhriska buugagta xuruufta waaweyn, waxay ku dhaweyn jirtay indhaha ilaa baalalka indhuhu taabtaan xaashida buugga, sidaas bay ku gaadhay labo darajo oo Jaamacadeed oo kala ah A.B. Iyo M.A. waxay ku shaqeysay barenimo ilaa ay ka gaartay Bare sare kuliyadda Aagutan muddo 13 sano ah, waxaa intaa u dheeraa khudbado ay u jeedin jirtay ururada haweenka iyo faalooyin ay ka sii deyn jirtay raadiyaha oo ku saabsan dhaliilka buugagta cusub.

Sanadkii 1943-kii waxay gaartay 50 sano, markaas bay ku kacday mucjiso kale, waxaa loo fiiqay indhihii, markaas buu kordhay arageedii afar jibaar, waxaa markaas u furmay duni cusub oo qurux badan, kolkaas bay wax kasta ku raaxeysatay, xitaa saxanka ay ku dhaqeyso jikada waxay tiri iyaddoo ka sheekeyneysa farxadeeda, "waxaan ku farxaa xumbada saabuunta aan ku dhaqayo maacuunta, intaan gacanta ku ururiyo ayaan u dhoweeyaa iftiinka.

Markaas bay u ekaataa qaanso roobaad dhalaaleysa, marna waxaan istaagaa dariishadda anigoo fiirinaya shimbiryo yaryar oo haadaya oo barafka dhacaya ku dhex duulaya, waxaa ii muuqda baalashooda

cadcad, markaas baan farax iyo liibaan la dhacaa", gabadhaasi waxay ka buuxsantay farax markuu kordhay arageedii ilaa ay ku qatintay buuggeedii "Eebow waan kuu mahad naqayaa, kuu mahadnaqayaa' waxay Ilaahey uga mahadnaqeysaa markay aragtay xumbada saabuunta iyo baalasha shimbaraha haadaya, marka miyaanay kula aheyn inaan isla yaabno, waxaan ku nool nahay Janno baraare ah, qurux badan oo saafi ah, laakiin ma arkeyno mana qadarino mana ka mahadnaqno.

Haddaba haddii aad rabti inaad ka adkaato walbahaarka ood nolol cusub bilowdid raac murtida lambarka 4-aad "tiri nimcooyinka Eebahay kugu manneystay intaan tirin laheyd dhibaatooyinka.

**QEYBTA AFARAAD
AHOOW NAFTAADA,
OGOOW IN AANU JIRIN DUNIDA QOF KULA MID AH**

Waxay ii soo dirtay Mrs Edith Allered oo degan magaalada Mountair warqad ay iigu sheegtay qisadan; "Carruunimadeydii waxaan ahaa qof dareen dhow oo xishood badan, waana buurnaa oo dhabanada ayaan aad uga sii buurnaa, kuwaas oo ii muujiyey inaan ka buurnahay sidaan ahay xaqiiqadeeda, hooyadeyna waxaa la fool xumaa dharka jirka ku dheggaan, sidaas darteed, waxaan xiran jiray dhar dhaadheer oo iga weyn, waxaan ku koray inaan ka dheeraado bulshada oon gooni u joogo, kamana heli jirin faraxa iyo ciyaarta caruurta, markaan galay dugsi waxaan awoodi kari waayey inaan kala qeyb galo asaagay dhaqdhaqaaqooda iyo ciyaaraha, gooni ahaanshaheygii badnaa iyo xishoodka dartii waxay igu dhigeen qof gooni ka ah dadka oo abuur gaar ah leh.

Markaan weynaaday, waxaan guursaday nin dhowr sano iga weyn, laakiin guurkii ma beddelin xaalkeygii, qaraabada ninkeyga waxay ahaayeen dad isku halsoon oo miisaan weyn leh, waxay isku dayeen inay iga saaraan gooni ahaanta, laakiin way ku fashilmeen iskudaygoodii ilaa arrinkii igu cuslaaday oo aan noqday qof weji go'an oo wax kasta ka danqaneysa, haddii iridda la soo garaaco waan argagixi jiray, waxaan ogaaday inaan ku hungoobay noloshee, waxaanse aad uga sii baqayey in ninkeygu ogaado hungadeyda, sidaas darteed, waxaan xoogga saari jiray inaan u muuqdo sidii qof faraxsan oo raali ah, markaan isaga la joogo meelaha fagaaraha ah, marka is yeelyealkii iima kordhin waxaan ka aheyn ciriiri iyo walbahaar aan u adkeysan kari waayey, waxaan ku fekeray inaanay noloshu wax qiimo ah ii laheyn, waxaan ku sigtay inaan is dilo".

Haweeneyda heerkaa gaadhay waxaa beddelay nolosheedii oo dhan fikrad ay kula kulantay si kedo ah, waxayna tiri iyadoo ka sheekeyneysa siday isu beddeshay; "waxaa beddelay nolosheydii oo dhan erayo aan ka maqlay sodohdey iyadoo ka sheekeyneysa siday wiilasheeda u soo barbaarisay, waxaana ka mid ahaa hadalladii

sodohdey, 'wax kasta oo dhaca waxaan ku adkeyn jiray wiilasheyda inay ku dhaqmaan kuna socdaan dabeecaddooda iyo abuurkooda" 'ereyga ku socodka dabeecadda ayaa haddiiba igu dhaliyey inaan gefsanaa, markaan isku khasbay dabeecooyinka aanan laheyn oon munaasib u aheyn abuurkeyga, Ilaah ii abuuray, sida runta nolosheyda markiiba si dhakhso ah ayey isu beddeshay markaan bilaabay inaan ku socdo dabeecadeyda, waxaan ku dhaqaaqay inaan barto nolosheyda meesha aan ka xumahay iyo meelaha aan ku wanaagsanahay, waxaan ku dhaqaaqay inaan burburiyo caadooyinkii xumxumaa oon ku dhegenaa ilaa yaraanteydii. Waxaan bilaabay inaan doorto dharka kan ugu wanaagsan ee la socda moodelka markaa socda, waxaan isku dayey inaan kasbado saaxiibo cusub, waxaan ku biiray uur haween oo yar, markii hore waan biqi jiray markaan khudbad jeedinayo, laakiin waagii dambe waan bartay oo waxaan kasbaday geesinimmo iyo kalsoonaan, waqti dheer bay igu qaadatay inaan ku leylayo nafteyda kuna socodsiiyo dabeecadda uu eebbe u abuuray, hadda waxaan ku noolahay sacaado iyo liibaan aanan marna fileyn, maanta waxaan ku waaninayaa carruurteyda inay ku socdaan dabeecadda wax kasta oo dhaca.

Wuxuu sheegay Dr. James Gardon "mushkiladda ku socodka dabeecadda naftaada waa mushilo jirtay dunidii hore, waxaana loo tiriyaa cuduradda neerfaha, caqliga iyo nafsiga inay ka dhashaan kartida inuu qofku u leeyahay ku socodka ama ku socod la'aanta dabeecaddiisa".

Wuxuu qory Angelo Part 13 buug iyo kumanyaal maqaal oo uu joornaalada ku faafiyey, waxayna dhammaantood ku saabsanaayeen barbaarinta carruurta, waxa laga sheegay ninkaa ku xeel dheeraaday dabeecadda dadka inuu yiri; 'ma jiro qof ka ayaan daran qofka doonaya inuu noqdo qof kale oon la dabeecad aheyn xagga caqliga iyo xagga jirka midna'. Waayo waxaan aragnaa mar kasta dad doonaya inay iska dhigaan ama isu ekeysiiyaan dad kale oon la dabeecad iyo abuur aheyn.

Magaalada Hoolywood maamulaha soo saarista filimada Mr. Saani Wood wuxuu yiri; "dhibaataada ugu weyn ee aan kala kulmo layliga fannaaniinta cusub waa inay ku socdaan dabeecaddooda, badankood waxay doonayaan inay noqdan Lana Turner heerkiisii labaad ama Clark Gabler heerkiisa saddexaad, si uu u qanciyo Saami Wood fannaaniinta dad aanay aheyn iska dhigaya inay naftooda run ahaan u matalaan, wuxuu dhihi jiray' "Dadweynuhu way ka xiiso dhaceen daawashada fannaaniintii hore waxay doonayaan inay daawadaan wax cusub".

Waxaan weydiiyey maalin Paul Boynton oo ahaa agaasimaha arrimaha shaqada ee sharikadda Secory-Vacuno ee batroolka, waamaxay gefka ugu weyn ee ay falaan dadka shaqo doonka ah? Wuxuu yiri; "Gefka ugu weyn ee ay sameeyaan waa inaanay ku socon dabeecadooda, intey runta ka sheegi lahaayeen xaqiiqda fikradahooda iyo aragtidooda, waxay isku dayaan inay kaga jawaabaan su'aalaha jawaabta ay u maleeyaan in loo shaqeeyuhu rabo, laakiin xaaladdaas sida badan laguma guuleysto, waayo dadku way garanayaan ninka ku faanaya waxaanu aheyn sida ay u gartaan lacagta been abuurka ah".

Waxay baratay gabar uu dhalay nin wade baabuur ah casharkan, hase yeeshee waxay kala kulantay dhibaato, waxay jecleyn gabadhaasi inay noqoto heesaa caan ah, waxaase turunturo ku noqotay afkeeda oo ballaarnaa iyo ilkaheeda oo soo taagtaagnaa, mar bay isku dayday inay ka heesto gole lagu caweeyo habeenkii, oo ku yaal magaalada New Jersey, waxay isku dayday inay afka isku qabato kuna daboosho dibnaheeda, maxaase ka dhashay? Waxay noqotay qof lagu madadaasho oo lagu jeesjeeso, waxaa joogay golaha nin fanka filimada ka shaqeeya oo dareemay codkeeda iyo habka ay u heeseyso inay hibo u leedahay fanka?

Markaasuu u yeeray oo ku yiri; "anigu waan ogahay waxa maskaxda kaaga jira, adigu waxaad dooneysaa inaad qariso ilkahaaga dhaadheer miyaanay sidaa aheyn"? way naxday gabadhii, laakiin ninkii baa sii watay hadalkii oo ku yiri; "maxaa ku cabsi gelinaya? Dembi miyaa in ilkahaagu dhaadheeraadaan? Ha isku dayin inaad ilkahaaga qariso, fur afkaaga intii suuragal ah, waxaad ogaan doontaa in dadku sidaa kugu

jeclaan doono, waliba ilkahaagu waxay ku siinayaan tilmaan kuu gaar ah, waliba waxaa la arkaa inay noqdaan sababta caanimadaada?

Way raacday gabadhii waanadii oo way is ilowsiisay ilkaheedii oo kumay fekerin maalintii kadib, waxaan ka aheyn raalli gelinta dhageystayaasha, siday u heesaysay waxay noqotay xiddig caan ah xagga filimada, raadiyaha iyo meelaha kale ee lagu caweeyo ilaa ay dadkii kale iyada ku daydaan gabadhaas magaceedu waa Gass Delay.

Wuxuu yiri Wiliam James abwaankii cilmi nafsiga "haddii aynu isku qiyaasno nafteena siday tahay iyo sida waajibku yahay inay ahaato, waxaan arkeynaa inay nolosheenu nus tahay, maxaa yeelay waxaan ku intifaacnaa oo keliya wax yar oo ka mid ah awooddeena, laxaadkeena iyo caqligeena.

Haddii si kale loo sheego wuxuu qofku ku dhex nool yahay xero yar oo ciriiri ah, oo uu ka dhex sameystay xuduudda naftiisa, qof kasta wuxuu leeyahay xoogag kala duwan oo fara badan, laakiin qofna kuma baraarugsana oo kama faa'iideysto.

Adigu waxaad ku tahay dunida dhif, waxaad ku tahay calanka keligaa, wax kula abuur ahi ma jiraan, ilaa waagii dhulka la uumay laguma arag qof dhan kasta kaala mid ah, hadda kadibna la arki maayo, qof si kasta kuugu eg, wuxuu sheegay cilmiga hiddaha ama is dhexgalka inaad ka abuuran tahay janiin unug ka mid ah 24 kooman, una kala baxa 12 xagga Aabaha iyo 12 xagga hooyada ah, waana kuwaas sifooyinka kala duwanaashaha ah ee aad dadka kaga soocmeyso.

Wuxuu ku sheegay Sheinfield kitaabkiisa "adiga iyo dhaxalka hiddaha" hoormoon kasta wuxuu sitaa boqolaal jinaat, laakiin mid ka mid ah boqolaalka Jinaat ayaa beddeli kara nolosha qofka oo dhan, kuna ridi kara isbeddel weyn oo asaasi ah, sida dhabta ah waxaan u abuuranahay si la yaab leh oo lagu wareerayo, xitaa markay kulmaan labada waalid inaad adiga laftaada ka dhalatid kulankaa, waxay suurtagal tahay saddexdii boqol oo malyuunba mar. Haddii si kale loo sheego waxaan dhihi karnaa, haddii aad leedahay 300 oo malyuun oo

walaala ah dhammaantood waa kaa duwan yihiin, waayo dhammaantood waxay u abuuran yihiin si khilaafsan abuurkaaga.

Waxaan kaaga xog warrami karaa sida aad dadka uga soocan tahay si xog ogaalnimo iyo kalsoonaan ah, sababtoo ah xaalkaanu wuxuu igu soo maray tijaabooyin adag oo qaraar, waana tan tijaabadii; "markii aan ka tegay tuuladeydii waxaan tegay Newyork, waxaana galay Akadeemiyada Mareykanka ee fanka matalaadda, waxaan damacsanaa inaan noqdo fannaan wax matala, waxaa maskaxda iiga soo dhacday fikrad aan is iri waad ku liibanaysaa muddo gaaban, weliba waxaan la yaabay siday dadku u garan waayeen fikradan fudud, waxaan is dhacsiyey inaan barto sida dadka caanka ah ee rag ka soo baxa ah ugu guuleysteen muraadkoodii, markaan bartay sifooyinkii fiicfiicnaa ee dadkaasi gaar u lahaayeen ayaan ka shaqeeyey inaan ku kulmiyo nafteyda sifooyinkaas oo dhan si aan ugu soo baxo sida ugu wanaagsan.

Alla doqonsaniyaa markaas!, waxaan ku dhumiyey sanooyin badan si aan isugu ekeysiiyo dad kale, hadaan ogaan lahaa inaanay suurtagal aheyn inaan noqdo qof aan nafteyda aheyn. Waxaa habbooneyd inaan ku waantoobo tijaabadii aan ku hungoobay, laakiin nasiib daro waxaan ku dhacay mar kale fikraddii hore oo kale, markaan ku dhaqaqay inaan allifo kitaab ku saabsan 'Khudbadaha guud iyo faa'iidada ay u leeyihiin dadka maamulka haya",

Waxaan is lahaa waa kitaabkii ugu wanaagsanaa dunida, markaan qorayey kitaabka waxaan raacay fikraddii aan horay ugu isticmaalay barashada fanka matilaadda, waxaan soo ururiyey fikrado dad kala duwan oon ku ururiyey hal majalad, waxaan soo urursaday dhowr kitaab oo ka hadlaya khudbadaha guud, waxaan is dhexgeliyey fikrado kala duwan oo ku qornaa kutubtaas, laakiin mar dambe ayaan ogaaday inaan gef sameeyey, waayo waxaan arkay in fikradihii aan ururiyey ay is burinayaan iskana soo wada horjeedaan oon qofna akhrin Karin, halkaa baan ku tuuray shaqadii adkeyd ee aan hal sano oo dhan ka shaqeynayey.

Markaas baan shaqo hor leh bilaabay oon is iri; "waxaa kugu haboon inaad noqotid 'Dale Carnegie', wuxuu kulansaday wanaag iyo xumaan, markaas baan guntiga dhiisha isaga dhigay, waxaan falay wixii waajibku ahaa inaan falo, markii ugu horreysay waxaan dejiyey kitaabka khudbadaha guud, anigoo kaashanaya tijaabooyinkeygii iyo waaya aragnimadeydii aan ka kasbaday muddadii aan ka shaqeynayey khudbadaha guud.

"noqo naftaada" waa waano uu I siiyey fannaankii muusikada ee caanka ahaa Irving Berlin, waxaa kale oo uu ku waaniyey waanadaas George Crshuin markuu barayey muusikada iyadoo uu kan hore markaas ahaa muusikiiste caan ah, kan kalena ahaa barbarasho uuna ku shaqeyn jiray 35\$ todobaadkii, Irving wuxuu u bandhigay Cershuin inuu u noqdo xoghaye xagga muusikada isagoo siin doona 3 jibbaar inta uu hadda qaato, wuxuuse raaciyey arrintan waanada ah; 'waa inaad aniga oggolaan waxaan kuu soo bandhigo, maxaa yeelay haddii aad oggolaatid waxaad isku dayi doontaa inaad noqoto Irving Berlin oo kale, haddiise aad ku dadaashid inaad noqotid naftaada, waxaad noqon doontaa Cershuin oo aan laheyn mid labeeya, Cershuin wuu qaatay waanadii, wuxuuna noqday ugu dambeyntii kuwa ugu caansan muusikiistayaasha Mareykanka.

Waxaa casharkan iyaguna bartay Shorlie Shaolin, Will Rogers Mare Margaret, MC Birde, Gene Autry iyo Malaayiin kale, markuu bilaabay Shorlie Shaolin shaqada filimada, wuxuu ka kasbaday maamulihii filimka inuu matalo Sharlie Door filim maaweelo wato oo caan ahaa markaas, laakiin ma noqon fanaan qiimo leh, ilaa uu bilaabo inuu metelo dariiqadiisa u gaarka ah.

Sidoo kale fannaankii madadaalada Bob Hope wuxuu ku tebiyey sanooyin badan oo cimrigiisa qaaliga ah inuu metelo heesaha dhaniska ah, laakiin kuma soo caan bixin magaciisa, wuxuuse soo caan baxay markuu metelay doorka u hibo ah ee ay leedahay naftiisa.

Adigu waxaad u abuuran tahay si ka duwan qof kasta oo dunida jooga, waxaad leedahay sifooyin kuu gaar ah oo aanay jirin cid kula

wadaagta, sidaas darteed, ka faa'iideyso sifooyinkaaga, hibooyinkaaga iyo awoodahaaga kala duwan ee kuu gaarka ah, hana u hanqal taagin inaad qof kale iska yeelyeeshid, maxaa yeelay waad ku hungoobi doontaa. Waxa xaqiiqo ah in 'qof kasta uu gaari doono waqti uu ogaan doono in xasadku jahli yahay, isu ekeysiiinta qofka kalena is dil tahay', waxaa waajib ku ah qofka inuu ku kalsoonaado naftiisa kuna qaato ceebaheeda, kuna raalli noqdo wixii loo qoray".

Waa inuu ogaado qofku inkastoo dhulka arsaaqi ka buuxdo inaan xabbad bariis ah la heleyn ilaa loo dhidido oo la soo bixiyo, awoodda Ilaahey ku abuuray jirkaaga waa kuu gaar, cid og xaqiiqdeeda oon Ilaahey aheyn ma jirto, xitaa adiga naftaada ma ogaan kartid ilaa aad tijaabiso ood ku dhaqanto.

Haddaba haddii aad rabtid inaad ka nabad gasho walbahaarka; raac murtida lam. 5-aad (baro naftaada, noqo sida lagu abuuray, ha isku dayin inaad iska yeelyeesho qof kale).

QEYBTA SHANAAD KA SAMEE LIINTA DHANAAN BIYO MALAB AH

Markii aan qorayey buuggan waxaan tagey maalin Jaamacadda Chicago, waxaan weydiiyey Agaasimaheedii Robert Maynard sida uu isaga celiyo walbahaarka? Wuxuu iigu jawaabay weligeyba waxaan raaci jiray waano uu i siiyey nin Saaxiibkey ah oo la yiraahdo Juns Rosen Warld oo ah "haddaad heysato liimo dhanaan ka sameyso biyo macaan" waa sidaas waxa uu sameeyo ninka caaqilka ah, laakiin ninka doqonka ah wuxuu sameeyaa sidaa lidigeed, haddii nasiibkiisu siiyo liin dhanaan wuxuu dhahayaa waxaa igu dhacay nasiib darro, markaasuu ciil iyo caro u dhimanayaa.

Abwaankii cilmi nafsiga Alfred Addler oo ku tebiyey cimrigiisa badankiis baarista dabeecadaha dadka iyo sifooyinkooda ku qarsoon wuxuu yiri; "waxyaabaha dadka dheeraadka la yahay waxa ugu qiimo weyn awoodiisa inuu dhibka dheef u bedelo" tusaale ahaan waxaan u soo qaadaneynaa qiso qabsatay haweeney la yiraahdo Thema Themson, iyadoo ka sheekeyneysa qisadeediina waxay tiri; "markii uu socday dagaalkii labaad ee dunida ayaa loo beddelay ninkeygii Mexico, anna waan raacay, laakiin haddiiba meeshii waan ku qalooday.

Markuu ninkeygu u baxo xerada tabarka Ciidanka keligey buu iiga tagi jiray guriga, markaas baan cidloona jiray dhulkana aad buu u kululaa, mana heli jirin wax I wehliya oon la sheekeysto, waayo dadka reer Mexico iyo hunuuddu ma yaqaanaan afka Ingiriiska, cuntada aan cunayno iyo hawada aan ku neefsanayno waxaa ka buuxay quruuruxa bacaadka, waxaan ka gaaray ayaan darrada heer aan adkeysan kari waayey, ilaa aan warqad u diray waalidkey oon u sheegay inaan goostay inaan ka soo tago ninkeygii oon u soo noqdo gurigooda.

Wuxuu iigu soo jawaabay aabbahay labo sadar keliya oo aan weligay xasuusan doono, sababtoo ah waxay beddeleen nolosheydii oo dhan, waxayna labadaas sadar ahaayeen; "labo maxbuus ayaa ka soo indho taagay birihii qolkii ay ku jireen, mid wuxuu fiiriyey dhoobada dhulka, midna wuxuu fiiriyey xiddigaha cirka" labada sadar ayaan dhowr jeer

akhriyey, markaasaan isku sheexay, waxaan goostay inaan xiddigaha cirka u hanqal taago, muddo yar kadib waxaan la saaxiibay dad badan oo reer Mexcico ah, jaceylkii waxay iigu beddeeleen kalgaceyl, haddaan ammaano alaabta ay sameeyaan sida dharkooda iyo dheryaha, markiiba way ii hibeyn jireen, waxaan isku maaweelin jiray daawashada muuqaalka qurxoon markay qorraxdu ku libdheyso qalbiga lama degaanka, waxaan isku shuqlin jiray inaan ka gurto alaalexeyda bacaadka oo ahaa badweyn gunteed.

Maxaa nafteydii sidaa u beddelay? Lama degaankii iyo hunuuddii midna isma beddelin, laakiin waxaa is beddelay waa nafteydii, waxaa iga baxday cuqdadii aan ka qabay dalkaas, sidaas bay iigu suura gashay in imtixaankii I hayey iigu bedelmo shaqo xiiso iyo raaxo leh oo ay nolosheydii noqotay mid qiimo leh, shaqadii way I kicisay ilaa aan ka dejiyo bug sheeko ah oo lagu magacaabo "biro dhalaalaya", waxaan ula jeeday birihii lama degaanka een ka soo indho taagay, si aan u arko xiddigaha cirka.

Sida runta ah Thema may feydin xaqiiqo cusub ee waa xaqiiqo hore oo ay sheegeen reer Giriig 500 sano ka hor, dhalashadii Nebi Ciise markay yiraahdeen; "waxaa ugu wanaagsan waxyaabaha midka helidiisu ugu adag tahay" waxa haddana sii cusbooneysiyeey fikraddii Girigiiga Harry Emerson oo yiri "liibaantu ma aha inaad faraxdo ee waa inaad guuleysato", waana guusha aan dareemeyno marka shaqadii aan qabanay miro dhaliso ee aan markaas liimadii dhanaaneyd ka dhigno biyo macaan.

Mar baan booqday nin beeraleey ah oo nasiib badan oo reer Florida ah, kaas oo liin aan dhanaaneyn balse sumaysan u bedelay biyo macaan, wuxuu iibsaday beer aanu hore u arag, markuu tagay beertii wuxuu ogaaday in lagu qatalay, waayo waxay aheyd beer aanay biyuhu joogsaneyn oo aan anfaceyn in wax lagu beero, xitaa xoolo laguma dhaqi kareyn, waxaa ka baxi jiray beerta doog yaryar oo abeesooyinka waabayda lihi daaqaan, kuwaas oo ku badnaa beerta.

Waxaa ku soo booday ninkii fikrad ugu muuqatay inuu dhibka heysta dheef ugu beddeli karo, wuxuu bilaabay inuu dhaqo abeesooyinka waabayda leh ee ka buuxa beertiisa, waxaan booqday beerta ninkaas, mar dhowr sano laga joogo, waxaan ku arkay kumanyaal dalxiiseyaal ah oo meel kasta isaga yimid oo daawanaya beertii ugu horreysay dunida ee noocaas ah oo lagu dhaqo abeesooyinka.

Ninkii aad buu ugu guuleystay shaqadiisii, wuxuuna ka qabtay beertii maal aan qiyaas laheyn, waabaydii uu ka miiray abeesooyinka wuxuu u dhoofin jiray warshadaha sameeya daawooyinka lidka sunta ah, wuxuu ku iibin jiray maqaarka abeesooyinka lacag qaali ah, si looga sameeyo boorsooyinka iyo kabaha haweenka, hilibka wuu qasacadeyn jiray, wuxuuna u dhoofin jiray meelaha hilibka aad looga jecel yahay ee dunida.

Waxaan ku socoteeyey dalka Mareykanka, waqooyigiisa, galbeedkiisa, barigiisa iyo koonfurtiisaba, waxaan ku arkay dad badan oo awooday in dhibkii ku dhacay ay dheef u beddelaan, waxaa si fiican u sheegay macnahaas William Bolitto oo yiri; "waxa ugu muhiimsan dunida maaha inaad dhaqaaleysato faa'iidooyinka aad heshay, waayo doqon kasta sidaa waa yeeli karaa, laakiin waxaa muhiim ah inaad khasaarahaaga u beddesho faa'iido, waana kaas sheyga muhiimka ah ee u baahan maskax laguna kala sooci karo doqonka iyo fariidka" wuxuu yiri Bolitto ereyadaas mar uu lug ku beelay shil tareen.

Waxaase jira nin kale oo ay ka go'een labada lugoodba, hadana awooday inuu khasaarihiisii faa'iido u beddelo, kaasoo ahaa Ben Faraston oo aan kula kulmay si lama filaan ah, jaranjaro hotel ku yaal magaalada Atlanta, markaan korayey jaranjaradii korontada ayaan arkay nin lugo la' oo ku fadhiyo kursi giraamo leh oo weji furan oo qoslaya, markuu gaaray meeshuu rabay ayuu si sharaf iyo maamuus leh ii warsaday inaan jidka u banneeyo, si uu ula baxo kursigiisa, wuxuuna igu yiri isagoo muusoonaya;

"waxaan ka xumahay mudane inaan ku dhibo" markaan tegay qolkeygii waxaan ku shuqliyey maskaxdeyda ninkii lixaadka la'aa siduu

u faraxsanaa, markaas baan goostay inaan u tago oo aan ka codsado inuu iiga waramo xaalkiisa, isagoo muusoonaya oo ka waramaya xaalkiisa, wuxuu ku bilaabay; "maalin ka mid ah sannadkii 1929-kii ayaan u baxay duurka si aan u soo gurto jirrido geedo oo ay cuskadaan laamaha geedaha digirtiisa, waxaan ku soo qaaday jirridihii aan soo gurtay baabuur, hase yeeshee nasiib darro baabuurkii baa ila gaddoomay oo waliba dhowr jeer ila rogmaday, ilaa uu ku dhacay geed weyn oo aan dhabarka wax ka noqday lugihiina I qalaleen, markaasaa la iga gooyay labada lugoodba, waxaana jiray markaas 24 sano ilaa maalintaas cag dhul ma saarin".

Waxaan warsaday siduu u qaabilay masiibadaas? Wuxuu ku jawaabay; Markaas maan laheyn geesinimo aan ku qaabilo, waan adkeysan kari waayey, ciil iyo argagax datood ayaan la qarxi gaaray, markiise ay sanooyin ka soo wareegtay waxaan dareemay inaan ciilka iyo cabashadu waxba ii tarayn, wuxuu ku daray; 'waxaan ogaaday ugu dambeyntii in dadku iga naxayeen iina naxariisanayeen, marka waa inaan anne u abaal gudo, u naxo oo u naxariisto markayga".

Waxaan weydiyey haddana inuu dareensan yahay in masiibaddaasi baas u noqotay noloshiisa, wuxuu yiri; 'maya waxay ii aheyd cawo iyo ayaan, 'markaasuu xaalkiisii iiga sheekeeyey uuna yiri; "markii argagixii igu damay ee aan ka miyirisaday jigtii masiibada; waxaan guda galay inaan bilaabo nolol cusub, waxaan bilaabay inaan wax akhriyo, waxaa ii macaanaaday akhrinta buugaagta suugaanta heerka sare ah muddo 14 sano ah, waxaan akhriyey 1,400 oo buug, waxay ii fureen buugaagtaasi duni cusub, waxaan galay Janno aanan ku fekerin, waxaan ku mamay muusikada oo aan markii hore ku noogi jiray, faa'iidada ugu weyn ee masiibadaasi ii tartay waxay tahay inaan helay waqti aan ku fekerro, waxaa ii suurowday markii ugu horreysay inaan ku fekerro arrimaha caalamka oon dareemo arrimaha dunida ka socda, waxaan ogaaday waxyaabo aan qiimo weyn siin jiray oon isku dhabar jebin jiray, heliddooda in aanay istaahilin ahmiyaddii aan siin jiray".

Waxaa ka dhashay akhriskiisii badnaa inuu u leexdo xagga siyaasadda, wuxuu bartay arrimaha guud ee caalamka, wuxuu khudbadeyn jiray

isagoo ku socdo kursigiisa garaamaha leh, maanta wuxuu yahay Ben Faraston wasiirka arrimaha dibadda ee walaayadda Georgia.

Waxaan ka shaqeeyey muddo 35 sano ah waxbarashada dadka waaweyn, waxaan ogaaday in waxa ugu daran ee dadku ka sheegtaan ay tahay inaanay dhameysan waxbarashoodii jaamacadda, waxaanay isu heystaan in wax weyn ka dhiman yihiin, aniguse waxaan ogaaday in fikradaasi gef tahay, waayo waxaan aqaanaa kumanyaal liibaansan oon waxbarashadoodu dhaafsiisneyn heer sugsi sare, marka waxaan ugu sheekeyn jiray qiso nin liibaansan oon aqaan, kaasoo aan xitaa dhameysan dugsiga hoose, wuxuu ka dhashay qoys sabool ah, markuu aabihii dhintay waxaa bixiyey kafantii iyo kharashkii duugidda saaxiibadii oo u qaaraamay, markaas kadib hooyadii baa waxay shaqo ka heshay warshad sameysa dalladaha oo ay ka shaqeyn jirtay toban saacadood maalintiiba.

Waxaa dhacday inuu yarkii ka qeyb galay metelaad riwaayad uu sameeyey ururka carruurta, riwaayaddaas wuxuu ka helay geesinimo ku abuurtay inuu barto khudbadaha iyo sida loo akhriyo, taasina waxay u jiiday inuu ka qeyb qaato halganka siyaasadda, markuu 30 jir gaaray waxaa loo doortay inuu xubin ka noqdo baarlamaanka walaayadda Newyork, laakiin uma bisleyn qaadista xilkaas, wax fikrad ahna kama heysan arrimaha baarlamaanka, wuxuu dersi jiray mashaariicda qaanuunka ah ee la keeno baarlamaanka codkana waa dhiiban jiray isagoon waxba ka garan, sida qoraaladii dadkii hore ee hindiga oo kale ayey la aheyd.

Waxaa ku dhacay walbahaar markii lagu magacaabay xubin guddi kamid ah baarlamaanka oo gaar u ah arrimaha keymaha, weligiina keyn cagta ma dhigin, haddana mar kale wuu walbahaaray markii lagu magacaabay xubin ka mid ah guddi loo xilsaaray bangiyada, weligiina bangi xiriir lama yeelan. Wuxuu ii cadeeyey inuu baarlamaanka ka bixi lahaa isagoo raaliigis ah haddii aanu ka baqeyn hooyadii inuu u sheego inuu ku fashilmay shaqadii baarlamaanka.

Markaas buu goostay inuu xoogga saaro waxbarashada (lix saac maalintiiba) iyo inuu u geddiyo liimada dhanaan ee jaahilnimo liimo macaan oo aqoon iyo cilmi ah, wuxuu awood u siiyey dadaalkiisii in ninkii siyaasiga ahaa ee aan magaca laheyn noqday nin caan ah oo magac heer qaran ah yeeshay, wuxuuna ku tilmaamay wargeyska Newyork Times inuu yahay ninka ugu dhow aqlabiyadda reer Newyork, ninkaasi magaciisu waa Al-Smith markii ay ka soo wareegtay toban sano maalintii uu goostay barnaamijkiisii wax is baridda ahaa, wuxuu noqday khasnadda cilmiga oo ay kasbato walaayadda Newyork, waxaana loo doortay barasaabka magaalada Newyork afar jeer.

Sanadkii 1928-kii wuxuu isku sharaxay madaxnimada xisbiga Dimoqraadiga, lix Jaamacadood ayaana siiyey shahaado iyo darajo cilmi ah, waana ninkii aan dhaafin heerka dugsiga hoose. Wuxuu sheegay Al-Smith inaanu heerkaa gaareen haddii aanu toban sano ku tebin waxbarasho maalin kasta lix saac ah, umana ay suuroobi karten inuu jahligii cilmi u beddelo.

Markii aan si qoto dheer u dersay shaqooyinkii waaweynaa ee ay qabteen dadkii magaca dheer lahaa; waxaan si dhaba u rumeysanayaa in wixii ku xambaaray dadkaas inay hirgeliyaan shaqooyinkaas culus uu ahaa dareenkooda ah inay wax ka dhiman yihiin, waanay gurteen mirihii ay abuureen.

Waxaa suuragal ah inaan gabyaagii Wilton aanu dejiyeen gabaygiisii qiimaha weynaa haddii aanu indhaha la'eyn, Beerthoven ma allifi kareyn muusikada codka dheer leh haddii aanu dhegaha la'eyn, Tchaikovsky haddii aanu ku cadaabneyn guurkiisa ilaa uu ku fikiray inuu is dilo sooma saareen muusikada Caanka ah, sidoo kale Dostovsky iyo Tolsty haddii aanay ku dhibtoon noloshooda gaarka ah ma allifeen sheekooyinkooda waaray.

Wuxuu qoray Darwin abwaankii beddelay aragtida nolosha "hadii aynaan bukin oo aanan sariir saarneyn ma fuli karneen shaqooyinka aan fulino" maalintii uu ku dhashay Darwin dalka Ingiriiska waxa uu ku dhashay buul yar oo xun oo ku yiilay keymaha Kentucky, Abraham

Lincoln haddii uu ka dhalan lahaa qoys maal qabeen ah uuna qaadan lahaa shahaado heer jaamici ah; isla markaana uu ku liibaani lahaa guurkiisa ma awoodi kareen inuu jeediyo khudbadiisii waartay goobtii Gettyburg,

markuu socday dagaalkii sokeeye ee Mareykanka, kumana gabyeen tixdii qalbiyada soo jiidaneysay ee uu jeediyey markii lagu celiyey madaxnimadii Mareykanka, tixdaas oo uu ku bilaabay "qalbi aan shar u laheyn qof aadami ah, ayuu ka buuxaa jaceyl dadkoo dhan uu u hayo" wuxuu ku sheegay Harry Emerson kitaabkiisii (kartida wax qabadka), xagee nooga yimid ra'yiga qaba in nolosha baraaraha ah ee xasiloon ka fog tahay dhibaatooyinka iyo ciriiriga, may soo saarto raga waaweyn ee waxtarka ah? Arrinku waa sidaa liddigeed, dadka ku dhashay dhibka way wadayaan halgankooda xitaa haddii ay ku seexdaan xariir taariikhduna way ka marag kaceysaa in halyeynimadu u hoggaansantay rag ku kala geddisan waxyaabo badan.

Ku qaddar iney innagu dhacdo quus iyo qalbi jab oon ka rajo dhigno inaan nolosha ciriiriga ah u geddino nolol saafi ah oo macaan, waxaa jira labo sababood oo innagu xambaaraya inaan wadno isku deyga waxayna kala yihiin:-

- 1- Waxa suuragal ah inaan ku guuleysano gaaridda danteena.
- 2- Haddii aanu ku hungowno isku dayga laftiisa, isku beddelidda xumaanta iyo wanaagga waxay noo hogaamineysaa inaan horteena fiirino oo aynaan gadaal u noqon, maxaa yeelay waxaa inagu abuurmeysa fikrad dhismo iyo curin u hanqal taageysa, waxaanay innagu dhalinaysaa awood dhaqdhaqaaq oo innagu riixo inaan howlo isku shuqlino markaasna aan heli doono waqti aan ku tebino inaan ka murugoono waxyaabihii ina dhaafay.

Mar uu ka tumayay Ole Bull kabankiisii xaflad weyn oo lagu qabtay magaalada Baariis waxaa si kado ah uga go'ay mid ka mid ah xarkihii kabanka, markaas wuxuu ku waday xafladdii saddexdii xarig ee soo hadhay, lamana dareemin in dhibaataadaasi ka hor

timid, taasoo haddii aanu sidaa yeelin laga yaabo in xafladaa weyn lagu khasaari lahaa.

Halganka nolosha waa in sidaa loo wadaa, waa inaan loo aabo yeelin xarigga go'ay ee waa in lagu waddaa saddexda xarig ee soo hartay, haddii aan awoodi karo waxaan ku naqshadeyn lahaa loox macdan ah, dugsiyadoo dhanna waa lagu dhigi lahaa ereyadii uu yiri William Bolit oo ahaa "muhiim maaha inaad badiso ama dhaqaaleeyso faa'iidooyinka aad heshay maxaa yeelay doqon kasta sidaa waa fali karaa, waxaase muhiim ah inaad khasaaraha ku gaaray u beddeshid faa'iido, waana taas midda lagu kala sooci karo doqonka iyo nin karmeedka.

Marka si aad u hesho fikrad kuu soo jiiddo raaxo iyo liibaan raac murtida lamb 6-aad, haddii calaf kuugu dhaco liimo dhannaan isku day inaad u beddesho mid biyo macaan oo raaxo leh.

QEYBTA LIXAAD

SIDAAD UGA BOGSAN LAHEYD CUDURKA UUR-KU-TAALADA MUDDO LABA TODOBAAD AH

Markaan guda galay allifaadda kitaabkaan waxaan u bandhigay dadka abaalgud dhan 200 \$ qofkii keena qiso dhacday oo ku saabsan "sida uu uga adkaatay walbahaarka" waxaan u xilsaaray sadddexda garsoore ee kala ah;

- 1- Eddle Ricken Backer madaxa Sharikadda Dayuuradaha Bariga.
- 2- Dr. Stewart Meclellan Madaxa Jaamacadda Lincloin iyo
- 3- H.V. Kaltenbarn faaleeyaha wararka Raadiyaha.

Inay soo saaraan qisada ugu munaasabsan ee u qalanta abaal marinta aan sheegay, waxaana ka mid ah sheekooyinkii loo keenay labo sheeko oo modiba tan kale ka daran tahay, xagga quruxda iyo wanaagga, ilaa ay saddexdii garsoore kala saari kari waayeen labadii qiso, tan mudan abaalgudka, markaasaa loo qeybiyey abaalgudkii waana tan labadii qiso midkood, waxaana soo qoray C.R. Burton oo ah sarkaal ka shaqeeya sharikadda baabuurta gadda, wuxuuna ku bilaabay.

"waxay dhimatay Hooyadey anigoo sagaal sano jira, mar laga joogo 19 sano ayey guriga ka baxday iyadoo uu la jiro wiil yar oo ila dhashay, dibna uma soo noqon, saddex sano kadib maalintaa waxaa dhintay aabahay, waxaa jirtay in aabahay iyo nin kale wada gateen makhaayad tuulo yar ku tiilay, marka aabahay oo maqan ayuu ninkii gaday makhaayaddii; wuuna dhuuntay, wuxuu helay aabahay taar loogu sheegayo siday wax u dhaceen, markaasuu aabahay orod isku taabtay isagoo ka naxay khiyaanada saaxiibkii kula kacay, intuu sii socday ayuu baabuur jiiray.

Eddooyinkeey oo duqyaal saboole ah ayaa qaaday saddex gabdhood oo ila dhashay, aniga iyo walaalkeyna suuqaan ku soo dhacnay, horena waxaan uga baqi jiray inaan maalin uun noqdo agoon, weliba dib jir ah, waxaa noo naxariistay laba qoys oo ahaa dadkii tuulada deggenaa, qoys aniguu I qaaday qoysna walaalkey, waxyar kadib qoyskii aniga I

qaaday ninkii lahaa baa shaqadii ka baxay, markaas bay I heyn kari waayeen.

Markaa kadib waxaa ii yeeray Mr. Leftin si aan ula noolaado isaga iyo haweeneydiisa oo beer ku leh meel afar mayl u jirta baladka. Mr. Leftin markaa wuxuu ahaa todobaatan jir, markaan gurigii galay buu ii yeeray, wuxuuna igu yiri; 'waad nala noolaan kartaa, laakiin waxaa shardi ah inaad been sheegin, waxna xadin, amarkana khilaafin'. Saddexdii waano waxay ii noqdeen mabda'a aanan ka leexaneyn, wuxuu I geeyey Mr. Leftin dugsiga tuulada, intaanay todoba beri ka soo wareegin buu I arkay anigoo guriga jooga oo ooyaya, wuxuu I warsaday waxa igu dhacay? Waxaan ku iri; carruurtii dugisa baa igu jeesjeestay oo igu tiri waa agoon, markaas baan caradii isku celiyey, waxaana ku sigtay inaan dagaal galo, markaas buu Mr. Leftin ii qalbi qaboojiyey, wuxuu I siiyey waano iga bixisay wixii I hayey oo dhan oo waliba cadawyadeydii u geddisay saaxiibo daacad ah.

Wuxuu igu yiri Mr. Leftin Rolph "saaxiibadaa way kaa joojinayaan jeesjeeska iyo quursiga haddii aad u muujiso tixgelin iyo xanaano, una gargaartid inta tabartaada ah, isku day oo tijaabi wanadan, waxaad arki doontaa natiijada haddiiba; "waan tijaabiyey waanadii, waxaana bilaabay inaan caawiyo ardaydii u baahneyd in la caawiyo, xagga casharrada ku adag, curinta, xitaa qaar baan u qoray riwaayado dhan, qaarna waxaan u soo gaabiyey kitaab dhan oo aan siiyey, waxaan u soo jeeday habeenno dhan inaan baro ardayada ku liidatay maaddada xisaabta.

Waxaa dhacday in labo qoys oo deriskayga ah inay ka dhinteen ragii, midna ka tegay gurigiisii, aniga baa maciin u noqday saddexdii qoys, waxaan mari jiray guryahooda, markaan subixii u socdo dugsiga iyo markaan ka imaado. Xaabadaan u soo guri jiray, lo'da baan u lisi jiray, beerahaan u waraabin jiray, natiijadii si la yaab leh ayey ii farax gelisay, waxaan noqay qof meel kasta laga jecel yahay, halkii hore la iiga quursan jiray, waxaan u noqday dhammaan dadkii saaxiib daacad ah.

Waa dambe ayaan ku soo noqday tuuladii, markii aan ka baxay askarinimadii, waxay ii soo dhoweysay tuuladii si xamaasad leh, waxaa I soo dhoweeyey in ka badan (200) oo beeraley ah, qaarkood waxay ka yimaadeen meel 80mayl u jira tuulada aan imid, si ay ii soo dhoweeyaan, inta madaxeygu saan leeyahay ma hilmaami doono casharkaas, waxaanan iloobeyn in markii aan isku shuqliyey inaan dadka u gargaro shaqaabadnimadii u gaddoontay liibaan iyo sacaado cabsidii iyo walbahaarkiina isku kalsoonaan.

Mr. Burton wuxuu ahaa nin nasiib badan maxaa yeelay wuxuu bartay siduu saaxiib u kasban lahaa oo uu walbahaarka uga adkaan lahaa iyo siduu nolosha ugu raaxeysan lahaa.

Nin la oran jiray Dr. Frank Leope oo degenaa magaalada Seattle oo ka tirsan walaayadda Washington wuxuu qabay muddo 23 sano ah cudurka xubno xanuunka loo yaqaan, inkastuu uu sidaa ahaa hadana wuxuu yiri Start White House oo ahaa Qoraaga wargeyska Seattlee Star weligay ma arag nin la mid ah Dr Leope, waa nin naftiisa u daran dadka kalena u roon, wuxuu ku raaxeystaa raalli gelinta dadka kale.

Side bay ugu suurowday ninkaa sariirta ku ururay inuu ku raaxeysto noloshiisa? jawaabtu waxa weeye ma aheyn nin ku raaxeysta sheegasho, kacdoon iyo aargudasho, waxaa kale oo uusan ku raaxeysan jirin inuu naftiisa ku xeeyraamo oo calaacalo ama uu dadka ka doono inay u naxariistaan. Wuxuu sameystay mabda' toosan oo uu ku socdo oo dhahaya; "Anigu shaqaan diyaar u ahay" wuxuu ururiyey magacyada iyo meelaha laga heelo dadka jirran ee sariiraha ku ururay, sidaas oo kale wuxuu diyaariyey waraaqo uu kaga maaweelinayo dhibaataada heysata, iyo waliba waraaqo kale oo uu ku boorinayo inay geesinimo iyo calool adeyg yeeshaan dadka jirran.

Wuxuu curiyey urur ay xubnihiisu yihiin dadka jirran si ay isku bartaan, waraaqo ay isku baranayaana is dhaafsadaan, wuxuu gaaray ururkii heer waddaninimo, waxaana loo bixiyey "ururka bukaan jiifka", waxaa xubno ka ahaa ururkaa kumanyaal jirrooleyaal ah, wuxuu awooday Dr. Leope isagoo sariirta jiifo ayey u suurogashay inuu diro waraaqo ay

tiradoodu gaareyso 1400 warqadood sanadkii. Waraaqahaas oo ka fududeeyey dadkii jirranaa dhibkii heystay una noqday maaweelo iyo madadaalo ku geesinimo gelisay inay akhristaan buugag kale ama ay dhageystaan raadiyaha.

Marka maxaa u dheexeeya Dr. leope iyo jirrooleyaasha kale ee faraha badan? Wuxuu yahay farqiga u dhexeeya in Dr. Leeope dareensanaa naxariis iyo kalgacal uu u qabay dadka kale ee jiran, markaas buu ku dhaqaaqay inuu u raaxeeyo intii kartidiisa ah isagoon waxba ka rabin.

Wuxuu yiri Alfren Aldar oo aqoon yahan cilmi nafsiga ku ah; waa xaqiiqo lala yaabo oo aan ka caado yeeshay inaan dadka qaba jirrooyinka qalbi madoobaadka ku iraaqdo, waad ka bogsooneeysaan jirrada muddo laba todobaad ah, haddii aad tijaabisaan waanadan; "isku day maalin kasta inaad qof farax geliso" waxaa la moodaa in hadalkaan aan la rumeysan kareyn, sidaa awgeed waxaa ka soo qaadaneynaay erayo uu ku soo qoray Addle buuggiisa la yiraahdo "noloshu maxay kuugu filan tahay", wuxuu ku sheegay buugaas ereyadan 'jirrada qalbi madoobaadka run ahaantii kama baxsana calool xumo, xin iyo xaasidnimo loo qabo dad kale' inkastoo qofka jirran la moodo inuu calool xumada iyo ciriiriga u jeedinayo naftiisa si uu u helo cadfiga dadka iyo naxariistooda, waxaad arkeysaa marar badan inuu ka sheekeeyo waxyaabihii hore u soo maray.

Tusaale ahaan waxaan xasuustaa carruurnimadeydii inaan jeclaa inaan ku seexo sariirta, laakiin waxaa iiga horeyn jiray walaalkay iga weyn iigamana kici jiriin ilaa uu maqlo oohinteyda, dadka qaarkood waxay ka aargutaan naftooda markaas bay is dilaan, marka takhtarradu waa inay iska hortaagaan cudurdaarka ay dadkaas ku banneysanayaan isdilk.

Dariiqadeyda gaarka ah een kula isticmaalo dadka kacsan waxay ku kooban tahay inaan u bandhigo talooyin sida; "ha falin wax aadan jecleyn falistiin" waxaad moodaa inay taladaasi sahlan tahay, laakiin sida runta ah waxay taabanaysaa boogta mushkiladda. Maxaa yeelay haddii jirrooluhu falo wuxuu isugu rabo oo keliya, markaas ma jireen qof uu ka aarguto ama uu u jeediyo xin iyo xaasidnimo.

Waxaa dhici kara haddii ninka jirran aad warsato inuu falo waxa uu doonayo inuu yiraahdo "ma jiro wax aan doonayo inaan falo", wax badan bay sidaa ku jawaabaan, waxaan ku iraaahdaa markaas, "haddaba ha sameyn wax aadan rabin" qaarkood waxay ku jawaabaan marka aad warsato waxa ay doonayaan, "waxaan doonayaa inaan maanta oo dhan sariirta iska jiifo, waxaan ogahay haddii aan u raaco doonistooda inay iska dhaafi doonaan, haddii aan ka diidana ay dagaal igu qaadi doonaan, marka waxaan ku waafaqi jiray doonistooda.

Waxaa kale oo jirta dariiqo kale oo aan uga jeedo beddelaadda nolosha qofka jirran, taasoo ah inaan ku iraaahdo 'waxaad kaga bogsan kartaa jirradaada laba todobaad haddaad raacdo waanadan; 'isku day inaad wax u tarto hal maalin qof kasta' jawaabaha ay ka bixiyaan dadka buka su'aashan waa wax fiiro u baahan.

Qaar waxay dhaheen 'waan sameyn jirnay weligeen' mana aysan sameyn marna, qaar kale waxay dhaheen 'waan ka fekeraynaa' kama aysan fekerin, mid baan ku iri; waxaad awoodi kartaa waqtiga aad ku tebisno hurdada inaad ku fekerto inaad qof wax u tarto, sidaas baad dhaqso ugu boggsaneysaa, maalintii dambe baan weydiyey inuu ku dhaqaaqay taladii iyo in kale, wuxuu igu yiri; markaan sariirtii tegayba hurdaan la dhacay, marka ma helin waqti aan ku fekero'.

Waxaa la arkaa mid kale inuu ku jawaabo ma karayo inaan ku fekero wax kale, maxaa yeelay waxaa iga adkaaday walbahaarka, waxaan ku iraaahdaa 'ha dhaafin walbahaarka, laakiin marmar ku feker inaad qof wax u tarto" waxaa la arkaa in mid kale igu yiraahdo 'maxaan wax u tarayaa dad kale iyaguba wax ima taraane? Markaas baan ugu jawaabaa' Caafimaadkaaga ayaa u baahan" dad kalen jirradaada oo kale ayaa ku dhaceysa haddii aanay isku dayin inay ka shaqeeyaan liibaantaada'.

Waxaas oo dhan waxaan uga dan leeyahay inaan dadka jirran u jeediyo inay isku shuqliyaan arrimaha dadka kale, maxaa yeelay haddii qofku dhexgalo bulshadiisa ee uu noqdo xubin waxtar leh oo dadka la

dhaqma waa bogsaday qofkaasi, waxaanay ila tahay waxa ugu weyn ee diintu fartay waa jeceylka deriska iyo gargaarkiisa.

Qofkii aan dadka u gargaarin wuxuu astaahilaa inuu la kulmo dhibaatooyin iyo howlo fara badan, noloshu waxay ka rabtaa qofku inuu yahay qof howlkar ah oo wax dhalinaya, xagga dad jaceylka, run sheegidda iyo wax isu quurka.

Dr. Adler wuxuu inagu booriyey inaan ficil fiican sameyno maalin kasta, muxuu yahay ficilka fiican? Ficilka fiican waa midkii uu Nebi Muxumed sheegay (NNKH) oo ahaa inaad wejiga u furto una muusooto walaalkaa. Mr. William T. Moon oo maamule ka aheyd dugsiga Moon ee magaalada Newyork umay baahan laba todobaad si ay uga bogsato qalbi madoobaadka, waayo waxay isku dawaysay wax u taridda dadka kale, markaas bay ku bogsatay hal maalin oo keliya.

Waana tan qisadeedii iyadoo werineysa; "Mar laga joogo 5 sano waxaa igu dhacay dareen xun oo ah inaan shaqaabad ahay, markuu iga dhintay dhowr sano ka hor ninkeygii oo aan wax yar is qabnay, waxaa igu weynaaday ciriirigii, markii ay soo dhowaatay Ciiddii mowliid weligeyna wehel la'aan ma aanan ciidin, dad aanu saaxiibo nahay ayaa igu casuumay inaan la ciido, laakiin ma aana dareemin wax farxad ah, waxaan ka baqay inaan culeys ku noqdo, markaas baan ka cudur daartay casuumaddii.

Maalintii ka horeysay ciidda waxaa igu adkaday hamiga iyo qamigii, markaasaan ka baxay galab dheer xaafiiskii, waxaan qaaday jidka shanaad, anigoo meel aan u jeedo garaneyn, waxaan rabay oo keliya inaan iska fogeeyo ciriiriga iyo murugada, jidka waxaa buuxay dad faraxsan oo isku soo qurxiyey soo dhoweynta ciidda, waxaan soo xasuustay sidaan u ciidi jiray waayadii hore, waxaa igu adkaatay inaan gurigii ku noqdo keligey, waxaan qabtana waan garan waayey, markaas bay ilmo iga soo qubatay, wax yar kadib waxaan gaaray saldhiggii basaska, waxaan xasuustay sidaan aniga iyo ninkeyga u fuuli jirnay basaska inagoon meelna u dan laheyn si aanu isaga raaxeysano,

waxaan fuulay baskii iigu horeeyey anigoon ka war qabin meel aan u socdo.

Markii uu baskii gudbay Webiga Huson, waxaan maqlay wadihii baska oo leh 'halkaan buu ku eg yahay baska', ma garaneyn xitaa baladka aan tegay, laakiin wuxuu ahaa balad deggan oo xasiloon, anigoo sugaya baskii kale ayey igu soo dhacday inaan iska daawado baladka cusub ee aan imid, waxaan ku soo baxay kaniisad lagu feysteynayo, waan galay waxaan arkay in laga buuxo, kursi dambe ayaan iska fariistay iyadoon cidina I fiirin, waxaa ka soo baxay geedka ciidda mowliidka nuur midabbo kala duwan leh oo sida xiddigaha u dhalaalaya, waxaa I saameeyey muusikadii macaaneyd, aadna waan u gaajeysnaa oo waxaa cunto iigu daameysay saaka aroortii, iyo weliba daalkii dheeraa ee aan soo galay markaas baan kursigii ku seexday.

Markaan baraarugay ma aanan ogeyn meel aan joogo, waxaan arkay wiil iyo gabar yar oo yimid geedkii Ciidda Mowliidka, waxaan maqlay gabadhii oo ku leh walaalkeed iyadoo I soo tilmaamaysa "ma waxaa keenay Islaantan Sant Clouse" markaan kacay aad bay u baqeen carruurtii, markaas baan dejiyey oon soo dhoweeyey, waxaan arkay inay lebisnaayeen dhar xun oo liita, waxaan weydiyey waalidkood, waxay ii sheegeen ineysan waalid laheyn, sida dhabta ah aad baan ugu naxay, markaan isu fiiriyey ayaan darrada aan sheeganayo iyo xaalka labadan carruur ee aan cid waalid ah laheyn, gacantaan ka qabtay, markaas baan u iibiyey xalwo iyo haddiyooyin kale.

Waxaa I yaab geliyey in welwelkii iyo wehel la'aantii I gubeysay ay dabeylaha raaceen, waxay I siiyeen labaii carruur ee agoonta ahaa sacaadadii aan waayey muddo dhowr bilood ah, waxaa ila soo gudboonaaday inaan u mahad celiyo Ilaahii I dhowray carruurnimadeydii, waayo waxaan ku hoos noolaa oon la ciidi jiray labaddeyda waalid oo aad ii jeclaa iina naxariisan jiray, waxay ii fidiyeen labadii agoon samafal ka badan kii aan u taray, tijaabadaas waxay I bartay in liibaantu tahay samo is dhaafsi ama bixin iyo qaadasho.

Haddii aanu dadka wanaajino innagana waa la ina wanaajinayaa, waxaan awoodi karnaa inaan qorno kitaab ay ka buuxdo sheekooyin dadkoodu hilmaameen naftooda, oo markaan kasbaday caafimaad iyo liibaan, tusaale ahaan waxaan u soo qaadan karnaa Margret Tylor oo ka mid ah haweenka caanka ah ee Mareykanka, isla markaana aheyd qoraa weyn oo allifta riwaayadaha, laakiin riwaayada macmacaan uma dhigmaan qisada runta ah ee iyada qabstay.

Maalintii uu Jabbaanku weeraray Dekedda Pearl, waayo markaas waxay aheyd sariir ool oo waxay sariirta jiiptay 22 saacadood habeenkii iyo dharaartii, waxay qabtay wadna xanuun, markii ay ugu fogaato waxay gaari jirtay beerta gurigeeda, iyadoo cuskan garabka gabadha wehlisa, waxay tiri; Margret waxaan ku dhameysan lahaa nolosheeyda sidaa haddii aanu Jabbaanku na soo weerarin, waana tan qisadeedii siday u dhacday, "weerarka lagu soo qaaday Dekedda pearl aawgeed baladkii waxaa ka dhacay qas iyo qalalaase, gurigeyga agtiisana waxaa ku qarxay bamboo uu xooggii qaraxeeda iga soo riday sariirtii, waxaa u soo gurmaday goobtii ciidamada si ay u badbaadiyaan carruurta iyo haweenka, ugana fogeeyaan khatarta.

Waxaa ila soo xiriiray ururka Laanqeyrta cas oo ogaa in gurigeygu talefoon leeyahay, si ay uga dhigtaan meelaha dadka lagala xiriiro, waxay warsadeen qof kasta oo heli kara meel banaan oo la dejin karo dadkii laga soo qixiyey meelahaa khatarta ah, waxay ila socdsiiyeen meelaha ay joogaan qoysaska askarta, waxaan ogaaday in ninkeygii Commander Robert badbaaday oo nabad qabo, waxaan isku dayey inaan la socodsiiyo haweenka uu ragoodu nool yahay una bishaareeyo, kuwa kalena u tacsiiyeeyo, aad baanay u badnaayeen, waxaa lagu warbixiyey in weerarkaasi ku dhinteen (2117) oo saraakiil iyo askar isugu jirta waxaana la waayey 960 ruux.

Markii hore anigoo jiifa sariirta ayaan ku jawaabayey telefoonka, wax yar kadib, waxaan awooday inaan ku jawaabo fadhi, markii ay shaqadii sii badatay ee xaaladdii aad ii saameysay, waxaan is illowsiiyey inaan jirranaa, markaas baan ka kacay sariirtii dibna uguma noqon mar aan aheyn waqtig caadiga ah ee hurdada, waxaan filayaa in haddii aanu

Jabbaanku weerarkaa soo qaadi laheyn; inaan sariirta ku dhameeysan lahaa inta nolosha iiga hartay. Intii aan sariirta jiifay waan iska raaxeysanayey dadkuna way ii dadaali jireen, waxaanse xasuustaa iney inyar inyar iiga dhimanaysay ku dadaalka iyo dhaqaalaha nafteyda.

Sida runta ah masiibadii Pearl waxay ka midd aheyd masiibooyinka waaweyn ee Mareykanka taariikhda ku leh, inagusa waxay ii aheyd nimco weyn, waxaan ka helay awood aan qiyaas laheyn, maxaa yeelay intaan isku shuqlin lahaa nafteyda, waxaan isku shuqliyey danihii dadka kale, sidaas darteed iima harin waqti aan ku fekerro ama aan ugu dadaalo nafteyda.

Dadka ku qulqulaya bukaan socodyada iyo takhtarrada Cilmi nafsiga 33% way daweyn karayaan naftooda, haddii ay isku shuqliyaan arrimaha dadka kale, miyey kula tahay inaan fikradaan jeebka kala soo baxay? Waxaa kala soo baxay hadal uu yiri abwaankii cilmi nafsiga Carl Jung oo ah "33% dadka ka sheeganaya cudurrada kama sheeganayaan jirro la yaqaan oo la taaban karo, waxayse ka sheeganayaan waa howl la'aanta iyo ku raaxeysi la'aanta nolosha".

Waxaa laga yaabaa inaad is tiraahdo sheekooyinkaas aniga ima taabanayaan, haddaan la kulmi lahaa laba agoon ah habeenkii ciidda ama aan joogi lahaa Dekedda Pearl, anigoo raalli ah ayaan fali lahaa wixii ay faleen Mrs Moon iyo Mrs Margret, laakiin arrinkeynu waa ka duwan yahay kooda, anigu waxaan ku noolahay nolol isku mid ah, maalin kasta waa tii hore oo kale, wax masiibooyin iyo belaayo ahna ma qabo, marka sideen baan u caawin karaa dadka kale? Maxaanse u caawinayaa? Waa maxay faa'iidada iga soo galeyso gargaarka dadka kale? Run ahaantii su'aalahaani waa macquul, waana tan jawaabtooda.

Inkastoo noloshaadu isku dhowdahay maalmahaaguna isku eg yihiin, waxaa hubaal ah inaad la kulmeyso dad kala duwan maalin kasta, marka sidee baad ula dhaqantaa dadkaas?

Tuaale ahaan boostaalaha sanad kasta wuxuu gooyaa boqolaal mayl, isagoo waraaqo kuu wado, weli ma isku dayday xitaa hal maalin inaad

warsato gurigiisa, si aad u ogaato noloshiisa? Ma warsatay masawirrada carruurtiisa, marna si uu farax iyo faan ula dhaco? Ma weydiisay inuu ku noogay shaqooyinka isku midka ah muddadaa dheer? Sidoo kale waxaa la dhihi karaa dukaanleyda yaryarka ah, kuwa wargeyska kuu keeno iyo kuwa kabaha kuu caseeyo dhammaan dadkaasi waa aadami, waxaa hubaal ah inay u qeybsan yihiin sabool iyo hodon, waxay leeyihiin yididiilooyin iyo mala-awaalyo, waxay u baahan yihiin in lala wadaago hammigooda oo lagala qeyb qaato himilooyinkooda, wax ma uga xaqiijisay doonista dadkaas weli? Maalina ma u muujisay inaad daneeyneyso arrimhooda gaarka ah, waa kaa gargaarka aan ujeedo.

Lagaama rabo inaad noqoto "Florencia Nightingale" ama nin toosinaya bulsahda oo ka qeyb qaadanaya hagaajinta nolosha dadweynaha, laakiin waxaa lagaa rabaa intii ay awoodaadu tahay inaad gacan siiso dadka, adigoo ka bilaabi doono berriba dadka aad la kulmeysid, waxaad haddana is weydiin doontaa waa maxay faa'iidada, waxaas oo dhan dan ma iigu jirtaa? Liibaanta raalli ahaanshaha isku kalsoonaanta iwm, waa waxyaabihii uu ku magacaabay Aristotel, "daneystenimada dahsoon"

Zoroaster wuxuu yiri "wax u tarka dadku ma aha waajib, laakiin waa raaxo ku kordhineysa caafimaad iyo Liibaan", wuxuu yiri; Bin Janiin Farankal "markaad dadka liibaansiiso ayaad adna liibaaneysaa", wuxuu qoray Herry C. Link oo ahaa maamulaha xafiiska Newyork "liibaantu kuma timaado jid aan aheyn in qofku naftiisa hilmaamo kuna leyliyo isu loogidda gargaarka dadka", isku shuqlinta danaha dadka kale kuuma faa'ideyneyso oo keli ah daawada walbahaarka, ee waxaad kasbaneysaa saaxiibo cusub oo aad ka heleysid wax badan oo aad ku faraxdo, waxaad is weydiin kartaa sidee looga heli karaa?.

Mar baan warsaday su'aashaas lafteeda Wiliam Lyen Phelephs oo Bare ka ahaa Jaamacadda Yale, wuxuu ku jawaabay haddaan tago hotel, timajare ama dukaanka cuntada, waxaan ku iraaahdaa dadka ka shaqeeya ereyo farax geliya oo tabaanaya qofka, marmar waxaan isku

dayaa inaan ammaano haweeneyda aan wax ka gadanayo dukaankeeda iyo siday timaha u xamratay oo kale,

waxaan weydiiyaa tima jaraha 'miyaanu ka daaleyn lugaha uu ku taagan yahay maalintii oo dhan', markaas baan warsadaa sababta uu u doortay shaqada tima jaraha? Muddada uu ka shaqeynayey iyo inta qof ee uu u xiiray? Waxaan ogaaday in ku bilaabidda dadka in arrimahooda la daneeyo ay farax iyo raaxo gelinayso, waxaan xusuustaa maalin aan galay qolka cuntada ee tareen ay leedahay sharikadda New Haven Railway, waxaanay aheyd maalin aad u kulul, waxaan arkay habkii cuntada loo qeybinayey oo aad u daahaya, markii uu ii yimid adeegihii si uu ii warsado cuntada aan rabo ayaan ku iri 'waxaa hubaal ah in dadka jikada ku jira dhibaato weyn la kulmeen maanta xagga kulka qorraxda iyo dabka jikada labadaba".

Wuxuu bilaabay yarkii caay iyo caratan, waxaad moodaa inaan ku kiciyey caro ku ururay, markaasuu yiri isagoo qeylinaya "Alla! All! Waxaan ka shaqeynayey tareenka 19 sano, waxaan arki jiray dadka rakaabka ah oo ka sheeganaya cunto xumida iyo la daahidda, kana caroonaya kulka daran, laakiin ma arag adiga hortaa nin u muujiyey caadifad iyo naxariis cunta kariyeyaasha masaakiinta ah ee ku dhalaali gaaray kulka qorraxda iyo dabka jikada, waxaan Ilaahey ka baryayaa inuu badiyo dadka adigoo kale ah. Wuxuu la yaabay adeegihii markaan u aqoonsaday shaqaaluhu inay yihiin aadami oo aanay ka mid aheyn qalabka sharikadda tareenka, wuxuu dadku doonayaa in la tixgeliyo oo la aqoonsado qiimahooda".

Anigoo jooga dalka Ingiriiska ayaan la kulmay nin xoolo dhaqato ah, waxaan u amaanay Eyga uu u doortay inuu xoolaha u ilaaliyo, waxaan ka codsaday inuu iiga sheekeeyo siduu u baray wax ilaalinta, markaan ka tegay ayaan gadaal u soo fiiriyey, waxaan arkay isagoo Eygii kor u qaaday oo ciyaarsiinaya garabkana u salaaxaya, waxaan awooday maalintaas inaan farax geliyo ninkii iyo Eygiiba. Ma u malaynaysaa in nin sida William Phelleps ku firdhinayo jaceylkiisa dadka midig iyo bidix inuu ku dhaco walbahaar, ama uu u baahdo gargaar uu u fidiyo qof

anigoo kale ah? Maya sida runta ah marka maxaad isugu dayi weyday inaad noqoto isagoo kale?

Akhristaha sharafta lahow haddaad lab tahay ku raaxeyso akhriska sheekadan, sababtoo ah ahmiyad kuuma laha wax ku saabsan gabadh ayaan daran oo ku khasabtay rag badan inay soo doonaan, gabadhii ayaanka darreyd maanta waa ayeeyo, mar dhowr sano laga joogo ayaan habeen u hoyday gabadhaas iyo ninkeeda, waxaa la iigu yeeray inaan khudbad ka jeediyo tuuladii ay ku nooleyd gabadhaas, subixii bay igu qaaday baabuurkeeda si aan u gaaro meel 50 myl inoo jirtay oo laga raaco tareenka u noqonaya Newyork, intaan sii soconay ayaan ka sheekeysanay sida loo kasbado saaxiibada, markaas bay igu tiri Mr. Carnegie waxaan kuu sheegayaa qiso aanan weligay qofna uga sheekeyn xitaa ninkeyga, waxaan isla markiiba ogaaday inaan sheekadu ragga u dhadhameyn, waxay ii sheegtay inay ka dhalatay qoys sabool ah oo degganaa magaalada philedephia, waxay ku bilowday sheekadeedii sidan;

"Masiibada igu dhacday yaraanteydii iyo dhallinyaranimadeydiiba waxay aheyd saboolnimada igu habsatay, ma awoodi jirin inaan u raaxeeyo nafteyda sida gabdhaha kale ee asaagey ah ee meel igula nool, dhar cusub ma aanan qaadan kari jirin, waxaa I saarnaa dulli iyo fool xumo, waxaa igu dhacay cabsi ah in la igu ceebeeysto dharka xun ah ee aan xirto, markaan sariirta tago waan ku qarwi jiray kuna ooyin jiray, waagii dambe markay iga badatay quustii ayaan cadeystay inaan ujeediyo su'aal qof kasta oo ila soo fariista, su'aashaas oo ku saabsan naftiisa tijaabooyinkiisa fikradihiisa iyo mashaariicda uu ugu talo galay aayatinkiisa dambe, ugama jeedin su'aalahaasi inaan ku soo jiito qofka ee waxaan uga jeeday inaan qofka uga jeediyo dharkeyga foosha xun.

Waxaa ka dhashay su'aalihii aan dadka weydiinayey wax la yaab leh oon loo qasdin oo ah muddadii badneyd ee aan dhegeysaneyey hadallada, dadka iska waramaya ayaa I baray inaan ahmiyad siiyo hadalladooda, waayo waxaan u dhegeysan jiray si xiiso leh, ila aan hilmaamo nafteydii iyo dharkii aan qaridayey, waxaa ka sii yaab badneyd inay ii hargashay inaan ahay dhegeyste fiican oo geesinimo

geliya sheekeeyaha inuu ka hadlo naftiisa, si aan ugu raaxeeyo uguna abuurro qalbigiisa farax iyo sacaado, ilaa aan ka noqdo magaaladii gabadha ugu magaca dheer, markaas bay dhallinyaradii isku laayeen guurkeygii, ma maqasheen gabadhayahow qisadan aan soo sheegnay waa dariiqo guul leh ee bal sidaa ogaada oo ragga ku tijaabiya.

Waxaan u maleynayaa in dad badan oo akhrinaya sheekooyinkaas dhihi doonaan sheekadan ku saabsan ahmiyadda dadka kale iyo gargaarkooda waa sheeko aan qiimo ceynkaas ah laheyn ama wacdi diini ah, laakiin waxba nagama gelin dadka sidaas u fekeraya arrimahooda.

Haddaad Ra'yigaas qabto xor baad tahay, haddiise aad ku doodeyso in ra'yigaaga toosan yahay waxaad ku doodeysaa in Nebiyadii iyo feylasuufyadii is daba joogay intii ay taariikhdu jirtay sida Nebi Ciise, Confucius, Budha, Plato, Aristotal iwm ay gefsanaayeen.

Si kastaba xaalku ha ahaadee haddii aad ka fogaaneyso mabaadii'da diinta iyo Nebiyada bal dhageyso waanada labadan nin ee mulxidiinta (gaalo) ah, aan ku bilaabo Husnan oo bare ka ahaa jaamacadda Cambidge, wuxuu khudbad ka jeediyey jaamacadda sanadkii 1936-kii gabayada iyo dabeecadahooda, wuxuu yiri; "xaqiiqooyinka qof ku dhawaaqo waxa ugu weyn middii uu Nebi Ciise yiri oo ah 'qofka naftiisa u go'a waa hoogay, qofka naftiisa u hura darteenayna waa liibaanay" waa jiraan waacidiin badan oo sheegaya hadalkaas oo kale, laakiin Husnan waa mulxid Ilaahey ka go'ay oo mar ku fekeray inuu is dilo, haddana wuxuu dareemay in ninkii ku fekeray naftiisa keli ah inuusan ka helin nolosha wax qiimo leh, waxaana ku habboon inuu muteysto hoog iyo khasaaro, ninkiise ilaawa naftiisa si uu ugu gargaaro dad kale wuxuu helayaa raaxo, farax iyo qalbi deggan oo fayow.

Haddii aad la dhici weyday habka Husnan dhegeyso waanadan kale ee ku saabsan ninka Mareykanka ugu mulxidsan (ugu gaalsan) qarnigaan aynu joogno oo ah Theodore Dreiser oo ku jeesjeesay diimaha oo dhan kuna tilmaamay inay yihiin sheeko-baraleey iyo sheeko carruureed,

wuxuu yiri xagga nolosha "waa qiso uu werinayo doqon wax ujeeddo ahna malahan"

Inkastoo uu fikradaas khaladka ah ka qabay xagga diinta, hadana wuxuu yiri "haddii uu doono qofku inuu ku raaxeysto nolosha waa inuu ka qeyb qaato sidii ay dadka kale raaxo u heli lahaayeen, sababtoo ah raaxada qofku waxay ku tiirsan tahay raaxada dadka kale, sidoo kale raaxada dadka kale waxay ku tiirsan tahay raaxadaada". Marka haddii aan dooneyno inaan u soo jiidno raaxo dadka kale, waa inaan ku degdegno, maxaa yeelay waqtigiu waa socdaa, qofna dariiqa nolosha ma gudbayo, waxaan hal mar ka aheyn, marka haddii aan dooneyno inaan raaxo u soo jiidno dadka kale waa inaan ku degdegno.

Haddaba, haddaad dooneyso inaad iska dheereyso walbahaarka oo aad hesho nabadelyo iyo liibaan raac murtida lamb. 4-aad 'iloow naftaada oo isku shuqli danaha dadka kale, fal maalin kasta ficil wanaagsan oo ka farxi qofka kale".

MURTIDA CUTUBKA AFRAAD OO KOOBAN

1. Aan ka buuxino maskaxdeena fikradaha nabadda, geesinimada iyo caafimaadka, maxaa yeelay nolosheena waa waxa aynu u fekerno.
2. Ka dheerow aargudashada cadowgaaga, sababtoo ah haddii aad isku daydo sidaa, waxaad dhibeysaa naftaada in ka badan intaad dhibeyso cadowgaaga, haku lumin ilbiriqsi waqtigaga ah inaad ku fekerto cadowgaaga.
 - a. Intaad ka tiiraanyoon laheyd dadka ku jisaaray samafalkaaga, marka horeba filo jisaarnimada, xusuuso tobankii qof ee uu daweeeyey Nebi Ciise in mid keliya uga mahadnaqay.
 - b. Ogow jidka keliya ee ku gaarsiinaya liibaanta inuu yahay inaad ku sugin abaalgud samafalka aad fashay ee waa inaad ku faraxdaa wax u taridda dadka kale.
3. Mahadnaqu waa sida ubaxa oo kale, wuxuu u baahan yahay in la abuur oo la waraabiyo, marka haddii aad dooneyso in carruurta barato abaalgudka ku abuur oo ku barbaari si uu ula koro jirkooda.
4. Tiri nimcooyinka uu Eebbe kugu manaystay.
5. Ha isku ekeysiiyin qof kale, ahaaw naftaada, ogow iska yeelyeelka qofka kale inuu yahay dayacaad.
6. Marka nasiibku kuugu dhaco liimo dhannaan u beddel biyo macaan, ama ku dadaal inaad dhibkaaga dheef u beddesho.
7. Iska iloow naftaada oo isku day inaad dadka kale liibaan siiso si aad adiguna u liibaanto

CUTUBKA SHANAAD
QAACIDDO DAHABI AH OO LAGU JEBIN KARO WALBAHAARKA
QEYBTA KOOWAAD
SIDEY AABAHEY IYO HOOYADEY UGA ADKAADEEN WALBAHAARKA

Sidaan horay uga soo sheekeeyey anigu waxaan ku dhashay kuna koray beeraha webiga Missouri, qoyskaygu waxay ku noolaayeen nolol caadi ah, sida beeraleyda kale, hooyadey waxay maamule ka aheyd dugsiga tuulada. Aabahey wuxuu ka shaqeyn jiray beer uu ka qaadan jiray 12 \$ bishiiba, marka si ay nafaqadu noogu filnaato hooyaday ayaa gacanteeda ku sameyn jirtay dharka aan qaato iyo saabuunta aan dharka ku dhaqano.

Sida badan lacag ma aanan isticmaali jirin, waxaan geyn jiray suuqa burcad iyo ukun, waxaan soo dhaafsan jiray bur, sokor, bun iwm, ilaa aan ka gaaro 12 jir, ma gaari jirin sannadkii lacagta aan isticmaalo 50 senti ama nus \$.

Markaan galay dugsiga waxaan lugeyn jiray maalintii hal mayl, imana horjoogsan jirin barafka dhacaya iyo dhaxanta midna, wuxuu gaari jiray heerkulka -220C, markaan 14 jir gaaray waxaan ka deeqtoomay iskaalshooyinkii waqtiga jiilaalka. Waxaa la moodi jiray lugaheyga in baraf laga soo dhambalay, qabowgooda aawgii, uma maleyn jirin dunida inuu jiro qof lugihiiis diiran yihiin.

Labadeyda waalid waxay u shaqeyn jireen sida qowsaarada oo kale, waayo waxay shaqeyn jireen 16 saacadood maalin kasta, inkastoo ay sidaa u dadaali jireen; hadana deyn kama bixi jirin oo aad bay u nasiib xumaayeen. Duufaantii isdaba joogga aheyd ayaa beeraha naga goyn jirtay, markaasuu daadku dalagga naga qaadi jiray, waxaana ka dhalan jiray daacuun calooleed xoolaha laaya sanad kasta, mar baan ka nabad galnay daadkii laba sanadood oo isku xigta, beerihii baa noo baxay, xoolihii baa noo cayilay, laakiin nasiib darro xoolihii baa baaray oo wixii saafi noogu soo haray oo sanadkoo dhan lagu soo dadaalayey waxay noqdeen 30\$ keliya.

Markaan muddo dheer wadnay shaqo culus oo adag ayaan noqonay sabool gacmo maran, waxaana naloo qabsaday deyn fara badan, ilaa aan rahan gelino beertii aan ku nooleyn, waxaa nooga sii darnaa dhibaataadii uu noo geystay qofkii lagu rahmay beerta oo noogu hanjabi jiray inuu naga xaraashi doono beerta.

Aabahay markaas wuxuu ahaa 47 jir, markuu xaalkiisu dhaafi waayey deyn loo heysto iyo aflagaaddo waxaa ku dhacay walbahaar, caafimaadkiisiina wuu xumaaday, cuntadii buu ka tagay, miisaankiisiina hoos buu u dhacay, wuxuu u sheegay nin takhtar ah hooyadey inuu aabbe ka rajo go'ay nolosha, wax badan baan ka maqli jiray hooyadey iyadoo leh, 'haddii uu odaygu dib uga dhaco waqtigii uu imaan jiray, waxaan ka cabsi qabaa in la arko isagoo xarig ka laalaada oo is daldalay', waxaa haddana dhacday in bangigii ku hanjabay inuu beerta naga xaraashi doono. Maalintaas markuu ka soo tallaabay aabahay webiga wuu istaagay, wuxuu ka soo degay gaarigii. Wuu lugeeyey, wuxuu is hor taagay webigii, wuxuu ku fekeray inuu isku tuuro oo ay halkaas ku dhamaato mushkiladda heysta, waxaase iska hortaagay inuu isku tuuro webiga siduu isagu ii sheegay waa dambe iimaankiisa xididdada dheer ee uu aaminsanaa inuu Ilaahey faraj u furi doono. Aabahay waa ku toosnaa iimaankiisa, waayo farajkii waa yimid, dhibkii kadib, wuxuu ku noolaa liibaan iyo barwaaqo 42 sano maalintii intii ka dambaysay ilaa uu ka dhinto 1941, isagoo 89 sano jir ah.

Hooyo iyadu may walbahaari jirin, waxay ku daweyn jirtay mashaakilka ka hor yimaada salaad iyo duco, waxay wada akhriyi jireen aabbe iyo hooyo aayado ay ka soo xusheen kitaabka Injiil oo ay ku wada duceysan jireen in Ilaahey naxariis iyo nabadgelyo siiyo.

Wuxuu yiri William James oo ahaa Bare falsafadda ka dhiga jaamacadda Harvard, 'waxaa xaqiiqo ah daawada ugu weyn ee lagu daweeyo walbahaarka inay tahay iimaanka, loomana baahna inaad arday ka noqotid jaamacadda Harvard si aad xaqiiqadaas u gaarto, maxaa yeelay aabahay iyo hooyadey way gaareen iyagoo ku nool tuulo duufaantii, daadkii isdaba joogga ahaa, deyntii lagu lahaana muu giligilin iimaankooda xoogga iyo bishaarada leh ee liibaansan', weli

waxaa dhegahayga ka sii qeylinaya codkii hooyadey iyadoo ku heeseysa heeso diini ah, markii ay guriga ka shaqeyneyso, waxaa ka mid ahaa heesaha ducada ah "Ilaaha naxariista badanow ka buuxi nafteyda ammaan iyo wanaag, ilaahow igu beer iimaanka kana buuxi qalbigeyga iyo Laabta".

Hooyadey waxay dooneysay inaan diinta u adeego, aniguna wax badan baan ku fekeray inaan noqdo waacid waddan shisheeye, laakiin markii aan Jaamacadda galay waxaa igu dhacay isbeddel weyn, waxaana batay cilmiga bayolojiga, falsafadda diimaha iyo culun kale, oo kala duwan, waxaan akhriyey kutub badan oo fasiraysa kitaabka Injiil, waxaan bilaabay inaan ka shakiyo wax badan oo Injiil lagu sheegay, waxaa igu dhacay jaha wareer sida uu sheegay Walt Whitman, "ninka ku maman xaqiiqada wax kasta waxaa maskaxdiisa isku cidhiidhiya su'aalo aan la koobi Karin", waan garan waayey waxaan rumeeyo ama beeniyo!, noloshee waxay iigu muuqatay waxaan faa'iido laheyn, waxaan joojiyey salaaddii iyo cibaadadii, waxaan ku dhowaaday iimaan la'aan, waxaan u arkay noloshu inay ku socoto ujeeddo la'aan, dadkuna qasdi la'aan yahay, sidii xayawaankii Denosar ee weynaa ee dunida ku noolaa waqti laga joogo 200 milyuun oo sano, dadkuna inay ku dambeyn doonaan sidii xayawaankaas oo kale oo tirmi doonaan.

Waxaan ogaaday in qorraxdu kuleylku ka yaraan doono inyar inyar, haddii uu ka dhinmo 10% kulka waxaa dhulka ku nool oo dhamina way halaagsamayaan, markaas baan fageystay Ilaaha abuuray cirka dhulka iyo dadka ku rakiban, wanaagga iyo anshaxa toosan. Waxaan ku dhowaaday inaan rumeeyo in dhulka cirka iyo caalamkii oo dhan oo ay ka mid yihiin balaayiinta xiddigaha ah ee ifaya iyo meerayaasha nuurka soo celiya ee wareegaya hawada mugdiga ah, ee ay abuurtay awood indho la' oon wax garad laheyn, ama inaan la abuurin ee ay weligeed iska jireyso waqtiga iyo makaanka.

Ma kula tahay inaan xaqiiqa ka gaaray su'aalahaas ama aan ka bogsaday shakigii iyo waswaaskii igu dhacay yaraanteydii? Jawaabtu waa maya, "ma jiro qof fasiri kara sirta jirista dunida iyo nolosha" maxaa yeelay, waxaa dhan kasta kaga xereysanahay sir qarsoon,

aaladda jirkaagu waa sir, sidoo kale xoogga korontada guriga kuu ifinaya, ubaxa beerta kuu bilaya iyo cagaarka aad ka daawanayso dariishadda.

Wuxuu ugu deeqay Charles F. Kettering oo Injineer ka ahaa warshadda General Motor 30 kun oo \$ kulliyada Antioch sanad kasta, wuxuuna ka bixinayey jeebkiisa gaarka ah si loo baaro sirta cagaarka, wuxuuna yiri "haddii aanu garano si ay geeduhu ugu beddelaan iftiinka xoraxda biyaha, Ogsidhka labaad iyo kaarboonka sonkorta ay nafaqeystaan, waxaan awoodi laheyn inaan beddelno wejiga dunida. Laakiin jahliga aan ka qabno sirta jirkeena iyo muuqaalka koonka innagu xeeran nagma hor joogsan karaan ku isticmaalka dunida iyo ku raaxeysiga, sidoo kale jahliga aan ka qabno sirta diinta inooma diideyso inaan ku raaxeysano nolosha ruuxiga ah ee heerka sare ah ee ay diintu u soo jeedisay dadka rumeeya.

Waxaan ogaaday ugu dambeystii xikmaddii uu sheegay Santayana oo aheyd "looma abuurin qofka inuu nolosha garto, laakiin waxaa loo abuuray inuu ku noolaado", haddaba waxaan ku dhowahay inaan iraaqdo 'waxaan u soo noqday diintii, laakiin ereyadaasi ma waafaqsana xaqiiqada sida aan ahay, waxaa runta u dhow inaan iraaqdo waxaan yeeshay aragti cusub xagga diinta, mana dareemayo khilaafka kala geynayo dadka kiristaanka ah, waxaa ii daran faa'iidada ay diintu ii leedahay guud ahaan sida ay faa'iidada iigu leedahay korontada, cuntada wanaagsan iyo biyaha nadiifka ah, waayo waxyaabahaasi waxay igu cawinayaan inaan ku noolaado nolol reyneyn ah, diintuna waxay igu caawineysaa inaan ku noolaado si ruuxi ah oo I raalli gelisa ina dareensiisa raaxo iyo xasiloonaan.

Sida uu yiri William James diinku wuxuu u siinayaa "lixaad adag oo ii hogaamiya nolol iyo xasiloonaan I raalli gelisa, wuxuu I siinayaa inaan ku noolaado himilo iyo yididiilooyin wanaagsan, wuxuu iga fageynayaa cabsida caloolyowga iyo walbahaarka, wuxuu iiga dhigayaa nolosha mid ujeeddo iyo qasad leh, wuxuu ii furayaa irdaha liibaanta, wuxuu iigu gargaarayaa inaan ka dhex sameysto nolosha abaarta ah bustaan barwaaqo ah".

Francis Baccon wuu toosnaa markuu yiri; waqti laga joogo 350 Sanadood ka hor "wax yar oo falsafo ah qofka waxay ka dhigeysaa gaal ama way gaaleysiineysaa, laakiin marka uu qofku u barto falsafadda si xeel dheer, wuxuu u dhowaadaa inuu diinta u soo noqdo".

Waxaan ogahay in dadku aanu heysan sheeko kale waxaan ka aheyn kala fageynta diinta iyo cilmiga, laakiin murankaasi maanta wuu dhamaaday dibna u soo noqon maayo, sababtoo ah cilmiga ugu cusub cilmiyada oo ah takhtarnimada cilmi nafsiga wuxuu dadka ugu bishaareynayaa mabaadii'da diinta, waayo? Waxay ogaadeen takhtarrada cilmi nafsiga in iimaanka xoogga leh iyo ku dhaqanka diinta ay kafaalo qaadayaan in laga adkaado walbahaarka, cabsida iyo gadoodka xididdada dareenka (neerfaha), waxyaabahaas baana dhaliya in ka badan kala bar cudurrada aanu ka sheeganayno.

Wuxuu yiri Dr. A. A. Brill oo ka mid ahaa aqoonyahanada cilmi nafsiga "qofkii si dhab ah diinta u heysta kama sheegto cudurrada nafta iyo jirrooyinka neerfaha" waayo haddii aanay diintu run aheyn nolosha micno ma yeelateen, waana xog la yaab leh.

Waxaan la kulmay Henry Ford wax yar ka hor dhimashadiisii, waxaan filayey inaan arki doono isagoo taag daran oo taqwad guuray, sababtoo ah wuxuu nafta ag dhigay dhisiddii sharikadda ganacsiga ee dunida ugu weyneyd, waxaanse ku arkay inuu yahay nin deggan oo xasiloon, inkastoo uu cimrigiisu gaaray 78 sano, waxaan weydiiyey inuu la kulmay noloshiisii wax walbahaar ah? Wuxuu igu yiri "maya, maxaa yeelay waxaan aaminsanahay inuu Ilaahey xukumo arrimahayga oo uusan iiga baahneyn waano, marka arrimaheyga isagaan u talo saaran, marka maxaan ka walbahaarayaa"

Waxay iigu muuqdaan takhtarrada maanta jira inay yihiin waacidiin nooc cusub ah mana nooga digayaan cadaabta aakhiro, laakiin waxay inooga digayaan cadaabka dunida aynu hadda ku nool nahay, sida boog-caloolleedka iyo gadoodka xididdada dareenka, haddii aan doono tusaale ku saabsan waxay dadka ku wacdiyaan takhtarrada cilmi

nafsiga akhri kitaabka uu allifay Henry Slink oo la yiraahdo "ku noqoshada diinta".

Waxaan ku soo sheegnay cutubkan bilowgiisii inaan garsoorayaal u doortay iney soo xulaan sheeko dhacday oo ku saabsan sida looga adkaaday walbahaarka tii ugu wanaagsaneyd, waxaanse la kala saari waayey laba sheeko oo kala daran ilaa loo qeybiyey abaal marintii, labadii qiso mid waan soo sheegnay, tii kalena waa tan, waxayna ka sheekeyneysaa haweeney la kulantay dhibaato adag, ilaa ay ku badbaaddo diinta, aan u bixinno haweeneydaa Mary Cushman, maxaa yeelay waxay leedahay carruur ka damqaneysa inay maqlaan dhibaataada hooyadood oo la faafinaayo, waana tan qisadii oo ay werineyso haweeneydii.

"Markii dhibaataada dhaqaale xummo ku dhacday dalka Mareykanka ninkeygu wuxuu qaadan jiray 18 \$ todobaadkii, sababtoo ah ninkeyga oo jirranaa oo marmar aan shaqada tegi kari jirin, waxay dantii nagu qasabtay inaan iibino gurigii aan degeneyn, waxaan laheyn 5 wiil, wixii oo dhan way na deeqi waayeen, wuxuu nagu yeeshay dukaanlihii aan biilka ka qaadan jirnay 50 \$, waxaan dharka u dhaqi jiray dadka deriska noo ah, waxaan u soo iibin jiray caruurteyda dhar duug ah oo huudhey ah, waxaa igu dhacay walbahaar iyo tiiraanyo, waxaa iiga sii darnaa in dukaanlihii aan biilka ka qaadan jirnay uu ku eedeeyey wiil aan dhalay oo 10 jir ah inuu ka xaday laba qalin, yarkii markuu maqlay warkii aad buu u xanuunsaday, maxaa yeelay wuxuu ahaa wiil aamin ah, waana dareen dhowaa, eeddaasina waxay ku ceebeysay dadka asaagiis ah dhexdooda, waxaanay dhaawacday qabkiisii, arrinkaasi aad buu ii xanuunjiyey, wuxuuna igu reebay uur ku taallo igu abuuray nooc waalli ah marka loo fiirsho wixii aan ku kacay.

Intaan istaagay ayaan soo xirtay dariishadihii qolka, waxaa I fiirisay gabadheydii yareyd oo I warsatay waxaan falayo, waxaan ku iri; waxaa jirta dabeyl xun oo inaga xirayaa, markaas baan inta furay gaas sun ah jiifsaday sariirtii, yartiina bogga ayaan gashaday, waxaanay aheyd goor barqo ah, yartii baa I tiri, waa maxay yaabkan hooyo!, soo hadda hurdo kama aynaan kicin? Markaas baan ku iri; dhib maleh, wax yar

ayaan haddana seexanaynaa, indhihii baan isku qabsaday, waxaa dhegta iiga soo dhacay sanqarta neefta gaaska ka soo baxaya tubada, waxaan dareemay inay sanku iga soo galeyso suntii, waxaan si kedis ah u maqlay muusikada raadiyaha oo aanan damin, markaas baan is iri; ha iska daarnaado', waxaan ka maqlay isagoo ku celcelinaya hees ah sidatan; "Wanaagsanaa Ilaahey naga gargaari ogaa murugta iyo welwelka, wanaagsanaan laheydaa inaan Ilaahey ku barino qalbi saafi ah, waxaan ugu dhaceynaa masiibooyinka iyo cadaabta dunida qalbi saafi ah ayeynaa Ilaahey ula tagin".

Markii aan dhegeystay heestii raadiyaha ayaan ogaaday inaan gef weyn oo fool xun ku kacay, weligayna aan gefsanaa, gefkaas oo ahaa inaan dagaalka nolosha keligeys galay, anigoo aan Ilaahey ku tiirsanaan, ugamana dacwoon Ilaahey dhibaataada I heysata ee hamiga iyo qamiga ah, waxaan ka booday sariirtii, waxaan xiray gaaskii suntan ahaa, waxaan furay dariishadihii iyo irdihii, markaas baan Ilaahey u towbad keenay oo aan maalintii oo dhan Ilaahey baryayey. Laakiin Ilaahey kama baryin inuu iga saaro dhibka I heysta, waxaanse uga mahadnaqay nimcadii uu igu maneystay markuu I siiyey 5 caaruur ah oo wada caafimaad qaba, waxaan ballan qaaday in aanan mar kale dafirin nimcadaas iyada ah, ballankiina waan fuliyey, xitaa markaan gadnay gurigii aan ku jirnay si aan u helno nafaqada ilmaha darteed, waxaan u guurnay guri xun oon ku ijaaranay 5\$ bishii, waxaan Ilaahey uga mahad celiyey inuu na siiyey guri aan ku hoyano, Ilaahey waa iga abaal mariyey mahad celinteydii, xaalkayaguna waa iska hagaagay waayadii dambe, anigu waxaan helay shaqo, wiilashiina mid kasta shaquu helay oo lisi jireen 13 sac habeen iyo maalin.

Maanta Ilmihii way wada koreen, way wada guursadeen, qaar caruur bay leeyihiin, markaan xasuusto maalintii aan furay gaaska sunta ahaa, waxaan Ilaahey uga mahadnaqaa inuu igu hanuuniyey waqti munaasab ah inaan xiro tubada, haddii aan dhameystiri lahaa ficilkii doqonimada iyo gaalnimada ahaa kuma aanan raaxeysteen nimcooyinka aan hadda ku jiro, markaan maqlo qof doonaya inuu is dilo, waxaan jeclahay inaan ku qeyliyo oon dhaho, 'ka joog Ilaahey baan

kugu dhaariyaye, maxaa yeelay saacadaha adag ee ciriiriga ah ma raagaan oo waxaa ka dambeeya waqti wanaagsan oo saafi ah".

Waxay caddeyneysaa tiro-koobyada laga sameeyey Mareykanka in 35 daqiiqaba uu hal qof is dilo, 2-dii daqiiqana uu hal qof waasho, isdilka iyo waallida badankeed waa laga nabad geli lahaa haddii ay dadkaasi heli lahaayeen ammaanta degenaanta iyo xasiloonaanta diintu dadka fareyso. Dr. Carl Jung wuxuu ku sheegay kitaabkiisa "qofka caasiga ah wuxuu baadi goobayaa ruux".

Soddonkii sano ee la soo dhaafay waxaa iga codsaday inaan la taliyo dad badan oo ka kala yimid waddamada horumaray, waxaan daweeeyey boqolaal jirranaa, welina lama kulmin mushkilooyinka ay sheegayaan, dadka gaaray 35 sano oon aasaaskeeda aheyn iimaanka oo ay waayeen iyo mabaadii'dii diinta oo ay ka dheeraadeen, waxay isu loogeen cuduro, markii ay naftooda ka dheereeyeen nabaddii iyo xasiloonaantii ay diintu dadka u soo jeedinaysay, qofku wuxuu ku cafimaadi karaa markuu soo ceshado iimaankiisa lana kaashado arrimaha diintu fareyso ee xagga ka hortagidda dhibaatooyinka.

Wuxuu yiri William James "iimaanku wuxuu ka mid yahay xoogagga lama huraanka ah ee qofka ka caawiya nolosha, la'aantiisuna waxay digniin u tahay qofku inuu dhibaato kale kala kulmi doono nolosha".

Mahadma Gaandi, hogaamiyihii Hindiga ugu muhiimsanaa ilaa waqtigii Budha, wuu ku hungoobi lahaa nolosha haddii aanu la kaashan salaadda iyo ducada, isagaana sidaa sheegay markuu yiri; sida runta ah diin la'aan waxaan noqon lahaa doqon caqli gaab ah waa hore', kumanyaal dad ah waxay awoodi karaan inay hadalka Gaandi oo kale yiraahdaan, waxaa ka mid ah aabahay oo ku sigtay inuu webiga isku tuuro, waxaana ka horjoogsaday iimaankiisa oo keliya.

Waxaa laga yaabaa iney jirrooyinka ka bogsan lahaayeen kumanyaalka ka dhex qeylinaya cusbitaalada cudurrada maskaxda haddii ay Ilaaheey gargaar ka baryi lahaayeen intay keligood gelayaan dagaalka nolosha, iyagoon xagga Ilaahey ka heysan gargaar iyo taageero, markay

masiibadu ina wiiqdo balaayaduna ina jahawareeriso ee dadka badankiisu ka quusto wax kale ayey Ilaahey xasuustaan, marka maxaan u sugaynaa intaanu heerkaa gaareyno, maxaan xooggeena u saari weynay ducada iyo mahadnaqa eebaheen.

Todobadii sano ee aan ku tebiyey allifaadda kitaabkan, waxaan ururiyey boqolaal tusaale iyo qisooyin dhacay oo ku saabsan rag iyo dumar awooday iney iskaga daweeyaan walbahaarka, ducada iyo xiriirka Ilaahey, oo ay wanaajiyaan, haddana waxaan idin soo hor dhigayaa qiso tusaale ah oo uu qoray wiil quustay oo qalbi jabay, lana yiraahdo John Ranthony oo hadda Qareen ka ah magaalada Houston, waana tan qisadiisii isagoo werinayo.

"Waxaan u shaqeyn jiray shirkad, shaqadeyda khibrad iyo aqoonba waan u lahaa, inta aanan u tegin qofka aan wax ka iibsanayo waxaan ururusan jiray xog warran ku saabsan qofka kaalinta uu kaga jiro bulshada, dabeecadda shaqadiisa iyo balwadiisa, marka aan la kulmo waxaan ku isticmaali jiray xogtii aan ka urursaday, laakiin arrinku sidaan rabay uma dhici jirin, waanay yareyd inaan ku guuleysto shaqadeyda. Waxaa igu dhacay welwel iyo walaac, waxaan labanlaabay dadaalkii, laakiin badeecadii aan iibinayey isma aanay beddelin, ilaa ay deeqi weydo nafaqadeydii, waxaa igu dhashay cabsi ilaa aan qaabili kari waayo dadkii rukunka ii ahaa, haddii aan tago xafiisyada gatayaasha waxaa iga adkaanayey cabsida, waxaan warwareegi jiray xafiiska gataha korkiisa, anigoo ku fekeraya inaan u tago iyo in kale, ilaa ay geesinimadii iga baaba'do, oon ku dhici waayo inaan galo, ugu dambeystii anigoo is tirtirsiinayo ayaan garaaci jiray xafiiska gataha, anigoo jecel in aanan ka helin xafiiska gatihii aan u socday.

Shirkadii aan u shaqeynayey waxay ii soo dirtay digniin ah inay joojin doonto kutubta ay ii soo direyso haddii aanan kordhin iibinta kutubta. Anigoo xilkeygu heerkaa marayo ayaan ka helay xaaskeyga waraaq ay iiga codsaneyso inaan u diro lacag biil ah, oo ay isaga bixiso deynta dukaanlaha iyo cuno kale oo ay biishaan, iyada iyo saddex wiil oo ay ii heysay, markaas buu walbahaarkii I sii gubay, quustiina sii badatay

maalinba maalinta ka sii dambaysa, waxaan sameeyo ayaan garan waayey, markaas ka horna xafiis garyaqaan oon ka furtay magaaladeydii ayaan soo xiray, hadana waxaa ii muuqday inaan ku hungoobay shaqadan cusub, waxaan waayey wax lacag ah oo aan isaga bixiyo hoteelka aan seexdo iyo nooli aan ugu noqdo magaaladeydii midna, xitaa haddii aan heli lahaa nooli kuma hagaagi kareen reerkii anigoo fara maran.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaan ku soo noqday hoteelkii aan seexan jiray, anigoo baaba'san, qalbi jaban, calool xun oo aan waxba heysan, dhalo caano ah mooyee, habeenkaas waxaan ogaaday sababta ay dadka qaarkood isu dilayaan iyagoo iska tuuraya dariishadaha guryaha dhaadheer, aniguna waxaan gaaray heer aan dadkaa ku daydo, haddaan geesinimo u heli lahaa, waxaa igu soo dhacay inaan Ilaahey xagiis u jeesto, una sheegto dhibaatooyinkeysa, waxaan bilaabay inaan Ilaahey baryo si uu iigu ifiyo jid aan kaga baxo mugdiga aan ku jiro, uuna ii barakeeyo shaqadeyda, si aan u helo dhaqaale aan xaaskeyga iyo carruurteyda ku daryeelo.

Markii aan dhameeyey ducadii, waxaa dhacday mucjiso weyn, waayo waxaa isla markiiba iga baaba'ay walbahaarkii, neerfihii kacsanaa waa ii degay, cabsidiina way iga baaba'day, waxaan iska dareemay geesinimo, rajo iyo iimaan.

Inkastoo aanan heysan kharash aan isaga bixiyo hoteelka, hadana waxaan heystay sacaado iyo raaxo, habeenkaas waxaan seexday hurdo aanan seexan dhowr sano, subixii waxaan ku kallahay xafiisyadii gatayaasha, waxaan is arkay anigoo ku degdegaya xafiisyadii aan hor warwareegi jiray, waxaan ku garaacay xafiiskii iigu horreeyey, gacan deggan oon giriireyn, waxaan galay anigoo madaxa taagaya, weji furan oo hadal cadcad, markaas baan idhi, subax wanaagsan Smithe, anigu waxaan ahay John, waxaan ka socdaa Shirkadda Mareykanka ee libisa kutubta qaanuunka, wuxuu iigu jawaabay isagoo muusoonaya oo ii soo kacay ina gacan qaday, soo dhowoow, waan ku faraxsanahay aragaaga, maalintaa waxaan gaday kutub ka badan intii aan gadi jiray todobaad dhan, waxaan soo hoyday galabtii anigoo faraxsan oo

faanaya, sidii geesi ku guuleystay goob dagaal, waxaan dareemay sidii anigoo abuuris cusub la ii abuuray.

Sida runta ah waxaan noqday qof cusub oo uu feker cusub ka buuxo, habeenkaa kumaan casheynta galas caano ah, sidii habeenadii hore, laakiin waxaan ku casheeyey hilib shiilan, khudrad iyo furuto, maalintaa wixii ka dambeeyey waxaa sii hagaagay xaalkeygii, wax iibinta kutubta oo aad kor iigu qaady xagga isku kalsoonaanta, waxaa ka soo wareegay 21 sano habeenkii ay murugada I madoobaysay ee aan hurdo ladi waayey, laakiin waxaan dhihi karaa waxaa ii bilaabatay nolol cusub iyo taariikh cusub, waana habeenkii aan ku baraarugay xiriirka Ilaahey igu xiraya, "ninkii keligii dagaalka gala si fudud buu u jabayaa, ninkiise gala isagoo Ilaahey cuskan oo gargaarsanaya weligii ma jabaayo".

Haweeney la oran jiray Mrs. L. G. Bair oo ka tirsaneyd magaalada Pigiiland, waxay ku qanacday casharkan markii ay ka hor timid masiibo xanuun badan, waana tan qisadeedii iyadoo werinaysa, "habeen baa taleefoonka gurigeyga yaal aad u garaacay, waan ku dhici waayey inaan qabto; waayo, waxaan ka baqay inuu ii sheego war xun oo ku saabsan wiilkeyga oo ku jiray isbitaalka sidii baan u noqday taleefoonkii, maxaa yeelay takhtarkii baa naga dalbay inaan si dhaqso ah ugu tagno, kama sheekeyn karo welwelkii nagu dhacay, aniga iyo ninkeyga intii aan fadhinaay qolka lagu sugo takhtarka, markii aan u galnay takhtarkii caalamadihii ka muuqday wejigiisa aad bay wadnaheyga u waxyeelleeyeen, hadaladiisuna argagixo bay inoo keeneen, wuxuu nagu yiri; "si uu ku badbaado wiilkiinu way adag tahay, waxna kama qabo haddii aad takhtar kale u bandhigtaan", markaan ka soo noqonay isbitaalkii waxaa ku dhacay ninkeygii welwel iyo naxdin, markaas buu inta feer duubtay oo hawada feeray yiri "ilaah baa igu oge in aanan wiilkeyga mowd u oggolaan Karin", markaas buu ooyey waana fool xun tahay oohinta ragga.

Waxaan galay kaniisadii iigu horeysay, markaas baan Ilaahey baryey, iyadoo ay ilmadu iga da'eyso, kamana badin ducadii ereyadan "ha jirto iraadadaadu Ilaahayow", markiiba waxaan dareemay nagaadi iyo

nabadgelyo igu soo degay, intii aan guriga ku sii soconnay waxaan ku sii celcelinayey ereyadii ahaa "ha jirto iraadadaadu Ilaahayow", habeenkaa waxaan seexday hurdo weyn oonan ka bararugin, dhowr beri kadib, waxaa nala soo hadlay takhtarkii oo noo sheegay in caafimaadka wiilkeygu soo hagaagayo ka dibna waa bogsaday, haddana waa afar jir".

Waxaan aqaanaa rag u arkaya diinta shey ku kooban haweenka, caruurta iyo waacidiinta oo keliya, waxaanay ku faanayaan inay yihiin rag awoodi kara inay galaan dagaalada nolosha iyagoon ka heysan gargaar iyo taageero midna xagga eebbe. Yaab ay u dhiman doonaan raggaasi haddii ay ogaan lahaayeen in geesiyaashii taariikhda badankood ay Ilaahey baryi jireen maalin kasta inuu taageero una gargaaro.

Tusaale ahaan geesigii Jack Dempsey wuxuu ii sheegay inaanu sariirta tegi jirin ilaa uu duceysto, cuntana ma cuni jirin ilaa uu u mahadnaqo Ilaahii siiyey, carrabkana kama qaadi jirin ducada iyo werdiga inta uu isu diyaarinayo tartanka feerka.

Wuxuu ii sheegay Edward R. Stettinwa oo ahaa agaasimaha guud ee shirkadda "general Motors" noqdayna markii dambe wasiirka arrimaha dibadda ee Mareykanka inuu tukan jiray ilaaheyna baryi jiray inuu ku toosiyo jidka toosan habeen iyo dharaarba. Markuu geesigii Eisenhower u duulay dalka Ingiriiska si uu u hogaamiyo ciidamadii gaashaanbuurta dagaalkii 2-aad ee dunida wuxuu sii qaatay kitaabka muqaddaska ah ee Ijiil.

Wuxuu igu yiri General Mork Clerk waxaan akhrin jiray Injiil intii dagaalku socday oo dhan, maalin kasta intaan jilbo joogsado ayaan Ilaahey baryi jiray. Raga geesiyaasha ah waxay garteen xaqiiqdii uu sheegay William James oo aheyd "innaga iyo Ilaahey waxaa noo dhexeeya xarig aan go'eyn, haddii aan daacad u noqono qalbigana u furno amarada Ilaahey waxaan doonaba waan heleynaa".

Qaar badan oo ka mid ah geesiyaasha aanu soo sheegnay waxay xaqiiqsadeen runta erayadii Dr. Elexas Carrel oo allifay buugga loo yaqaan "insaanku waa wax qarsoon", ereyadaas oo ah duco waa xoogga ugu weyn dhaqdhaqaaqa ee ilaa maanta la yaqaan, waxaan arkay dad badan oo jirran oo takhaatiirtu ka qusteen oo duco keliya daaweysay ku bogsaday, ducadu waa sida macdanta raadiyoomka ah oo soo saara ileys iskiis u soo baxa, dhaliyana dhaqdhaqaaq. Ducadu waxay dadka u kordhisaa nashaadkooda markii ay la hadlayaan Ilaaha koonka xukuma oo ay ka baryayaan inuu siiyo awood ku kaalmeysa dhibaatooyinka nolosha, xitaa talo saarashada, Eebahay keligeed way ku filan tahay inay inoo kordhiso xoog iyo awood mana jiro qof Ilaahey u hoggaansamay oon gaarin natiijooyin aad u wanaagsan.

Wuxuu ogaaday Admiral Byrd macnaha ku xiridda nafta Ilaaha abuuray ee koonka xukuma, ogaanshahaasina waa kii awood u siisay inuu ka badbaado imtixaan adag oo qabsaday, wuxuuna ku sheegay kitaabkiisii "keli ahaan" waana tan qisadiisii;-

Sanadkii 1834 wuxuu ku jiray shan bilood buul xun oo ku hoos yiil buuro baraf ah gobolka Qudbiga koonfureed ee barafka ah, waxaanu ahaa qofka keli ah ee ku nolaa xariiqa -78C ee koonfureed, waxaa hareerihisa ka guuxayey dabeylo baraf iyo dhaxan ah, waxaa daboolay mugdi aan dhammaad laheyn habeen iyo dharaarba, intaa waxa u dheeraa waxaa ka xumaatay shooladii uu cuntada ku karsanayey oo uu ka soo baxayey qiiq sun ah, intaas oo dhibaato ah keligiis buu ku aha oo wax wehel ah ma heysan, waxaana wehel u gargaara ugu dhowaa meel u jirta 123 meyl, waxaanay meeshaas tegisteeda ku qaadaneysay dhowr bilood hadduu tegi lahaa.

Wuxuu isku dayey inuu hagaajiyo schooladii si uu u joojiyo qiiqa suntan ah, laakiin kuma guuleysan, qiiqiina sidii buu u socday, markaas buu sanku ka galay, kolkaas buu dhabarka u seexday oo xiskii ka tegay, wuna miyir daboolmay oo cunto iyo hurdaba waa ka tegay, waxaanu noqay xayeysiis daciif ah oo dhaqdhaqaaq gabay, wax badan buu dareensanaa inuu ka mid noqon doono dadka dhintay, waxaa maskaxda ka galay inuu ku dhimanayo buulkaas uu ku dhex jiro, qofna

aanu garan doonin meydkiisa marka waxaa isweydiin leh maxaa badbaadiyey noloshiisii?

Isagoo nolosha ka quustay jiitamaya oo sugaya inay nafta ka baxdo oo keli ah ayuu isku dayey in laga dhaxlo falsafadiisa nolosha, markaas buu ku qoray xusuus qorkiisii ereyadaan; "dadku keligii kuma ah dunida" markuu qorayey ereyadaas wuxuu ku fekerayey xiddigaha ku firirsan cirka, dayaxyada iyo waxyaabaha kale ee ku wereegaya falagyadooda oo si habsami ah u socda, wuxuu ku fekerayey qorraxda oon marna ka celineyn iftiinkeeda iyo kulkeeda taako dhulka ka mid ah, inkastoo ay ka raagto, hadana way u soo baxeysaa gobolka fog ee cimilada ah ee ugu shisheeya koonfurta dhulka, markaa waxaa badbaadiyey dareenka ah inaanu meesha cidlada ah keligii ku aheyn ee uu heysto naxariista Eebbe oo wehel u ah.

Haddaba sidee iimaanka iyo ku xinaanta Ilaahey u soo jiiideysaa nabadeliyo iyo xasiloonaan? William James oo ka jawaabay su'aashan wuxu yiri "hirarka badweynta kacsan ee isdaba jooga marna ma kiciyaan mana dhoobeeyaan biyaha fadhiya ee ku xasiloon badweynta gunteeda, sidoo kale qofka iimaankiisu qoto dheer yahay oo uu xididdo adag yahay dhibaatooyinka yaryar ee ku yimaada marmar ma kiciyaan xididadiiisa dareenka". Qofka diinta u heysta si dhab ah caasi buu ku yahay walbahaarka umana liico, wuxuuna diyaar u yahay inuu u jilib dhigo waxa uu waqigu la imaanayo ee masiibooyin ah.

Marka maxaan Ilaahey ugu jeesan weynay haddaan dareeno walbahaar? Maxaan Ilaahey u rumeyn weynay inuu yahay awoodda ugu weyn ee caalamka? Yaanay kaa hor joogsanin ducada iyo xiriirka Ilaahey inaad aheyn qof diinta ku camal fala, marka la fiiriyo dabcigaaga ama qoyska aad ku soo kortay ku kalsoonow in ducadu ku siineyso waxtar iyo faa'iido ka badan inta aad maleyneyso, waa shey ficil ah oo dhab ah, hadaad I weydiiso waxaan ula jeedo oo dhabta, salaaddu waxay kuu awood siineysaa inaad xaqiijiso saddex arrimood oo lama huraan u ah qofka aadamig ah, ha ahaado mid Ilaahey rumeysan ama mid inkirsan waxaanay kala yihiin saddexdaas arrimood kuwa soo socda:-

- 1- Inaad mushkiladaada Ilaahey u bandhigto, ducaduna waxay kugu caawinaysaa inaad si daacad ah oo hagar la'aan ah Ilaahey ugu bandhigto uguna caddeyso dhibaataada culeyska kugu haysa, sida aan ku soo sheegnay cutubka afraad, suuragal maaha in la xalliyo dhibaataa haddii aan marka hore la caddeyn oon daboolka laga qaadin dhibaataada oo dhan. Ducadu waxay la mid tahay qoraalka ninka suugaanta qoraa ku firdhinayo hamiga iyo qamiga gubaya, haddaan doono inaan xal u helno dhibaatooyinka ina heysta, waxaa waajib ah inaan ku caddeyno carrabkeena, waana sida aan falno marka aan Ilaahey u sheeganeyno dhibkeena.
- 2- Ducadu waxay ku dareensiisaa inaad keli ku aheyn culeyska dhibaatooyinka ku heysta, waayo ma jiraan wax ka culeys badan kana adag marka dhibaatooyinku keligaa kugu soo baxsadaan oo aad u wehel weydo, waxaana jirta wax badan inay masiibadu tahay mid si gooni ah u taabanaysa shaqsiyadeena oo aynaan u sheegi kareyn qof kasta, xitaa qofka dadka inoogu dhow, laakiin waxaan u sheeganaa takhaatiirta cilmi nafsiga, waayo waxay rumeysan yihiin in jirrooyinka xididdada kacsan iyo ciriiriga ruuxda lagu daaweyn karo in qofku ka sheekeeyo dhibaatooyinkiisa una sheegto qofka uu ku kalsoon yahay, marka haddaanu jirin qof uu ku sireysan karo dhibaataadiisa ha u sheegto Ilaahey oo u fidin kara gagaar dhab ah, kana feydi kara hamiga iyo qamiga laabta ka buuxa.
- 3- Intaa waxaa dheer in ducadu kugu xambaaareyso shaqada iyo ku dhaqaaqeeda weliba waa tallaabada ugu horeysa ee waxqabadka ah, mana jiro qof maalin kasta duceysta oo Ilaahey barya oon ka gaarin faa'iido iyo sacaado la taaban karo, haddii si kale loo sheego ma jiro qof Ilaahey baryey oo aan xaalkiisu hagaagin ama aan faraj looga furin dhibkii heystay.

Wuxuu yiri Dr. Alexis ducada waa xoogga ugu weyn ee dhaliya dhaqdhaqaaqa ilaa maanta la yaqaan, marka maxaan uga faa'iideysan weynay xoogaas? Waxaad doonto ku magacow Ilaaheey ama abuure ama Ruux, muhiim maaha khilaafka magaca mar haddaan heshiis ku nahay in Ilaahey yahay xoogga abuuray ee xukuma caalamka.

Haatan maad akhriska kitaabka halkan ku joojisid ood tagtid qolka hurdada ood Ilaahey u sujuudid una furtid qalbigaaga xiran, haddii aad diinta ka baxday maad Ilaahey ka baridid inuu kugu soo celiyo kuna duceyso sidan "Ilaahow ma geli karo halganka nolosha keligey, Ilaahow ii dambi dhaaf oo qalbigeyga ka nadiifi gefefka aan sameeyey iina iftiimi jidka nabadda, iimaanka iyo caafimaadka, marmar Ilaahow qalbigeyga ka buuxi kalgaceylka dadka dhammaantiis adigoon u kala soocin cadowga iyo saaxiibka, Ilaahow adigaa ii dhow oo I maqlaya ee iga aqbal ducadeyda.

CUTUBKA LIXAAD
SIDAAD UGA FOGAAN LAHEYD WALBAHAARKA DHALIISHA
QEYBTA 1-AAD
QOFNA MA LAADO BAKHTIGA

Sanadkii 1929-kii waxaa ka dhacay xagga arrimaha tacliinta sare ee magaalada Chicago dhacdo lala yaabay, aqoonyahanadii waddankoo dhan baa meel kasta isaga yimid si ay u arkaan dhacdadaas. Wax yar ka hor taariikhdaas waxaa yimid magaalada Yale wiil yar oo la yiraahdo Robert Hutchins, wuxuu ku bilaabay shaqada markii hore adeege hotel, markii 2-aad wuxuu ka shaqeyn jiray inuu soo guro xaabada wax lagu karsado, markii 3-aad wuxuu noqday ama u gaddoomay geddissley, markuu 8 sano joogay magaaladii ayaa loo magacaabay guddoomiyaha Jaamacadda Chicago isagoo 30 jir ah, markaas baa meel kasta la isaga yimid isagoo lala yaabsan yahay wiilka yar ee 30 jirka ah ee madax looga dhigay Jaamacada Chicago taasoo aheyd dhacdo aan weligeed horey u dhicin.

Aqoonyahanadii Mareykanka sacabada bay dhabanada ku qabteen iyagoo yaab iyo amakaag la dhacsan, waxaa ku soo burqaday wiilkii daad dhaliilo ah oo meel kasta looga soo furay, qaar waxay yiraahdeen malahan khibrad iyo tijaabooyin, qaar waxay ku eedeeyeen inuu ka qabo aragti gurracan waxbarashada, waxa dhaliisha qeyb libaax ka qaatay wargeysyada oo olole ku waday wiilkii,

Maalintii loo caleemo saaray madaxtinimada Jaamacadda waxaa u yimid Roberet aabihiis nin saaxiib la ah oo ku yiri; "waxan akhriyey saaka wargeysyada, waxaan aad uga naxay ololihii lagu qaady wiilkaaga ee lagu dhaliilayey", wuxuu ugu jawaabay Robert aabihiis, waa run, waa dhaliil qaraar, laakiin ma ogtay waxa lagu dhaliilayaa hadba inta qiimahaagu le'eg yahay, ogoow qofna ma laado eey Bakhtiyey" waxaa xaqiiqadan dareemay Islow la oran jiray Wales, markii dambena noqday boqorkii Ingiriiska ee 8-aad Edward, isagoo markaas arday ka ahaa kulliyadda ciidanka badda ee Dornmouth, waxaanu markaas ahaa 14 jir.

Maalin baa la arkay Islowgii yaraa oo oohin hiqda haya, haddii la weydiyey sababta uu la ooyayo wuu sheegi waayey, markii dambe ayaase la ogaaday in ardayda qaarkood garaaceen, markaas baa Taliyihii kulliyadda u yeeray ardaydii la eedeeyey, wuxuuna ku yiri; "sida runta ah Islowgu iima soo dacwoon, laakiin waxaan jeclahay inaan ogaado sababta idinku xambaartay inaad dishaan", markii ay cabbaar ka warwareegeen ayey ku jawaabeen sidan, "waxaa nagu xambaartay inaan ku faanno hadhow markaan saraakiisha ciidamada badda ee Boqorka noqono inaan dhahno boqorkaan dilnay oo weliba gacanteenaan ku garaacnay".

Marka ogoow haddii lagu soo jeediyo dhaliil ama garaacid iney tahay aqoonsi qaddarkaaga, iyo qiimahaaga la aqoonsaday, waana qiraal lagu qiray inaad la timid ficil kuu soo jeediyey indhaha dadka, waxaa jira dad badan oo ka hela ama iskudhisa inay ceebeeyaan dadka ka heer sarreeya xagga aqoona, qiimaha bulshada iyo kartidaba, tusaale ahaan intii aan ku jiray allifaadda buuggan waxaan ka helay waraaq haweeney ku caro burburtay oo wixii ay caay tiqiin oodda kaga qaaday General William Boothe oo ahaa curiyihii 'Ciidamada Badbaadada ee Mareykanka", waxaana jirtay inaan horey khudbad uga sii daayey raadiyaha oo aan ku ammaanay waxtarkii Boothe.

Haweeneydii waxay ii soo dirtay waraaq ay iigu sheegtay in Boothe ka xaday 8 milyan xoolihii uu u ururiyey gargaarka, sida runta ah eeddu waa masabid aan qiimo laheyn, iyaduna umay jeedin inay wax dhacay sheegto, waxayse dooneysay inay isku dhisto cambaareynta nin ka heer sarreeya iyada.

Waxaan Ilaahey uga mahad celiyey in aanan haweneydaas nin u aheyn, waraaqdeediina iima kordhin aqoon xagga Gen. Boothe ah, siday rabtay haweeneydaasi, laakiin waxaan ogaaday xumaanteeda iyada.

Sida uu yiri Schopenhawer, "dadka uur qabiidka ah ee caloosha xun waxay ku raaxeystaan inay baaraan ceebaha ninka wanaagsan ee ragga ah", run looma qaadan karo in nin madax ka ah jaamacad uu ku

darsamo dadka uur qabiidka ah, inkastoo ay dhib tahay sida loo rumeysto arrintaas, haddana way dhacday oo waxaa sameeyey nin madax ka ahaa Jaamacadda Yale, oo la yiraahdo Timoths Dwight wuxuu ka helay raaxo inuu ceebeeyo nin loo sharaxay Madaxweyninimada Mareykanka, wuxuu qoray Timoths isagoo dadka uga digaya inay doortaan ninkaas, "haddii ninkaas loo doorto madaxnimada Mareykanka waxaanu arki doonaa haweenkeena iyo gabdhaheena oo lagu xad gudbo oo sharaftooda lagu tunto, waxaanu noqon doonaan dad la dagaalamaya wanaagga iyo nadaafadda oo cadow u ah dadka iyo Ilaaheyba".

Soo lagama yaabo inaad u maleyso in eeddaas loo jeediyey Hitler ama nin la mid ah? Laakiin haka xumaan markaad ogaato in loo jeediyey Thomes oo magaciisu waaray, waana ninkii qoray warqaddii gobanimada Mareykanka ee loo yaqaan Aabaha dimoqraadiyadda.

Yaad u maleyneysaa ninkii lagu eedeeyey laba wejiile, wax aanu aheyn sheegte, nin la mid ah dembiileyaasha dhiigya-cabka! Oo uu weliba wargeys ka sameeyey sawir lagu jeesjeeso oo ah isagoo taagan meel dadka lagu qalo oo doonaya inuu qof gowraco, dadkiina hareeraha ka joogaan iyagoo ku jeesjeesaya oo quursanaya.

Ninka sidaasi qabsatay waa George washington, waxaasi waxay dhaceen waqti tagay oo la soo dhaafay, laakiin waxaa is weydiin leh dabeecaddii dadku ma kortay oo ma is beddeshay? Aan fiirino Admiral Peary kaasoo dadka ka yaabiyey markuu gaaray qudbiga waqooyi 6.4.1909, yoolkaas oo la arki waayey dad badanina ku dhinteen intay u socdeen, xitaa Peary wuxuu ku dhowaaday inuu dhinto intaanu gaarin gaajo iyo dhaxan dartood, waxaa qalalay faraha lugaha, markaas buu iska gooyey, waxaa isugu yimid masiibooyin iyo balaayo oo dhan, wuxuu ku dhowaaday inuu waasho, waxaa dhacday in wargeysyada ka sheekeeyaan socdaalkiisii, dadkiina aad bay ugu duceeyeen in Ilaahey guul gaarsiiyo.

Markaa Peary magaciisa caan buu noqay, waxaase ka maseyray madaxdiisii oo xin iyo xasad kula kacay, waxay u maleegeen masabid

oo waxay yiraahdeen; "wuxuu ka urursaday dadka lacag isagoo ku marmarsiyoonaaya inuu ku bixin doono cilmi baaris waxtar u leh dadka Aadamiga ah", madaxdiisuna waxay jeclaayeen in la qab jebiyo Peary oo waxay u dhigeen turunturooyin is hortaagay, ilaa uu wadi kari waayey safarkii oo uu soo dhex galay arrinkii Madaxweyne Mckinley.

Ma u malaynaysaa inuu Peary la kulmi lahaa xinkaa, xasadkaa iyo caayda dusha laga saaray haddii uu iska ahaan lahaa sarkaal ka tirsan ciidamada badda ee Maraykanka? Maya dhibkaasi ma gaareen, maxaa loogu kiciyey waxaas oo qeylo ah? Waase maxay dembiga uu galay? Sababtu waxa weeye inuu falay wax aanay fali kareyn dadka wax ka sheegayey.

Waxaa soo maray General Grant imtixaan ka xun kan Peary sanadkii 1862-kii, markii uu socday dagaalkii sokeeye ee Mareykanka, wuxuu ka guuleystay ciidankii Waqooyi, markaas buu magac weyn ku helay, waxaa jeclaaday dadweynihii, guushiisii waxay soo gaartay Yurub, maxaase ka dambeeyey? Markii ay ka soo wareegtay 6 todobaad guushii faraxa laheyd; waa la qabtay waana la xiray General Grant, ciidankiisii baana laga dhex saaray, markaas buu sida carruurta u ooyey dulligii iyo dulmigii lagula kacay darteed, maxaa loo xiray General Grant? Wuxuu ku kiciyey madaxdiisii maseyr maxaa yeelay wuxuu soo hooyey guulo aanay keeni kareyn.

Hadaba haddii aad ka walbahaartid eed laguugu masabiday ama dhaliil lagu jeediyey, raac murtida lambarka 1-aad, "xusuuso dhaliisha gardarrada ahi inay tahay aqoonsi qarsoon oo lagu aqoonsanayo kartidaada iyo wax qabadkaaga, ogoow hadba heerka uu joogo qaddarkaaga iyo qiimahaaga ayaa laguugu dhaliilayaa.

QEYBTA LABAAD HA U LIICIN DHALIISHA

Waxaan la kulmay maalin General Senedly Bulter oo lagu naaneyso sheydaanka-naarta, ninkan oo lagu tilmaamo inuu ahaa taliyihii ugu kakanaa ee xukumay ciidanka badda ee Mareykanka wuxuu ii sheegay, markuu yaraa inuu aad ugu hanqal taagi jiray magac sharaf iyo raganimo wuu ka caroon jiray haddii dhaliil yar loo soo jeediyo waana ka dagaalami jiray, hadduu maqlo wax yar oo taabanaya sharaftiisa, laakiin muddadii 30-ka sano aheyd ee uu ka shaqeynayey ciidanka, way beddelantay, dabeecadiisii, wuxuuna noqday nin aanay dhaliishu damqeyn, wuxuuna yiri; "wax badan baa la igu tuuray ereyo quursi iyo jeesjees ah, wax badan baa la igu tilmaamay inaan ahay dad cun, abees halis ah ama dawaco dhagar badan, in badan bay dadka aqoonta dheer ii leh cay iyo cambaareyn iga buuxiyeen, ma jiro wax afka ka soo baxo oo aan la igu caayin, laakiin waxaas oo dha uma aabo yeelin ilaa maantadan, Haddaan maqlo qof I caayaya uma jeesto xaggiisa si aan u arko qofka uu yahay"

Haddii uu Bulter ku caasi garoobay dhaliishii; sida runta ah dad badan oo innaga mid ah waa Butler liddigiis, way ka xumaanayaan dhaliisha yar ee loo jeediyo, umana adkeysan karaan eedaha iyo caayda kaga timaada dadka kale, waxaa ku dhacaya qaarkood walbahaar iyo calool xumo, waxaan xasuustaa nin qoraa ka ah joornaal la yiraaho 'qorraxda Newyork' oo ka qeyb galay mar dhowr sano laga joogo khudbadaha aan ka jeediyo machadkeyga inuu maalin igu qaaday werar uu ku qoray wargeyskiisii, wuxuu igu dhaliilay dariiqada aan dadka wax u baro, ma kula tahay inaan ka diiray dhaliishaas la igu weerary? Jawaabta waa haa, xoogaa waan ka diiray, waxaan u qaatay in quursi iyo jeesjees la igula kacay.

Waxaan kula hadlay taleefoon Jill Hedges oo ahaa agaasimihii wargeyska, waxaan ka codsaday inuu soo qoro maqaal lagu cadddeynayo xaqiiqooyinka runta ah intii ay qori lahaayeen aflagaadada. Inkastoo aan rabay in ciqaabtu la ekaato dembiga la iga galay, laakiin waan ka shalaayey ficilkii aan ku kacay markii aan

taleefonka kula soo qaaday arrimihii I kiciyey agaasimaha wargeyska, maxaa yeelay waxaan hubaa in dadkii akhriyay wargeyska nuskood aanay arag maqaalka la igu dhaliilay, nuskii kalena waxay u qaateen ciyaar, kuwii dhaliisheyda si run ah u qaatayna way hilmaameen dhowr todobaad kadib.

Waxaan ogaaday inaan dadku isku shuqlin arrimaha dadka kale, in ka badan dhowr ilbiriqsi, maxaa yeelay qof kasta wuxuu ku shuqloon yahay danihiisa gaarka ah 24-ka saac, xanuun yar oo ku dhaca ayaa ka jeedinaya qofka inuu xasuusto jirradaada iyo teydaba, haddii la innagu been abuurto ama la ina shirqoolo ma bannaana inaan ka tiiraanyoono, waayo Nebi Ciise kama fadli badnin, waxaana khiyaanay midka mid ah asaaxbtiisii kuwa ugu daacadsan, markii lagu laaluushay xoogaa lacag ah oo u dhigma 19\$ mid kalena wuxuu ku sigtay markuu halis galay inuu ku dhaarto inaanu aqoon u laheyn Nebi Ciiise (CS) marka maxaad u filaneysaa inuu ku soo gaaro dhib ka yar kii lagula kacay Nebi Ciise (CS).

Waan kari waayey inaan dadka ka joojiyo gardarrada iyo aflagaadada ay ka sii deynayaan carrabkooda, laakiin waxaan karay inaan falo wax ka kheyr roon middaas oo ah inaan ismoogeysiiyo cannaanta dadka iyo dhaliishooda, haddii aan sii caddeeyo ujeeddadeydu maaha inaan dhaliil kasta indhaha ka qabsatid, waxaanse ujeedaa midda gardarrada iyo masabidka ah.

Maalin baan warsaday Mrs Eleanor Roservelt siday u aragto dhaliisha, ilaah baa og inta haweeneydaas la kulantay, caay iyo aflagaaddo, waxay aheyd haweeneydii ugu cadow badneyd ee gashay guriga cad ee laga xukumo Mareykanka, waxay iigu jawaabtay su'aashii "markaan yaraa aad baan u yaxyax iyo cabsi badnaa, dhaliishana waan ka baqi jiray" maalin bayna eedadeed Teddy Rosvelt ku tiri; "anigu waan kaa war-wareegayaa inaan wax qabto cabsi aan ka qabo dhaliisha darted, ee maxaad igula talin laheyd", intay sidaa u fiirisay ayey ku tiri; dan ha u gelin waxa dadku kaa sheegayaan, mar haddii aad ku kalsoon tahay in shaqada aad fulineyso xaq tahay ood jid toosan u martay. Mrs.

Rosevelt waxay ku camal fashay taladii eeddadeed waxaanay u noqotay tiir laxaad leh aayatiinka nolosheeda.

Mar uu la hadlayey Charles Shuhab oo ahaa ninka iska leh warshadaha waaweyn ee birta shuba, ardayda jaamacadda Princeto wuxuu u caddeeyey inuu casharkii ugu muhiimsanaa oo saameeyey intuu noolaa uu ka qaatay oday Jarmal ah oo ka shaqeynayey warshadihiisa, waxaa dhacday in odaygaasi muran xoog leh la galay koox shaqaalaha ka mid ah, waana markii dagaalkii 2-aad ee dunida socday, waxaanay ku murmeen siyaasadda dagaalka, markaas bay shaqaalihii ku xanaaqeen odaygii intay qabteen ayey webiga ku tureen, wuxuu yiri Shuhab "markuu ii yimid odaygii isagoo ay doobo ku dhamooqan tahay biyihina ka da'ayaan ayaan weydiiyey, "waxa uu shaqaalaha ku sameeyay oo kallifay in sidaan loo galo intuu qoslay ayuu yiri "waxba ma jiraan".

Wuxuu yiri shuhab "laga bilaabo maalintaa waxaan ka dhigtay erayadii odayga mabda' aan ku camal falo". Waxay caddeyneysaa faa'iidada mabda'aas markii lagu soo jeediyo dhaliil gardarro iyo masabid ah, shaki malaha inaad u labanlaabi karto ninkii u jilib dhiga, dhaliishaada, laakiin maxaad ku sameyn kartaa nin kuu qoslaya markaad dhaliil u soo jeediso.

Lincoln waxaa loo soo jeediyey dhaliil aan loo adkeysan Karin siduu u maamulay dagaalkii sokeeye ee Mareykanka, waxana ku baabi'l lahaa, haddii aanu garanin in isku dayga ka jawaabidda iyo la dagaalanka dhaliisha loo soo jeediyo ay tahay doqonimo iyo garaad xumo, maxaa yeelay waxay ka hoosaasinaysaa xilka weyn ee laga sugayey.

Wuxuu yiri Lincoln "haddii aan isku dayi lahaa inaan akhriyo dhammaan wixii talo ah ee la ii soo jeediyey anigoo ka jawaabin bay watigeyga oo dhan qaadan laheyd shaqadoo dhanna way fariisan laheyd" anigu waxaan ku tebiyaa wixii awoodeyda ah inaan ku fuliyo xilka I saaran haddii aan ku guuleysto waxba iga dhibi meyso dhaliishii la ii soo jeediyey markaas, haddiise aan ku fashilmo oo ay malaa'igta

eebahay ku dhaarato inaan niyad sami u gutay waajibkeygii waxba ii tarimeyso, maxaa yeelay marna la ii garaabi maayo.

Marka haddii lagu soo jeediyo dhaliil been iyo masabid ah xasuuso murtida lamb. 2-aad, "isugu gee awoodaada oo dhan howsha aad rumeysan tahay inay xaq tahay, ka dibna ka daboolo dhegahaaga dhaliil kasta oo kaaga timaadda dadka wax canaanta".

QEYBTA SADDEXAAD DOQONIMOYIN AAN KU KACAY

Waxaa ku jiray khaanadda xafiiskeyga gal gaar ah oo aan ku qoray "waxyaabo doqonimo ah oo aan ku kacay", wuxuu iiga dhigan yahay galkaasi buug weyn oo aan ku qoro wixii xumaan iyo dadnimo xumo ah oo aan falo, gefefkaas waxaan u yeeriyey xogheynteydii oo iyadaa qortay, qaar kalena waan ku dhici waayey inaan u yeeriyo oo anigaa gacanteyda ku qoray, weliba haddii aan nafteyda daacad u ahaan lahaa waxaan ka buuxi lahaa xafiiskeyga galal ay ku wada qoran yihiin "dhammaan doqonimadii aan sameeyey".

Markaan furo buugga gefefkeyga oo aan dib u akhriyo dhaliishii aan nafteyda u jeedin jiray waxaan dareemaa inaan is hortaagi karo maanta mushkiladda ugu dhibka badan anigoo la kaashanaya tijaabooyinkii hore ee I soo maray, waxaana caado ii aheyd waayadii hore markaan la kulmo dhibaato ama mashaakil adag inaan mas'uuliyadda dad kale u tiiriyo, laakiin markaan weynaaday ee aan kasbaday waaya aragnimo oo aan soo maray imtixaanno qaraar waxaan ogaaday ugu dambeystii inaan aniga keligey mas'uul ka ahaa wixii masiibo ah ee I soo maray, waxayna ila tahay in dad badani garteen waxa aan gartay.

Waxaa laga sheegay Nepeleon isagoo masaafuris ku jooga jasiiradda S. T. Helena inuu yiri; "Qof aan aniga aheyn mas'uul kama aha hoogeyga iyo jabkeyga, waayo waxaan ahaa cadowga ugu weyn ee nafteyda".

Haddana bal aan soo qaadano nin ku xeel dheeraaday la doodidda naftiisa iyo la xisaabtankeeda, ninkaas oo lagu magacaabi jiray H. P. Howell, waxaa la sheegay inuu si lama filaan ah ugu naf baxay isagoo jooga Hoteelka loo yaqaan Ambassador ee Newyork bishii luuliyo 1944-kii, waxaa markaa geeridiisii ka gilgishay dadkii degenaa xaafadda Wall Sreet oo ah xaafadda maalqabeenada iyo ganacsatada ee Newyork, sababta geeridiisa looga gilgishayna waxay tahay isagoo ahaa nin maalqabeen ah isla mrkaana madax ka ahaa bangiga ganacsiga ee Newyork iyo dhowr sharikadood oo waaweyn, ninkaasi ma laheyn

aqoon dheer, wuxuu ku bilaabay, noloshiisa, karraani, dukaan yar oo ku yiilay meel tuulo ah, markii aan ka codsaday inuu iiga sheekeeyo dhaqanka noloshiisa wuuu yiri; "waxaan caadeystay inaan jeebka ku heysto xusuus qor yar oo aan ku qoro wixii kulamo ah ee aan sameeyo maalin kasta, waxaan caadeystay inaan furo xusuus-qorkaa galab kasta oo Sabti ah si aan nafteyda ula xisaabtamo oo aan u ogaado wixii aan ku guulaystay iyo wixii aan ku hungoobay, waxaan u fiirsadaa wixii gefef ah ee aan ku kacay, waxaa iiga soo baxa xisaabtankaa gefef badan oo aad fool xun oo aan la yaabo, waxaase dhacday in gefefkii maalinba maalinta ka dambeysa sii yaraadeen, welina sidii baan u wadaa la xisaabtanka nafteyda galab kasta oo sabti ah, waxaan rumeys nahay in liibaanteyda ay u sabab tahay la xisaabtanka nafteyda".

Waxaa laga yaabaa inuu Howell ka soo ergistay dariiqadaan la xisaabtanka nafta nin la oran jiray Ben Franklin, faraqa u dhexeeyase wuxuu yahay Franklin masugi jirin todobaadka dhamaadkiisa si uu naftiisa ula xisaabtamo laakiin galab kasta ayuu naftiisa la xisaabtami jiray, wuxuuna ogaaday in gefefka ugu fool xun ee uu sameeyo ay u badan yihiin 3 gef oo uu mar kasta ku kaco waxayna kala yihiin saddexdaas gef:-

1. Waqti dhumis.
2. Isku shuqlin waxyaabo aan micno laheyn.
3. Muran aan faa'iido laheyn.

Wuxuu maskaxda gashaday in haddii aanu ka xoroobin saddexdaas gef uusan wax horumar ah gaari kareyn, wuxuu sameeyey todobaadka la dagaallanka saddexda gef ama ceebood ee uu leeyahay, wuxuu sameystay buug gaar ah oo uu ku qoro natiijada uu ka gaaro la dagaallanka saddexdaas gef, waxay ku qaadatay muddo labo sano ah si uu uga xoroobo gefefkii aan soo sheegnay, marka la yaab malaha inuu ka mid noqdo raga loogu jecel yahay Mareykanka.

Haddaba waxaad ogaaneysaa in dadka caqligaabka iyo doqomada ah keliya ka caroodaan haddii wax yar oo gef ah ama canaan ah loo jeediyo, ninka wax garadka ah wuxuu jecel yahay inuu ogaado waxa lagu canaanayno si uu u saxo gefkiisa.

Walt William wuxuu yiri; "Casharrada nolosha ma waxaad ka baratay dadka ku ammaanaya, ku taageeraya, kuu naxariisanaya mise waxaad ka baratay kuwa ku weeraraya, ku tuuraya ee ku cadaadinaya"?

Marka maxaan u sugaynaa inta gefefkeena la inoogu ceebeynayo? Soo kama habboona inaan innagu is dhaliilno oo aan nafteena ujeedino canaantii uu qof kale u jeedin lahaa. Waxaa inala gudboon inaan innagu barano dhaliilasheena si aanu cadowgeena u helin fursad uu inagu ceebeeyo.

Waxaa sidaas falay Charles Darwin 15 sano ka hor isagoo naftiisa dhaliilaya, markuu qoray buugga caanka ah ee la yiraahdo "Asalka noocyada", maxaa yeelay wuxuu ogaaday haddii kitaabkaas la faafiyo inay ku kici doonaan aqoonyahanada iyo culumada diinta sababtoo ah kitaabkiisu wuxuu lid ku ahaa aragtidiisii hore ee abuurista aadamiga, markaasuu 15 sano oo kale dhaliilayey kitaabkiisa, wuxuuna ka baarayey gefef lagu ceebeyn karo si uu u saxo qaladaadkiisa intaan cid kale ku ceebeyn.

Ka soo qaad inuu qof ku yiraahdo, waxaad tahay doqon wax ma garad ah!, ma kici laheyd? Ma caroon laheyd? Intaadan jawaabin fiiri waxa uu sameeyey, Lincoln mar uu ku tilmaamay, wasiirkiisii gaashaandhigga Edward M. Stanton inuu yahay doqon garaad xun, wuxuu ka carooday wasiirku markuu amray Madaxweyne Lincoln inuu madaxda ciidamada qaarkood isku beddelo isagoo ku raali gelinayey dad siyaasiyiin ah, wuxuu wasiirku diiday inuu fuliyo amarkaas, waliba wuxuu ku daray caay iyo dhaliil uu u jeedinayo Madaxweynahiisa isagoo ku tilmaamay inuu yahay doqon caqligaab ah, maxaa yeelay wuxuu amray kala bedelka ciidanka waqti aan loo baahneyn.

Markii Lincoln maqlay caaydii loo soo jeediyey ma caroon ee wuxuu yiri; "haddii uu Stanton sidaa igu sheegay waan ahay, waana laga yaabaa inuu iga jid leeyahay, marka waxaan eegayaa si aan u xaqiiqsado arrinkaas. Markaas buu u tagay wasiirkii aflagaadeeyey, wuxuu ku qanciyeey Stanton madaxweynihii in kala beddelkii uu soo

jeediyey aanu waqtigan ku habooneyn, markaas buu Lincoln ka noqday amarkii ku saabsanaa kala beddelidda. Lincoln wuxuu oggolaaday dhaliishii loo soo jeediyey oo dhan, maxaa yeelay wuxuu ogaaday in dhaliisha loola jeeday dhismo iyo toosin keliya.

Marka waxaa inala gudboon inaan soo dhoweyno dhaliisha noocaas oo kale ah ee loola jeedo dhismaha iyo danaha ummadda in lagu toosiyo, maxaa yeelay ma dhici karto inaan ku toosnaano 75% wax qabadkeena. Sidaas waxaa sheegay Theodore Roosevelt markuu ahaa Madaxweynaha Mareykanka. Einstein wuxu isna caddeeyey inuu gefsanaa ra'yigiisa 99% waqtigaas.

La Rache Foncalnd isaguna wuxuu yiri; "Aragtida cadowgu inaga qabo ayaa runta uga dhow middaan inagu iska qabno" anigu waxaan hubaa inuu hadalkaasi yahay mid run ah waqtiga intiisa badan, inkastoo runtu sidaas tahay haddana marka dhaliil la inoo soo jeediyo haddiiba gaashaankaan u daruurnaa intaanu qofkii ka bixin hadalkiisii dhaliisha ahaa oo waxaan mar kasta jecel nahay inaan iska difaacno canaanta, waxaana soo dhoweyneynaa ammaanta, marka kuma shaqeyno caqli ee waxaan ku shaqeynaa oo aan addoon u nahay caadifadda, caqliguna wuxuu la mid yahay doon bad hirar kacsan lagu dhex tuuray oo ay hadba dhan u tuurayaan biyuhu, baddaasina waa caadifadda iyo hawa-raaca.

Waxaan aqaanaa nin saabuunta ka ganacsan jiray oo gaaray heer uu isagu codsado in la dhaliilo, mar uu saabuun u gadi jiray sharikad weyn ayuu ku guuleysan waayey shaqadiisii, haddii uu u tago nin dukaan leh oo uu ka iibsaa waayo saabuunta wuxuu is weydiin jiray sababta loo diiday badeecadiisa? Muxuu yahay gefka uu sameeyay? Ma si wanaagsan baanu u caddeyn waxtarka saabuunta? Ma xamaasad baa ka maqan? Marar badan wuxuu ku noqon jiray dukaankii diiday saabuuntiisa, wuxuu dhihi jiray hadda kuuguma iman inaan kaa gado saabuun ee waxaan kuugu imid inaan kaa codsado waano, taasoo ah markii aan kuu soo bandhigay inaad iga iibsatid saabuunta ma iga dareentay inaan wax qalooc ah falay? Dariiqadaasi waxay ku caawisay ninkii saabuun gadaha ahaa inuu kasbado saaxiibo badan. Hadda ninkii

wuxuu ka mid yahay agaasimayaasha guud ee sharikadaha saabuunta dunida kuwa ugu waaweyn, magaciisa waxaa la yiraahdaa E. H. Little sannadkii dhowaa wuxuu ahaa ninka 24-aad ee dalka Mareykanka ugu macaash badan.

Marka maxaan u fali weynay sidii H. P. Howell, Franklin iyo ninkii saabuun gadaha ahaa ee aan ka soo sheekeynay, haddaba si aad uga dheeraato walbahaarka ay kuu soo jiiddo dhaliishu raac Murtida Lamb 3-aad "diyaarso xusuus qor aad ku qortid xumaanta iyo gefefka aad sameysid ee laguugu ceebeyn karo, mar kasta ku noqo xusuus qorkaaga si aad ugala soo baxdo wax kuu faa'iideeya aayatiinkaaga iyo mustaqbalkaaga "ogow inaad toosneyn waqtigaaga oo dhan, haka kibrin inaad fasho sidii uu falay saabuun gadihii oo aad weydiisato dadka dhaliil daacad ah, sida uu E. H. Little ugu noqon jiray dukaankii diido badeecadiisa.

MURTIDA CUTUBKA LIXAAD OO KOOBAN

1. Dhaliisha dulmiga iyo gardarrada ah waxaa sida badan ku qarsoon ammaan dahsoon, waxaa laga yaabaa inaad qofka ku ceebeyneyso arrin ku kicisay naftiisa xin iyo maseyr markaad qabatay falal aanu qaban Karin.
2. Ku tuuntuunso shaqada aad is leedahay waa xaq, kadibna dhegaha ka qabso wixii kale ee cannaan iyo dhaliil ah, mar haddaad rumeysan tahay inaad xaq ku joogtid.
3. Diyaarso xusuuss qor aad ku qortid xumaanta iyo qalooca aad u badan tahay inaad ku kacdid ee kuu soo jiida dhaliisha, hana iskala weynaan inaad codsato dhaliisha marka loola jeedo toosinta iyo dhismaha.

CUTUBKA TODOBAAD
LIX DARIIQO OO KAA DHEEREYNAYA NOOGGA IYO WELWELKA
KUNA SIINAYA FIRFIRCOONI IYO DHAQDHAQAAQ
QEYBTA KOOWAAD
SIDAAD UGU KORDHIN LAHEYD HAL SAAC SOO JEEDKAAGA.

Maxaad u malaynaysaa inaan ugu qoray halkaan digniinta noogga "Daalka" kitaabkan ujeedadiisu tahay sida loo daweeyo walbahaarka? Jawaabtu waxa weeye walbahaarku inta badan waa noogga ama walaac, macnaha wuu dhalay ama wuu la dhashay, arday kasta oo barta takhtarnimada wuxuu kuu sheegi karaa inuu nooggu daciifiyo xoogga jirka ee iska difaacidda cudurrada, sidoo kale, takhtar kasta oo dadka daweeya wuxuu kuu sheegi karaa inuu nooggu yareeyo xoogga nafta ee iska celinta caadifadda cabsida iyo walaaca, marka ka dheeraanshaha nooggu waa ka hortagga walbahaarka.

Waxaa xaqiiqdan caddeeyey Dr. Edward Jacobson oo qoray labo buug oo ku saabsan nasashada oo kala ah:-

1. Nasashada habeysan.
2. Waa waajib inaad nasatid.

Wuxuu ahaa Dr. Edward sanooyin badan agaasimaha sheybaarka cilmiga shaqada xubnaha dadka ee ku yaal Jaamacadda Chicago. Sanooyinkaas wuxuu ku tebiyey sida jiifka loogu nasto ee wax loogu daweyn karo, wuxuuna yiri; "jirro kasta oo dareenka ah ama caadifadda; kuma dhacdo qofka markuu jiifka ku nasanayo, ama waxaan dhihi karnaa ma dhici karto qof jiif ku nasanaya oo raaxeysanaya isla markaana walbahaaraya"

Marka si aad isaga ilaaliso noogga oo uu ka dhasho walbahaarka raac murtidan "badso raaxeysiga oo jiifso, is dabci intaan walbahaarku ku soo kedin".

Waxay ogaadeen madaxda ciidamada Mareykanka markii ay tijaabooyin badan sameeyeen inay askartu socon karaan muddo dheer haddii ay iska dejiyaan culeyska oo ay nastaan 10 daqiiqo saacadiiba, markaas waxay amar ku bixiyeen madaxdii in la raaco xeerka ah markii ciidamadu socdaan saacadba in la nasiyo 10 daqiiqo, qalbiguna kama adkeysii badna ciidanka Mareykanka, maxaa yeelay qalbigu wuxuu

bambeeyaa oo ku shubaa xidadada dhiig buuxin kara, gaariga tareenka ee badeecadda qaada, sidoo kale wuxuu bixiyaa maalin kasta tamar ku filan I 20 tan oo dhuxul ah aad meel ku kuustid ilaa dhererkoodu ka gaaro 10 mitir, qalbigu wuxuu wadaa howshaas adag ee aan qalbigu rumeyn Karin muddo 50 ama 70 ilaa 90 sano dhan.

Marka sidee buu qalbigu ugu adkeysan karaa waxaas oo howl ah? waxaa ka jawaabay su'aashaas Dr. Walter B. Canon oo yiri; "dadka badankiis waxay moodayaan inuu qalbigu si joogto ah oo aan istaag laheyn shaqada u wado, laakiin runtu sidaas way ka duwan tahay, waayo labdii boodboodba waxaa u dhexeeya nasasho, sida caadiga ah qalbigu wuxuu boodboodaa 70 jeer daqiiqadiiba "boodboodka dhexdhexaadka ah" wuxuuna shaqeeyaa 9 saac oo keliya 24-ka saac marka saacadaha nasashadu waa 15 saacadood maalintiiba.

Markii dagaalkii 2-aad ee dunida socday wuxuu awooday Wilson Churchill isagoo todobaatan jir dhaafay inuu shaqeeyo 16 saac malalintiiba, wuxuuna maamulayey howlaha dagaalka oo dhan, marka sidee buu ku awooday inuu sidaa falo? Wuxuu shaqada fulin jiray maalin kasta isagoo ku jiifa sariitiisa, ilaa laga gaaro 11:00 suaxnimo waraaqaha buu akhrin jiray marada buu bixi jiray, xiriirada taleefoonka ayuu sameyn jiray, fadhiyada degdegga ahna dib buu u dhigi jiray. Markuu qadeeyo sariirta buu tegi jiray, wuxuuna nasan jiray hal saac, galabtiina wuxuu tagi jiray sariirta mar 3-aad, wuxuuna nasan jiray 2 saacadood intaan la gaarin waqtiga cashada oo ahaa 8:00 fiidnimo. Sidaas aawgeed kuma uusan shaqeyn jirin noog iyo daal, waayo wuxuu badiyey nasashada, markaas buu awooday inuu howshaas u adkeysto kuna qaabilo xiiso iyo firfircooni maalin kasta.

Rock Filler, wuxuu awooday inuu asaagiis ku dhaafo laba arrimood:-

1. Wuxuu ururiyey xoolihii ugu badnaa ee uu qof ururiyo waqtigiisii.
2. Wuxuu gaaray cimrigiisu 98 sano isagoo shaqeyn kara.

Marka sidee bay ugu suurta gashay? Tan cimriga waxaa la arkaa inay jirto labo sababood midi waa dhaxal, tan kale wuxuu caado ka dhigtay inuu 30 daqiiqo seexdo xafiiskiisa maalin kasta qadada kadib, waxaa u

tiil xafiiskiisa sariir uu isku kala bixiyo duhurkii markaas buu u raaxeyn jiray jirkiisa, mana jirin qof kicin kara xitaa Madaxweynaha taleefoon kulama hadli kareyn Rock Filler markuu jiifo.

Wuxuu yiri; Connie Mark ciyaaryahankii weynaa ee "base Ball", haddii aanan indhaha is gelin intaanay ciyaartu bilaaban 5 daqiiqana ha noqotee haddiiba waan daali jiray waxaana iga dhumi jiray xirfadihii ciyaarta marka la gaaro goolka 5-aad.

Waxaan weydiyey Eleano Roosevelt siday ugu suurta gashay inay u adkeysato howlaha adag ee culus muddo 12 sano ah oo ay ku nooleyday guriga Cad ee Maraykanka? Waxay tiri; "waxaan caado ka dhigtay in aanan qofna qaabilin ama jeedin wax khudbad ah ilaa aan ka fariisto kursi raaxo leh, markaas baan indhaha isku qabsan jiray intaan is kala bixiyo muddo laba daqiiqo ah, kolkaas baa dabeyl cusubi I mari jirtay oo aan sidii qof cusub howsha u qaabili jiray.

Waxaan la kulmay Gene Autry, isagoo isu diyaarinaya tartanka caalamiga ah ee fardaha waxaan ku arkay qolkiisii sariir ka mid ah sariiraha askarta, waxaan weydiyey sababta ay sariirtani u taallo qolka leyliga, wuxuu igu yiri; "waxaan ku jimicsadaa muddo saacad ah duhur kasta intaan bilaabin howsha, markaan matalayo filimada intaan ku tiirsado kursi ayaan iskala bixiyaa indhahana isku qabtaa inta u dhexeysa labo muuqaalood, nasashada yari wax badan bay ii tartaa".

Edison waxa uu rumeysnaa in awoodiisa weyn iyo u adkeysigiisa la yaabka leh sabab u tahay caadada uu ka dhigtay inuu indhaha caseysto meel kasta oo uu joogo iyo waqti kasta ee uu doono. Waxaan la sheekeystay Henry Ford wax yar ka hor intaanu u dabaaldegan sanad guuradiisii 80-aad ee ka soo wareegtay dhalashadiisa, waxaan la yaabay xooggiisa iyo dhaqdhaqaaqiisa markaas baan weydiyey sirta ku jito! Wuxuu igu jawaabay; "isma taago haddaan fariisan karo, mana fariisto haddaan jiifsan karo".

Horance Man oo lagu naaneyso "aabaha cilmiga cusub ee barbaarinta" sidaas oo kale buu rumeysnaa waayo markuu weynaaday ee loo

doortay Hormuudka Kuliyadda Antioch, wuxuu qaabili jiray ardaydiisa arrin kasta oo la soo gudboonaata isagoo ku jiifa sariirtiisa.

Waxaa la arkaa inaad is weydiiso sidee bay iigu suurtoobi kartaa inaan sidaa falo? Haddii aan ahay karaani makiinad garaacayo, waa runtaa ma awoodi kartid inaad fasho sidii uu fali jiray Edison, haddii aad tahay xisaabiye kursi iskuma kala bixin kartid adigoo la hadlaya madaxdaada, marka waa jid inaad I weydiiso su'aashaas. Laakiin haddii gurigaagu kuu dhow yahay oo aad qado doonatid toban daqiiqana ha noqotee. Caadadan waxaa isticmaali jiray George G. marshal loo ahaa taliyaha ciidamada qalabka sida ee Mareykanka waqtigii uu socday dagaalkii 2-aad ee dunida.

Haddii aad waqti u weydo duhurkii inaad indhaha caseysato waa inaad isku kala bixisaa sariirta nasashada ka hor, haddii aad maalintii saacad ka seexatid waxaad ku biirisay saacad waqtigaaga soo jeedka ah, waayo? Oo sidee bay ku noqotay? Saacad aad maalintii ka seexatid marka lagu daro lix saacadood oo aad habeenkii ka seexatid ayaa guud ahaan ka faa'iido badan siddeed saacadood oo xiriir ah oo aad habeenkii seexatid.

Ninka shaqaalaha ah wuu kordhin karaa wax soo saarkiisa hadduu maalintii saacad ka seexdo, waxaana sidaa xaqiijiyey Fredrick Taylor mar uu ka ahaa farsama-yaqaan maamulka warshad bir shubta oo weyn, wuxuu arkay in qofka shaqaalaha ah uu guri karo 12 tan iyo nus kadibna uu noogayo, markaas wuxuu baaray sababta noogga guud ahaan, wuxuuna ku ogaaday baaristiisii inuu guri karo shaqaalahaasi midkiiba 47 tan, isagoon daalin halkii uu ka guri jiray 12 tan iyo nus kuna noogi jiray, tasoo ah qiyaastii in ku dhow afar jibbaar, marka sidee bay ku suurtoobi kartaa?

Wuxuu u doortay Taylor nin shaqaalaha ka mid ah inuu ku tijaabiyo howsha intuu saacad gacanta ku qabsaday ayuu ku yiri; "hadda bilow shaqada, hadda naso, hadda billow, hadda naso", waxay noqotay natiijaddii inuu shaqaalihii guro 47 tan saacadihii caadiga ahaa ee shaqada, sababtuna waxay tahay, waxaa la farayey qofkaas

shaqaalaha ah inuu nasto inta aanu daalin, marka la isku daro inta uu shaqeynayey, waxay noqotay saacaddiiba 26 daqiiqo, waxaanu nasanayey 34 daqiiqo saacadiiba, taasi macnahedu waxa weeye inuu nasanayey in ka badan inta uu shaqeynaayey, haddana waxa uu soo saaray wax ka badan wixii uu soo saari jiray markuu shaqada isku xiriiriyo nasasho la'aan.

Haddaba si aad nooggaa ama daalka uga hortagtid raac murtida lamb. 1-aad "fal ficilka ciidanka Mareykanka, ama kan qalbigaaga oo naso waqti kala go'an intaan nooggu ku soo gaarin, sidaas baad saacad ugu biirineysaa saacadahaaga soo jeedka ah'.

QEYBTA LABAAD MAXAA KU NOOJIYA

Waxaa jirta xaqiiqo la yaab leh oo ah "in shaqada maskaxda keligeed aanay keeneyn noogga" waxaa la arkaa inaadan rumeyn xaqiiqadan, laakiin koox culumo ah baa waxay isku dayeen mar dhowr sano laga joogo iney ogaadaan inta maskaxdu shaqeyn karto iyadoon noogin, way yaabeen culumadii markii ay arkeen dhiigga maskaxda ka soo burqanaya oo ay ka waayeen wax raad ah oo ku tusinaya noog, waliba markii shaqadu ugu adkeyd, haddii aad dhiig ka qaadid nin gacanta ka shaqeynaya isagoo shaqo kulul waday muddo, waxaad ka heleysaa dhiiggiisa qamiirka noogga iyo dhacaankiisa, haddiise aad dhibic dhiig ah ka qaadid nin caalim ah sida Einstein oo kale markuu ugu howl badan yahay qamiirka noogga iyo calaamadihiisa ka heli meysid.

Marka maskaxdu waxay shaqeyn kartaa 10-12 saacadood si xoog iyo nashaad leh iyadoon noogin ama daalin, haddaba haddii aanay maskaxdu noogeeyn maxaan u dareemeynaa daalka?

Waxay qabaan takhaatiirta cilmi nafsiga in noogga aan dareemeyno badankiisu uu ka dhashay waxa aanu ku fekereyno iyo waxa aanu dareemeyno.

Wuxuu ku sheegay Dr. J. A. Hadfield buuggiisa "xoogga nafta", noogga aan dareemeyno badankiis, wuxuu ka dhashaa fekerka, sida runta ah noogga asalkiisu ka yimid xagga jirka aad buu dhif u yahay.

Takhtartka dadka ee Mareykanka Dr. A. A. Brill wuxuu intaas ku daray "in 100% noogga ay ka sheeganayaan shaqaalaha ku fuliya howlaha fadhiga muddo dheer uu ku noqonaayo waxyaabo xagga nafta iyo caadifadda ah" laakiin maxay tahay caadifadda noogga u keentay shaqaalaha fadhiga ku shaqeeynaya? Ma caadifad farax baa? Mise waa raallinimo? Labadaba ma aha ee waa ciriiri caloolyow dareen tixgelin la'aan iyo welwel, waa kuwaas caadifadda ay dareemayaan ee noojiya shaqaalaha maskaxd ka shaqeeya, kuwaas oo keenay in jirka daciifo iskana celin waayo jirooyinka, wuxuuna yareynayaa nooggaasi kartida,

waxqabadka shaqaalaha oo galabtii ku noqonaya gurigooda iyagoo dhafoorada heysta, madax wareer dartiis, inagu waxaan dareemeynaa noogga, sababtoo ah caadifadda baa kicineysa neerfaha ama xididada dareenka, waxaa sidaas tilmaamay sharikad ceymisa nolosha oo la yiraahdo Merto Politan, wareegto ay ku baahisay dadka oo ka hadleysa noogga howsha adag lafteedda ma keento noogga sida badan, waxaan ujeedaa noogga aan ku ba'ayn hurdada weyn ama nasashada dheer, nooggaa waxaa keenaya walbahaarka, gadoodka neerfaha iyo caadifadda, saddexdaas shey ayaa saldhig u ah noogga, inkastoo la moodo in shaqada caqliga iyo howsha jirka asal iyo saldhig u yihiin noogga.

Ogow xubinta kacsani waa midda shaqeysa yeel ama ha yeelin, marka u debci oo u keydi xooggaaga howl waxtar badan oo faa'iido leh.

Hadda bal jooji akhriska meesha aad mareysa markaas fiiri sida aad u fadhidiid? Maku foorartaa buugga? Maka dareemeysaa xanuun badan labada indhood dhexdooda? Jirkaaga dhammaantiis ma debecsan yahay oo ma kala baxsan yahay? Ma jiraan cad wejiga ka mid ah oo ku giijsan?

Haddii aadan u fadhiyin si raaxo leh oo kala daadsan dhammaantaa waxaad abuureysaa gadood xididdada dareenka iyo xubnaha ah, haddii si kale loo sheego waxaad abuureysaa noog aan loo baahneyn, markaad qabaneyso howl maskaxda ah, wuxuu yiri Joseleyn "waxa dadku ugu daalayo shaqada maskaxda waxa weeye in dadku guud ahaan rumeysan yihiin in shaqada adag u baahan tahay ficil xoog leh, haddii kalese lagu hungoobi doono", sidaas darteed markaan qabaneyno shaqada kulul waan xeydanaa, muruqyadaan muujinaa si aanu isu dareensiino inaan ficil xoog leh fulineyno taasina waa caado aan wax qiimo ah ku laheyn tayada shaqada.

Waxaa jirta xaqiiqa yaab leh, isla markaana laga argagaxo oo ah "in malaayiin dad ah oo ku bakheylaya kuna gacan adag xoolahooda inay si dhiba u bixiyaan oo ay weliba sayr-sayriyaan caafimaadooda iyagoo raaligood ah", hadaba kee baa mudan in lagu bakheylo xoolaha iyo

caafimaadka? maxaa lagu daweeeyaa noogga neerfaha? Dawadiisu waa iskala bixin lagu nasto, sidaas darteed ka caado yeelo iskala bixinta markaad shaqeyneyso wax kastaba aad qabatide, hana u maleyn in amarkaasi fudud yahay, waayo waxaa la arkaa in loo baahdo inaad badeshid caadooyinkii aad soo baratay intii aad noleyd oo dhan, wuxuu yiri William James "dhibaatooyinka heysta dadka Mareykanka ah sida camal xumida iyo carada waxay ka dhalataa caadooyinka oo keliya" camal xumidu waa caado iskala bixintuna waa caado, caadooyinka xunxun waa laga tegi kara, caadooyinka wanwanaagsan waa la kasban karaa.

Sidee la isku kala bixiyaa? Ma waxaa laga bilaabaa maskaxda miise xididada dareenka? "neerfaha" midna haka bilaabin, waxaad ka bilowdaa murqaha iyo xubnaha jirka, mar kasta, hadda bal aan sameyno tijaabo fudud, kadibna aan fiirino waxtarkeeda tijaabada, waxaan ku sameyneynaa indhaha.

Akhri ereyadaan ilaa aad ka dhameysid marka ka joogso, ku tiirso kusiga aad ku fadhidid, indhaha isku qabo oo ku dheh indhahaaga adigoo aamusna iskala bixiya, raaxeysta oo ka reebtoonaada diidmada iyo kacsanaanta ku celceli amaradaas, naftaada muddo hal daqiiqo ah, waxaad arki doontaa in indhahaagu fulinayaan amarkaaga intaanay ka soo wareegin laba ilbiriqsi, waxaad arki doontaa iyagoo dabcaay oo raaxeystay, marka haddiiba waxaad rumeysaneysaa sirta weyn ee raaxada iskala bixinta ku jirta.

Waxaad awoodi kartaa inaad tijaabadan ku sameyso dhammaan qeybaha kale ee jirka, sida muruqyada afka, wejiga, qoorta, iwm. Laakiin labada indhood ayaa ugu muhiimsan xubnaha jira xagga ku raaxeysiga iskala bixinta.

Wuxuu qabaa Dr. Edward Jacobson agaasimihii jaamacadda Chicago in debcinta muruqyada indhaha kaligood ay ku filan tahay dejinta gadoodka iyo kacsanaanta jirka dhammaantiis, waxaana sidaas ugu wacan in indhaha keligood qaataan qeyb libaax oo ka mid ah dhaqdhaqaaqa xididada dareenka oo dhan, sidoo kale waxay

dareemayaan dad badan xanuun ah in indhahoodu canaad qabaan, sababtuna waxaa weeye kacsanaanta indhaha.

Vici Baun oo caan ku aheyd curinta riwaayadaha waxay sheegtay "in waagii ay caruurta aheyd ay la kulantay oday da'weyn kana baratay casharkii ugu muhiimsanaa nolosheeda, waxaa jirtay maalin inay kuftay oo dhulka ku dhacday, waxay ka dhaawacantay jilbaha, markaas buu odaygii kiciyey wuxuuna odaygu ahaan jiray ciyaaryahan, markaas buu ku yiri "sababta aad u kuftay waxay tahay waxaadan aqoon iskala bixinta iyo jimicsiga, waxaa loo baahnaa inaad debciso xubnahaaga sidii calal dhamaad ah oo kale. Kaalay aan ku tusee, markaas buu tusay sidii ay u dhici laheyd iyadoon wax dhibaato ah gaarin, haddii ay debcin laheyd xubnaheeda sidii calal duug ah ama iskaalo la waray, waxaad awoodi kartaa inaad ku raaxaysatid iskala bixinta meel kasta oo aad joogtid, waxaana waajib ah in aadan ku howshoon iskala bixintaas, sababtoo ah iskala bixinta maaha howl la qabanayo ee waa ka reebtoonaan howl ama shaqo, waana inaad ka bilowdid iskala bixinta mar kasta muruqyada indhaha iyo wejiga.

Haddana iga guddoon shan tulaase oo kuugu gargaaraya inaad ku noqotid xariif fanka iskala bixinta:-

- 1- Akhri kitaabka ugu weyn ee dunida u soo baxay xagga fanka iskala bixinta, waxaana ujeedaa kitaabka uu qoray Dr. Daria Harald magaciisuna yahay "ku raaxeyso diidmada neerfaha".
- 2- Ku raaxeyso iskala bixinta, debci xubnaha jirkaaga oo laalaadi sidii iskaalsho dhamaad ah oo kale, ogow inaan guriga ku heysto iskaalshooyin dhamaad ah si aan uga barto sidaan u kala bixin lahaa jirkeyga, haddii aadan heli Karin iskaalshooyin waxaad heli kartaa bisad, weli ma aragtay bisad ama mukulaal qorrax jifta, haddii aad aragtay waxaa hubaal ah inaad fiirisay sidey isu kala bixisay ilaa la moodo maro la dhaqay oo la waray.
- 3- Shaqee inaad doonto oo waqti ah waase inaad dhowrtaa kala baxsanaanta fadhiga intaad shaqada heyso.
- 4- Ku noqo naftaada maalin kasta afar ama shan jeer oo is weydii inaad qabatay shaqo ka badan intii caadiga aheyd ee loo baahnaa

xaqiiqa ahaan. Ku isticmaal xubno jirkaaga ka mid ah oo aan ku lug laheyn shaqada aad qabaneysa xagga iskala bixinta, waxyaabahaasi waxay kugu caawinayaan inaad abuurto caadada iskala bixinta.

- 5- Imtixaan naftaada mar kale markaad shaqada dhameeyso is weydii inaad daalan tahay? Haddii aad daalan tahay ogow inaan daalku ka dhalan howsha aad qabatay xooggeeda laakiin uu ka dhashay qaabka aad xoogga u isticmaashay.

Wuxuu yiri; Dane M. Josselyn "haddii aan iska dareemo wax noog ah ama neerfaha oo kacsan galabtii markaan shaqada dhameeyo waxaan xaqiiqo ahaan u ogaadaan in shaqadii maalintaasi khasaare aheyd xagga tirada iyo tayadaba, haddii qof kasta ku camal fali lahaa casharkaasi way yaraan lahaayeen dadka u dhinta jirooyinka neerfaha, waana la waayi lahaa dadka ku qulqulaya takhaatiirta oo ka sheeganaya cudurrada daalka iyo walbahaarka.

QEYBTA SADDEXAAD

SIDEY AFOOYINKU ISAGA DHOWRI LAHAAYEEN DAALKA

UNA ILAASHAN LAHAAYEEN DHABANADOODA

Deyrtii sanadkii hore ayaan u diray xogheynteydii magaalada Boston si ay uga qeyb gasho dugsiga caafimaadkii ugu yaab badnaa ee dunida, waxaa la dhigtaa dugsigaa todobaadkii hal maalin, waxaan dhihi karaa waa dugsiga bukaan socodka nafta, inkastoo magaciisa rasmiga ahi uu ahaa "dugsiga cilmi nafsiga iyo dhaqan celinta" waxaana loo dhisay in lagu daweeyo jirooyinka ka dhasha walbhaarka iyo tiiraanyada, ardayda dugsigaasi waxay ahaayeen afooyinka caadifadooda iyo neerfahoodu kacsan yahay. Laakiin sidee buu ku dhashay dugisgaasi? Sannadkii 1930-kii wuxuu u fiirsaday Dr. Joseph H. Dratt oo arday u ahaa Sir William Osler jirooleyaashii soo booqanayey cusbitaalka Boston, wuxuu arkay in badankood aanay ka sheeganeyn meel jirka ka mid ah oo la xadidi karo, inkastoo cudurkoodu aad uga muuqday jirkooda.

Tusaale ahaan waxaa jirtay Marwo u timid takhtarrada oo ka sheeganeysay in xubnaha gacmuhu qallalaan waxay tiri; "xanuun aawgii kama shaqeyn karo" mid kale oo timid waxay ka sheeganeysay in caloosha Kansar uu ka hayo, kuwo kale waxay ka sheeganayeen madax wareer iyo lafo xanuun, waana dhab in cudurradaasi xanuun ku hayeen, laakiin markii si dhab ah loo baaray waxaa caddaatay in jirkoodu fiyow yahay, takhtarradii hore waxay dhihi lahaayeen waxba ma qabtaan oo jirrada aad ka sheeganaysaan waa dhalanteed aan xaqiiqo aheyn oo aad maskaxda gashateen.

Laakiin Dr. Dratt wuxuu ogaaday in afooyinkaasi aanay ku qanceyn waxba ma qabtaan, isla markaana wuxuu xaqiiqsaday inay jirran yihiin oo aanay is yeelyeeleyn, markaas buu is weydiyey siduu u daweyn lahaa afooyinkaas? Wuxuu furay dugsiga Boston ee aanu soo sheegnay inkastoo ay shaki iyo jeesjees markii hore ku qaabileen takhaatiirtii, waxaa xusid mudan inuu ku tallaabsaday dugsigii natiijooyin yaab iyo amakaag u keenay dunida, waayo waxaa lagu daweeeyey 18-kii sano ee la soo dhaafay kumanyaal afo oo jirran oo ku bogsaday, wuxuu yiri Dr.

Rose Hilferding oo kaaliye ka ahaa dugsigaas "waxyaabaha lagaga bogsado walbahaarka waxaa ka mid ah inuu uga sheekeeyo qofka walbahaarsan qof uu ku kalsoon yahay dhibaataada uu ka sheeganayo".

Markii jirooleyaashu yimaadaan dugsiga waxay awood u heli jireen inay si faahfaasan uga sheekeeyaan dhibaataadooda, maxaa yeelay waxaa markaas ka degaya culeyskii walbahaarku ku hayey maskaxdooda, waayo qarinta dhibaataada iyo isku celinta ciilka waxay kiciyaan neerfaha iyo dhiigga.

Waxay goob joog u aheyd xogheynteydu iyadoo la dhaqan gelinayo arrinka ka sheekeysiga dhibaataada, waxaa jirtay gabar ka mid aheyd ardayda dugsiga oo ka sheeganaysay dhibaato xagga qoyska ah intey kacday bay ka sheekeysay dhibaataada ay ka walbahaareyso, markii ay bilaabeysay hadalka dhib buu uga soo baxayey sidii qof sakaraad ah oo taahtaahaya oo kale, markii ay cabbaar hadashay bay erayadii si fiican uga soo baxeen marba marka ka dambeysa hadalkii waa sii caddaanayey, waxaana ka soo ifayey wejigeeda raaxeysi marba marka ka sii dambeyso, markii ay dhameysay sheekadii way muusooneysay, marka miyey xallisantay mushkiladdii? Maya dhibaataadu howl yaraantaa kuma xallisanto ee waxaa dhaliyey isbedelkaas ka sheekeynta ay u xeel baxday qof dhageysanaya oo qaddarinaya oo u naxariisanaya oo waaninaya, waxay tuurtay culeyskii laabta kaga fadhiyey, waxaa furmay waddo weyn oo daaweynta ah kuna qarsoon eryada.

Furfurista nafta ee cilmi-nafsiga wuxuu cuskan yahay awoodda wax bogsiiinta ee ku qarsoon ereyada, waxay rumeeyeen aqoonyahanada cilmi-nafsiga in qofka jirran ka bixi karo mushkilooyinka heysta ee xagga ruuxda ah, haddii uu ka sheekeeyo, maxay sidaa ku noqotay? Waxaa laga yaabaa in ka sheekeynta dhibaataadu ifineyso xididdada mushkiladda ama aan ka neefsaneyno culeyskii ay dhibaataadu laabta inagaga heysay ee nafta inagu dhibtay.

Haddaba marka soo socda haddii walbahaarku inagu dhaco aan raadino qof aanu ku kalsoonahay oo aynu uga sheekeyno

dhibaatadeena, laakiin taasi micnaheedu ma ahan inaan qof kasta qalbigeeena u furno oon uga sheekeyno xogteena, waa inaan doorano qof aan ku kalsoonahay oo aan ballan adag la dhigano ha noqdo takhtar ama wadaad, markaad hor fariisato ku dheh, "waxaan kuugu imid inaad igala taliso mushkilad I qabsatay oon u taag waayey, waxaan jeclahay inaad iga dhegeysato, waxaa la arkaa inaad ii irdo-bixisid sidaan uga bixi lahaa dhibaatada I haysata, haddii aad wax igala qabato waxaad igu leedahay abaal weyn, haddiise ay kuu suuroobi kari weydo inaad wax igala qabatid dhegeysiga keliya ayaa wax weyn ii ah.

Haddii aad weydo qof aad ku kalsoon tahay waxaan kuu tilmaamayaa iney jirto qolo wax kaala qabaneyso oo ah "Hay'adda badbaadinta nafta", waa hey'adda uga cajaa'ibsan dunida, waxaa loo curiyey markii hore in lagu badbaadiyo dadka doonaya inay is dilaan, markii dambase way ballaaratay howsheedii oo waxay u gargaartay dhammaan dadka ay dhibaatooyinku cunaqabateeyaan, waxaa iiga sheekeeyey Miss. Lore B. Bonnel, oo qaabilsan xagga soo dhoweynta dadka yimaada hay'adaas oo doonaya tala siin, waxay iga oggolaatay iyadoo ku mahadsan inay ka jawaabi doonto su'aal kasta oo uga timaada akhristayaasha kitaabkan "dhaaf walbahaarka".

Marka haddii aad u qortid dhibaatadaada hay'adda badbaadinta nafta, ku kalsoonow in sirta mushkiladaadu qarsoonaan doonto oo la dhowri doono, waxaa kuu soo jawaabi doona dad daacad ah oo aqoon u leh xallinta mushkilooyinka, waxayse ila tahay inay door roon tahay inaad qalbigaaga u furtid qof aad ku kalsoon tahay oo ku dhegeysanaya, haddiise aad weydo waxaad la xiriiri karta hay'adda badbaadinta nafta, ka sheekeynta dhibaatada waxay ka mid noqotay daawooyinka lagu isticmaalo dugsiga Boston.

Haddana waxaan u soo jeedinaynaa afooyinka talooyin kale oo dugsiga Boston lagu isticmaalo laguna daweeyo walbahaarka iyo tiiraanyada ka timaadda mushkilooyinka qoyska waana kuwan:-

- 1- Hayso xusuusqor, waxaad ku qortaa ra'yi kasta oo wanaagsan oo aad la kulantid oo ku xusan kitaabkan, waxaa kale oo aad ku qortaa

gabayada, xigmadaha iyo maahmaahyada kugu caawinaya xalinta dhibaatooyinka, haddaad maalin iska dareentid ciriiri iyo ciil soo qaado waxaad horey u qortay, waxaad ka heli doontaa wax ku dhaafiya ciriiriga ku heysta oo ku ilowsiiya dhibaataada oo kuu soo celiya faraxaagii.

- 2- Ha u aabo yeelin ceebaha dadka kale, waxaa hubaal ah in ninkaagu ceeb leeyahay maxaa yeelay haddii uu malag yahay kuma arooseen, miyaanay sidaasi kula aheyn?

Waxaa jirtay haweeney ka mid aheyd ardayda dugsiga Boston oo lagu yaqiinay inay u abuurto ninkeeda xumaan iyo mashaakil oo u jeedin jirtay cannaan iyo dhaliil joogto ah, waxaa la weydiiyey maxaad fali laheyd haddii uu dhinto ninkaagu? Markiiba su'aashii bay ku argagaxday, markaas bay qaadatay qalin iyo warqad, waxay bilowday inay qorto samaanta ninkeeda iyadoo barbar dhigtay ceebihii ay hore ugu sheegi jirtay, waxay la yaabtay markii samaantiisii ka badatay xumaantiisii. Maxaad sidaa haweeneydaas u sameyn weyday, markaas istiraahdid waxaad guursatay nin xun oo kibir badan? Waxaa la arkaa markaad is barbar dhigtid xumaantiisa iyo samaantiisa inuu noqdo ninka aad dooneysid.

- 3- Xoogee xiriirka aad la ledahay dersikaaga, waxaa lagu waaniyey afo ka mid aheyd ardayda dugsiga Boston oo ka sheeganaysay wehel la'aan inay soo qorto qiso halyeygeedu yahay 'ninka ugu horreeya oo ay la kulanto markii ay ka baxdo fasalka' markii ay fuushay baskii waxay ku fekeraysay qofkii ay ka qori laheyd qisada, waxay ka dhex baartay dadkii la fuushanaa baska si ay qisadu ugu dhowaato wax run ahaan u dhacay, waxay bilowday inay dadkii la sheekeysato oo ay u dhowaato, hadda afadii waa naag liibaansan oo sheeko macaan iyo dhaqan fiican leh.

Haweenku waa inay ogaadaan in deriskoodu yahay kuwa dadka ugu dhow, iyagaana ugu mudan in si wanaagsan loola dhaqmo oo xiriir fiican lala yeesho si looga badbaado cidlada iyo wehel la'aanta walbahaarku soo jiido.

- 4- U dejiso barnaamij howlaha berrito ku sugaya, waxaa u caddaatay maamulka dugsiga Boston in afooyin badan dareensan yihiin inay ku jaha wareereen shaqada guriga iyagoo waqtigoo dhan ku tebiya

waxaan qiimo weyn laheyn, sababtoo ah way degdegayaan, waqtigana way la tartamayaan. Marka si looga nabadgalo dhibaataada ka dhalata shaqada murugsan ee aan barnaamij laheyn waxaa lagula taliyey afooyinka inay maalin kasta dejistaan barnaamijka maalinta soo socota. Markii ay fuliyeen qorshahaas waxaa dhacay inay qabteen howlo ka badan kuwii hore isla markaana in daalkii yaraaday oo ay heleen waqti ay ku raaxeystaan oo ay naftooda qurxiyaan, afo kasta waa inay hesho waqti ay ku tebiso sidey ugu dadaali laheyd nafsadda jirkeeda iyo is qurxinta, waxaa jirta in isku kalsoonaanta afada ee quruxdeeda, muuqaalkeeda, bilicsanaanteeda iyo dharkeeda uu ka fogeynaayo walbahaarka, ciilka iyo ciriiriga.

- 5- Ugu dambeynn ka fogow daalka kuna raaxeyso iskala bixinta, iska jir daalka waayo ma jiro wax ka gaboojin og dhabannada kana gaarsiin og noog. Waxay dhegeysatay xogheynteydii muddo saacad dhan ah macalin Paule Johnson, agaasimaha dugsiga Boston isagoo ka hadlaya mabaadii'da iskala bixinta ee aanu soo sheegnay, intaanay ka soo wareegin toban daqiiqo bilowgii tijaabada iskala bixinta, gabadhii xogheynta ii aheyd waxay noqotay sidii qof hurdaya oo kale oo waxay isku kala bixisay kursigeedii!

Marka muxuu dugsigu isugu dhibayaa inuu baro afooyinka fanka iskala bixinta? Wuxuu ogaaday dugsigu siday takhtaduba u ogaadeen in ku raaxeysiga iskala abixinta ka mid yahay waxyaabaha aasaasiga ah ee lagu tirtiro walbahaarka.

Marka haddaad tahay qof afo ah waxaa kugu haboon inaad ku raaxeysatid iskala bixinta, waana fursad fiican ee ha iska dhuminin, taasoo ah inaad dhabarka u seexan karto, inkastoo ay seexashada dhulka yaab idinla tahay, laakiin dhulka adag ayaa uga fiican xagga iskala bixinta joodariga ku cabaysan cudbiga iyo xariirta.

Haddana waxaan idiin soo gudbinayaa dhowr leylis oo lagu sameyn karo guriga dhexdiisa, bal isku day muddo todobaad ah kaddibna fiiri isbedelka ku dhaca muuqaalkaaga, bilicsanaantaada iyo quruxda kaa soo baxdo.

- a. Markaad dareento noog ama daal dhulka seexo oo debci jirkaaga iskana siiddaa xubin kasta intii suuragal ah, isku rogrog dhulka haddii aad doonto sida carruurta, maalin kasta laba jeer sidaa fal.
- b. Adigoo jiifa sariirtaada isku qabo indhaha oo nataada hoos u dheh erayadii uu kugula taliyey Johnson ee ahaa 'cirku waa saafi, qorraxduna way soo baxday iyadoo ifeysa, dunidu way xasiloon tahay, aniguna waxaan ka mid ahay dunida", markaas Ilaahey bari adigoo indhaha isku haya.
- c. Haddii aad dhulka seexan kari weydo shaqo daraadeed, waxaad ku fariisan kartaa cabbaar kursi, waxaa fiican inuu yahay kursi siman uguna fariiso sida taallooyinka faraacinada baabacooyinka jilbaha saaro.
- d. Furaha lugahaada kor u qaad intii aad kartid, haddana debci oo ku celceli, siiddaa dhowr jeer xubnaha kale ee jirkaaga, xubnahaaga kor u taag intaad awoodid, kadibna debci markaad xoogaa joogto, qoorta ku wareeji madaxa si miyir leh oo xoog ah, kadibna debci ha raaxeystee.
- e. Deji neerfahaaga adigoo ku isticmaalaya inaad si xoog leh oo nidaamsan u neefsatiid, waxay sheegeen dad reer Yuuji ah oo ah Hindiga ciyaaraha adadagna ku caan baxay; "in neefsashada habaysan ee nidaamka lihi tahay daawada ugu fiican ee lagu dejin karo neerfaha kacsan". Ka feker meelaha laalaaban ee wejigaaga ah kuna dhaqaaq sidaad u tirtiri laheyd, ku dadaal inaad iska tirtirtid meelaha duuduubmay ee sunnooyinka iyo dhabanada ah, kana tirtir maskaxdaada ku welwelka arrimahaas fal sidaa maalin kasta labo jeer, waxaa laga yaabaa inaad u baahan inaad tagto meelaha loo tago duugidda iyo qurxinta, waxaa la arkaa in raaxada iyo raalinimada gudaha ay tirtiraan weji kaduudka iyo arag xumida.

QEYBTA AFARAAD
AFAR CAADO OO LOOGA BADBAADDO WALBAHAARKA
XAGGA SHAQADA IYO DAALKA

1. Ka Dheeree Miiskaaga Waraaqaha Iyo Galalka, Waxaan Ka Aheyn Midda Ku Saabsan Arrinka Aad Markaas Wax Ka Qabanaysid

Wuxuu yiri; Roland L. William, gudoomiyihii sharikadda tareenada ee Chicago ninka ay miiska u tuuran yihiin warqado iyo feylal wuxuu ogaan doonaa farqiga weyn ee u dhexeeya waxqabadkiisa, isagoo sidaas ah iyo waxqabadkiisa marka uu iska fogeeyo waraaqaha miiska, waxaan aheyn midda uu markaa shaqada ka hayo. Haddii aad soo booqatid maktabadda Kongareeska mareykanka ee Washington waxaad ku arkaysaa shan erey oo laga soo qaatay gabaygii caanka ahaa ee Pope oo lagu naqshadeeyey derbiga ereyadaas oo ah "nidaamku waa qaanuunka Ilaahey ee koowaad, waanay haboon tahay in nidaamku noqdo qaanuunka koowaad ee shaqada", laakiin waxaa nasiib darro ah inaan lagu dhaqmin ereyadaas, waxaad ku arki kartaa xafiiska sarkaalka caadiga ah, iyadoo ay ka buuxaan waraaqo iyo galal laga yaabo inaanu arag qaarkood muddo todobaadyo ah.

Wuxuu ii sheegay nin iska lahaa wargeys ka soo baxa magaalada New Orleans in xoghayihiisa uu maalin nadiifiyey xafiiskiisa, wuxuuna ka helay makiinadda teebka oo labo sano ka hor uu waayey, waayo waxay ku dhex qarsoontay waraaqihii fiiqsanaa. Markii aad aragto xafiis isku dhex daadsan oo ay ka buuxaan waraaqo galal, warbixino iyo wareegtooyin shaki kuma jiro inaad argagaxayso oo uu kugu abuurmayo qalbi jab iyo walaac, waxaa ka sii daran isku shuqlinta boqol mas'aladood inaad hal mar wax ka qabatid, taasoo kugu rideysa jirrooyinka ah dhiig-kar, wadno xanuun iyo boog-calooleed.

2. U Qabo Sida Arrimuhu U Kala Muhiimsan Yihiin

Nin la oran jiray Henry L. Douberty oo ahaa aasaasihii sharikadda u adeegidda magaalooyinka, wuxuu yiri; "waxaa jira labo shey oo qiimo gal ah, laakiinse aan lacag lagu iibsana Karin, waxayna kala yihiin:-

1. Awoodda ah in la fekero iyo
2. Kartida u fulinta arrimaha sidey u kala daran yihiin.

Nin la oran jiray Charles Luckman wuxuu ahaan jiray nin miskiin ah, laakiin wuxuu awoodday muddo 12 sano gudahood ah inuu gaaro darajada agaasimaha sharikadda Peosedent mushaarkiisuna wuxuu gaaray 100,000 sanadkii, wuxuu u tiiriyey guushaas weyn ee uu gaaray labadii shey ee uu Henry ku tilmaamay inaan lacag lagu iibsana Karin, wuxuu kici jiray 5:00 subaxnimo, markaas buu qorsheyn jiray howlaha maalintaas sugaya, wuxuu u habeyn jiray sidey u kala muhiimsan yihiin.

Anigu waxaan ku ogaaday tijaabooyin kala duwan in qofku sida badan ka caajiso ama ka wahsado inuu qabto howlaha aan u qorsheysneyn, sidey u kala muhiimsan yihiin, waxaanse ogaaday dejinta barnaamij nidaamsan oo ku habaysan sidey howluhu u kala muhiimsan yihiin uu wax badan ka door roon yahay in qorshe la'aanta lagu dhex dhaco shaqooyinka.

Haddii aanu George Bernad Shaw dejin laheyn naftiisa qorshaha uu ku hormaray oo ahaa in sheyba sheyga uu ka mudan yahay u ka hormariyo, ma noqdeen qoraa caan ah ee wuxuu ku dhameysan lahaa noloshiisa sarkaal lacag haye ka ah bangiga, waxaa ka mid ahaa barnaamijkiisa joogtada ah inuu maalin kasta qoro 5 buug, qorshahaasi wuxuu gaarsiiyey himilada uu u socday.

3. Berri Hala Sugin Go'aan Aad Maanta Gaari Karto

Nin arday ahaa oo la oran jiray H. P Howell wuxuu ii sheegay inuu arkay mar uu xubin ka ahaa guddiga sheybaarka birta ee Maraykanka in go'aamada guddigu gaarayaan ay aad uga yar yihiin mushkilooyinka hor yaal, waxaana qasab ku aheyd xubnaha guddiga in qof kasta qaato

xeyn warqado ah si uu guriga ugu soo baaro, markaas buu ku taliyey Howell in guddiga loo soo hordhigo mushkilooyinka mid mid ilaa midda la keenay go'aan laga gaarana aan mid kale la soo hordhigin, guddigu waa la dhacay ra'yigii, waxayna natiijadii noqotay in mushkilooyinkii raagay oo dib loo dhigi jiray go'aamo laga wada gaaro, xubnihii guddigana way ka raaxeysteen waraaqihii ay guryaha u qaadan jireen si ay u soo baaraan xallinta mushkilooyinka.

4. Ka caado yeelo nidaamka iyo ku kalsoonaanta dadka kale.

Waxaa jira dad badan oo geerida gacantooda ku doonanaya, sababtoo ah ma yaqaaniin inay ku kalsoonaadaan dadka kale oo ay u xilsaaraan howlaha qaarkood, waxayna ku adkeysanayaan inay wax kasta keligood sameeyaan, runtii way dhib badan tahay in culeyska howsha la saaro dad kale, weliba haddii aanay aheyn kuwo u qalmo, waxaase jira waxyaabo aan looga maarmi Karin in dad kale lala kaashado haddii la rabo in laga badbaado noogga iyo walbahaarka, ninkii mashruuc dhisaya ee aan baarin sida loo habeeyo shaqada culeyskana loogu qeybiyo dadka ku haboon isagoo la haraya kormeerka iyo fiirada, wuxuu u muuqanayaa konton jirkiisa sidii nin gaboobay oo dhacay.

QEYBTA SHANAAD

SIDAAD UGA BADBAADI LAHEYD WAHSIGA

Caajisnimadu waxay ka mid tahay waxyaabaha keena walbahaarka, si loo caddeeyo aragtidaas aan tusaale u soo qaadano gabar la yiraahdo Alice oo aheyd gabar garaacda makiinadda teebka, markii ay shaqada ka soo hoyato waxay imaan jirtay iyadoo daalan oo dhacdhaceysa, markii ay guriga soo gasho sariirta ayey isku kala tuurtaa, iyadoo leh anigu waan daalanahay, casho ma rabo ee yaan la I kicinin, ilaa ay hooyadeed ku barido inay casheyso inta aysan seexan, markaas bay cagajiid ku casheyn jirtay.

Iyadoo xaalkeedu sidaa yahay ayaa waxaa dhacday inuu taleefoon u soo diray wiil saaxiibkeed ah uuna ku casuumay xaflad caweys ah, markaas bay farax la boodbooday oo wixii hayey oo dhan ka duuleen oo ay degdeg u lebisatay, haddiiba waxay u oroday xafladdii, waxaanay ku maqneyd ciyaartii caweyska ilaa 3:00 subaxnimo, kamana daalin dhaaniskii iyo tumashadii muddadaas oo dhan.

Waxay ku soo noqotay gurigii iyadoon aheyn gabadhii fiidkii sugi kari la'eyd cashada ee dooneysay inay sariirta isku tuurto, marka gabadhaasi dhab ahaantii ma daalaneyn fiidkii siday isu maleyneysay, sababtuna waa inay ku maqneyd shaqo aanay xiiso u heyn, marka nolosha oo dhanba lama macaaneyn, waxaa jira malaayiin sida Alice oo kale ah waxaana la arkaa inaad adigu ka mid tahay.

Waxaa sugan in habka qofku u fekeru uu u soo jiidi karo daal ka badan inta shaqada gacanta laga qabto ay soo jiiddo. Mar dhowr sano laga joogo wuxuu ku qoray Dr. Joseph Barnach majalad la yiraahdo arkiifiyada cilmi-nafsiga maqaal uu ku tilmaamay tijaabooyin uu sameeyey si uu u ogaado raadka uu wahsigu ku leeyahay soo jiididda noogga, wuxuu u bandhigay qaar ka mid ah ardaydiisii su'aalo adadag oo ay naftoodu neceb tahay, maxaa ka dhacay? Waxay dareemeen ardaydii markii ay ka jawaabayeen su'aalihii noog, waxa qabatay qaarkood hurdo, qaarkood waxay ka sheegteen madax wareer, qaarna

indho xanuun, laakiin waxay ka sheeganayeen ma dhalaanteed baa mise waa wax jira?

Waxaa laga qaaday iyagoo ku jira imtixaankii dhiig? Waxaa ka soo baxay tijaabadii in cadaadinta dhiigga ee jirka iyo qaadashada ogsijiinta ay hoos u dhacayaan marka uu qofku daalo, haddii uu nasto qofku oo uu daalka ka ba'o dhaqdhaqaaqa jira sidii hore buu ku soo noqonayaa.

Haddii aanu ku shuqloon nahay howl aanu xiiso u qabno ma dareemeyno ciriiri, kamana noogeyno, tusaale ahaan mar baan fasax u aaday buuraha kanada, waxaan joogay dhowr beri oo aan ku raaxaysanayey inaan ka kalluumeysto xeebaha gacanta, "Coral Creek" waxaan dhex jeexayey keymaha, waxaan fuulayey geedaha waaweyn ee jidadka xiray, waxaan shaqadaa kulul hayey ilaa siddeed beri, mana dareemin wax daal ah, sababtoo ah shaqada ayaan xiiso u hayey oo aan ku faraxsanaa. Laakiin ka soo qaad inaan ku noqdo markan ka xiiso dhaco kadib, maxaan dareemi lahaa? Shaki kuma jiro inaan ciriiri geli lahaa oon ka wahsan lahaa dhaqdhaqaaqa anigoo jooga meel hadda ka sarreysa toban kun oo tallaabo neeftana igu ceshoomi laheyd.

Dr. Edward Thomdike oo bare ka ahaa jaamacadda kolombiya wuxuu sameeyey tijaabooyin ku saabsan walbahaarka, wuxuu ku khasbi jiray dhalinyarada inay soo jeedaan todobaad dhan, wuxuu u xilsaari jiray shaqooyin ay jecel yihiin oo ay xiiseynayaan, markuu dhameeyey tijaabooyinkii wuxuu caddeeyey sidatan "sababta aasaaska ah ee yareyneysa wax soo saarka qofka waxay tahay inuu qofku ka xiiso dhaco shaqada uu hayo taasoo keeneysa noog iyo naceyb shaqo.

Marka ay shaqo jeceyl jirto waxa dhalaneysa howl karnimo iyo awood wax qabasho, waxaa laga yaabaa inay kugu adkaato inaad la socoto toban mitir afadaada, hadday tahay mid madax adag ama amarka diida oo kuu abuureysa xumaan iyo aflagaado mar kasta, haddiise ay tahay qof wanaagsan oo aad is jeceshihiin waxaad la socon kartaa ilaa intaad doonto, marka maxaad sameyn kartaa?

Bal fiiri waxa ay sameysay gabar karraaniyad u aheyd sharikad batroolka soo saarta oo degeneyd magaalada Tusla, waxay u xil saarneyd inay buuxiso foomam xisaabeed iyo tiro-koobyoy, laakiin shaqadaa xiiso umay hayn, waxay ku noqotay shaqadii culeys iyo ciriiri, waxay goosatay gabadhii in shaqadaas ay neceb tahay ay u beddesho mid raaxo iyo madadaalo leh, sidee bay ku awooday? Waxay sameysay tartan ku kooban nafteeda, waxay tirisay foomamkii ay buuxisay shalay, markaas bay jebisay rekoorkii shalay, maalintii dambe waxay ka badisay intii maalintii hore, laakiin maxay u tartay ammaantaas? Mahadnaq iyo dalacsiin maku heshay? Maya, waxay u tartay waxa ugu weyn inay iska ilaalisay nooggii iyo walbahaarkii, waxaanay heshay raaxo iyo raalinimo, haddii aad I warsato sidaan ku ogaaday xaaladda gabadhaas waxaan ku jawaabi kara anigaa guursaday gabadhaas iyada ah.

Haddii aad shaqada neceb tahay oo aanad kareyn inaad macaaneyso u shaqee sidii iyadoo ah shaqo macaan oo lagu raaxeysto, waxaad arki doontaa adigoo is beddelay oo shaqadii xiiso u haya, maxaa yeelay falsafadda ah iska yeelyeelka sidii iyadoo uu arrinku sidaas yahay waa falsafo uu cilmi-nafsigu aqoonsan yahay.

Wuxuu ku taliyey abwaankii cilmi-nafsiga William James "aan isu muujino sidii inagoo geesiyaal ah si aan geesi u noqono, aanu u dhaqano sidii inagoo liibaansan si aanu liibaan ku gaarno" marka haddii aad shaqada neceb tahay ku isticmaal fikradan u shaqee sidii adigoo ku raaxeysanaya oo macaansanaya isku khasabkaas wuxuu kuu xaqiijin doonaa raaxo maaweelo iyo macaansi xaqiiqo ah.

Wuxuu ii sheegay Mr. H. VV. Kaltenbon oo caan ku ah ka faaleynta wararka raadiyaha siduu uga dhigay shaqo uu necbaa mid xiiso leh markuu labaatan jir ahaa, wuxuu ka shaqeyn jiray markab xoolaha qaada oo ka goosha badweynta Atlantic, wuxuuna ka ahaa kormeere sida xoolaha loo quudiyo loona dhaqaaleeyo, markuu yimid waddanka Ingiriiska wuxuu ku soo wareegay baaskiil, markaas buu u dhoofay dalka Faransiiska, isagoo sabool ah ilaa ay dantu ku khasabtay inuu rahan geliyo kaamaradii uu wax ku sawiri jiray oo uu ku rahmay \$5 si

uu ugu bandhigo wargeysyada inuu yahay nin shaqo doon ah, wuxuu helay shaqo ah iibinta alaabta ay carruurtu ku ciyaaraan, wuxuu garaaci jiray guryaha reer Baariis, isagoon waxba ka aqoon afka Faransiiska, inkastoo uu sidaa ahaa haddana wuxuu gaaray heer uu macaasho sanadkii 5,000\$ wuxuuna noqday ninkii ugu fursad fiicnaa xagga wax iibinta dalka faransiiska waqtigaas.

Sidee bay ugu suurta gashay ninkaas isagoon aan afka faransiiska aqoon fiican u laheyn inuu ku liibaano shaqada iibka alaabta? Wuxuu warsan jiray madaxdiisa inay u qoraan ereyada uu uga baahan yahay iibka, markaas buu inta xafido dhaqaqi jiray si uu alaabta u soo gado, guryaha markuu tago wuu garaaci jiray, waxaana u soo bixi jirtay afada guriga leh, markaas buu kula hadli jiray erayadii uu soo xafiday, isagoo weliba jejebinaya oon si fiican u baran, markaa buu u bandhigi jiray alaabta uu wado, haddii la weydiiyo su'aal intuu garbaha nuuxiyo buu oran jiray anigu waxaan ahay Mareykan, oo ma aqaano afka faransiiska, wuxuu tusi jiray erayadii loo soo qoray, markaas bay haweeneydii aad u qosli jirtay, isaguna waa ku dayan jiray, wuxuuna hor dhigi jiray alaabada kale ee uu wado.

Wuxuu ii sheegay Kaltenben inaysan shaqadiisu fududeyn, wuxuuse ku dadaalay inuu sii wado shaqadaas kana dhigo mid xiiso iyo raaxo leh, wuxuu isku fiirin jiray subax kasta muraayadda, wuxuu is dhihi jiray "dhageyso Keltenbon waa lama huraan inaad shaqadan sii waddo, haddii aad rabto inaad noolaato, marka haddii ay lama huraan tahay inaad waddid maxaad uga dhigi weyday wax lagu raaxeysto oo madadaalo leh, maxaad ugu fekeri weyday markaad guriga garaaceysto inaad tahay fannaan matalaya riwaayad, dadka guriga joogane yihiin daawadayaal? Maxaad shaqada ugu qaban weyday si xamaasad iyo firfircooni leh"?

Markaan weydiiyey Kaltenbon inuu waano u jeediyo dhallinyarada u hanqaltaagaysa wuxuu yiri; "waxaan ku waaninayaa inay naftooda la sheekeystaan maalin walba sidaan fali jiray, maxaa yeelay sheekadaasi waxay u tahay leyli maskaxdooda, waxaanay ku abuuraysaa howlkarnimo iyo hanweynaan".

Ma kula tahay isla sheekeysiga qofku inuu yahay shaqo Carruureed? Haddii ay haa kula tahay ha u gefin wuxuu waafaqsan yahay cilmi-nafsiga, sababtoo ah nolosheenu waa waxa aynu ku fekerayno iyo waxa maskaxda inooga jira, markaad adigu la sheekaysato naftaada subax kasta waxaad naftaada ku beeri kartaa fikradaha geesinimada, liibaanta, xoogga iyo nabadda, waxaad xusuusin kartaa naftaada nimcooyinka mudan inaad ilaahey uga mahad celiso, taasoo ka buuxineyso qalbigaaga farxad iyo sacaado, haddii aad ka buuxiso madaxaaga fikrado wanaagsan waxaad awoodi kartaa inaad ku raaxeysato shaqo kasta si kastaba ha u adkaatee.

Ninka madaxda kuu ah wuxuu doonayaa inaad ku raaxeysato shaqadaada si uu isagu uga faa'iideysto, laakiin iska illoow wuxuu isagu rabo, ku feker miraha aad ka goosaneyso ku raaxeysiga shaqadaada, xusuusi naftaada in xiisaha shaqada uu labanlaabayso sacaadada noloshaada, waxaad ku gaareysaa horumar heerka aad kaga jirto bulshada iyo faa'iidooyinka kale oo aan la soo koobi Karin.

QEYBTA LIXAAD

SIDAAD UGA DHEERAAN LAHEYD WALBAHAARKA KA DHASHA HURDO LA'AANTA

Haddii ay hurdadu kaa tagto ma welweleysaa? Ha yaabin markaad ogaato in Smvel Unternyer oo ahaa qareen caan ah inuusan dhadhamin macaanka hurdada noloshiisii oo dhan. Markuu galay Jaamacadda wuxuu ka sheeganayey soo jeed, joogto ah markaas buu goostay inuu ka faa'iideysto soo jeedkiisa, makuu hurdi waayo isma dhibi jirin ee wuxuu tegi jiray qolka wax akhriska markaas buu wax akhris u fariisan jiray, maxay noqotay natiijadii? Waxay noqotay inuu ku guuleystay imtixaankii jaamaadda darajada ugu sareysa, wuxuuna noqday nin ay ku faanto jaamacadda Newyork.

Markuu ka baxay Jaamacaddii hurdo la'aantiina kamay harin, wuxuuna noqday gar-yaqaan, marnaba isuma uusan dhiibin walbahaarka, inkastoo uu hurdo la'aan ahaa haddana cafimaadkiisu wuu fiicnaa oo wuxuu qaban karayey shaqo ka badan inta uu asaaggii qabto, taasina la yaab malaha, maxaa yeelay wuxuu shaqeynayey inta ay asaaggii hurdayeen.

Markuu gaaray Samvel 21 jir waxaa soo geli jiray sanadkii 75 kun oo doolar, sanadkii 1941-kii wuxuu ku qaatay kiish Malyan \$ wuxuu gaaray cimrigiisu 81 jir, waxaa hubaal ah haddii uu isu dhiibi lahaa walbahaarka oo uu u hogaansami lahaa in noloshiisu dhakhso u baabi'l laheyd.

Inkastoo aynu ku tebino hurdada saddex u dhig meel ahaan nolosheena haddana ma jiro qof yaqaan hurdada xaqiiqadeedu waxay tahay, waxaan naqaanaa hurdadu inay tahay maaddo uu jirkeenu u baahan yahay inuu ku raaxeysto, laakiin ma ogin in hurdada shardi u tahay nolosheena.

Waxaa dhacday dagaalkii 1-aad ee dunida in madaxa rasaasi uga dhacday nin la oran jiray Paul Kern oo ahaa askari reer Niger ah, markuu ka bogsaday dhawaacii waxaa ka tagtay hurdadii, takhaatiirtu

waxay ku dayeen wixii daawo lagu seexo ah oo dhan, iyo waxyaabaha maskaxda dadka beddela sida xaashishadda iyo afyoonka waana kari waayeen inuu seexo.

Waxay yiraahdeen takhaatiirtii 'ninkani ma noolaan karo wax badan' laakiin malahoodii ma dhaboobin oo waxaa dhacday in ninkii noolaa muddo dheer, weliba wuxuu galay shaqo cusub, marka xaalkii Paul wuxuu beddelay ra'yigii iyo aragtii ay takhaatiirtu ka qabeen dhibaataada ka dhalata hurdo la'aanta. Waxaa la arkaa in walbahaarka ka dhasho hurdo la'aanta uu aad uga khatarsan yahay hurdo la'aanta nafteeda.

Dr. Nthniel Klietnan oo Bare ka ahaa Jaamacadda Chicago wuxuu ku sameeyey tijaabooyin fara badan hurdo la'aanta, markaas kadib wuxuu caddeeyey inaan weli laheyn qof u dhintay hurdo la'aan, run ahaantii waxaa jirta in dadku uu ka walbahaaro hurdo la'aan, uuna ka murugoodo ilaa caafimaadkiisu khatar galo, laakiin hurdo la'aantu mas'uul kama aha dhibaataadaas, waxaase mas'uul ka ah ka walbahaaridda hurdo la'aanta iyo cabsida ka timaado welwelkaas, waxaa la caddeeyey in dadka ka walbahaara hurdo la'aanta badankood ay seexdaan in ka badan inta ay u maleynayaan.

Waxaa tusaale u soo qaadan karnaa nin ka mid ahaa halyeeyadii aqoonta ee Qarnigii 19aad oo la yiraahdo Harbert Spencer wuxuu ahaa doob guun ku gaboobay doobnimada, wuxuu ku noolaa qol ku yaal hotel weyn, ninkii uu la kulmaba wuxuu uga sheekeyn jiray hurdo la'aantiisa, habeenkii marka uu seexanayo dhegaha ayuu iska awdi jiray si aanu u maqal wax shanqar ah, marmarna wuxuu isticmaali jiray xashiish si uu hurdo u helo.

Waxaa dhacday inay habeen wada seexdeen hal qol isaga iyo nin la oran jiray Syce oo ka tirsanaa barayaasha Jaamacadda Oxford, subixii ayuu ka sheegtay Heberti hurdo la'aan, waxaanu sheegay sidii caadada u aheyd inaanu xalay hurdo dhadhamin, runtuse waxay aheyd sidaa liddigeeda, maxaa yeelay ninkii la seexday Heberti hurdo ma dhadhamin oo waxaa hurdadii u diiday khuuradii Hebert. Shardiiga ugu

horreeya ee hurdada macaan ee raaxada leh waxaa weeye inaad dareentid xasiloonaan iyo nabadgelyo.

Wuxuu yiri Dr. Thomas Haystop isagoo u khudbeynaya Jamacayadda Caafimaadka ee Ingiriiska "muddadii badneyd ee aan ku tebiyey tijaabooyinka iyo waaya-aragnimadii aan ka kasbaday daaweynta dadka, waxaan ogaaday in aasaaska hurdada ugu macaan laga helo hibo Eebbe, sababtoo ah ducadu waa sheyga ugu muhiimsan ee nafta u soo jiida xasiloonaanta kuna baahiya neerfaha degenaanta".

Dr. David Harld oo ah qoraaggii kitaabka lagu magacaabo "sidii aad ugu raaxeysan laheyd neerfaha kacsan", wuxuu ku waaniyey dadka ka sheeganaya hurdo la'aanta, "iney jilbaha hoostooda barkin gashadaan, barkin kalena gacmaha hoostooda, si ay lugaha iyo gacmahu u raaxeystaan, markaas kadib waa in la debciyaa xubnaha daamanka, indhaha, lugaha iyo gacmaha, waxaa la arki doonaa iyadoo uu hurdo la dhacay qofkii ka sheeganayey hurdo la'aanta, isagoon sababta ka warqabin" wuxuu intaas ku daray aniga lafteyda ayaa tijaabiyey arrintaas, waxaana ii xaqiiqowday in tijaabadaas dhab tahay waxyaabaha ugu door roon ee lagu daweeyo hurdo la'aanta waa in la daaliyo jirka oo la isticmaalo ciyaaraha isboortiga, sida tartamada orodka, booddada, kubbadda iwm. Markaad daasho jirku wuxuu u baahanayaa raaxo, markaas khasab baad u raaxeysaneysaa, waayo dadka daalan waxay ku seexdaan codka onkodka iyo kan bambooyinka argagixisada ah iyadoo arkaya khatarta hortaagan.

Wuxuu ii sheegay Foster Kenedy oo abwaan ku ah cilmiga neerfaha inuu arkay dagaalkii 1-aad ee dunida, mar uu ciidankii 5-aad ee Ingiriiska dib u soo guranayey, askari uu daalkii ka batay oo xitaa awoodi waayey inuu socdo oo meeshii uu joogay iska seexday isagoon u aabo yeeleyn cadowgiisa ciribta ku soo hayey, aniguna ma maqal weli nin isu dilay hurdo la'aan, umana maleynayo inaan maqli doono hadda kadib, maxaa yeelay soo jeedka dadka ma dilo, waayo markuu qofku daalo dantaa ku khasbi doonta inuu seexdo.

Is diliddu waxay I xasuusisay xaalad uu tilmaamay Dr. Henry C. Link oo ku sheegay kitaabkiisii "qofku wuxuu daaha ka qaadaa waxyaabo cusub (The discovery of man) "fasalka ka adkaanta cabsida iyo walbahaarka 'qiso nin jiranaa oo doonaya inuu is dilo hurdo la'aan darteed" waxaanu ogaaday takhtarkii inaan waxba la dhacsiin Karin ninkaas, markaas buu yiri "haddii aad kolleyba isdilayso waxaa kuu roon inaad dhimatid adigoo halyey ah oo taariikhda galay, waxaad sameyn kartaa inaad orod ku wareegtid xaafadda aad deggan tahay, marka adigoo ordaya oo Lagu daawano ayaad dhici kartaa, marka ninkii sidii buu yeelay, markuu muddo dheer ordayey ayuu dareemay inuu caafimaadkiisu wanaagsan yahay, kolkaas buu laba habeen oo kale orodkii waday, wuxuu dareemay inuu orodkiisu sii wanaagsanaaday, habeenkii 3-aad intuu daalay ayuu hurdo macaan la dhacay markii dambe wuxuuba ku biiray ururka ciyaaraha, wuxuuna ka qeyb galay tartamo orod ah, sidii buu ku helay noloshii uu horay u waayey in dhoweydba, marka si aad uga fogaatid walbahaarka ka dhasha soo jeedka raac shantaan waano.

1. Haddii ay hurdadu kaa tagto fal sidii uu fali jiray Dr. Samvel tag miiska wax akhriska ilaa ay hurdo kaa timaaddo.
2. Xusuuso inaan weli la arag qof u dhintay hurdo la'aan, laakiin ka walbahaaridda hurdo la'aanta ayaa keenta cudurrada.
3. Isku day duco iyo werdi hurdada ka hor, maxaa yeelay ducada daacadda ah ee aad Ilaahey qalbiga u furto waa waxa ugu fiican ee nafta u soo jiida nabadelyada iyo xasiloonaaanta neerfaha.
4. U raaxee jirkaaga, dhacsii xubin kasta inay ku raaxeysato iskala bixinta iyo jimicsiga.
5. Isku shuqli ciyaaraha Isboortiga qarkood, haddii aad daasho waxaa hubaal ah inaad hurdo la dhici doonto.

MURTIDA CUTUBKA TODDOBAAD
LIX DARIIQO OO KAA ILAALINEYSA NOOGGA IYO WELWELKA
KUUNA XAFIDEYSA AWOODDA WAX QABADKA

1. Iskala bixi ama jimicso intaadan daalin.
2. Baro sidaad isu kala bixin laheyd adigoo shaqada ku jira.
3. Haddii aad afo tahay ku dadaal quruxdaada iyo caafimaadkaaga adigoo isku kala bixinaya gurigaaga.
4. Ku dhaqan caadooyinka afarta ah ee hoos ku qoran:-
 - a. Ka nadiifi miiskaaga dhammaan waraaqaha iyo galalka wixii aan ka aheyn arrinka aad markaas gacanta ku heysid ee aad wax ka qabanaysid.
 - b. U kala hormari arrimaha siday u kala daran yihiin oo ay u kala mudan yihiin
 - c. Markay kugu furanto mushkilad haddiiba ku dhaqaaq wax ka qabashadeeda.
 - d. Ka caado dhigo nidaamka ku kalsoonaanta dadka kale iyo kormeeridda wixii aad cid kale u xilsaaray.
5. Si aad uga dheeraato noogga iyo ka xiiso dhicidda shaqada ku dar shaqada waxaad ku raaxeysato oo ku xiiso geliya
6. Xusuusnow inaan weli la arag qof u dhintay hurdo la'aan, laakiin ku welwelka hurdo la'aanta inuu keeno cudurro badan.

CUTUBKA SIDDEEDAAD
GO'AAMO SALDHIG U AH NOLOSHAADA
QEYBTA KOOWAAD
SIDAAD U HELI LAHEYD SHAQO KUU QALANTA IYO
GO'AAN SALDHIG U AH NOLOSHAADA

Cutubkan wuxuu ka hadlayaa dhalinyarada wiilal iyo gabdhaba leh ee aan shaqo u qalanta helin, haddii aad ka mid tahay kooxdaas cutubkaan waxaad ka heli doontaa gargaar weyn, haddii aad ku dhowdahay 18 sano waxaad u socotaa waqtigii uu ku fuuli lahaa waajib ah inaad gaadhid labada go'aan ee ugu khatarsan go'aanada nolosha, labadaas go'aan waxay saldhig u noqon doonaan mustaqbalka noloshaada iyo weliba caafimaadkaaga.

Go'aanka 1aad: wuxuu yahay sidaad u kasban laheyd ceyskhaaga waa maxay xirfadda aad jeceshahay inaad ku shaqeysaa mustaqbalka sida: beeraley, takhtar, Injineer, karraani, Barre iwm.

Go'aanka 2-aad: wuxuu yahay sidaad u dooran laheyd qofkii kula wadaagi lahaa nolosha ee aabbbe ama hooyo u noqon lahaa carruurtaada. Wax ka qabashada labadaas arrimood waxay u baahan tahay is biimeyn, waayo waa sida khamaar oo kale.

Wuxuu yiri Henry Emerson "wiil kasta wuxuu noqonayaa khamaar wade, marka uu dooranayo xirfadda uu ku noolaanayo mustaqbalkiisa, wuxuuna ku khamaarayaa naftiisa", marka sidee baa loogu guuleysan karaa khamaarkaas, marka hore isku day inaad heshid waxa aad jeceshahay. Mar baan weydiiyey Mr David M. Goodric oo madax ka ahaa sharikadda sameysa lugaha baabuurta, waa maxay waxyaabaha shaqada kuu soo jiida? Wuxuu iigu jawaabay "waa inuu qofku macaansado shaqadiisa haddii uu qofku ku raaxeysanayo shaqada uu hayo saacadihii shaqada ee go'naa waxay dhamaanayaan iyadoo la moodo inaan la gaarin, dareenka qofkana wuxuu ahaanayaa inta shaqadu socoto sidii ruux ciyaaraya".

Edison oo ahaan jiray wiil wargeysyada gada dugsina aan dhigan yaraantiisii wuxuu awooday inuu afgembi ku sameeyo taariikhda warshadaha Mareykanka, wuxuu yiri maalin "weligay ma qaban shaqo igu adag intii aan noolaa, waayo waxaan shaqada ka dhigan jiray wax fudud oo sida ciyaar oo kale ah" marka Edison waa tusaale lagu dayan karo.

Hadaba sideed u jeclaan kartaa shaqada haddii aadan ogeyn shaqada munaasabka kuu ah ee waafaqsan aqoontaada, waxay ii sheegtay Mrs Edna Kerr oo agaasime ka aheyd qeybta shaqaalaha ee sharikadda Dopont "in dhibaataada ugu weyn ee ka hor timaadda dhallinyarada badankood ay tahay iyagoon garaneyn shaqada ay rabaan, waxay ku dartay xitaa dadka jaamiciyiinta ah way ka muuqataa xaaladaas, waayo waxay codsanayaan shaqo kasta iyagoon kala sooceyn shaqada u qalanta iyo tan kale".

Waxaa suurtagal ah inaad la yaabtid sababta kitaabkan ka hadlaya walbahaarka loogu daray cutubkaan. Laakiin la yaab malaha haddii aad ogaatid dhibka walbahaarku u geysto dadka marka uu qofku ka shaqeynayo shaqo uu neceb yahay oo aanu xiiso iyo jaceyl u heyn. Haddaad ka shakisan tahay arrintan bal weydii qof ay qabsatay dhibaataadaas, waxaan ujeedaa qof ka shaqeeyey shaqo uu neceb yahay sida aabahaa, deriskaaga, ama madaxdaada.

Marka waxaan ku waaninayaa dhallinyarada inaanay oggolaan shaqo aan u qalmin, xitaa haddii ay sidaas jecel yihiin, waalidkaa iyo qaraabadaada ha oggolaanin shaqo aanad qalbiga ka jecleyn, hana ka tegin inaad tixgeliso talada waalidka, waayo waxay noolaayeen intaad jirto labadeed ama ka badan, waxay leeyihiin tijaabooyin iyo waaya aragnimo aan adiga weli ku soo marin, laakiin go'aanka ugu dambeeya ee shaqada mustaqbalkaaga adigaa mas'uul ka ah, waayo waa adiga ninka shaqada ku liibaanaya ama ku hungoobaya.

Haddana waxaan jeclahay inaan idiin soo jeediyo talaabooyin idiinku gargaaraya shaqooyin idiin qalma

1. LA XIRIIRI HAY'ADAHA DADKA KU HANUUNIYA XIRFADDA.

Anigu kuma lihi xafiiskaasu wuxuu kaa saarayaa dhibaataada, waayo wuxuu arrinku ku xiran yahay qofka aad talada warsaneyso kartidiisa iyo wax dhacsiintiisa, maxaa yeelay hanuunista xirfadda weli ma gaarin heer sare, haddii aad doonto inaad ka waano qaadato xafiisyada xirfadaha waxaad tegi kartaa xafiiska kuugu dhow, adigoo ku tashanaya inaad ka heleyso xafiiskaasi talooyin keliya, laakiin go'aanka kama dambeysta ah adigaa qaadan doono.

2. KA DHEEROW SHAQOYINKA IYO XIRFADAHA UU DADKU KU BATAY

Waxaa jira kumanyaal dariiqo oo lagu kasban karo risqiga, laakiin ma ogtahay waxa dhaca sida badan, waxaa loo bandhigay arday jaamacad ka tirsan 20 kun oo shaqo inuu arday kasta ka doorto shaqada uu jecel yahay 66% ardaydii waxay doorteen 5 shaqo keliya, taasi waxay aheyd xaggii wiilasha. Xaggii gabdhaha 80% waxay doorteen 5tii shaqo ee ay wiilashu doorteen, marka la yaab malaha in shaqooyin yari dad badani isugu yimaadaan, sidoo kale la yaab malaha in walbhaarka iyo jirrooyinka nafta ay ku dhacaan dad badan, gaar ahaan dadka kuleetiga cadcad iyo saraakiisha waaweyn, marka ka digtoonow inaad u shaqo tagto meelaha uu shaqa-doonka aad ugu badan yahay sida qareenada wargeysyada, raadiyeyaasha, shineemooyinka iwm.

3. KA DHEEROW SHAQOYINKA AY KULA TAHAY IN SIDA LOOGU GUULEYSTAA AY ADAG TAHAY

Ku tebi sahan iyo baaris inaad ka baaraan degto waxa la xiriira shaqadaas intaadan go'aan ku gaarin, inaad u xeydato, waxaad awoodi kartaa inaad la tashato nin shaqadaas ku tebiyey 20 ama 40 sano oo cimrigiisa ah, waxaa laga yaabaa inuu kuu faa'iideeyo wax mustaqbalka nololshaada wax u tara, sidee bay ku suuroobi kartaa la kulanka dadkaas? Tusaale ahaan ka soo qaad inaad dooneysid inaad noqoto Injineer dhismo intaadan go'aan qaadan waa inaad labo todobaad ku tebiso kulamo aad la yeelanaysid Injireerada baladkaaga

ama kuwa deriskiina ah, waxaad ugu tegi kartaa xafiisyadooda adigoo horey ula ballamay ama aan ula ballamin, haddii aad doonto inaad la ballantid u qor warqad munaasib ah, tusaale ahaan waxaad ugu qori kartaa sidatan:

Aad baan kuugu mahadinayaa haddii aad ii fidisid samafal aanan weligay ilaaweyn, kaas oo ah anigu waxaan kaa doonayaa talo bixin iyo waano, waxaan ahay ruux dhallinyaro ah oo jira sano, waxaan jeclahay inaan barto Injineernimada dhismaha guryaha, waxaan jeclahay intaanan go'aan gaarin inaan kaa talo qaato.

Haddii aadan waqti iigu heleyn xafiiskaaga inaan guriga kuugu imaado su'aalaha aan jeclahay inaad iiga jawaabto waa kuwa soo socda:

- 1- Haddii ay suuroobi laheyd inaad nolol cusub bilowdid mar kale ma dooran laheyd Injineer dhismo mar labaad?
- 2- Xirfadda dhismaha ma tahay mid ay dadkii ka bateen oo ay kala meel waayeen?
- 3- Haddii aan barto Injineeriyada dhismaha ma igu adkaaneysaa shaqo heliddu?
- 4- Haddii aan ahay nin ay kartidiisu dhexdhexaad tahay, maxay kula tahay inta iga soo geli karta 5ta sano ee ugu horeysa shaqadaas?
- 5- Ma jiraan ceebo ama xumaan ay leedahay xirfadda Injineernimada guryaha?
- 6- Haddii aan ahay wiilkaaga ma igu waanin laheyd inaan noqdo Injineer dhismo?

Haddii aad tahay qofka talo doonka ahow qof xishood badan oo ka baqaya inuu hor fariisto qof magac weyn leh, waxaan kuu soo jeedinayaa labo talo oo kugu caawinaya muraadkaaga:-

1. Kaxeysa ruux da'daada ah maxaa yeelay waad is geesinimo gelin doontaa, haddii aad weydo waxaad kaxeysataa aabahaa ama qof kale oo waalidkaa ah.

2. Xusuusnow haddii aad nin sharaf leh wax warsatid waxaad aqoonsatay qiimihiisa iyo sharafkiisa, wuxuuna jecleysan doonaa sida badan inuu ku waaniyo.

Waxaa jira guud ahaan in dadka waaweyn ay jecel yihiin inay u jeediyaan waanooyin guud dadka dhallinyarada ah. Haddii ay dhib kugu noqoto inaad warqad u qortid ninka aad talada ka dooneyso ugu tag xafiiskiisa adigoon hore ula ballamin oo ku dheh "waan kuu mahadnaqayaa haddaad ii oggolaatid inaan ku weydiiyo waano arrin aad ii dhibtay ... ka soo qaad inaad Injineer raadisay oo uu ku qaabili waayey, waa ma dhacdo" raadi 5 injineer oo kale, ka waayi meeysid mid ku oggolaada oo raalli ka noqda la kulankaaga, xusuusnow inaad u socotid inaad gaartid mid ka mid ah labada go'aan ee saldhig u noqon doona mustaqbalkaaga, marka u ogolow naftaada waqti ku filan iney raadiso xaqiiqooyinka la xiriira go'aanka aad qaadan doonto si aadan u gaarin go'aan qabyo ah oo aad hadhow ka tiiraanyooto.

Qof kasta oo caadi ah wuxuu karaa inuu ku liibaano shaqooyin badan, hase yeeshee waxa suuragal ah in qof kasta oo caadi ah uu ku hungoobo shaqooyin badan.

Anigu waxaan isu heystaa inaan ku guuleysan lahaa kuna raaxeysan lahaa haddii aan qabto shaqooyinka soo socda:-

Beeraha, takhtarnimada, waxbarashada, wargeysyada iwm., waxaanse qabaa inaan ku hungoobi lahaa haddaan ka shaqeeyo shaqooyinka xisaabaadka, injineernimada, maamulka warshadaha, hoteelada waaweyn iyo boqolaal shaqo oo kale.

CUTUBKA SAGAALAAD
XALLINTA DHIBAATOoyINKA DHAQAALAH
QEYBTA KOOWAAD
SIDAAD UGA BIXI LAHEYD DHIBAATOoyINKA DHAQAALAH
OO 70% SABAB U AH WALBAHAARKA

Haddii aan awoodo inaan xalliyo dhibaataada dhaqaale ee qof kasta heysata maba qoreen buuggan oo waxaan filayaa inaan la taliye u noqon lahaa madaxweeynaha, waxaanse sameyn karaa inaan kuu tilmaamo buugag lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan arrinkan iyo inaan ku hor dhigo dhowr talo oo wax ku ool ah.

Waxaa lagu caddeeyey tiro-koob lagu faafiyey Majaladda Ladies Home Journal in 70% walbahaarku ka dhasho xagga dhaqaalaha. Dadka badankiis waxay u maleynayaan inay ka baxayaan dhibaato kasta haddii uu kordho wax-soosaarka 10% waana rumoobi karaa malahaas mararka qaarkood, waxaase jirta marar kale oo badan inuusan malahaasi rumoobeyn.

Tusaale ahaan waxaan la kulmay Mrs Elsie Stepleten oo khabiirad ku ah arrimaha miisaaniyadda la taliyena ka ah sharikadda Wanmaker, sanooyin badan waxay ka shaqeyneysay inay la taliye u noqoto dadka ka dhibaateysan xagga maaliyadda, waxay ii sheegtay "kororsiimaha dhaqaalaha ma xallinayo dhibaataada maaliyadda, waayo waxaan arkay kororka dhaqaalaha marar badan inay la socoto kharash badan oo la galo, dhibaatooyinkuna ay sii bataan, waxaase jirta in sababta xaqiiqiga ah ee ay ka sheeganayaan dadka ka welwelsan lacag yaraanta ay tahay dadkaas oon garaneyn sida ay u isticmaalayaan dakhliga soo gala.

Waxaa laga yaabaa iney dhihi doonaan akhristayaasha qaarkood "jeclaan lahaayeen qoraaga buuggan Carnegie ee xikmadda badan inuu sideydoo kale ahaan lahaa, bal aan arkee sida uu u gaarsiiyo mushaarka yar kirada guriga, kharashka biyaha iyo nalka .., waxaan ku leeyahay dadkaasi anigaba way I soo martay dhibaataada dhaqaalaha mar aan ka shaqeyn jiray beeraha, waxaan shaqeyn jiray 10 saacadood

maalintii, waxaan ku qaadan jiray shaqadaas adag 5 senti oo keliya, maalintii oo dhan waxaan ku fekeri jiray siduu qofku ugu noolaan karo shaqadaas muddo 20 sano ah Sidaan u seexan karo guri aan biyo iyo nal midna laheyn oo uu heerkulkiisu garayo -50C oon shidaal diiriya laheyn, waxaan ogahay inay dad badani lugeeyaan dhowr mayl, maxaa yeelay ma heli karaan waxay baska ku raacaan, waxaa jira kumanyaal dad ah oo marka ay makhaayadaha galaan dalbada cuntada ugu jaban markii ay guryahooda tagaana intey surwaalkooda laalaaban hoos dhiga gogoshooda, sababtoo ah ma heli karaan lacagta feerada.

Waxaas oo dhan waan wada ogahay, aadna waan u dareensanahay, maxaa yeelay waa wax aniga I soo maray, inkastoo aan sidaa ogahay haddana waxaan awooday inaan wax lacag ah ka keydsado mushaarkeygii yaraa ee ahaa 5ta senti, ee aan ka qaadan jiray beerta, waxaan ku bartay tijaabooyinkii I soo maray in sida ugu habboon ee looga badbaado deynta iyo dhibaatooyinka dhaqaalaha ay tahay inaad dejisatid barnaamij ku saabsan kharash kugu baxaya kuna socotid barnaamijkaas inta badan.

Iska dhig inaad tahay agaasime mas'uul ka ah shaqadiisa goor kasta iyo meel kasta oo aad ku bixineyso kharash, laakiin waa maxay qaaciddooyinka loo cuskan karo maamulka maaliyadda? Sidee u nidaamin kartaa miisaaniyadda qoyskaaga? Waxaan kuu soo jeedinayaa 11 waano oo ku saabsan arrinkaas waana kuwan.

1. QOR MEELAHA AAD WAX KU BIXINEYSO DHAMMAANTOOD

Markuu bilaabay suugaan-yahankii Ingiriiska ahaa Arnold Benneh shaqada suugaanta mar laga joogo 70 sano, wuxuu heysan jiray buug uu ku qoro dhammaan wixii lacag ah ee uu bixiyo iyo saabta uu u bixiyey? ma kula tahay inuu la yaabanaa meesha ay lacatiisu ku baxdo? Maya, wuu ogaa meesha ay lacagtiisu marto, laakiin wuxuu jeclaa fikradda lafteeda ilaa uu caado ka dhigtay ku dhaqanka fikraddaas oo uu ka noqday nin maal qabeen ah oo caan ah oo gatay dooni uu ku tamashleeyo.

Sidoo kale Rock Filler wuxuu heysan jiray buug uu ku qoro waxa ka baxa, marka uu seexanayo habeen kasta ayuu xisaabin jiray waxa uu bixiyey iyo sababta uu u bixiyey, waxaa fiican inaad leedahay buug aad ku qortid kharashka aad bixineyso iyo meesha aad ku bixineyso, waxaad dhihi kartaa ma nolosheyda oo dhan ayaan heysanayaa buugga? Waxaan ku leeyahay maya, dadka khibrada u leh arrimaha miisaaniyadda waxay leeyihiin waxaa kugu filan heysashada buuggaas labo bilood ama saddex bilood, wuxuu kugu caawinayaa buuggaas haddii aad si fiican u qorto inaad ogaatid waxa kaa baxay si kastaba haku baxee iyo xoolahaaga meesha ay marayaan, waxaad markaas saldhig u sameysan kartaa miisaaniyadda noloshaada.

Waxaa laga yaabaa inaad tiraahdid waan aqaanaa meesha aan ku bixiyo lacagteyda iyo sida aan ku bixiyo, waa laga yaabaa inaad taqaan laakiin waxaa fiican in fikradda la soo sheegay aad ka caado yeelato.

Mrs Stepleton dad badan oo u yimid waxaa dhib ku noqotay siday ku xasuustaan habka ay u bixiyaan lacagtooda, laakiin waxay sheegaan meelaha ay ku bixiyeen, bal warqad ugu qor oo tus, waxaan shaki ku jirin inay yaabayaan iyagoo leh ma jidkaas bay xoolaheygu ku baxayaan? Iyagoon rumeysan Karin.

2. SAMEYSO MIISAANIYAD KOOBEYSA DHAMMAAN BAAHIDAADA

Waxay tiri Mrs Stapleton "waxaad arki kartaa laba qoys oo meel ku wada nool kuna jira laba guri oo isku heer ah, leh carruur isla'eg, waxa soo galaana ay isla'eg yihiin, hadana ay baahidoodu aad u kala duwan tahay, waayo? Dadkaasi dhaqankooda baa kala duwan, sidaas darteed waa in miisaaniyaddu qof kasta gaar u ahaataa isaga keligiis, laakiin ha u qaadanin in miisaaniyadda loola jeedo inaad iska xaaraantinimeyso ku raaxeysiga nolosha wanaagsan oo aad ciriiri is gelisid, waxaa loola jeedaa ku dhaqanka miisaaniyadda inay tahay saldhigga deggenaanta dhaqaalahaaga oo ku xiran xasiloonaanta naftaada. Laakiin sideed u habeyn kartaa miisaaniyaddaas? Marka hore koob kharashkaaga iyo meelaha aad ku bixisid oo dhan haddii aad iswaafajin kari weydo waxa ku soo gala iyo wax kaa baxa kaasho qof waaya arag ah.

3. KU DADAAL INAAD SI XIGMAD LEH WAX U KHARAH GAREYSO

Waxaan ula jeedaa inaad baratid sidaad ugu heli laheyd sheyga wanaagsan qiimaha ugu jaban, waxaa jira in sharikadaha waaweyn ay leeyihiin dad aqoon gaar ah u leh "fanka iibka" si ay ugu soo iibiyaan sharikadahooda, waxa ugu wanaagsan qiimaha ugu yar. Marka adigoo ah agaasimaha dhaqaalaha ee gurigaaga maxaad ugu dayan weyday sharikadahaas?

4. HA ISKU WAREERIN KU FEKERKA DAKHLIGAAGA.

Waxay tiri Mrs Stapleton "ma jiro wax iiga cabsi badan in la iga dalbo inaan habeeyo miisaaniyadda qoyska dakhligoodu uu yahay 5,000\$ sanadkii. Markii la weydiyey sababta waxay ku jawaabtay, "dakhliga 5,000\$ dhan waa himilada qoys kasta u hanqal taagayo, waxaa la arkaa in qoysku muddo dheer ku socday miisaaniyad qorsheysan oo xikmad ku fadhiya ilaa uu dakhligiisu gaaray 5,000\$ sanadkii, wuxuu markaas u maleynayaa in dhaqaalihiiisu gaaray heer aan loo baahneyn in lagu socdo xikmad iyo tashiil, markaas bay gadanayaan guri, baabuur, dhar aan qiyaas laheyn iyo alaabtii guriga oo la beddelo, wax yar kadib wuxuu ogaanayaa qoyskii in aanu dhaqaaluhu ku filneyn oo ay galeen ciriiri, maxaa yeelay waxay ku xad gudbeen kharashkii, taasina la yaab malaha oo waa dabeecadda aadamiga, waayo qof kasta wuxuu jecel yahay inuu kor u qaado heerka ku raaxaysiga nolosha, laakiin yaa fiican inaad ku noolaatid miisaaniyad qorsheysan iyo in deyn meel kasta lagaaga lahaado?.

5. KEYDSO LACAG KU ANFACDA WAQTIGA CIRIIRIGA.

Haddii ay kugu dhacdo masiibo kuu dhibaato gelisa inaad deyn gashid, waxaad ogtahay in heshiisyada sharikadaha ceymiska, saamiyada kale, shahaadooyinka keydsiga iwm ay yihiin xoolo aad ku isticmaali kartid markaad u baahatid, laakiin intaadan gadin raasumaalkaas waad rahmi kartaa, laakiin waxaa suurowda inaad heysanin saamiyo iyo heshiisyo ceymis midna, ee aad leedahay guri ama baabuur iwm, marka xaggeed wax ka amaahaneysaa? Waxaa jira ururo dadka wax ku

amaahiya damiin shaqsi ah ama ku deymnaya mushaarkooda, laakiin waxay qaataan faa'iido ka badan tan bangiga, sababtoo ah waxay ka cabsi qabaan damiinka shaqshiga ah, marka iska hubso intaadan gelin deynka.

6. KA CEYMI NAFTAADA JIRROOYINKA DABKA IYO DHACDOOYINKA DEGDEGGA AH.

In qof kasta oo raba uu iska ceymiyo dhammaan dhacdooyinka waa wax suurtagal ah, aniguse kugu waanin maayo inaad iska ceymiso dhammaan dhacdooyinka oo dhan laga bilaabo simbiriraxashada musqusha ilaa furuqa. waxaan kugu waaninayaa inaad iska ceymisid dhacdooyinka waaweyn ee wax ka qabashoodu ka sarreyso awooddaada kuuna keeni kara welwel iyo walaac.

7. SHARDI INAAN LACAGTA CEYMISKA NAFTAADA CADDAAAN LOO SIININ XAASKAAGA MARKAAD DHIMATO.

Haddii aad doontid inaad ceymisid naftaada si lacagta ceymiska uu qoyskaagu u qaato dhimashadaada kadib, ha ilaawin inaad shardiso inaan lacagta ceymiska hal mar xaaskaaga la wada siin doonin? Haddii la siiyo maxaa dhacaya? Maxay ku sameyneysaa garoobka cusub lacagta cusub? Haka jawaabto Mrs Marian S. Eberlt oo madax ka ah qeybta haweenka machadka nolosha ee Newyork, waxay tusaale u soo qaadatay haweeney carmali ah oo u dhiibtay hal mar wiil ay dhashay 20 kun oo \$ oo ah qiimihii ceymiska ee ay ninkeeda ka dhaxashay si uu ugu aasaaso warshad biraha baabuurta ah, laakiin wuu ku khasaaray, waxay natiijadii noqotay in haweeneydii noqotay sabool dibjir ah oo aan meelna heysan.

Waxaa kaloo jirtay naag garoob ah oo uu nin dilaal ah ku waaniyey inay ka soo qaadato koox saamiyo ah shirkadda ceymiska, markuu u caddeeyey in qiimahoodu labanlaabmi doonaan muddo gaaban, markaas bay aad ugu khasaartay taladiisii ilaa ay ku gadatay in ka yar 10% intii ay markii hore ku gadatay saddex sano ka hor, marka haddii

ay dhab kaa tahay oo aad dooneyso inaad u daneyso qoyskaaga dhimashadaada kadib fal sida uu falay H.P. Morgan oo ahaa dhaqaale-yahan xikmad badan, wuxuu u dardaarmay xoolihiisii 16 qofood oo 12 haween yihiin, laakiin uma dardaarmin lacag caddaan ah ee wuxuu u dardaarmay saamiyo sharikado ku jira oo faa'iidadooda la hubo oo laga siinaayo lacag joogto ah.

8. BAR CARRUURTAADA SIDAY MAS'UUL UGA NOQON LAHAAYEEN XAGGA LACAGTA

Inta madaxeygu saan leeyahay ma ilaawi doono maqaal aan ka akhristay wargeyska la yiraahdo "your life", waxaa qortay Mrs Stella, Weston Tuttel, waxay kaga sheekeysay habkay u bartay gabadheeda siday mas'uul uga noqon laheyd xoolaheeda, waxay soo qaadatay buugga jeegagga ay la macaamilooto, waxay siisay gabadheeda oon weli gaarin sagaal sano, markay mushaarka soo qaadato waxay u dhiibi jirtay hooyadeed, haddii ay u baahatana waxay ka qaadan jirtay iyadoo jeeg u qoreysa, haddana waxay habsan jirtay waxa soo gala, waxa ka baxa, gabadhii kumay raaxeysan oo keli ah arrinkii ee weliba waxay baratay siday u xafiddo xoolaheeda oo ay u noqoto mas'uul.

9. AFAYAHAY WAXAAD LACAG KA SOO SAARI KARTAA JIKADA.

Markaad qiyaasto miisaaniyadda qoyskaaga hadday dabooli weydo kharashkaaga waa inaad labo arrin midkood sameysid:

B- inaad u hogaansantid welwelka iyo walaaca iyo

T- inaad ku dhaqaaqdid sidaad u heli laheyd dakhli kale.

Laakiin sidee bay kuugu suurta geli kartaa inaad hesho dakhli kale? Ka dhegeyso Mrs Nellie Speer ha kaaga sheekeyso wixii ay fashay sanadkii 1931-kii, waxay ku soo dhacday wehel la'aan markii ninkeedii dhintay labadeedii wiilna guursadeen, waxay ku jirtay guri weyn oo ka kooban dhowr qol, maalin bay gashay biibito si ay wax uga cabto, waxay ku aragtay bur iyo sabaayad aan si fiican loo sameynin, Markaas bay weydiisay ninkii biibitoolaha ahaa inay u keeni karto sabaayad loo gado, wuxuu u sheegay inay u keento labo xabbo si loogu tijaabiyo, waxay tiri; "inkastoo aan cunta karinta iqiinay laakiin dad baa weligey ii

joogay oo cuntada ii Karin jiray, intii aan noolaa ma dubin in ka badan 10 xabbo oo sabaayad ah.

Markuu biibitoolihii iga dalbaday labo xabbo oo tijaabo ah, waxaan ka codsaday gabar kale iney ii tilmaanto sida loo sameeyo, markaas baan sameeyey labo xabo, oo aan ku tuuntuunsaday hagaajintooda, markaan u geeyey ninkii biibitada aad bay u jecleysteen rukunkiisii, maalintii labaad wuxuu iga dalbaday 5 xabbo, anigoo la kaashanayo labo gabdhood oo kale ayaan gacanteyda ku sameeyey, waxaan ka macaashi jiray shaqadaas sanadkii 1,000\$ markii ay kordheen dadkii iga rabay sabaayadda, waxaan furtay dukaan yar oo lagu iibiyo sabaayadda keliya, markaan warsaday inay haweenka kale sidaa fali karaan oo ay jikadooda ka soo saari karaan dakhli, iyagoo aan wax kharash ah gelin waxay tiri; "waa hubaal inay awoodi karaan" ujeeddada aan ka leeyahay sheekadan waxay tahay in Mrs Sperr intay welwel iyo walaac u dhiman laheyd ay ku dhaqaaqday tallaabo wax ku ool ah oo ka badbaadisay walbahaarkii, isla markaana ay ku heshay xoolo. Haddaba hareerahaaga fiiri, waxaad ka heli kartaa meelo badan ood wax ka soo saari karto adigoon waxba khasaarin, waxaad awoodi kartaa inaad si fiican u baratid cunto karinta, kadibna waxaad furan kartaa dugsi aad gabdhaha ku bartid cunto karinta oo gurigaaga dhexdiisa ah.

Waxaa jira buugag dadka ku hanuuniya sida looga faa'iideysto waqtiga la gacan bannaan yahay, kuwaas oo anfacaya ragga iyo haweenkaba.

10. HA KHAMAARIN

Waxaan aad ula yaabaa dadka doonaya inay ku xooleysataan khamaar, waxaan aqaanaa nin leh makhaayad lagu dheelo khamaarka, laakiin markaan arkaba wuxuu caayaa dadka doqomada ah ee moodaya inay khamaar xoolo ku helayaan, wuxuu iiga sheekeeyey nin ku caan ah khamaarka tartanka fardaha oo ku bixin jiray sannadkii lacag dhan 36 malyuun oo \$.

11. HADDII AYNU KARI WEYNO INEYNU XALLINO DHIBAATADEENA DHAQAALE WAA INEYNAAN U DILIN NAFTEENA WAXAAN LA HELI KAREYN

Haddii ay irdaha aan ku kordhin laheyn dhaqaalaheena innaga soo xirmaan waa inaan beddelno fikradaheena iyo argtideena mushkiladda siday tahay si ay inoogu furmaan jidad kale.

Xusuuso in dad badan oo kale ay kula qabaan dhibaataada dhaqaalaha? Sababtoo ah adigu waxaad ka xun tahay inaad gaarin heerka dhaqaale ee uu gaaray hebel.. isaguna wuxuu ka xun yahay inuusan gaarin nimcada uu hebel ku raaxeysano, hebelkaasina wuxuu tiigsanayaa mid kale, marka sidaas baa qofba qof u kamanayaa oo aan loo heleyn qof raalli ku ah heerka uu joogo.

Dad badan oo caan ku ah taariikhda Mareykanka oo magac ku leh waxay soo mareen dhibaatooyinka dhaqaale. Lincoln wuxuu qaatay amaah sidoo kale, Gorge Washington isna deyn buu qaatay si uu ugu bixiyo ololaha doorashada madaxtinimada Mareykana oo uu tartan ugu jiray.

Haddii aan weyno wax allaale wixii aan rabno ama aan gaari weyno meesha aan dooneyno, waa in aynaan isku dhiibin walbahaarka oo aynaan iska dhoobeyn fikirka iskana sumeyn nolosha, waa inaan uga hortagno mushkiladda siday xikamadda falsafadda sheegtay, wuxuu yiri nin Feylasoof ah oo u dhashay reer Roma lana oran jiray Seneca "haddii ay kuugu muuqdaan in waxaad heyso oo dhami ay kugu yar yihiin, ogow haddii dunida oo dhan gacanta lagu geliyo inay kula yaraan laheyd", xusuusnow haddii aad hanato dhaqaalaha Mareykanka oo dhan kuma lihid waxaan ka aheyn inaad maalintii saddex jeer wax cuntid kuna seexatid hal sariir markiiba."

Haddaba si aynu u yareyno dhibaatooyinka dhaqaalaha aan raacno 11-kaan waano.

1. Ku qor mushkiladda dhaqaale darro ee kula soo deristo warqad.
2. Sameyso miisaaniyad u dhiganta xaqiiqda baahidaada.
3. Baro inaad si xikmad leh wax u bixiso
4. Ha isku wareerin ku fekerka dakhligaaga.
5. Keydso wax aad rahan gelin karto markaad deyn u baahato.
6. Ka ceymi naftaada jirrooyinka halista ah sida gubashada iyo waxyaabaha kediska ah ee keena khasaaraha degdegga ah.
7. Ka digtoonow in hal mar la wada siiyo haweeneydaada lacagta ceymiska ee naftaada, markaad dhimatid, u geli xoolahaaga wax ay faa'iido joogto ah ka helaan qoyskaagu.
8. Bar carruurtaada sidey mas'uul uga noqon lahaayeen lacataada.
9. Haddii ay dhibaatooto haweeneydu waxay lacag ka dhalin kartaa jikada.
10. Ha khamaarin
11. Haddii aanu kor u qaadi kari weyno dhaqaalaheena; waa inaan beddelnaa fikraddena oon hagaajinaa, si aan u helno fikrad wax dhalisa.

CUTUBKA TOBNAAD

SIDA LOOGA ADKAADO WALBAHAARKA

SHEEKOYIN GAAGAABAN

1. WAXAA IGU KULMAY HAL MAR LIX MUSHKILADOOD OO AD-ADAG

Waxaa qoray C.I. Blackwood agaasimaha dugsiga ganacsiga Blackwood ee magaalada Oklahona, xagaagii sanadii 1943-kii markii uu socday dagaalkii 2aad ee dunida, waxaan u maleeyey walbahaarkii ka dhexeeyey dadka oo dhan nuskiis in aniga la i saaray, waxaan ku noolaa muddo 40 sano ah nolol caadi ah oon turunturooyin iyo dhibaatooyin midna laheyn, mushkilooyinka caadiga ah ee aanay ka badbaadi Karin aabayaasha qoysaska maamulkooda gacanta ku haya, sideydoo kale mooyee. Waxaan ka caado yeeshay in dhibaatooyinka noocaas ah aan si dhib yar oo fudud u xalliyo, marka si lama filaan ah bay iigu kulmeen hal mar lix mushkiladood oo kala daran waana kuwan;-

- a- Dugsigii aan lahaa oon maamuli jiray wuxuu ku dhowaaday inuu kaco oo albaabada loo xiro, waayo ardaydii wax ka baraneysay oo dhan waxay ku biireen oo ay galeen ciidamada, kuwii soo harayna way ka baxeen, iyagoo aan dhameysan waxbarashadii, sababtoo ah waxay heleen shaqooyin lacag badan.
- b- Wiilkeygii weynaa wuxuu galay ciidanka, markaas waxaa igu dhacay walbahaarka ku dhici kara aabbe kasta oo uu wiil ka jiro goob dagaal.
- c- Waxay biloway dowladda Hoose ee Oklahona inay ka rarto dadka dhul ballaaran si ay uga dhisto gegi diyaaraduhu fariistaan, gurigeygii aan aabahay ka dhaxlay wuxuu galay dhulka la qaatay, waxaana ogaa in waxa la igu ceyminayo aanay ka badnaan doonin 10% qiimihii runta ahaa ee guriga iyo anigoo weliba waaya guri, markii ay ugu darneyd xaaladda guryo la'aantu, waxaana lahaa markaas qoys ka kooban lix qofood.
- d- Ceelkii aan biyaha ka dhaansan jiray oo ku dhex yiilay beerteyda waa qallalay, haddaan ceel qotana wuxuu iigu kacayaa 500\$ oo biimo ah, maxaa yeelay waxaa laga baqayaa meesha dhanba in lala wareego si looga dhigo gegi diyaaradeed, waxaan ku soo qaadan

jiray biyaha teneg muddo laba bilood ah, waxaan ka baqay inuu xaalku sidaa ahaado inta uu dagaalku socdo.

- e- Waxaan deggenaa meel u jirta dugsiga aan maamulo ilaa 5 meyl lugaha baabuurkuna aad bay iiga gaboobeen oo haddii ay banjaraan lama helayo meel lagu hagaajiyo, waayo dagaalka dartii baa loo xiray dhammaan howlihii baabuurta ku saabsanaa. Marka waxaan ka cabsanayey haddii ay iga xumaadaan lugaha baabuurku inaan waayo waxaan ku tago dugsiga.
- f- Gabadheyda weyn waxay dhameysay dugsiga sare, waxaanay rabtay inay Jaamacad gasho, aniguna ma heyn lacag aan kaga bixiyo kharashka jaamacadda, waxaan ka cabsi qabay haddii aan runta u sheego inay qalbi jabto oo ay murugooto.

Markaas galab baan goostay inaan qoro dhammaan waxyaabaha aan ka walbahaarayo, waxaan is iri, ma jiro dunida nimay qabsatay dhibaatooyinkan ku qabsaday oo kale, caadana iima aheyn inaan daneeyo mushkilooyinka yaryar ee la xallin karo, waxaanse ogaaday in mushkilooyinka hadda I hortaagan in aanan waxba ka qaban Karin, markaas baan qoray dhibaatooyinka aan kor ku soo xusay ee walbahaarka igu dilay.

Markii muddo yar laga joogayba waan halmaamay inaan qorayba, markii ay ka soo wareegtay 8 bilood maalintii aan mushkilooyinka qoray ayaa anigoo baaraya waraaqaheyga, waxaan ka dhex helay warqaddii aan ku qoray lixdii mushkilo ee nolosheyda halista geliyey, waxaan u akhriyey si xiiso leh, laakiin ma dhicin midna dhibaatooyinkii aan ka cabsi qabay ee welwelka iyo murugada igu riday, waxaanay u dhaceen sidatan:

- a- Middii dugsiga ee aan ka baqanayey iney igu dhacdo arday la'aan darteed ma aanay dhicin, sababtoo ah dowladdii baa u fidsay gargaar dugsiyada laga barto xirfadda si loogu tababaro dadkii ku naafoobay dagaalkii, loona baro xirfado ay ku noolaan karaan, dugsigeygiina dadkii wuu qaadi kari waayey.
- b- Wiikeygii askarta galay nabad qab buu ku soo noqday.

- c- Cabsidii aan ka qabay in beerta iyo guriga la igala wareego may dhicin maxaa yeelay meel hal mayl ii jirta ayaa laga helay ceel batrool ah, markaasaa dhulkii la iska dhaafay.
- d- Middii ku saabsaneyd ceelkii iga gudhay, haddiiba waxaan qoday ceel kale, markii ay beertii ii nabad gashay.
- e- Middii lugaha baabuurka iyadana may dhicin oo lugihii baabuurkeyga waxba igama noqon.
- f- Middii aan ka baqanayey inaan gabadheyda xaqiiqada u sheego in aanan bixin kareyn lacagta jaamacadda, iyadu way xallisantay oo markii la ii xil saaray shaqada dheeraadka ah bay I soo gashay lacag aan ku bixin karo kharashka waxbarashada gabadheyda intaan jaamacaddiiba la furin.

Waxaan ka maqlay dad badan iyagoo leh in 99% waxyaabaha aan ka cabsaneyno ama aan ka welweleyno ma dhacaan, laakiin hadalkaasi uma aabo yeelin ilaa aan aniga lafteyda arkay. Maanta waxaan abaal weyn u hayaa tijaabadaas isoo martay, waxay I bartay cashar aanan weligeys hilmaami doonin, waxay I bartay inay doqonimo tahay in laga cabsado waxaan weli dhicin oo aynaan xukumi karin, lagana yaabo inaanay dhicinba, xusuuso in maanta ay tahay berridii aad shalay ka cabsaneysay inaad ka hortagtid, weydii naftaada sideen ku ogaanayaa inuu dhicidoono waxa aan ka cabsanayo ama ka walbahaarayo.

2. WAXAAN AWOODI KARAA INAAN ISKA DHIGO QOF SAACID AH OO FARAXSAN SAACAD GUDAHEED (Qore: Roger W. Babsan oo ku caan ah dhaqaalaha)

Markaan ciriiri galo oo walbahaar igu dhaco waxaan isku beddeli karaa qof faraxsan muddo saacad gudaheed ah, waayo waxaan raacaa dariiqadan:

Waxaan tagaa maktabadeyda, waxaan gacanta u fidiyaa khaanadaha kutubka taariikhda anigoo indhaha isku haya, markaas baan mid kala soo baxaa anigooon ka warqabin midka uu yahay, sida buuggii u qoray Prescott ee ku saabsanaa weerarkii Mexico ama kii uu qoray Sultan ee ku saabsanaa 12-kii Qeysar noloshoodii amase mid kale, markaas baan furaa kitaabka aan la soo baxay oon akhriyaa muddo saacad ah.

Markaan hore u sii akhriyaba waxaan dareemaa in dunida sidii loo abuurayba ay dhibaato iyo mushkilad ku jirtay, marka dhibaato laga baxaba in mid kale la sii gelayo, intii ilbaxnimadu dhalatayna waxaa sii batay imtixaanaadkii iyo afooyinkii isdaba joogga ahaa, waxaa ka buuxa kutubta taariikhda dhacdooyin jirku uu ka gilgisho, waxaa la heli karaa haddii taariikhda la baaro dagaallo badan, abaaro cudurro iyo gardarrooyin ay dadku iskula kacayaan, markaad akhrido waxaad dareemeysaa in dhibaataada ku heysataa inkastoo ay kuugu muuqato mid adag oo kulul in haddana marka loo fiiriyo dhibaatooyinkii dadkii hore soo mari jiray waayadii hore in dhibaataadaadu noqoneyso wax fudud, markaas baan ka hortegi karnaa dhibaatooyinka fudud. Dariiqadan waxay ku habbooneyd in fasal gaar ah lagu qoro marka "akhri taariikhda, fiiri mushkilooyinka dunida heystay toban kun oo sano ka hor, ku qiyaas mushkiladda ku heysata kuwii horay u heysan jiray dunida".

3. SIDA LOOGA XOROOBO DAREENKA LIIDNIMADA

Waxaan la kulmay markaan 15 sano jiray cabsi iyo walbahaar, maxaa yeelay waxaan ahaa wiil aad u dheer, dhuuban oo caato ah dhismaha jirkeyguna aad buu daciif u ahaa, waxaan la kulmi lahaa hungo iyo hoog haddii aanay hooyadey iga badbaadin welwelkii iyo walaacii, waxaan ka welweli jiray habeen iyo dharaarba caatanimadeyda iyo dhererkeyga xad dhaafka ah.

Hooyadey oo Bare ka aheyd dugsi, waxay ogaatay xaalkeyga markaas bay igu tiri dhegeyso hooyo "ku dadaal waxbarashada aqoonta iyo sidaad ku kasban laheyd risqigaaga, laakiin dhererkaaga iyo caatanimadaada waxba ha isku daalin, maxaa yeelay waa wax ka baxsan awooddaada, sidaas baadna ahaan doontaa ee sidaa raalli ku ahaaw iskana ilow inaad sidaas tahay mar haddaanu jirin adduunka qof beddeli kara abuurkaaga".

Waxaa kale oo jirtay in waalidkey sabool ahaa oo uusan awood u laheyn inuu iga bixiyo kharashka jaamacadda, marka waxaa waajib igu

ahaa inaan qardajeexo, jidkii aan u mari lahaa tacliinta sare, waxaan soo ugaarsaday dhowr daanyeer, waqtigii jiilaalka, waxaan ku gaday gurigeenii 4 \$, waxaan ku iibsaday lacagtii laba doofaar oo yaryar, markaas baan dhaqaaleeyey ilaa ay aad u naaxeen, waxaan ku iibiyey jiilaalkii dame min 40\$, markaas baan awood u helay inaan jaamacad haleelo.

Waxaan lebbisan jiray markaan jaamacadda joogo shaati cowlan oo ay hooyadey samaysay, waxaanay iigu doortay midabkaas cowlan si aanu uskagu uga muuqan, waxaan soo qaatay badlad uu lahaan jiray aabahay oo iga weyn iyo kabihiisa oo igu bilow-bilow ah, dharkeeygii foosha xumaa ee aan habbooneyn wuxuu iga horjoogsaday inaan dhex galo ardayda ama aan kala qeyb galo sheekada iyo kaftanka, waxaan isku celin jiray qolka waqtiga biririfta, waxaana isku shuqlin jiray wax akhris. Himiladayda ugu weyn waxay aheyd markaas inaan helo dhar ila eg oo aanan kala xishooneyn inay asaagey igu arkaan, markaas kadib waxaa dhacday afar arrimood oo iigu gargaaray inaan ka adkaado dareenka liidnimada, kuwaas oo igu abuuray isku kalsoonaan oo beddelay nolosheydii oo dhan waana kuwan afartii arrimood:

- 1- Markaan siddeed todobaad ku jiray jaamacaddii ayaan galay imtixaan aan ku helay shahaado awood ii siisay inaan bare ka noqdo dugsiyada tuulooyinka.
- 2- Waxaan la heshiiyey dugsi tuulo ku yaal inaan wax ka dhigo, maalintiina waxaan ka qaadan jiray 2\$, waxaan ka dareemay dhacdadaas inay jiraan dad igu kalsoon oo ila dhacsan.
- 3- Markii aan qaatay mushaarkii iigu horreeyey waxaan iibsaday dhar cusub oo qurxoon, haddii la i siiyo maanta malyuun \$ uguma farxeen sidaan ugu farxay badladii iigu horeysay ee aan iibsaday inkastoo uu qiimaheedu yaraa.
- 4- Isbedelka xaqiiqada ah ee nolosheyda iyo guushii iigu horreysay ee aan ku jebiyo walbahaarkii aan ka qabay nolosheyda iyo liidnimadayda waxaa sabab u ahaa guulihii aan ka gaaray Dowladaha Hoose ee Puntnan, waxay igu boorisay hooyadey inaan ka qeyb galo tartanka khudbadaha guud ee lagu qabto golahaas sanad kasta, fikraddii way ila wanaagsanaatay, waanay i cabsi gelisay, maxaa yeelay waxaan ka xishoon jiray inaan hal qof la

hadlo marka sideen isu hortaagi karaa kumanyaal qofood, laakiin iimaanka hooyaday iyo kalsoonideyda may laheyn xad, marka kalsoonideydii baa igu xambaartay inaan ka qeyb galo tartanka, waxaana u doortay mowduuca khudbadda "fanka quruxda madaxa bannaan ee Mareykanka" inkastoo aanan fanka wax aqoon ah u laheyn markaan bilaabay diyaarinta, haddna waxaan ogaa in dhageystayaasha badankood waxba iiga aqoon rooneyn fanka, khudbaddii markaan diyaarinayey ayaan kor ka xafiday, waxaan u khudbeeyey tobonaan jeer geedaha iyo lo'da si aan nafteyda u leyliyo.

- 5- Waxaan doonayey inaan hooyadey raalli-geliyo oo aan ka soo baxo siday rabto, waxaan ku qurxiyey khudbaddii waxyaabo kicinaya caadifadda dadka oo xamaasad gelinaya, markaas baan ku guuleystay abaalgudkii koowaad, waxaa igu dhacay yaab iyo amakaag sida dadku ugu farheen khudbadeydii, qeylo ayey cirka ku toleen, waxay qaarkood cirka u ganeen koofiyahoodii, xitaa dadkii hore iigu jeesjeesi jiray intay garabka iga dharbaaxeen bay igu yiraahdeen "waan ku kalsooneyn inaad ku guuleysaneyso tartanka" hooyadeyse intay gacmaheedii igu qabatay bay laabteeda igu dhejisay markaas baa indhaheeda ilmo farax ah ka soo daateen sidii roob oo kale.

Haddaan dib ugu fekeri taariikhdeyda waxay ila tahay in guushaasi aheyd bilowgii isbedelka nolosheyda ee dhabta ah, sababtoo ah waxay ii suurta gelisay guushaasi magac iyo sharaf aanan hore ugu maleyneyn inaan gaari karo, waxaan gaaray isku kalsoonaan, intaas waxaa ii sii dheeraa in abaalgudkii aan helay uu ahaa sanad waxbarasho oo lacag la'aan ah, kulliyadda General Normal intii u dhexeysay 1896 – 1900m, waxaan u qeybin jiray waqtigeeyga si caddaalad ah waxarashada iyo waxbaridda, si aan u bixiyo kharashka jaamacadda aan wax ka barto,

Waxaan ka shaqeyn jiray mararka qaarkood makhaayadda Jaamacadda iyo shaqooyin kale oo kala duwan, sida ololaha beera goynta, dhismaha jidadka iwm. Sanadii 1896 waxaan ahaa 19 jir, waxaan akhiriyeey 28 khudbo oo aan dadka ku boorinayey inay

madaxweyne u doortaan Wiliam J. Bryan khudbadihii aan ugu yeerayey dadka doorashada waxay igu xambaareen inaan xagga siyaasadda u jeesto, waxaan markaas galay kuliyadda qaanuunka iyo khudbadaha guud ee Jaamacadda De Paw.

Markaan helay shahaadadii jaamacadda, waxaan u wareegay walaayadda Oklahona, waxaan ka furtay xafiis qareenimo magaalada Cawton, waxaan ka shaqeeyey Golaha Odayaasha ee raacsan walaayadaas muddo 13 sano ah, markaas baan la ii doortay xubin ka mid ah Kongreeska, waxaan ku jiray afar sano markaan gaaray 50 jir waxaan gaaray yididiiladii aan weligey sugayey, markii la ii doortay xubin golaha Senetka mareykanka, anigoo ka wakiil ah Walaayadda Oklahona, waxaan heystay kalsoonida xisbiga dimoqraadiga ee ii sharaxay markii hore Golaha Odayaasha ee Oklahona, haddana kan kongareeska, gu'gii dambena ii sharaxay Golaha Senetka ee Maraykanka.

Ugama jeedo sheekadan faan iyo dhaadasho, maxaa yeelay waxaan qabtay aniga uun baa daneynaya, laakiin waxaan uga jeedaa inay dhallinyaradu isku geesinimo geliso horumarka iyo hanweynaanta, kana badbaadiso naftooda walaaca iyo walbahaarka ay ka qabaan mustaqbalkooda, kana koraan dareenka liidnimada iyo hooseynta, oo aniga I baabi'in gaaray maalintii aan gashan jiray kabihi aabahay iyo badladiisi iga weyneyd.

(W.Qoray Elmer Thomas oo ka tirsanaa golaha odayaasha ee Mareykanka)

Fiio Gaar ah: waxaa la yaab leh Elmer Thomas oo ahaa ninkii ka baqan jiray inuu asaagii soo dhex galo isagoo ka baqaya in lagu caayo fool xumada dharkiisa inuu ugu dambeystii noqday ninka ugu xaragada badan uguna dhar qurxoon asaagii.

4. WAXAAN KU NOOLAA JANADII EEBEHEEY

Waxa qoray maqaalkan ninkii allifay labadii kitaab ee kala aha:

"Dabeylaha Fanka iyo Rasuulka, iyo afar iyo toban kitaab oo kale"
magaciisuna waa R. V. G. Badley.

Sanadkii 1918-kii ayaan ka ambabaxay dalka aan iqiinay ee aan ku barbaaray, waxaana u dhoofay waqooyiga-galbeed ee Afrika, halkaas baana kula noolaa carabta deggan saxaraha lama degaanka ah muddo 10 sano ah, waxaan aad u bartay afkooda, waxaan u lebisani jiray sidooda, waxaan cuni jiray cuntadooda, waxaana ku noolaa nolol la mid ah middooda, waxaan lahaa Ari aan caanaha ka maalo iyo teendho aan seexdo, waxaan aad u bartay diinta Islaamka ilaa aan ka allifo kitaab ku saabsan Nebi Muxamed (NNKH).

Sanooyinkii aan la noolaa badowda carabta, waxay ii aheyd muddadii ugu fiicneyd nolosheyda iiguna nabadgelyo iyo xasiloonaan badneyd, waxaan ka bartay carabtii lama degaanka ku nooleyd sidaan uga badbaadi lahaa walbahaarka, waayo waxay ahaayeen dad diinta Islaamka iyo qadarta Eebbe rumeysan, taasina waxay ku caawisay iney ku noolaadaan ammaan, nolosha waxay ugu noolaayeen si fudud oo sahlan, waxba ku degdegi mayaan iskuna ridi mayaan welwel iyo walaac, waxay aaminsan yihiin in wixii loo qoray aanay seegeyn, wax aan loo qorinna qofna aanu ku dhaceyn, laakiin taasi micnaheedu maaha inay iska seexanayaan oo ay shaqada iyo mushkiladda gacmaha ka laabanayaan!, maya.

Waxaan tusaale kuu siinayaa waxaan ula jeedo "waxaa dhalatay dabeyl xun oo kulul oo dadkii ciid indhaha kaga wada ridday, waxay aheyd dabeyl aad u kulul ilaa aan dareemay in timaha madaxeyga hoos dab lagaga soo shiday oo aan ku dhowaaday inaan waasho, laakiin carabtii waxba kama aysan sheegan, intey garbaha nuuxiyeen ayey yiraahdeen weeraha caanka ah waa "amar qoran", hase yeeshee markay dabeyshii dhamaatay ayey shaqo ku dhaqaaqeen, waxay gowraceen arigii taagta darnaa intaan kuleylku dilin, xoolihii xoogga lahaana waxaa loo raray dhinaca koonfureed, howlahaas oo dhan

waxay qabteen iyagoo aamusan oo aan calaactal iyo heydaaro midna laheyn.

Wuxuu yiri nabadoonkoodii khasaaro badan nama soo gaarin, waxaan ka cabsi qabay khasaaro intaa ka badan, 40% waan heysanaa xoolaheenii, waxaan awoodi karnaa inaan dib u cusbooneysiino dhaqaalaheena.

Waxaa jirta dhacdo kale oo I qabsatay mar aan ku safray baabuur, saxaraha dhexdeeda ayey lug naga banjartay, wadihiina ma wadan lug keyd ah, markaas baan aad u ciriiriyooday, waxaa igu dhacay hammi iyo qami, waxaan warsaday carabtii ila socotay anigoo aad u kacsan, maxaa talo ah oo aan sameynaa hadda? Waxay igu jawaabeen "markaan hadda ah ciil iyo caro waxba tari mayaana, weliba waxaa la arkaa inaad ku dhacdo qalbi jab iyo doqonimo kale". Baabuurkii xoogaa buu nala socday isagoo ku luudaya saddex lugood, wax yar kadibna waxaa ka dhamaaday shidaalkii, haddana waxaan fiiriyey saaxibaday, waxaan arkay iyagoo aanay wax isbeddel ah oo ku saabsan dhibaataada na heysata ka muuqan, weliba waxay ku dhaqaaqeen inay lugeeyaan iyagoo heesaya ilaa ay gaareen meeshii ay rabeen.

Tobankii sano ee aan ku noolaa lama degaanka Carabta waxay igu qancisay in dadka waalan iyo kuwa nafta ka jirran ee ka buuxa dalka Mareykanka inay yihiin raqda ay bakhtiisatay ilbaxnimada degdegga iyo orodka nolosha oo dhan saldhig ka dhigtay. Intii aan ku noolaa saxaraha Carabta iguma uusan dhicin wax walbahaar ah, waayo waxaan ku noolaa Jannadii Eebahay, waxaan helay xasiloonaan raalinimo iyo qalbi degenaan.

Waxaa jira dad badan oo ku jeesjeesaya qaddarka ay carabtaasi rumeysan yihiin, laakiin yaa og in ay carabtu garteen waddadii xaqiiqda aheyd, markaan dib ugu noqno taariikhda ee aan fiirino waxyaabihii la soo maray waxaa muuqanaya in nolosheenu ka sameysan tahay waxyaabo fara badan oo xiriir ah, mana ahan wax annagu aan qorsheynay oo aan ka hortagi kareyno, Carabtuna dhacdooyinka noocaas ah waxay ku magacaabaan qaddarka Eebbe

ama wax lagu qoray oo calaf iyo nasiib ah, hadalka murtidiisu waxay tahay inay ka soo wareegtay markaan ka soo tegay lama degaankii Carabta 17 sano, welina waxaan raacaa xagga qaddarka Eebe ee Carabta.

Waxaan ku qabilaa dhacdooyinka aan waxba laga qaban Karin si xasiloonaan iyo degenaan ah, dabeecadda aan carabta ka kasbaday waxay igu caawisay dejinta neerfaha in ka badan kumanyaal jeer intey dejiyaan daawooyinka neerfaha.

Wuxuu yiri qoraha maqaalka "anigu ma ahi qof muslim ah mana idiinku yeerayo inaad rumeysaan qaddarka, laakiin markii ay nagu dhacdo aafu weyn sida dabka, duufaanka iyo masiibooyinka kale ee ka baxsan awooddeena inaan wax ka qabano, miyaanay inala habooneyn oo aan aqoonsano amarka dhacay intaan ciil iyo carro u dhiman laheyn, kadibna ku tallaabsano wixii inala gudboon ee aan qaban karno.

5. SIDAAN SHALAY U ADKEYSTAY AYAAN MAANTA U ADKEYSANAYAA (waxaa qortay Dorrry Dix qoraagii Caanka ahaa)

Wax badan baan soo maray gaajo iyo cudur, markay dadku i weydiiyaan sidaan ku qaabilo aafuoyinka waxaan ugu jawaabaa, 'sidaan shalay ugu gegasday ayaan maanta ugu gegasanayaa, una oggolaan mayo nafteydu inay isku wareeriso ama ka walbahaarto wax berri dhici doona', markaan dib u fiiriyo nolosheydii hore waxay iila muuqataa inay aheyd goob dagaal oo ay ka buuxaan meydii iyo dhaawicii oo ah himilooyinkeygii, mala awaalkeygii iyo dhallanteedkeygii, haddana inkastoo ay sidaasi jirto u tacsiiyeyn maayo nafteyda oo ilmo u daadin maayo wixii aan soo dhaafay, anigu lama mid aheyn haweenkii kale ee ka digtoonaa inay maraan dhibaatooyinkii aan soo maray, anigu waxaan arkay nolosha qaraarkeedii iyaguse waxay arkeen macaankeedii, sidaas darteed wax aysan iyagu ogeyn baan anigu ogahay, waayo waxaan arkay wax aanay iyagu arag, waxaa iga garan og nolosha iyo xaqiiqadeeda haweeney

ilmadii ka qubatay indhaheeda ay dhaawacday dhabanadeeda oo murugo iyo tiiraanyo ay gubtay qalbigeeda.

Waxaan ka bartay dugsiga nolosha falsafad aan fududeyn, waxaa jirtay gabadh ku nooleyd nolol wanaagsan oo barwaaqo ah, waxaan ka bartay sidaan ugu noolaan lahaa xuduudda maalinta aan ku jiro anigoo isku wareerin dhibaatooyinka berrito oo aanan ka warqabin, waxaan ka bartay in aanan dadka aad isugu halleyn oo aanan ka filan wax ka badan waajibkooda, waxaan ka bartay inaan faraxa isku khasbo mar kasta, waxaa jira waxyaabo kaa hor imaanaya oo kaa oohinaya ama kaa qoslinaya, marka haddii ay haweeneydu awoodi karto inay faraxdo oo ay qososho intii ay qalbi jab iyo hoog ku dhici laheyd, waxay ka balanbali laheyd cudurrada ka dhasha waswaaska iyo cabsida, anigu kama tiiraanyoodo wixii aan ku tebiyey nolosheyda oo ah dhibaatooyinkii I soo dhaaftay, taasina waxay istaahishaa in loo huro qiimo kasta oo ay ku kacdo.

6. WAXAAN AHAA DOQON WEYNAADAY

(Qore: Percey H. Whiting agaasimaha Sharikadda Dale Carnegie ee Newyork)

Waxaan ku dhowaaday inaan dhinto toban jeer, aabahey wuxuu lahaa farmashiye, waxaan xiriir joogto ah la lahaa takhaatiirta iyo kalkaaliyeyasha, waxaan ka bartay magacyada cudurrada iyo sida ay dadka ugu dhacaan, sheekadii badneyd ee laga sheekeenayey cudurrada ayaa igu riday 'waswaas', haddii laga sheekeeyo jirro wax yar kadib waxaan dareemaa calaamooyinkii jirradaas markaas baan isku arki jiray xanuun iyo xummad.

Waxaa dhacday mar inuu ku faafay degmadii aan ku noolaa cudurka loo yaqaan qabsin, waxaan markaas gargaari jiray aabahey oo farmashiga joogay, waxaa igu dhacay wixii aan ka baqayey, "qabsinkii", sidaan qabay markaas, waxaan tegay sariirtii anigoo ku fekeraya jirradii, waxaa la iigu yeeray takhtar markii uu I baaray ayuu igu yiri 'waxaad qabtaa jirrada qabsinka', markaan ogaaday inaan qabo qabsinka ayaa walbahaarkii iga baaba'ay, markaas baan seexday

habeenkii hurdo macaan, waxaan soo kacay subixii anigoo caafimaad qaba oo fayooow!.

Cudurada waxaan ka baqi jiray kuwa ugu xun-xun, markaas baan sheegan jiray inaan qabo, tusaale ahaan waxaan sheegan jiray inaan qabo Qaaxo iyo Kansar, waxaan ku mala awaali jiray cudurradaas oo igu dhaca, hadda markaan waxaas xasuusto waan qoslaa, markii hore aad baan u waswaas badnaa, waxaan ka gaaray waswaaska heer markaan gadanayo badladda xilliga Gu'ga aan is dhihi jiray marna ma noolaan doontid ee maxaad ugu khasaarineeysaa lacagta badan dhar aanad xiran doonin.

Maanta waxaan aad raalli uga ahay isbeddelka igu dhacay, tobankii sano ee la soo dhaafay marna maan jiran, marka waxaa is weydiin leh sidee baan isaga celiyey cudurka? Waxaan isaga celiyey inaan ku jeesjeeso doqonimadeydii hore, markuu igu dhaco walbahaar ama aan u maleeyo inuu cudur I hayo waxaan is dhihi jiray dhageyso "Percy, waxaa ka soo wareegtay labaatan sano intaad hadba qolkaaga ku dhimaneystay iyadoo uu mar kasta kugu dhacayey cudur halis ah, welina waad iska caafimaad qabtaa, weliba sharikad ceymis ah ayaa oggolaatay iney nolosheyda ceymiso, marka miyaa la gaarin waqtigii aan ku qosli lahaa garaad laawaha sida dhallaanka ah ee aan ahaa waagii hore".

Waxaan ogaaday markaas kaddib ineysan suurtagal aheyn inay kulmaan inaan ku walbahaaro cudurro dhalanteed ah isla markaana aan ku qoslo jirrooyinkii dhallanteedka ahaa isla waqtigaas, sidaas darteed waxaan door biday inaan ku qoslo welina sidii baan ku socdaa ilaa iyo hadda.

7. WAXAAN KU DADAALALAY IN JIDKA SAABKU II FURNAADO

(Qore: Gene Outry xiddiga filimaada ee ku heesa heesaha lo'jirta).

Waxay ila tahay in walbahaarka badankiis ka yimaado dhibaatooyinka qoyska iyo dhaqaalaha, nasiib wanaag waxaan guursaday gabar u barbaartay sideydoo kale, sidaas dareed xagga aragtida nolosha iyo

ra'yigaba waan isku dhoweyn, xagga dhaqaalaha waxaan ku isticmaalay labo dariiqo oo kala ah:

b- waxaan raacaa jidka guud ee jumlada ee ma raaco midka yaryarka ah ee tafaariiqda, tusaale ahaan haddii aan u baahdo deyn hal meel ayaan wax ka qaataa, markaan bixinayana hal mar ayaan wada bixiyaa ee waxba ma dhaafo, si aanan uga murugoon wax yar oo igu hara iyo si aan uga badbaado in meelo badan waxyaabo yaryar la iiga yeesho.

t- waxaan kaga dayday habkaan ciidamada oo waxaan ka caado yeeshay inuu jidka saadka ii furnaado mar kasta qiima kasta ha iigu kacee.

Markaan carruurta ahaa waxaan dhadhamiyey xanuunka gaajada iyo saboolnimada, waxaa dhacday in beertii aan cuntada ka heli jirnay qallashay oo biyo weyday, waxaan galnay ciriiri ah xagga cuntada, xaalkii baan u adkeysan waayey, markaas baan shaqo raadsaday, waxaan shaqo ka helay sharikadda tareenada, waxaa la igu qaatay mushaar dhan 150\$ bishiiba, markii dambe ee dhaqaaluhu wanaagsanaaday waxaan arkay in xoogaaga aan qaato gaashaan iiga yihiin dhibaatooyinka baahida, waxaan ku dadaalay in aanay iga xirmin ishaas yar ee dakhliga ah, sidaas darteed maan sii deyn shaqadii ilaa aan ka helo mid ka roon.

Tusaale ahaan waxaa dhacday anigoo ka shaqeynayey saldhigga tareenada ee magaalada Chelsea sanadkii 1927-kii inuu iigu soo galay xafiiskii nin socoto ah oo rabay in taar loo diro, wuxuu arkay anigoo kaban garaacaya kuna heesaya mid ka mid ah heesaha lo'jirka, wuxuu aad ula yaabay habkii aan u garaacayey kabanka iyo codkeygiiba, wuxuu igu yiri 'waxaa ku sugaya mustaqbal wanaagsan xagga shineemooyinka iyo raadiyaha' aad buu u amaanay codkeygii.

Markuu ninkii isu key sheegay neeftii baa igu ceshoontay, waayo wuxuu ahaa Will Roger oo caan ku ahaa xagga soo saaridda filimada, laakiin intaan shaqada ka bixi lahaa oon u ordi lahaa Newyork arrinkii baan habsaday oo aan dhan kasta ka fiiriyey, ilaa aan ku qancay in tegidda Newyork aanay waxba i yeeleyn, waxaan ka helay sharikaddii tikidh lacag la'aan ah. Markaan tegay Newyork waxaan warwareegay

jidadka magaalada muddo toban todobaad ah, wax shaqo ahna kama helin,

Waxaa igu dhici lahaa walbahaar haddii aanan ka gaashaaman markii hore oo aanan heysan laheyn jid aan shaqadeydii ugu noqon karo markaan doono, waxaan ku noqday shaqadii, waxaa ku jiray muddo shan sano ah, muddadaasi waxaa la i siiyey fasax ah inaan shaqada ka maqnaado muddo aan ka badneyn saddex bilood, markaa waxaan ku soo noqday OkloHEMA, saldhigii shaqadeyda, waxaan shaqeeyey laba bilood, waxaan keydsaday xoogaa lacag ah si aan ugu laabto Newyork oon ugu doonto shaqo.

Waxaan tagay Newyork nasiib wanaag shaqaan helay, anigoo ku sugaya agaasimaha raadiyaha qolka soo dhoweynta ayey igu soo dhacday inaan isku maaweeliyo mid ka mid ah heesaha lo'leyda kabankana iska garaaco, waxaan ku heesayey hees ka bilaabmeysa Jeamine oo ay miraheedu ka mid yihiin 'waxaan ku riyoodaa habeenada wanaagsan ee i soo maray .. "waxaa si lama filaan ah ii maqlay ninkii allifay heestaas oo ahaa Nat Child kraut, waana wax dabiici ah in qofka fannaanka ahi ku farxo ereyadiisii oo lagu heesayo, wuxuu isla markiiba ii qoray warqad tixgelin siin ah oo uu igala hadlayo Sharikadda victor Recording, inay shaqo i siiso, waxaa la iga qaaday imtixaan xagga codka ah,

Hase yeeshee waan ku dhacay imtixaankii, markaas baan ku noqday mar kale shaqadeydii sharikadda tareenada, waxaan ka shaqeeyey haddana sagaal bilood, intii aan shaqada ku jiray ayaan markaa qoray hees uu cinwaankiisu yahay "gabadheydii timaha qallinka ah laheyd", waxaana igala qeyb galay Jimmy Long, heeskii baa la iga duubay waxaana laga sii daayey idaacadda, maalintii labaad waxaan ka helay warqad sharikadda cajaladaha duubta ee Mareykanka, waxaa la igu casuumay inaan ka qeyb galo imtixaan xagga codka ah, waan ku guuleystay imtixaankii, waxaana la iga duubay dhowr cajaladood oo la iga siiyey 50\$ middiiba.

Ugu dambeyntii waxaan heshiis la galay Idaacadda magaalada Chicago inaan ugu heeso heesaha lo'leyda, waxaana la i siin jiray 40\$ todobaadkiiba, markaan ka shaqeeyey idaacaddii 4 sano ayaa mushaarkeygii la kordhiyey oo la gaarsiiyey 90\$ todobaadkii, waxaa kale oon ka heli jiray riwaayado aan ka qeyb galo 300\$ todobaadkii.

Sanadkii 1934-kii waxaa ii furantay irid cusub oo beddeshay nolosheydii, taasoo ah in laga sameeyey guddi magaalada Hollywood, waxaa loo xilsaaray guddigaas dib u habeynta filimada ay soo saarto Hollywood, wuxuu ku taliyey guddigii in la badiyo riwaayadaha lo'jirka, markaas baa loo baahday dad ku heesa heesaha lo'leyda, waxaana ka mid ahaa guddigaas agaasimaha sharikadda codka duubta, markaas buu aniga ii doortay inaan metelo riwaayadahaas kuna heeso heesaha lo'jirayaasha.

Waxaan ugu guuleystay matilaaddii si aanan fileyn, waxaa hadda i soo gala 100 kun iyo weliba kala bar faa'iidada ay ka hesho sharikaddu riwaayadaha aan wax ka matalo.

8. MARKII DUQA MAGAALADA SOO GARAACAY IRIDDEYDA

(Qore: Homer Cory oo ku caan ah riwaayada)

Maalin ka mid ah sannadkii 1923-kii ayaa iigu darneyd intaan dunida ku noolaa waayo waa maalintii uu soo garaacay iriddeyda duqii magaalada, markaas baan ka baxay irid dambe oon ka baxsaday.

13 sano ka hor maalintaas waxaan is moodayey inaan ku fadhiyo carshigii aqoonta, waxaan gaday mid ka mid ah riwaayadahaygii oo magaceedu ahaa Galbeedka Qalcadda Biyaha "West of the water Tower" waxaan ka iibiyey sharikad filimada soo saarta, waxaan ka helay lacag xoog leh oo awood ii siisay inaan aniga iyo xaaskeyga labo sano ku soo wareegno Yurub sida ay sameeyaan dadka maalqabeenada ah,

waxaan joogay Baariis muddo lix bilood ah, waxaan qoray Riwaayad kale oo aan u bixiyey 'waxaa ku habboon iney soo booqdaan Baariis",

waxaa iga iibsaday Willy Roger oo ka sameeyey filim, kadib waxaa la ii soo bandhigay inaan iska joogo magaalada Hollywood oo aan u go'o dejinta riwaayadaha iyo filimada ay sameyso sharikadda Willy Roger laakiin ma aanan oggolaan.

Waxaan ku soo noqday Newyork, waxaa igu bilowday dhibaatooyin, waxaa igu soo dhacay inaan leeyahay awood iyo hibo Ilaahey I siiyey oo aanan weli ka faa'iideysan, taasoo ah inaan hibo u leeyahay ganacsiga, waxay iiga sheekeeyeen dad aanu is naqaano in nin la yiraahdo John Jacob Astor uu ka kasbaday malaayiin \$ xagga ganacsiga dhulka magaalada Newyork, waxaanu ahaa nin daaduun ku yimid dalka oon xitaa si fiican ugu hadli Karin af-ingiriisiga, markaas baan is iri "mar haddii ninkii shisheeyaha ahaa ee aan afka aqoonin uu kasbaday malaayiin \$, maxaad u malayn adigoo libaax ah oo weliba reer Balad ah? Markaas baan goostay inaan noqdo nin taajir ah.

Xagga ganacsiga waxaan ka ahaa nin Jaahil ah oo meel wax laga bilaabo maan aqoon, waxaa igu soo dhacday inaan rahmo gurigeygii oon ka gato dhul xaafadda Forest Hills, waxaan goostay inaan heysto dhulkaas inta dhismuhu soo gaarayo, weligeyna maan iibin taako dhul ah, nasiib darro waxaa dhacday masiibadii dhaqaalaha ee caalamiga aheyd, taasoo sida Danabka oo kale igu noqotay, markaas bay ii gilgishay sida ay dabeysha weynu u gilgisho laamaha curdanka ah, waxaa la iga rabay 220\$ inaan ku bixiyo bil kasta dhulkii aan gatay iyo weliba deyntii rahanka ee guriga loo heystay, waxaa igu dhacay walbahaar, sidaan u bixin lahaa lacagtaas, waxaan isku dayey inaan qoro sheekooyin ama maqaalo madadaalo ah oon ka gado wargeysyada, laakiin nasiib darro suuq uma aanan helin wixii aan qoray.

Riwaayadihii aan markaas qorayna way igu bareen, waxaan markaas aad ugu baahday lacag, wax lacag ii gooyana waxaan ka heystay makiinadda qoraalka ee teebka iyo ilko Dahab ah oo iigu jiray, waxaa igu badatay tiiraanyaddii ilaa aan hurdadii ka tagay, mararka qarkood waxaan kici jiray saqda dhexe, markaas baan iska lugeyn jiray oon suuqa dhex wareegi jiray, si aan u noogo oo ay hurdo iiga timaado,

arrinkii wuxuu ku dhamaaday inaan khasaaro dhulkii aan gatay een ku rajada weynaa iyo bangigii oo qaatay gurigii aan ku jiray, markii aan bixin kari waayey deynkii, waxaa la ii soo diray duqii magaalada, si uu guriga uga saaro aniga iyo qoyskeyga alaabtana uu dibadda noogu daadiyo.

Markii dambe waxaan helay xoogaa lacag ah oo ku ijaartay guri xun, kadib markii aan ka guuray gurigeygii hore, waxaan ku fariistay mid ka mid ah boorsooyinkii alaabta noogu jirtay, markaas baan hareeraha fiiriyey oon fekeray, waxaa igu soo dhacday xikmad aan hooyadey ka maqli jiray oo aheyd "ha u ooyin caano daatay", laakiin aniga caano igama daadan ee waxaa iga daatay dhiig.

Markaan cabbaar ku mashquulsanaa fekerkii iyo tiiraanayadii, ayaan is idhi 'waadigan hoos u dhacay ilaa aad gunta gaadhay adigoo caafimaad qaba, ma jirto meel gunta ka sii hooseysa ee aad u sii dhacdid marka waa inaad kor u baxdaa'.

Waxaan fiiriyey wixii iiga nabad galay rahankii gurigeyga, waxaan ogaaday inaan weli caafimaad qabo oo aan saaxiibbo leeyahay, waxaan bilaabay nolol cusub anigoon isku dhabar jebineyn oohinta wixii tagay, waxaan u beddelay xoogeygii aan ku baabi'in jiray walbahaarka shaqo waxtar ii leh, xaalkeygii inya inyar buu isu beddelay waana soo hagaagay.

Hadda waxaan Ilaahey uga mahadnaqayaa imtixaankii I soo maray, sababtoo ah wuxuu igu beeray awood, adkeysii iyo isku kalsoonaan, markuu igu dhaco welwel waxaan nafteyda uga sheekeeyaa maalmihii aan mushkiladda quusay oo aan ilaa gunta tegay, ee aan haddana ka nabad galay markaasaan ilaawaa welwelkii I haya.

9. NINBA WAA MARKIISA MUDANAYAAL

(Qore: John Homer Miller oo ah ninkii allifay kitaabkii bal deymoo naftaada "take a look at yourself").

Waxaan ogaaday dhowr sano waqti laga joogo inaan walbahaarka looga adkaan kareyn dhuumasho, orodna looga baxsan kareyn, hase yeeshee loogaga adkaan karo in laga fekeri sababaha keenay, sababtoo ah walbahaarku qofka ugama yimaado dibadda ee waa wax ka soo dhex baxo naftiisa gudaheeda, waxaan haddana ogaaday in waqtigu tirtiro walbahaarka, markaas baan goostay in aanan ku fekerin markay igu timaado dhibaato laga walbahaaro ilaa ay ka soo wareegto todobaad, waana ogahay ineysan awoodin joojinta ku feker dhibato todobaad dhan, laakiin ma oggolaado in todobaad dhan ay maskaxda iga shuqliso, markaa waxaa dhacda in mushkiladdii iska xallisanto ama anigu aan beddelo aragtideyda oon gaaro heer aanan welwel geli kareyn.

Waxaa igu caawiyey ku dhaqanka falsafadaas William Osler markaas oon rag ka soo bax ku aheyn takhtarnimada oo keliya balse ku darsaday daaweynta nolosha, mid ka mid weerihiisii ayaa igu xambaaray inaan iska eryo walbahaarka wuxuu yiri Osler mar uu ka hadlayey xafad lagu casuumay, waxaan u tiiriyaa guusha aan gaaray qaacido aan ku dhaqmo oo ah "inaan isku shuqliyo dhibaatooyinka I hor taagan maalintaas oo keliya, mushkilooyinka iman doonana aan u dhaafo mustaqbalka iskumana wareeriyo saacadaas aan joogo mushkilooyin ka baxsan waqtigaas".

Marka muddadii aan kula jiray halganka walbahaarkka waxaan ka caado dhigtay mabda' aan ka maqlay shimbirka hadla ee loo yaqaan babaqaaq, isagoo qafis ku xiran naadi ku yaal magaalada Pensalvenia, marka ay xubnaha naadigu irrida ka soo gelayaan buu ku celcelin jiray ereygan "nin walba waa kolkiis mudanayaal", waxaan ogaaday in haddii aan mushkilad walba markeeda xalliyo, inaan wax ka qaban karo dhibaatooyinka nahor taagan kana raaxeysan karo fekerka iyo welwelka.

10. SIDEE BUU UGU INTIFAACAY JOHN D. ROCK FILLER SANOYIN KA BADAN CIMRIGIISII

Wuxuu ururiyey Rock Filler malyuunkii \$ ee ugu horreeyey xoolihiisa isagoo jira 33 sano, toban sano kadibna wuxuu aasaasay sharikaddii ugu weyneyd dunida ee loo yaqaan "the great standard oil company" markuu gaaray 53 sano waxaa ka adkaaday walbahaar oo cafimaadkiisa khatar geliyey ilaa uu u ekaaday masawirada ay caruurto ku ciyaarto sida uu tilmaamay John K. Winkler oo taariikhda nolosha Rock Filler qoray, waxaa ku dhacay calooshiisa cunto shiid xuno, timihii madaxa iyo sunnooyinka ayaa ka daatay, wuxuu gaaray caafimaadkiisu heer halis ah ilaa ay takhaatiirtii u soo jeediyeen inuu ku noolaado caano keliya, waxaa ku dhalatay bidaar fool xun oo aan la fiirin Karin, wuxuu madaxa gashan jiray koofiyad si uu dadka uga qariyo bidaartiisa, waagii dambase wuxuu sameystay timo buruko ah oo uu hadba beddeli jiray.

Ninkaas waagii uu dhallinyarada ahaa wuxuu ahaa nin xoog leh, toosan oo garba adag, laakiin markii uu gaaray 50 jir ee la rabay in caafimaadkiisa iyo xooggiisa heerka ugu sarreeyo gaaraan waxaa dhacday inuu soo gotay oo uu lugahii qaadi kari waayey.

Rock Filler wuxuu ahaa ninka dunida ugu xoolo badan, haddana wuxuu ku noolaa cunto aan ilmo yar ku noolaan Karin, wuxuu dakhligiisu ahaa 70 malyan oo \$ sannadkii, waxaana cunto ahaan ugu bixi jirtay kharash aan dhameyn 20\$ bishiiba waayo wuxuu cuni jiray buskud iyo caano keliya, wuxuu noqday lafo maqaarkii ku dhegay, wuxuu ku dhowaaday geeri, takhaatiirtu habeen iyo dharaarba waa kor fadhiyi jireen, wuxuuna ku bixin jiray is daweyntiisa lacag xoog leh, waxaa is weydiin leh maxaa Rock Filler jirrada heerkaas ah gaarsiiyey? Maxayse aheyd jirrada heysay? Waxaa hayey walbahaar dhiig-cadaadin iyo gadood xididdada neerfaha.

Rock Filler wuxuu caabudi jiray lacagta, wuxuu ugu jeclaa dunida wuxuu maqlo badeecad uu ka macaasho, waagii uu yaraa haddii uu maqlo inuu ku guuleystay iibinta badeecad, intuu koofiyadda tuuro

ayuu boodboodi jiray farxad darteed, haddiise uu maqlo inuu ku khasaaray badeecad wuu jirran jiray.

Mar baa waxaa dhacday inuu raray alaab qiimaheedu gaarayo 40 kun oo \$ wuxuuna saaray Doon isaga oo aan ceymin, lacagta lagu ceymin lahaana kamay badneyn 150\$, habeenkii ay doontu baxday waxaa ka dhacday dabeyl xoog leh xagga badda, markaas buu aad u walbahaaray, wuxuu ka baqay in doonidu degto oo ay baddu liqdo, halkaana uu ku khasaaro, subixii waxaa u yimid ninkii shirkadda la lahaa oo la yiraahdo George Gerdener, iyadoo uu Rock Filler xafiiskiisii dhex wareegayo oo uu fariisan kari waayey murugo darteed, markaas buu ku qeyliyey ninkii shirkadda la lahaa oo ku yiri "ilaahay baan kugu dhaariyaye orod oo soo fiiri sharikadda ceymiska haddii ay naga oggolaaneyso inaan ceymino badeecaddii doontii shalay aan dirnay iyo in waqtigu naga tagay.

Ninkii sharikadda la lahaa wuxuu u tegay sharikaddii ceymiska oo ka oggolaaday in la ceymiyo sidaas buu lacatii ceymiska oo dhameyd 150\$ ku bixiyey, markuu ninkii ku soo noqday Rock Filler wuxuu arkay isagoo bastii ah oo uu walbahaarkii ku sii xoogeystay, sababtoo ah Rock Filler wuxuu helay taar loogu soo sheegay in badeecaddii nabad ku gaartay meeshii loogu tala galay, markaan dambe wuxuu ka murugeysanaa 150-kii\$ ee uu ku khasariyey ceyminta badeecadda u nabad gashay, maalintaas wuu jirraday, markaas buu guriga aaday oo uu iska seexday, wuxuuna markaas dakhligiisu ahaa 500,000 sanadkii.

Rock Filler waqti uma heli jirin ciyaar iyo tumasho, waxaa dhacday mar inuu gatay ninkii sharikadda la lahaa huuri yar oo uu qiimihiisu dhan yahay 200\$ isaga iyo saddex saaxiibadiis ah si ay ugu tamashleeyaan waqtiga nasashada, markuu maqlay Rock Filler arrinkaas wuu suuxi gaaray sida uu uga naxay.

George oo ah ninkii shirkadda la lahaa ayaa galab sabti ah ku casuumay Rock Filler inuu la tamashleeyo, wuxuu u yimid Rock Filler oo shaqo ku howlan, markaas buu ku yiri; "ilaahay ka yaab oo naftaada u naxariiso oo kaalay huurigaan nagula soo tamashlee, si

caafimaadkaagu u hagaago". Markaas buu Rock Filler wejiga kaduuday oo uu ku yiri saaxiibkiis "dheegeyso George, adigu waxaad tahay ninka ugu xoolo dhumin badan ee aan la kulmo nolosheyda heerka dhaqaalahaagu aad buu u liitaa keyguna wa sidoo kale".

Haddii aad sidaa ku sii socotana waxaa hubaal ah in arrinku ku dhammaan doono in sharikaddeenu kacdo oo ay khasaarto, halkaasna aynu ku ceydhoobi doono, anigu idin raaci maayo, tamashlana marabo mana doonayo aragga huuriga aad wadato, markaas buu u jeestay shaqadiisii, wuxuuna shaqeynayey ilaa habbeen badhkii, muusan aqoon Rock Filler farax iyo kaftan, maalin baa laga sheegay inuu yiri; "Weligay habeen maan seexan anigoon u sheegin nafteyda in liibaanta aan gaaray laga yaabo inay tahay mid gaaban oon waareyn".

Saraakiisha la shaqeysa Rock Filler aad bay uga baqan jireen, waxaase yaab leh in isaguna uu iyaga ka baqan jiray, maxaa yeelay wuxuu ka cabsanayey inay sirta shaqada bixiyaan oo ay ka faa'iideystaan dadka la tartamaya badeecadiisa, markuu gaaray heerkii ugu sarreeyey hodontinimada iyo magaca oo uu dahabku ugu soo burqadanayey sida daadka oo kale, ayaa waxaa dhacday in sharafkiisii iyo magaciisii uu hal mar hoos u dhacay,

Waxaa la allifay buugag, waxaana lagu faafiyey wargeysayada, in sharikadda Standard Oil Company ninka lihi oo ah Rock Filler inuu yahay dhagar qabe khaa'in ah oon ka xishooneyn inuu tirtiro qof kasta oo la tartama badeecadiisa, wuxuu noqday Rock Filler ninkii ay shaqaalaha Batroolka ee Pensilvenia ugu necbaayeen dunida, waxay jeclaayeen badankood inay fursad u helaan inay xarig adag qoorta kaga xiraan kadibna ay ka soo lulaan jidadka si dadka kalena ugu waano qaataan sida ninkaa looga abaal mariyey dambiyadiisii.

Waxaa lagu soo waalay waraaqo caay iyo hanjabaad ah ilaa uu sameystay askar, ilaa uu samaystay ilaalo nabadgelyadiisa. Wuxuu isku dayey inuu iska dhega tiro ceebaha loo jeedinayo, laakiin wuu awoodi waayey, wuxuuna u adkeysan kari waayey xumaanta dadka

uga imaanaysa, markaas buu caafimaadkiisii xumaaday, wuxuuna ku dhacay jahwareer.

Waxaa ku dhacay jirooyin xunxun, kuwaas oo ku noqday cadow cusub oo kaga yimid gudihisa, wuxuu isku dayey markii hore inuu qariyo oo uu naftiisa ka saaro inuu jiran yahay, laakiin hurdo la'aantii, calool xanuunkii, tima buubniinkii iyo tiiraanyadii ayaa isku gaashaan buursaday, markaas buu qarin kari waayey, takhtaradii waxay kala dooran siiyeen laba daran midkood:-

1. Inuu shaqada faraha badan dhaafo iyo
2. Inuu dhinto.

Wuxuu doortay inuu shaqada badan faraha ka qaado, laakiin wa mar uu baaba'ay oo uu noqday laf iyo harag keliya.

Mar ay qaabishay Ida Tarbel oo aheyd gabadha ugu caansan qoridda taariikhda dadka magaca leh ee Mareykanka, way amakaagtay markii ay aragtay xaalkii Rock Filler, waxayna qortay hadalkan; "Wuxuu u muuqday sidii nin uu cimrigiisu gaaray da'dii asaasaqa", mana aheyn Rock Filler nin gaaray da'daas ee wuu ka da' yaraa, Jeneeral Macmthumb markii lagu xiray Filibiin, laakiin wuxuu ahaa nin walbahaarku baaba'saday ilaa ay Ida lafteeda u naxday oo ay ka buuxsantay caadifo iyo naxariis, xaalkiisa awgii. Inkastoo ay "Ida" ku mashquulsaneyd buug ay wax kaga sheegeysay sharikadda Standard Oil Company oo ay aad ugu careysneyd.

Rock Filler waxay kula taliyeen takhaatiirtiisii inuu raaco saddexda arrimood ee hoos ku xusan, wuuna raacay intii noloshiisa uga harsaneyd:-

- 1- Iska jir walbahaarka wax kasta oo dhaca.
- 2- Raaxeyso oo ku tamashlee hawada Furan.
- 3- Yareyso cuntada oo ka kac miiska cuntada adigoo weli u baahan.

Rock Filler wuu ogolaaday inuu raaco saddexdaas arrimood, shaqadii badneyd faraha ayuu kala baxay, wuxuu bartay ciyaarta xeeгада, wuxuuna balwad ka dhigtay cilmiga beeraha, wuxuu isku shuqliyey

inuu u dhowaado deriskiisa oo uu xiriir fiican la yeesho, wuxuu ku tebin jiray waqtigiisa turub ciyaarid iyo inuu isku maaweeliyo heeso.

Wuxuu sameeyey wax intaas dheer oo ah inuu ka fekeri dhibaatooyinka dadka kale, wuxuu iska joojiyey wixii uu hore ugu fekeri jiray oo ahaa siduu xoolo badan u heli lahaa. Markaan dambe wuxuu isku dayey sidii uu wax ugu qaban lahaa xoolihii uu ururiyey iyo sidii uu dadka kale wax u tari lahaa. Wuxuu malyuun \$ ugu deeqay ururada samafalka, laakiin arintaasi ma fududaan markii hore, maxaa yeelay mar uu siiyey maal badan kaniisad waxaa ku dhacay, baadariyaashii baladka oo dhan oo go'aansaday in ay deeqdiisa celiyaan, sababtoo ah bey yiraahdeen waa dhiiga dadweynaha ee ay sharikaddiisu nuugtay, Rock Filleer waayadiisii dambe wuxuu caadeystay inuu wax bixiyo.

Mar baa loo sheegay in kulliyad ku taal daanta magalada Michigan ay bixin kari weyday deyntii lagu lahaa, markaas buu ugu deeqay malyuun \$, wuxuuna u dhigay xarun keyn oo qurux badan, markaas bay ka mid noqotay jaamacadaha dunida ugu caansan oo ah Jaamacada Chicago.

Wuxuu doonay inuu gargaaro dadka madow ee mareykanka ah, wuxuu ugu deeqay lacag ay ku dhistaan jaamacad u gaar ah oo loo bixiyey "Tuskedee", wuxuuna ka qeyb qaatay la dagaalankii cudurka Gooryaanka, waxaa u yimid maalin Dr. Charles W. Stines oo gooryaanka aqoon gaar ah u leh, wuxuu yiri "daawo aan qiimaheedu ka badneyn 50 senti ayaa qofku badanaa u dhimanayaa, maxaa yeelay waxaa adag sida dadku ku helaan 50 senti, markiiba wuxuu ugu deeqay Malyuun \$, si looga hortago cudurkaas ka argagixiyey dadkii degenaa koonfurta Mareykanka oo uu aad ugu faafay, weliba waxaa intaas u dheer inuu dhisay hay'ad la yiraahdo "hay'adda Rock Filler ee la dagaalanka jahliga iyo cudurka".

Markaan ka sheekeeynayo howlaha waaweyn ee Aadamnimada ah waxaan dareemayaa oo aan qadarin weyn iyo abaalgud uga hayaa badbaadada nolosheyda ee hay'adaas Rock Filler. Maxaa yeelay waxaan xasuustaa sanadkii 1932-kii inuu daacuun ku faafay dalka

shiinaha aniguna halkaas ayaan joogay, waxaan arkay cudurkaas oo beeraleyda dalkaas xasuuqaya, waxaan eegay dugsiga caafimaadka ee Rock Filler oo ku yiil Bikiin, markaas baan iska talaalay daacuunkii, waana dugsi lagu sameeyo tallaalada reer beledka iyo kuwa shisheeyaha si isku mid ah oo aan kala sooc laheyn, weli dunida laguma arag hay'ad la mid ah hay'ada Rock Filler, waayo waa hay'ad aan metal laheyn.

Wuxuu ogaa Rock Filler inuu dunida ka socdo dhaqdhaqaaq xoog leh oo lagu soo saarayo waxyaabo dunida wax u tara sida baaris weyn oo cilmi ah, la dagaalankii jahliga. Faafinta cilmiga iyo ciribtirka cudurada khatarta ah, laakiin waxaa hortaagnaa dadka hormuudka u ah howlahaas lacag la'aan meel kasta oo ay dunida ka joogaan, marka wuxuu goostay Rock Filler inuu dadkaas ka gargaaro daryeelidda aadamiga ee uma caawin jirin in ay dadka ku cuna qabateeyaan cilmigooda ama ka ganacsadaan.

Maanta aniga iyo adigaba waxaan u mahad celinaynaa Rock Filler nimcada ay soo xaqiijisay daawada loo yaqaan "Pencillin", iyo daawooyinka kale oo fara badan oo lagu soo saaray xoolihii uu ugu deeqay Rock Filler baarista cilmiga. waxaa looga mahad celin karaa caruurta uu ka badbaadiyey xumad qodaxeedka caruurta gumaadi jiray oo 5-tii caruur oo ay ku dhacdaba mid keliya ka kici jiray, sidoo kale waxaa looga mahad hayaa dagaalkii lagula jiray cudurrada duumada, qaaxada, dacar-dhiigga infelebensada iyo cuduro kale oo fara badan oo dunida dhib ku hayey oo hantidiisii wax looga qabtay.

Laakiin Rock Filler isaga xaalkiisa sidee buu noqday? Ma helay xasiloonaan iyo nabadgelyo markuu faraha kala baxay xoolo urursigii? Jawaabtu waa haa, wuxuu yiri Alan Nevins "haddii dadku u maleynayaan in Rock Filler 1900 kadib weli murugo ku nool yahay isagoo ka xun ceebihii lagu sheegay sharikaddiisa dadkaasi wey gefsan yihiin sida dhabta ah".

Rock Filler wuxuu dareensanaa sacaado iyo liibaan, walbahaarna wey kala tageen ilaa uu si fiican u seexday, habeen baa loo sheegay in

sharikaddiisa looga adkaaday dacwaddii loo haystay oo lagu xukumay ganaaxii ugu badnaa ee soo maray taariikhda garsoorka, maxaa yeelay waxay dowladdu aragtay in sharikaddiisu noqotay sharikad cuna qabateyn ku dhaqanta oo ku xadgudubta qaanuunka dalka, markaas baa dacwad lagu soo oogay, waxayna socotay dacwaddii 5 sano, waxaana ugu dambeyn laga adkaaday sharikadisii, markii maxkamaddii ku dhawaaqday xukunkii.

Waxay ka baqeen qareenada sharikaddiisa in Rock Filler markuu maqlo go'aanka xukunka uu aad uga naxo, maxaa yeelay waxaa ka badnaa isbedelka weyn ee ku dhacay xaalkiisa, waxaa taleefan kula soo hadlay qareenkii sharikadda, wuxuu la socod siiyey siday dacwadii ku dhamaatay isagoo si qabow oo fudud ugu sheegaya, wuxuu ku dhameeyey hadalkiisii "waxaan ku rajo weynahay inaad ka nixin hadalkan oo aysan hurdadu kaa tegin", wuxuu ku jawaabay Rock Filler "waxba ha ii baqin caawa si fiican baan u seexanayaaye".

Ninkuu hadalkaasi ka soo baxay waa ninkii maalin la jiraday 150\$ oo uu ku ceymiyey doonidii alaabta u qaaday ee nabad gashay, sida runta ah walbahaarku wuxuu ku qaatay Rock Filler muddo dheer, laakiin markii uu ka adkaaday aad buu uga raaxeystay, maxaa yeelay waxaa laga baqayey inuu walbahaarku dilo markuu 53 sano jiray, markii uu walbahaarka ka adkaaday wuxuu sii noolaa 45 sanaddood ilaa uu ka gaaray 98 jir.

11. BUUG AAN AKHRIYEEY OO KA HADLAYA AWOODDA JINSIGA AYAA BADBAADIYEEY GUURKEYGA (Qore: B.R.W)

Waxaan jeclaa inaan qoro magaceyga oo dhan, laakiin waa qiso shaqsi ah oo ku saabsan in la qariyo dadkii ay qabsatay inkastoo Dale garan karo maxaa yeelay waxaan uga sheekeeyey mar laga joogo 12 sano.

Markaan ka baxay jaamacadda waxaan helay shaqo hey'ad farsamo oo weyn, waxaan ka shaqeeyey 5 sano badweynta baasifiga anigoo ah wiilka hay'adaas ee bariga fog, todobaad ka hor ambabaxaygii ayaan

guursaday gabadhii ugu qurxooneyd uguna wanaagsaneyd intii aan la kulmay, markii ay dhamaatay bishii arooska waxaa nagu dhacay masiibo adag, oo xaggii xiriirka galmada naga qabsaday, labadeenaba, gaar ahaan gabadhii ilaa ay ku dhowaatay inay u laabato Ameerika oo ay u sheegtay ehelkeedii iyo saaxiibadeed inay ku hungowday guurkii iyadoon ka sheexeyn. Waxaan ku nooleyn laba sano luufluuf iyo shalaayto ilaa aan ku fekeray dhowr jeer inaan is dilo, waxaa dhacday inaan helay maalin buug bedelay nolosheydii oo dhan.

Ilaa yaraanteydii waxaan balwad u lahaa akhrinta buugaagta, habeen baan soo booqday nin saaxiibkey ah oo Mareykan ah, waxaan ku arkay maktabadiisa qurxooneyd buug cinwaankiisu yahay "ideal Marriage", oo uu allifay Dr. Van. D. Valde. Wuxuu iigu muuqday in mowduucaas aad loogu xeel dheeraaday, laakiin aqoon jaceylkii aan u qabay buugaagta ayaa igu qasabtay inaan qaado oo aan fiirfiiriyo tismadiisii, waxaan ku arkay inuu si caddaan ah oo aan gabasho laheyn uga hadlaayo jinsiga isla markaana ka fog diir ka qaadidda iyo qawaaniinta.

Haddii uu qof igu waanin lahaa inaan aqristo buug jinsi ah waxaan u qaadan lahaa inuu qabkeyga dhaawacay, sababto ah waxaan ka gaaray aqoonta jinsiga heer aan ka dejin karo kitaab hase yeeshee dhibaataadii ku habsatay guurkeyga ayaa igu qasabtay inaan akhriyo buugaas, waxaan warsaday saaxiibkey inuu I amaahiyo dhowr maalmood buuggii isaga ahaa.

Sida runta ah arrinta buuggaas waxay ku abuurtay nolosheydii xaalad cusub, xaaskeygiina wey akhriday marka guurkii aan ku hungownay wuxuu noqday mid wanaagsan oo na dareensiiyey sacaado iyo farax badan.

Haddii aan heli lahaa malyuun \$ waxaan ku iibsanaa lahaa xaq faafinta buugaagta noocaas ah, markaas baan bilaash ugu qeybin lahaa kumanaan wiilal iyo gabdha guur doon ah, mar baan akhriyey erey uu qoray Dr. John B. Weston oo ah " awooda jinsiga muran la'aan waa tiirarka ugu waaweyn ee nolosha, dhibaatooyinka dadka haysta waxay yihiin kuwo ka dhashay xiriirka jinsiga ee rag iyo haweenba, haddii

aanu ereyga Wetson dhammaantii run aheyn waxaa hubaal ah inuu badankiis run yahay.

Haddii aad rabtid inaad ogaato gefefka guurka ee foosha xun leh akhri buuga la yiraahdo "waa maxay gefefka guurka", oo ay qoreen Dr. J. V. Hamilton iyo Keneth Mack Gowan, wuxuu baaray Mr. Hamilton gefefka guurka muddo afar sano ah intaanu allifin buugaas, wuxuuna yiri "sida runta ah sababaha keena in lagu hungoobo guurka ama dumin kara waa isdeeqsiin la'aanta galmada, inkastoo ay jiraan dhibaatooyin kale oo iyaguna turuntureeya guurka toosan", waxaana jira in Dr. Hamilton waxa uu ka sheegay guurka ay run yihiin maxaa yeelay, wuxuu ku ogaaday tijaabooyin qaraar oo uu soo maray.

TARJUMAHA BUUGGA

Tarjumaha buugga wuxuu qoray koox buugaag ah oo u kala baxa qaar uu tarjumay, kuwo uu allifay iyo kuwo uu kala qeyb qaatay culumo kale.

1. Afartan Xadiis.
2. Shirkii ugu yaabka badnaa Taariikhda Aadamiga.
3. Fanka maamulka
4. Saaxiibo Kasbo
5. Cusbooneysiinta Diinta

Wuxuu allifay kutubtan kala ah:

1. موقف الإسلام من تطور المجتمعات (طبع عام 1984)
2. نشوء الإسلام وتطوره (مذكرات لطلبة الجامعة الوطنية (1984)
3. الصومال في سنوات العجاف (1990 – 1996) جاهز للطبع

Wuxuu kala qeyb galay culimo kale allifaadd kutubtan.

1. Aasaaska Islaamka
2. Ambiyada Ilaahey.